DAABACAADDA KOOWAAD

ANTIKIRIISTOOS

Dajaal Korayaa Qarsoon

Sheeko

Axmed Khaalid Mustafa

Waxa turjumay
Cali Ileeye

Baahinta
HIIL PRESS
DAL IYO DIBAD

Xuquuqda qoraalkani waxa
ay si buuxda ugu dhawran tahay
qoraaga: © 2018 Axmed Khaalid Mustafa.
Oggalaansho qoran la'aan
sinnaba xogtan loo ma minguurin karo
oo loo ma sii faafin karo, ha ahaato
qaab elektoroonik ah
ama qaab kale ba.


Nashqadda Jaldiga: HIIL PRESS

Quraaridda: Qaryaan Maanmaal Buureed Gurxan

TURJUMAHA KALA SOO XIDHIIDH
E-mail: **Caliileeye@gmail.com**
Telephone: **+252612924436** ama **+252634776153**
Muqdisho, Banaadir, Soomaaliya

“Cilmigan dib u heego dhaca
Cilmigan dul ka xaadiska ah
Cilmigan samo dawdarka ah
Caqligu ka daboolan yahay
Bukaankiyo daafta qaba
Gumaysigu diin u yahay
Ilaah lagu diiddan yahay
Islaam la dagaalankaa
Danaysigu weel u yahay
Dirsoocu u aabbe yahay
Daandaansigu guul u yahay
Dabkiyo wada hawsarkaa
Dilkiyo wada dhiig cabka ah
Duullaankiyo boobka jecel
Cilmigan dalandoolka badan
Damiirku ka maydka yahay
Khansiirkiyo duufka cuna
Dillaalkiyo tuugga dhala
Wannaagu ka dayro yahay
Xumaantu u dooran tahay
Dadkiyo simay xoolihii
Raggiyo dumarkii furfuray
Intuu dumarkii is-baday
Raggii dumar qaar ka dhigay
Afduubkiyo qoolka taxan
Run baa lagu daahayaa
DAJAAL korayaa qarsoon.’’

Daba-huwan - Hadraawi


Madasha
Kutubta
Hubaal

XUSUUSIN

Dhammaan shakhsiyadaha ku xusan
sheekadani waa kuwo dhab ah:
jinkooda, insigooda iyo shayaadiintooduba.
Inta badan sheekooyinka ku jiraa
waa kuwo ku dhisan dhacdooyin
dhab ah oo sugan.

TUSMO

TUSMO 7

Hordhac 8

Tilyaha Ileyska 15

Soo Deg Inaana 47

Sagaal Aannu Siinnay Ileyska 60

Sunta Nooca Ugu Halis Badan 85

Fardofuul ka Yimid Jannada 111

Akhri Daraakooloow 127

Wiiro-Komooko 147

Filin Uu Soo Saaray Shaydaan 173

Guurtidii Reer Sahyoonoow 203

Shaydaankii Reer Bani Israa'iil 220

Dhiig Ku Daatay Dhulkii Ballan-qaadka 244

Miyaan la Gaadhin Xilligaagii Mudane? 276

Mudannahayaga iyo Wiilka Mudannahayaga 288

Hordhac

Ugu danbayntii waa aynu isku kaliyaysannay aniga iyo adigu. Gooni ayaa aan kuula baxay, oo waa aan ku hantiyay. Indhahaaga ayaa aan hantiyay markasta oo aad weedhahayga eegto, ama aad akhrido qormadayda. Waa markii ugu danbaysay ee aad sheeko aan leeyahay akhrido noloshaada, maxaa yeelay, geeri ayaa aan qarka u saaranahay. Nolosha waxa iiga hadhay saacado kooban oo aanan tiradooda kasayn, waxa keliya ee aan hubo ayaa ah in ay yar yihiin. Iyaga oo yar haddana waa ay ku filan yihiin in aan ku waraabiyo xogta aan rabo.

Inta aanan kuu bilaabin, waxa aan ku leeyahay akhri buuggan oo gub! Waxa ay isku deyi doonaan in ay kaga takhalusaan isaga iyo ciddii akhridaba. Sidaa ayaa ay ku sameeyeen dhammaan buugaagtii la mid ka ahayd kan. Ha cabsan, keliya maanka ku hay erayadayda. Haddii ay ku dilaan ka dib markii aad ogaatay xogtaydan, waxa aad dhiman doontaa adiga oo raalli ah. Yaa raba in uu dhinto isaga oo faraxsan casrigan? Ha baqan saaxiib.

Yaan ahay? Xaggeen ka imi? Sidee? Waa weydiimo aan hubo in ay dhammaantood kaa dhex guuxayaan. Waxa laga yaabaa in aad rabto in aad buuggan tuurto, oo aan nolol-maalmeedkaaga iska sii wadato, laakiin waxa aan kuu hubaa ma jiro farqi u dhexeeya –iyaga agtooda, qofka buuggan akhriya iyo ka soo gata ee iskaga tuura guddaafadda

ugu dhowi; iyagu dhammaan waa ay dabarjarayaan. Qofka akhriyaa se fursad badbaado ayaa uu haystaa. Sidaa ha ii soo eegin! Waa run aniga ayaa qoray buuggan, laakiin mayd socda ayaa aan ahay. Qolkayga ayaa ay igu soo jebin doonaan, adduunka ayaa aanay iga tirtiri doonaan sidii oo aanan weligayba iman.

Ha igu mashquulin sharraxa iyo hadal madhan, aan hore kuugu bilaabo xogta. Maxaa yeelay innooma uu hadhin waqti aynu luminno labadeenuba. Sheekadan wax badan ayaa aad ku ogaan doontaa, wax badan ayaa aad diidi doontaa, wax badan ayaa aad la yaabi doontaa, wax badan ayaa aad necbaysan doontaa. Balse aan hal wax kuu sheego, been kuuma sheegi doono. Waxa aan farta kaa saari doonaa run aanay weligeed cid kale kuu sheegin. Waxa aan kuu faydi doonaa siro aanay habboonayn in qof kula mid ah loo sheego. Haddii aan been kuu sheegayo ima ay dileen, ee waa ay I abaal marin lahaayeen, oo waa ay I waynayn lahaayeen, sida dadka kaleba ay u sooraan.

Waa aan garanayaa qof caajislow ah ayaa aad tahay, ama akhriska ma jeclid ama akhriska waa aad jeceshahay balse ma xiisaysid buugaagta aanay ku xardhanayn magacyada qorayaasha waaweyni. Sidaa darteed, si aad buuggan u akhrido gebigiisaba, waxa aan kuu hindisay ciyaar aynu labadeennu dheelayno, cid kale ina lama ciyaari doonto.

Waa ciyaarta waraaqaha. Ma aha waraaqda turubka ama kuwa taaroodka, balse waa waraaqo cayn kale ah, nooc nacdalan. Sida ugu habboon ee loo ciyaaraa waa in la isku xigsiiyo , haddii aad is weydaariso waxa ay noqonayaan waraaqo bilaa qiimo ah. Haddii se aad si hagaagsan oo isku xigta u habayso – sida aynu labadeennu yeeli doonno, waxa kuu furmi doona afaafka siro aan weligaa laguu sheegin, cidna aanay kuu sheegi doonin. Waa siro khatar ah oo la dilayo cid kasta oo fahanta, lana gubayo cid kasta oo barata ama dadka barta.

Waxa aan hortaada ku tuuri doonaa 13 kooxood oo

waraaqo ah. Koox kastaa dhacdo ayaa ay warinaysaa, waxa aanay daaha ka faydaysaa sir aan la ogolayn in aad ogaato. Waa ay ku dabageli doonaan, waayo sirtii ayaa aad garatay. Waxa aad tahay caajisloow oo waa aan ku fahmay, haddaba sheeko kasta oo ka mid ah 13 kaa sheeko waxa aan kuugu soo gudbin doonaa hab ka duwan tii ka horreysay. Ma aragtaa sida aan kuu daryeelayo, sidaa waxa aan u sameynayaa waayo nolosha waqti yar ayaa iiga hadhay, mana rabo in aan hal ilbidhiqsi ka lumiyo caqligaaga baxsan ee aan soo jeedin. Inta labada sheeko u dhaxaysa waa aad iska bixi kartaa, waayo waa aan yara dhurmi doonaa. In kasta oo ay tahay dhurmid faa'ido leh, haddana haddii aad yara baashaalayso halkan ku baashaal oo sheekooyinka haka jeedsan.

Mar kasta oo aynu tallaabo hore u qaadno ciyaarta, naftayda ayaa aan ku bari doonaa, xagga aan ka imid ayaa aad ogaan doontaaa,sida aan kugu soo gaadhay ayaa aad ogaan doontaa; waxa aad garan doontaa cidda ku dilaysa ee ku gubi doonta, marka ay I gubaan ee ay I dilaan aniga iyo sida aad uga badbaadi karto. Imika waxa aan kuu sheegayaa uun magacayga. Waxa aan ahay Boobi Faraank [1] . Waa aan dareemayaa in aad garatay in aan Maraykan ahay! Waa dhab taasi.

Ugu danbayntii inta aanan bilaabin waxa aan ku xasuusinayaa arrin muhiim. Ha u malayn in ay suurtogal tahay in aad buuggan hal mar ku akhrido, meel deggan hal fadhi. Ugu yaraan waa in aad dhammayso buuggan 3 jeer, si aad u dhuuxdo xogta uu xanbaarsan yahay.

Aynu bilawno in aynu ciyaarno dheesheennii , oo aan gadaal magaceeda kaaga sheegi doon. Hadda waxa kugu filan in aad

[1] Boobi Faraank: Bobby Franks

ogaato in ay tahay ciyaar waraaqeed; waraaqo nacdalan. Hortayda fadhiiso adiga oo deggan. Eeg kooxda koowaad ee waraaqaha, taas oo aan ku soo hordhigi doonoo qaab habaysan miiskaaga. Waa aan kasayaa in nalka daciifka ah ee qolkaygu uu madax-xannuun kugu ridayo, laakiin dhib ma laha. Waa qasab, ee aan bilawno hadda.

Waxa aan hortaada dhigay saddex waraaqood oo rogan. Mid mid ayaa aan kuu tusi doonaa iyaga oo isku xiga, hannaanka ay sheekooyinku isugu xigaan. Sheekada koowaad ayaana ugu horreysa. Waxa aan ku qeexayaa sirta koowaad. Ila soco. Waraaqdka koowaad waa sawirka shaydaan la fogeeyay (rajiim ah) oo laba gees leh, aad baanu u cadhaysan yahay.

- Waraaqda labaad waa waraaqda sixirka; sixirka dhulka. Waxa ka muuqda ilays ka soo baxaya gunta hoose ee dhulka, oo burburinaya dhagaxaanta ku hareeraysan.
- Waraaqda saddexaad waa waraaqda sixirka hawada. Waxa ka muuqda nin sixirroole ah oo tafaaful hawada ku tufaya.
- Waraaqda afraad waa waraaqda awoodda dhammayska tiran. Waxa ka muuqda nin feedh u duuban yahay oo xoog weyn, oo xidhan fargal weyn oo dahabiya.
- Waraaqda shanaad waxa ka muuqda sawirka sanamyo aad mooddo in midkood la burburiyay.
- Waraaqda lixaad ee ugu danbaysaa waa madaraq (dubbe). Waxa ka muuqda sawirka nin xoog weyn, tummaal ah, oo gacanta ku haya madaraq weyn oo si xaasidnimo ah u walcinaya.

Haddii aad illowdo sawirradan iyo waraaqahan, hortaada ayaa ay iman doonaan hadda marka aan sheekada koowaad kuu akhriyo iyo sirta koowaad.

HORDHAC

ANTIKIRIISTOOS
DAJAAL KORAYAA QARSOON

Tilyaha Ileyska

Tan iyo Maalinkii la Abuuray Nuurka

(2500 C.H – 2000 C.H)

"Heestan waxa aan u qaadi doonaa
Ilaahay, marka uu yimaaddo badbaadiyaha weyni …
Inantan aan waxbagalabsan, ee werwersan,
ee quruxda badan kaalay oo xoree.''

Waa hees Baabili ah oo guun ah , cod waayeel ah oo Baabili ah ayaa uu ku qaadayay madaxana waa uu ruxayay dheelid. Waxa uu lahaa cod halaasiya oo macaan, balse shanqadha ku gedaamani ma ay ahayn mid la jaanqaadaysa codkiisa wacan. Waxa uu ka dul heesayay ci'da adhiga daaqaya beer, adhigana waxa uu ugu lulayay ushiisa –oo waa uu faraxsanaa. Oo ma waxa jira qof lugaynaya deegaankan ashqaraarka ah oo aan faraxsanayn. Waxa aynu joognaa boqortooyadii Caashuur[2] ee hore, meel u dhow magaalada Baabil [3] ; magaaladii ugu weynayd ee ay arkaan jin iyo insi taariikhda, adhiilaha heesayaana waa oday Iishma[4].

[2] Caashuur: Assyria.
[3] Baabil: Babylon
[4] Iishma: Ishma.

"Marka uu yimaaddo
badbaadiyaha weyni,
dhabtii waa aad
xoroobi doontaa.''

Afar kun oo sanno ka hor dhulku wuu ka duwanaa dhulkan, cirkuna waa uu ka geddisnaa cirkan. Haddii uu Iishma eego barkadda uu ag socdo, waxa uu arkayay illaa salkeeda oo dhan, waxa uu arkayay kalluunka ku jira iyo xayaabada ku samaysantay sidii qof eegaya shinbiro cirka maraya oo kale. Afar kun oo sanno ka hor wax kastaa waxa uu ahaa wax hufan oo nadiif ah. Waxa uu rabay Iishma in uu yara nasto, waxa uu u kacay dhanka geed uu cuntada hoos dhigtay. Markii uu geedkii u dhowaaday waxa uu arkay cuntadiisii oo daboolkii laga qaaday waanu yaabay.

Tuugtan fuqarada ahi weligood ilbaxi maayaan. Haddii ay cunto i weydiistaan waa aan siin lahaa, balse waxa ay doorbidayaan xatooyada. Naftoodu dawarsiga waa ay nacaysaa, xatooyadana waa ku raalli. Iishma waa uu yaabay markii uu si wacan weelkii cuntada eegay. Inkasta oo weelku fur la'yahay haddana caanihii iyo cuntadiiba waa sidoodii. Caano-fadhigii ayaa waxyar laga qaadqaatay, caanihiina wax aan badnayn ayaa laga dhamay, wax yar oo aan oon iyo gaajo midna tirayn. Waa uu fadhiistay duqii Iishma, waa uu cabbay oo waa uu cunay, hadhkii geedkana waa uu ku nastay. Ka dib waxa uu go'aansaday in uu barkadda ku maydho, sidii ay samayn jireen dhammaan adhijirtii boqortooyooyinkii hore. Dharkii inta uu iska wada bixiyay ayaa uu biyihii ku dhaadhacay.

Isaga oo Iishma maydhanaya, haddana kolba waxa uu eegayay dharkiisa si aan u kas ahayn. Si kedisa waxa geedkii u hoos degay koox shinbiro xamaam ah oo qurux badan. Cuntadii ayaa ay dul tageen. Xamaamkii waxa uu bilaabay in uu caano-fadhigii goosgoosto, caanihiina ay kiishadda cunaha ka buuxsadaan. Waxa uu ahaa muuqaal yaab leh. Waa ay duuleen shinbirihii, waxa aanay aadeen meel aan aad u

durugsanayn. Inyar ka dib haddana waa ay soo noqdeen shinbirihii, cuntadii ayaa ay ku dageen, afka ayaa ayna ka buuxsadeen cuntadii, ka dibna waa ay duuleen. Waxa uu ka soo baxay Iishma barkaddii, maryihiisii Baabiliga ahaa ayaa uu gashaday. Xaggii geedka uma uu kicin ee waxa uu aaday meeshii uu xamaamku u duulayay, ee uu ka soo noqonnay kolba. Waxa uu arkay wax ay indhihiisii la waaweynaadeen yaab iyo anfariir dartii. Waxa uu meeshii ugu tagay gabadh yar oo sagaal jir ah. Indhihiisu weligii ma ay arag wax la qurux ah. Taas lama uu yaabin, waxa uu la fajacay in uu xamaamku inanta yar ku hareeraysnaa, oo ay quudinayeen caano iyo cunto.

Gabadha yari waxa ay ahayd mid qoslaysa, oo gacmaha dhaqdhaqaajinaysa iyada oo faraxsan. Markii uu Iishma u soo dhawaaday waa ay qososhay qosol hufnaanteedu uu ka ilmaysiiyay Iishma. Caqliga Baabili adhijir ah, waxan uu arkayaa waxa uu la ahaa wax khayaali ah, oo sheeko baraley ah. Iishma kor ayaa uu u qaaday yartii, shimbirihiina hawada ayaa ay u duuleen iyaga oo ku wareegaya, oo la dhacsan si aanu fasiri karin Iishma. Iishma waxa uu eegay indhaheedii quruxda badnaa, waa markii ugu horreysay ee uu arko baadad sidaa u qurux badan. Waxa uu go'aansaday Iishma in uu inanta yar qaato oo uu korsado. Waxa uu go'aansaday in uu u bixiyo magac ay dabeecaddii meeshu ku ilhaamisay. Waxa uu u bixiyay "Tii xamaamku jeclaa''. Magacu marka af Baabili loogu dhawaaqo waxa uu ahaa mid caadi ah, waxa uu noqonayay Baabili ahaan "Samiiraamis[5]".

" Marka uu yimaaddo badbaadiyaha weyni …

[5] Samiiraamis: Semiramis.

Iyo inantan aan waxba galabsan ee
werwersan ee quruxda badan,
kaalay oo xoree hadda.''

Waa dabbaaldeggii weynaa ee Baabil. Marka uu bandhig iyo dabbaaldeg ka jiro Baabil waxa sii boqol jibbaarma quruxdeedii hore, ee indhahaaga u raaxee. Marka ay kulmaan buuraha cagaaran, bananka, webiyada qulqulaya iyo qasriyada marmarka caddaanka ah iyo ka buluugga ah lagu dhisay iyo sawirrada farshaxanka ah ee gidaarrada lagu xardhay. Marka waxaas oo dhan ay sii bilaan carruurta cirka ku sii daynaysa caleenta sacfaraanka, fardaha dheelaya iyo dadka xidhan dharkoodii ugu bilicsamaa taariikhda, marka waxaas oo dhan aad aragto ayaa aad garanaysaa in ay dhacdo weyni jirto. Marka aad aragto sacfaraankii oo dhulka oo dhan qariyay, ayaa aad garanaysaa in uu cunug u dhashay boqor "Kuush [6] '' iyo boqorad "Oodaag' , weliba cunug wiil ah, waayo bandhiggan lama sameeyeen haddii uu cunuggu gabadh yahay.

Waa kan wiilkii xooshka ku jira, ee ay hareero tuban yihiin ummulisooyinki, kuwaas oo habeenno badan u soo jeeday daryeelka hooyada inta ay ka ummulaysay. Ku soo dhowaw xoolka oo fiiri cunugga. Marka aad u soo dhowaato waxa aad maqli doontaa weedho badan oo ammaan ah: '' Indhihiisu qurxoonaa'', ''Waa cunuggii ugu cajiibsanaa ee aan arko,'' Weedhahaasi waxa ay kugu riixayaan in aad u dhowaato oo aad eegto. Waa kan hortaada yaalla! Madax yar iyo indho fiiqfiiqan ayaa ay quruxdiisu koobsatay. Waxa jira wax ku werwer gelinaya! Sida ay ummulisooyinku u hareer tuban yihiin cunugga, ee ay u hareero daadsan tahay caleenta

[6] Kuush: Kush

sacfaraanku, waxa jira wax kale oo aad arkayso. Ma aha walxo, balse waa shayaadiin. Haa, waa shayaadiin. Waxa ay u dhoolla-caddeynayaan si fajac ah oo ay isla garanayaan, wax aanad fahmayn ayaa aanay akhriyayeen.

Inkasta oo ay cunugga ag yaaleen shandado gacanta lagu sameeyay oo xirsixidh ku jiro iyo toon eryaysa rooxaanta xun, haddana waa ay joogeen. Waxa ay ummulisooyinku gacmaha marsadeen sacfaraan, fooddana waxa ay u mariyeen boqorad Oodaag, si shaydaanka looga ilaaliyo cunugga, haddana waa ay joogeen shayaadiintu.

Dadki waa ay wada aamuseen, waxaana hadlay sheekhii weynaa ama Hoomeelkii sida ay reer Baabil u yaqaanneen. Waxa uu yidhi sheekhu:

– Maanta waxa ii sharaf ah, aadamahana u sharaf ah, dhulka oo idilna u sharaf ah dhalashada wiilka lab ee qaadan doona magaca boqorka weyn ee Kuush. Wiilkan boqran oo uu qoyska boqortooyadu gartay in ay u bixiyaan ‘‘Saahaak[7]’’.

Dadkii farxad ayaa ay isla oogsadeen qaylo, balse magaca Saahaak ma uu ahayn mid wata macno la jeclaado. Magacu waxa uu af Baabili ku noqonayaa ‘‘Maskii qaniinyada darnaa’’. Markii magaca maska la soo hadal qaaday, waxa la maqlayay qosolka shayaadiinta, miciyahoodana waxa ka soo baxayay foodhi shaydaan oo farxadeed.

***

Adhi jirihii Iishma waxa uu eegay wejiga dabacsan ee dheddignimada la hurda, ee la moodo in ay tahay hadiyad sammada keligii looga soo diray; waa dheemmantan yar ee uu

[7] Saahaak: Sahak.

bixiyay Samiiraamis. Waa adhijire yar oo maalinta inteeda badan qatan. Hoyga ay u qalanto dheemmantan yari ma aha guryaha duugga ah dhexdooda, waxa la hubaa in ay Ilaahyadu u kaydiyeen quruxdeeda goob kale oo bilan. Waxa ku soo dhacday maskaxda Iishma fikrad weyn oo ku saabsan Samiiraamis.

Berri waxa la qabanayaa bandhig-suuqeedka weyn ee Naynawa[8], kaas oo ku beegan xilliga guurka, ee sannad kasta lagu qabto Baabil. Halkan waxa isugu yimaadda doobabka iyo gashaantimaha ka kala yimi dhammaan gobollada boqortooyada weyn ee Caashuur, si uu mid kastaa uga raadsado lammaane ku habboon. Odayaashu waxa ay iibsadaan hablaha yaryar, si ay ugu guuriyaan wiilashooda marka ay waaweynaadaan. Waxa uu eegay labadii indhood ee Samiiraamis ee qurxoonaa, waxa aanu goostay in uu berri Naynawa geeyo. Iishma waxa uu ku qaaday Samiiraamis tunka, waxa aanu aaday suuqii Naynawa. Haddii ay maalin uun quruxi hadli lahayd waxa ay ku dhawaaqi lahayd ‘‘Naynawa!’’.

Iishma waxa uu xidhay dharkiisii ugu wacnaa laakiin waxa uu u muuqday dawarsade, marka loo eego dadka jooga suuqan ay ku tartamayaan nin kasta oo qaab leh iyo gabadh kasta oo qurux badan. Waa ay qoslaysaa Samiiraamis qosol soo jiidasho leh, oo ku dhaliyay qof kasta oo arkay weyddiinta, ‘‘Waa maxay dawarsadahan luulka gacanta ku sitaa?’’

“Siimaa” ilaaliyaha fardaha boqorku, waxa uu marayay suuqa si uu fardo cusub boqorka ugu iibiyo . Ishiisu waxa ay ku

[8] Naynawa: Nineveh

dhacday wajigii Samiiraamis. Siimaa waxa uu illaabay fardihii, waxa uu illaabay boqorkii, wax kastana waa uu hilmaamay; kaliya waxa uu xasuustay in uu madhalays ahaa. Mar kale ayaa uu eegay cunugtii: timo bunni ah oo dahab la moodo ayaa ay lahayd. Sidee ayaa uu bunnigu dahab u noqdaa?! Ma sharrixi kartid illaa aad timaha yartan aragtid. Laba indhood oo soo koobaya macnaha dheddiginnimada oo dhan, dibno curdin ah … Siimaaa wax kasta faraha ayuu ka qaaday, waxaanu u kacay dhanka adhijirihii gaboobay iIshma. Iishma Waxa uu si feejigan u eegay dharkii Siimaa ee boqortooyada, cunugtiina waxa ay u dhoollacaddaysay Siimaa si yaab leh. Waxa garaacay wadnaha, oo uu ka soo fuqay gororkii u danbeeyay ee aabbennimo ahaa. Waa ay ku carartay oo legga ayaa ay ka gashay, sare ayaa uu u qaaday isaga oo faraxsan. Waxa uu jeebka ka soo saaray kiish lacag dahab ah , oo uu rabay in uu fardaha ugu qaalisan ugu iibiyo boqorka. Iishma waxa uu eegay kiishkii oo hunguriga ayaa ka soo dhacay, ka dibna waxa uu dhunkaday gacantii Siimaa, waanu iska dhaqaaqay isagoo ku heesaya :

"Marka uu yimaaddo badbaadiyihii waynaa,
waad xoroobi doontaa runtii"

***

Waxa ay ahayd madal wayn oo wareegsan, oo uu ku xardhan yahay marmar cad iyo mid dahabi ah. Waxa ku xardhanaa sawirrada Baabiliga ah ee ujeedaysan. Badhtanka madasha waxa ku taallay tuumbo biyaha ka soo qaadaysa webiga, oo si khayaali ah kor ugu tuuraysa. Ma rumaysan kartid in sidan ashqaraarka ah loo farsameeyay biyo-dhaca ka hor afar kun oo sannadood .

Indhaha ka qarso waxan oo hablo qaaqaawan ah ee jiif-jiifa ama kuwan taag taagan, ee ku hareeraysan wiilka quruxda badan ee dhexdooda fadhiya. Eeg xoogga, quruxda iyo

ragannimada wiilkan; eeg bilicda deegaanka iyo sixirka dhismaha reer Baabil ee ku hareeraysan. Waxa aad ku jirtaa qasri ka mid ah qasriyada boqortooyadii Baabil. Wiilkan quruxda badan waa Saahaak inankii boqor Kuush, oo boqol sanno laga joogo dhalashadiisa! Ha yaabin, da’da dadku berigaa waxa ay u dhexayn jirtay shan boqol iyo kun sanno .

Waa adigan kolba indhaha la raacaya bilicdan ashqaraarka ah. Goobta dalxiis ee ugu bilicsan Haawaay[9] waxa ay noqon lahayd wax foolxun marka madashan loo eego. Indhahaagii waxa ay qabteen wax kaa dhabqiyay quruxdii aad la dhaygagsanayd, waxa aad aragtay duq gaboobay oo faalig hayo; dhammaan ilkuhuna ka daateen, gadhkiisana waxa ku yaalla dhawr miiq oo timo ah, oo u dhaadheer oo si layaab leh oo foolxun. Waxa uu xidhan yahay cabbaayad madow oo jeex jeexan, isaga oo dhutinaya ayaa uu ku soo dhawaanayaa madasha. Waxa uu koray odaygii duqa ahaa masrixii marmarka ahaa. Dummarkii qaaqaawanaa ayaa si quudhsi ah u soo eegay, indhaha ayaa uu yar yareeyay Saahaak oo si deggan ayaa uu u eegay duqii. Isaga oo ku dheel dheelaya ayuu ku yidhi:

– Maansuukhyahaw cadh’dhada qabaa sidee ayaad halkan usoo gashay ?

Duqii waxa uu ku eegay laba indhood oo kaah iyo kalsooni iska keen ahi ku ladhanyihiin. Cod u eeg ka abeesada ayaa uu ku yidhi:

– Aniga oo laangadhaynaya ayaa aan soo dulmaray maansuukhyo cadh’dho qaba oo badan, oo xidhan koofiyado qosol leh, oo u taagan oo u taagan sidii qodin la tiiriyay. Waxa ay ilaalinayaan wax ay ku sheegeen inanka Kuush ee wayn.

[9] Haawaay: Hawaii.

Waxa aan u soo galay meesha si aaan u arko inanka Kuush ee la sheegayo, mise waxa aan arkay hacoo hablo iskaga dhex jira oo aan hub iyo seef midna sidan.

Dadkii waa ay naxeen, gaadhkiina Saahaak ayaa ay ku wareegeen. Saahaak inta uu booday oo uu leeb ka qaatay mid ilaalada ka mid ah, ayaa uu wadnaha ka geliyay odaygii. Odaygii wuu dhacay, Saahaakna waxa uu yidhi isaga oo cadheysan :

– Raqdan u tuura libaaxyada, hilibkan xun ka raalli ahaada dhaha, ee aanu maanta idin siinnay .

Gaadhkii raqdii oo la moodo inay beri hore tawaftay, inta ay qaadeen ayaa ay ku dhex tureen xeradii libaaxyada; libaaxyadiina iyaga oo gaajaysan ayaa ay cad cad u kala goosteen raqdii.

Saahaak isaga oo cadhaysan oo hiiftaamaya, ayaa uu qasrigii dhex qaaday. Cid kasta oo ka soo hor baxda waa uu huruufayay, gaadhkiina waxa uu ku canaantay side ayaa uu duqani u soo galay qasriga. Qolkiisii ayaa uu galay Saahaak.

– Maan garanayn in aad magac leedahay inankii Kuush ee waynaayoow!

Saahaak waxa uu eegay goobta codku ka imanayo, isaga oo yaabban. Waxa uu arkay nin ilko la'a, oo toban miiq oo timo ah gadhkiisa ku hadheen, oo xidhan cabbaayad madow oo jeex jeexan codkiisana la moodayay codka abeesada.

***

Mar kale waxa aynu dhex joognaa Baabil, balse waa aynu ka fognahay qasriyadii boqortooyada. waxa aynu joognaa koonaha magaalada xaafadaha danyarta. Waxa meesha maraya nin xidhan maryo boqortooyo, oo fuushan faras suunnaari ah, oo ay ku hareeraysan yihiin rag maryo isku eeg xidhan oo fardo isu eeg wata. Kani waa Oonsi la taliyaha boqorka, magaalada ayaa uu gaaf wareegayay isaga oo hoggaaminaya raxan madax ah, si uu dadka uu gaadhsiiyo amarrada boqorka ee aan dhammaan. Dadku waa ay ku

xoonsanayeen iyagoo oo werwersan dhanna raagsanaya .

Dadkii xoonsanaa ee aamusnaa ayaa ku war helay shanqadha faras meel fog ka soo ordaya. Dadkii si yaab leh ayaa ay u eegeen, weftigii boqorkuna si cadho leh. Yaabkii waxa uu isu rogay amakaag , cadhadiina fajiciso. Qofka faraska madow ku taagan ee sida dagaalyahanka u eryayaa maaha nin balse waa Samiiraamis:

– Ma wax badan ayaa I dhaafay?

Si maad iyo kalsooni leh ayaa ay u tidhi, oo aanay cid kale ku dhicin inay tidhaahdo .

Eeg waftigii boqorka, u fiirso Oonsi waxa ka dhacday cumaamaddii, indhihiisuna galka ayaa ay ka baxeen. Waxa uu la ashqaraaray dheddignimada, debecsanaanta iyo quruxda inantan faraska wadata. Siimaa ayaa ku canaantay Samiiraamis sida ay faraska u eryaysay iyo sida ay kulanka waftiga uga soo daahday. Balse Oonsi ayaa waftigii ku amray in ay socdaan oo ay iska tagaan. Kolanyadii waa ay dhaqaaqday, Samiiraamisna faraskii ayaa ay ku boodday, laakiin waxaa soo jeediyay codka Siimaa :

– Shamiiraam! Kaalay soo deg oo dhunko gacanta la taliyaha boqorka, oo ii dhaaf dheh gefka aan galay, imaatinkaagu waxa uu dhabqiyay hadalkiisa e .

Waa ay ka soo boodday Samiiraamis faraskii, waxa ay u dhaqaaqday dhanka Oonsi iyada oo si dheddignimo ah u fiirinaysa. Jooggeeda iyo jamaalkeeda ayaa gilgilay, waxaana la moodayay in uu isagu u cudur daaranayo iyada .

Samiiraamis waxa ay soo fidisay gacanteedii quruxda badnayd gacantiisii ayaa ayna salaanatay. Inta uu gacanteedii soo dhuftay, oo uu isagu dhunkaday ayaa uu si hoose ugu yidhi:

– Marwo Shamiiraam inaad aqbasho inaan ku guursado, waa dariiqa kaliya ee qalbigaygu kugu saamaxayo .

Samiiraamis waxa ay eegtay Siima, kaa soo u eegaya sida aabeheed oo kale. Wuu dhoollacaddeeyay waanu

dhiirrigeliyay. Ka dib waxa ay eegtay Oonsi, waa nin awood leh oo xil wayn ka haya boqortooyada, qalbigeedu wuu aamusay caqligeedu se wuu waafaqay. Samiiraamis habeenkii xigay ba waxa ay ahayd gabadhii Oonsi, la taliyaha sare ee boqor Kuushka weyn; boqorka boqortooyada Baabil oo dhan .

***

Saahaak wuu anfariiray markii uu eegay meesha codka abeesadu ka soo baxayay. Waxa uu arkay odaygii duqda ahaa, wuu weeraray waxa aanu isku dayay in uu dilo. Gacanta ayaa uu is yidhi odayga ku dhufo oo hawo cidlo ah ayaa uu feedhay. Waxa uu soo qaaday faynuuskii qolka dhex yaallay, oo xaggii odayga ayaa uu ku tuuray, balse waxa ay indhihiisu qabteen faynuuskii oo jidhkii odayga ka dhex baxaya.

Wax uu sameeyoo ayaa uu garan waayay Saahaak, odaygii ayaa se talo ku dhaqaaqay. Waxa uu soo qaaday faynuuskii, Saahaakna waxa uu arkay duqii faynuuska siday oo saddex qof noqday, ka dibna toban qof noqday. Tiradii odaygu waa ay is labanlaabtay illaa qaar ka mid ahi hawada duuleen .

Dhammaantood waxa ay siteen nal ama faynuus. Mar kaliya ayaa ay faynuuskii ku soo wada tuureen dhankii Saahaak. Markii uu is yidhi ka baxso dhulka ayaa uu ku dhacay. Qolkii wuu ololey Saahaakna wuu garan waayay si uu u baxsado. Odaygii waxa uu ku soo dhawaaday Saahaak, caqliga ayaa uu ka qabsaday oo waxa uu doono ayaa uu ku akhriyay. Konton duq halka ay ka ahaayeen waxa ay noqdeen oday kaliyaata, waxaana uu soo dul istaagay Saahaak. Cod xanshaashaqa oo ka abeesada oo kale ah ayuu ku yidhi:

– Naftaada fikir ha ku wareerin ina Kuushow, iskama kay

dhicin kartide.
Saahaak oo fajacsan ayaa yidhi:
– Yaad … yaa aad tahay adigu?
Odaygii aya ku yidhi si aayar ah:
– Waxa aan ahay Luusifar[10]: taliyaha ilayska tan iyo maalinkii la abuuray nuurka.

Faynuuskii iyo ilayskii baxayay ayaa mar qudha wada damay Luusifarna hadalkiisii ayaa uu sii watay :
– Waxa aad tahay mid la doortay ina Kuushow, waxa ku doortay nuurkayga iyo aragtidayda. Aniga dartay waxa aad noqon doontaa ka ugu awood badan dhulka, aniga ayaa ku bari doona sirta maajiga[11], aniga ayaa kuu gacangelin doona waxa dhulka ku sugan oo dhan: jin, insi iyo hantiba .
Saahaak ayaa doonay in uu hadlo, balse Luusifar ayaa hadalka sii watay:
– Cid aan adiga ahayni kuma habboona inay dunida ku amar ku taaglayso, cid aan adiga ahayn kuma habboona inay laxahan hoggaamiso. Adiga cid aan ahayn kuma habboona inay barato sirta maajiga. Haddaad rabto inaad taliskaaga sii liicayaa xoojiso, oo aad waxaas oo awooda hesho iyo in ka badan oo aan wali kuu sheegin: Iigu kaalay buurtaa Danbaawandi. Carruurta halkaa joogtana weydii Luusifar iyaga ayaa ii kaa keeni doonee.

Odaygii hawada ayaa uu ku baaba’ay, sidii oo aanu hore u jirinba. Saahaakna waxa uu ka tagay isaga oo yaabban, yaab noloshiisa oo dhan beddeli doona maalmaha soo socda.

[10] Luusifar: Ibliis; Lucifer.
[11] Maajiga: Sixirka: Magic.

***

Waa buurta Danbaawandi, habeen gudcur ah oo dem ah. Wiil qurux badan ayaa fananaya buurta waddo dhagax ah, isaga oo raadinaya carruur tilmaanta. Oo waa ayo carruurta xilligan meesha joogtaa? Waa madow, gacmihiisana ma arko, waxa uu maqlayaa uun shanqadha kabihiisa. Marba marka ka danbaysa waxa u muuqanaya hadh dad la moodo, oo isku beegaya dhagaxaanta. Saahaak waa uu u qaadan la'yahay, cod dheer ayaa uu ku qayliyay:

– Odayahaw duqda ahi ku mee, waa I kan waan joogaa Danbaawandi ye?

Wax jawaab ah muu helin aan ka ahayn daryanka codkiisa ee buurtu ku soo celisay. Waxa uu mar kaliya dareemay in aanu keligii ahayn, ee la weheliyo. Waxbaa la socda oo mar jaanta la qaadaya. Wuu naxay Saahaak oo hareeraha ayuu eegay, dhinac kasta waxa uu ku arkay indho dhalaalaya: hortiisa, hareertiisa iyo gadaashiisa waa indho. Ma uu baqan Saahaak ee waa uu qayliyay isaga oo canaananaya :

– Mee Luusifar, mee kii isku sheegayay amiirka nuurku?

Markuu intaa yidhi ayaa ay is tuseen, waxa ay ahaayeen boqol carruur ah. Si kakan ayaa ay u soo eegayeen. Dhar madow ayaa ay xidhaanaayeen, timo madow oo dhaadheer ayaa ay lahaayeen. Inta ay isku soo urureen iyaga oo aan hadlin ayaa ay xagga woqooyi u dhaqaaqeen. Saahaak waa uu raacay isaga oo yaabban. Waxa ay geeyeen god buurta ku yaallay, ka dibna laba saf ayaa u istaageen , waddana waa ay u banneeyeen. Saahaak inta uu eegay ayaa uu dhex maray, godkii ayaa aanu galay .

Sidii ballantu ahayd Luusifar waa sii sugayay. Ma uu ahayn duq, curyaanna ma uu ahayn, balse waxa uu ahaa Luusifar; tilmaan kale ma laha oo aan ahayn in uu yahay Luusifar! Kursi weyn ayaa uu ku fadhiyay, madow ayaana ku

hareeraysnaa, inkasta oo ay ka ag shidnaayeen laba faynuus oo nuur yar bixinayay.
Xoogaa cabsi ah ayaa gashay qalbiga Saahaak. Noolaha hortiisa fadhiyaa ma aha insi, inkasta oo uu muuqaal dad leeyahay haddana wejigiisu caadi uma uu muuqan. Tani ma aha gacan bashar, kuwani ma aha faro bashar, ciddiyahani ma aha kuwo dad. Waa maxay noolahani tolow ? ma Illaahay oo carshigii fadhiyaa! caqligiisa Baabiliga ah ee abaaday ma soo saari karo in uu labo tallaabo u jiro shaydaankii Luusifar, ma uu garanayn in uu hor taagan yahay Ibliis laftiisii.

***

Wax kastaa si qunyar ah ayaa ay usoo muuqdeen, wejigii madowgu hadheeyay hadda waa la arki karaa, Saahaak imika yaabkii waa uu ka baxay. Luusifarka la sheegayaa waxa uu lahaa timo dhaadheer oo dhulka taabanaya, timahaasi wajiga oo dhan ayaa ka qariyeen, mana garanaysid inaad hor taagantay iyo inaad daba taagantay. Luusifar ayaa si deggan u yidhi :
– Waxa aan kaa doortay Saahaakow ragga dunida jooga oo dhan. In kasta oo aad nolol baashaal ah ku jirto, haddana waxa aad leedahay qalbi dhintay oo aan jixin jixin, qalbi geesi ah iyo ruux keenodiid ah.
Waa uu fir-ka-naxay Saahaak oo dhidid ayaa dhafoorka yaacay, waxa aanu la amakaagsan yahay cidda hor fadhidaa waxa ay tahay. waxa uu si hoose ugu yidhi:
– Maxaa aad igu dooratay ?
Si cadho leh ayaa uu Luusifar ugu jawaabay Saahaak, codkiisa ayaana laga dareemayay in uu xanaaqay, waxa uu yidhi :
– Waxa aan kuu doortay si aad dadka u hantido, si aad u noqoto basharkii u horreeyay ee la baro sirta maajiga.
Inta uu aamusay ayuu Luusifar yidhi :
– Waa inaan qalbigaaga imtixaamo, sirta maajiga ee wayni haddii cid qaldan u gacan gasho qofkaasi hore ayaa uu ka

dhimanayaa.
weedha imtixaan waxa ay dhimbiil dab ah ku ahayd nafta Saahaak, waxa aanu yidhi:
– Waa maxay maajigan aad ku soo cel celinaysaa, waa maxay imtixaanka aad I marinaysaa ?
luusifar ayaa hadalkii boobay oo yidhi:
– Waa in aad I aragto oo aanad fir-ka-nixin, haddii aan wajigayga ku tuso oo aan inyar oo naxdina ishaada ka dareemo, markaba waan ku dilayaa. Haddii aad I aragto oo aanad nixinna sirta maajigu waa garabkaaga, oo adduunka ayaa laguu soo laabi doonaa, noolaha oo dhamina waa ay ku hoggaansami doonaan.
Wax badan ayaa uu aamusnaa Saahaak, ka dibna waxa uu yidhi:
– I tus wajigaaga waayahaye kanoow?
Si degdeg ah ayaa ay timihii uga leexdeen wejiga Luusifar, oo si toos ah u fadhiistay, wejigana ku soo dhaweeyay Saahaak.
Waxa uu ahaa Saahaak mid ilbidhiqsigaas daawanaya wejiga ugu foolxun ifka, waa wejiga ibliis e. Dhafoorka ayaa dhididday, wadnaha ayaa garaacay, ka dibna waxa uu yidhi :
– Wexee nacdalan ayaa aad tahay adigu?
Luusifar ayaa hadlay, foolxumadiisiina waa ay sii laba jibbaarantay. Waxa uu yidhi
– Waxa aan ahay shaydaan la fogeeyay.

Kani waxa uu ahaa kulankii ugu horreeyay ee jin iyo insi dhex mara, waxa aanu ka dhacay Baabil, xaddaaraddii ugu horreysay ee dad sameeyay duufaankii Nuux ka dib.
Saahaak habeen kasta waxa uu booqan jiray godkaas. Luusifar waxa uu baray Saahaak sirta maajiga. Maaji waxa ay la macno

tahay afka reer Baabil sixirka.
Saahaak waxa uu ahaa sixirroolihii ugu horreeyay ee dhulka kor socda. Taariikhdu waxa ay Saahaak ku naanaystay magac caan ah oo kiisii caadiga ahaa qariyay, waxa loo yaqaannaa taariikh ahaan Namruud[12]; boqor Namruud. Markii dhawr jeer ay ka soo wareegtey kulankii Saahaak iyo shaydaanka waxa uu Saahaak shirqoolay aabbihi Kuush. Waxa uu u qoday hog dheer oo ay ka soo jeedaan konton waran, oo caleen lagu daday. Kaasi waxa uu ahaa shirqoolkii ugu horreeyay ee taarikhda qof loo dhigo, waxa uu ahaa dabinkii dilay boqor Kuush. Shirqoolkaasi waxa uu Saahaak u sahlay inuu boqor noqdo, oo uu aabbihii dhaxlo. Waxa uu saahaak noqday boqorkii ugu waallida iyo dhiig daadinta badnaa abid.
In aad noqoto boqor kelitalis ah waa la fahmi karaa, balse in aad noqoto boqor digtaytar ah, oo sallid ah, oo dhiigya cab ah; oo haddana sixiroole ah oo faajir ah, waa shay aan weli adduunka soo marin. Namruud waxaas oo dhan ayaa uu ahaa Waxa uu ahaa qofkii ugu horreeyay ee taaj madaxa saarta, fikradda taajka laftigeeda waxa uu ka soo xaday boqorrada jinka. Waxa uu sameystay taaj wayn oo dahab ah iyo fargal wayn oo dahab .
Taariikhdu waxa ay xustaa in uu Namruud yidhi markii uu madaxa taajka saartay:– Waxa aanu nahay annagu boqorrada ifka, ee hantiyay waxa yaal adduunka.
Weedha ‘‘annagu’’ illaa hadda waa la garan la’ayahay cidda uu ula jeeday.

***

[12] Namruud: Nimrod.

Markii uu Saahaak ama Namruud heshiiska la galay Ibliis, ee uu baray sirta maajiga, waa kii aabbihii Kuush dilay, ee kursigii dhaxlay. Saahaak waxa uu bilaabay in uu xukunkiisa dhidibada u aaso, oo dhulka boqortooyadii Baabilna uu balaadhiyo. Dagaallo hor leh ayaa uu bilaabay Saahaak, isla markii uu kursiga salka dhigayba. Inkasta oo la taliye sare Oonsi uu aroos ahaa haddana durbaankii dagaalka ayaa hurdada ka kiciyay. Isaga oo kaliya jiif looma diidin balse gabadhiisiina waa ay la diyaar garowday; faras yaqaan Samiiraamis. Samiiraamis waxa ay ahayd fardofuul jiitay, waxa aanay dagaalladii ka dhigtay wacdaro aanay raggu samayn. Guuto dhan ayaa ay kaligeed hoggaaminaysay. Quruxdeedii hore ayaa ay hoggaamintu qurux ugu kordhisay. Waxa ay lahayd qurux ay indhuhu u qushuucayaan, qurux ragga oo dhami u carrab laalaadiyeen. Waxa ay lahayd laba indhood oo waaweyn iyo baadad timo madow oo cufan leh. Indhaheeda waxa laga akhrisanayay kaaha cabqariyadda iyo in ay tahay taliye Imbiraadooriyad seeska u dhigi karta.

Dagaalkii ugu horreeyay waxa ay muujisay Samiiraamis maskaxbadnaan iyo xeelad-dagaal oo xadhkaha goostay. Xeelad burburisay boqortooyadii Bakteeriya, ee dhufayska adkayd. Warkii Samiiraamis waxa uu gaadhay boqor Namruud, kaas oo la fajacay sida ay gabadh dagaal yahani wacdarahan u dhigi karto. Waa uu u yeedhay si uu u abaal mariyo, waxaana dhacay kulankii ugu horreeyay ee Namruud iyo Samiiraamis dhex mara.

Boqor Namruud waxa uu ahaa mid fadhiya carshigiisa, isaga oo hadal kulul kula hadlaya la taliyayaashiisa, sida uu mar walba sameeyo. La taliyaasha waxa ka mid ahaa Oonsi, xaajiga Samiiraamis. Si kedis ah ayaa ay u soo gashay Samiiraamis iyada oo wadata quruxdeedii, kalsoonideedii iyo

tamarteediiba. Markii ay Namruud aragtay wadnaha ayaa garaacay, si aanay hore isugu arag. Qalbigeeda ayaa ay su’aashay ma waxa aad ka cabsanaysaa boqorka ugu weyn dhulka? Waa ay is-diidsiisay naxdintii, iyadu ma aha nooca u ruxma haddii ay qof madax ah arkaan. Markaa waxa uu Namruud canaananayay mid ka mid ah la taliyayaashiisa. Markii uu arkay qoftan soo gashay si dareen leh ayaa uu u eegay, fadhigii ayaa uuna ka kacay. Markii uu kacayay waxa uu is weydiinayay maxaa aad u kacaysaa? Waayo isagu ma aha dadka u kaca qof u soo galay. Indhaha ayaa ay isku dhufteen, cid kale in ay jirtana maa aad moodayn sida ay isugu maqnaayeen.

Waxa meeshii soo galay daymo kale, oo cadhaysan oo waxa dhacaya diiddan. Oonsi ninkii Samiiraamis ayaa aan ku faraxsanayn sid ay wax u socdaan.

Haddana waxa meeshii soo galay indho kale oo nacdalan, indhihii shaydaanka ee Luusifar.

***

In yar kadibba waxa aad daawanaysaa Oonsi oo ka sii shalwanaya qalcaddii weynayd ee Baabil. Namruud ayaa khaarajiyay, si uu u guursado Samiiraamis. Si dheeldheel ah ayaa uu Namruud u sii eegaayay Oonsi dhimashadiisa. Markiiba Namruud waxa uu la aqal galay Samiiraamis, waxaana loo dhigay aroos ay la ruxmatay dhammaan boqortooyadii Baabil. Waxaa la dhigay xaflado aan hore iyo danbeeto midna loo arag, saddex cisho oo xidhiidha ayaa uu dabbaaldeggu socday. Haddiyado badan ayaa dadka oo dhan loo qaybiyay oo dhar iyo xalwad ba leh. Waxa kulmay dayaxa iyo cadceedda sida ay sheeko-baraleydu sheegto: cadceeddu waa ilaaha iftiinka oo ay ku sheegeen Namruud, dayaxuna waa ayaanka quruxda Samiiraamis.

Awooddii Namruud waa ay laba-jibbaarantay, markii ay Samiiraamis xikmad iyo xeelladdeediiba kula soo biirtay.

Maskaxbadnaantii dagaalka ayaa la midowday qallaylkii, qooqii iyo sixirkii Namruud. Boqortooyadii Namruud waxa ay ku duushay dhammaan boqortooyooyinkii ku hareeraysnaa oo dhan, illaa uu Namruud noqday boqorka toddobada gobolba "adduunka". Intaas uun kuma uu joogsan ee waxa uu damcay awood dheeraad ah, waxa uu doonay in uu cirka ku duulo. Waxa uu soo ururiyay lix boqol oo kun oo qof, oo uu ka soo kaxeeyay dhammaan boqortooyooyinkiisii toddobada gobol ba. Waxa uu amray in ay dhisaan fooq cirka ku dhereran, oo aanu qofku gaadhay dushiisa illaa uu sannad socdo. Waa dabaq daruuraha in badan dhaafaya. Dhabtii waa ay bilaabeen injinneerada iyo shaqaalihii dhismaha fooqaas, illaa jinka ayaa ka qayb qaatay dhismihiisa. Dhawr sanno ayaa lagu dhisay fooq weyn, waxa aanu noqday fajicisadii ugu horreeyay ee toddobada fajac ee adduunka; waa fooqa Baabil. Fooqaasi waxa uu ahaa qasriga Namruud iyo carshigiisa dhulka.

***

Maalin maalmaha ka mid ah Namruud waxa uu ku jiifay dhabta xaaskiisa Samiiraamis. Waa uu hurday, iyaduna gacanteeda ayaa ay ku salaaxaysay timihiisa, dhibirsanaan aanay hore u lahaan jirin. Namruud se arrin kale ayaa ku furnaa markaa, waxa uu ku jiray riyo cajiiba. Waxa uu arkayay fardofuul faraskiisa fuushan oo hawada duulaya, qorrax ka soo baxa. Isna waxa uu is arkay isaga oo sammada duulay, oo la diriraya ninkaa kale ee faraska fuushan. Waxa uu arkay ninkii faraska fuushanaa oo meeshii ka tagay iyo meere iftiimaya oo meeshii ka soo muuqda. Waxa uu eegay kobtii uu is lahaa kula dagaalan fardofuulka ee uu markii hore joogay, waxa uu arkay se cadceed meeshii joogta. Cadceeddi waa ay baaba'day oo meerihii kale ayaa meeshii fadhiistay – ee iftiinka badnaa. Mar kale ayaa uu meeshii eegay waxa aanu arkay fardofuulkii oo meeshii meeraha taagan, oo u soo socda

dhankiisa. Waxa uu u soo kacay ninkii faraska fuushanaa dhulka, waxa aanu isaga oo farashkii fuushan soo weeraray Namruud. Namruud waa uu qayliyay oo waa uu ka sasay hurdadii. Waxa uu arkay Samiiraamis oo eegaysa, garabkiisana gacmaha saartay oo dejinaysa .

Waxa ay Samiiraamis soo ururisay dadkii ugu aqoonta badnaa Baabil, si ay ugu fasiraan riyada Namruud. Waa ay ka baqanayeen in ay runta farta ka saaraan, oo ay u sheegaan waxa ay riyadu ku saabsan tahay. Ugu danbayntii waxa ay isku raaceen in ay dhabta u sheegaan Namruud. Waxa ay ku yidhaahdeen waxa dhulkan ku dhalanaya wiil, wax badan ayaa aanu burburin doonaa wiilkaasi.

Wuu cadhooday Namruud cadho argagax leh. Waxa uu amray in la dilo dhammaan wiilasha ku dhalanaya toddobada gobolba. Ciidankiisu waxa ay gaaf-wareegi jireen guryaha, carruurtana waa ay layn jireen. Maalmahaas waxa dhashay Nabi Ibraahiim, hooyadii ayaana ka qarisay ciidankii Namruud illaa uu weynaad oo uu qaangaadhay. Reer Baabil waxa ay ahaayeen kuwo caabuda meerayaasha iyo dayaxa. Cadceeddu waa ilaahooda weyn; boqor Namruud, dayaxuna waa ilaahooda yar; Samiiraamis. Namruudkan la caabudaa isagu shaydaanka ayaa uu hoos tagi jiray.

Waxa uu ahaa Namruud maalmahaa mid kibray oo qooqay. Gacan bir iyo dab ah ayaa uu ku maamulayay bulshada. Nabi Ibraahiim waxa uu bilaabay in uu dadka ugu yeedho dacwadda, oo ku wacdiyo Ilaah qudha ayaa jira, ee iska dhaafa waxa kan aad caabudaysaan. Waxa uu u sheegay in meerayaasha iyo sanamyadu ay yihiin wax aan dhib iyo dheef toona qofka u soo jiidahayn. Waxa dhacday sheekadii caanka ahayd ciiddii gu’ga "Nayruuska". Waa ciiddii uu Nabi Ibraahiim burburiyay sanamyadii Baabil, ee yaallay macbadka Oor; halkaas oo uu faashkii sudhay qoorta sanamkii ugu weynaa; Mardookh. Markii ay dadkii ciiddii ka soo noqdeen waxa ay arkeen dhammaan sanamyadii ay caabudayeen oo la burburiyay, marka mid laga reebo, kaasina waa Mardookhii

weynaa oo ka mudhay sanamyadii kale, sheeddana laga soo arkayay isaga oo faash garabka u sudhan yahay. Dadkii waa ay buuqeen, oo xanaaq ayaa ay isla oogsadeen. Waxa ay xasuusteen cadhadii uu Ibraahiim u qabay sanamyadooda, waa aanay u yeedheen si ay wax u weydiiyaan. Waxa uu ugu jawaabay weydiintii caan baxday ee ahayd:
– Waxa burburiyay sanamkaa weyn, ee isaga weydiiya haddii uu hadli karayo.
Waa ay gadoodeen dadkii, waxa aanay warkii gaadhsiiyeen ilaahooda Namruud. Waxa dhex martay Namruud iyo Nabi Ibraahim doodda adag ee caanka ah:
– Waa ayo Ilaaha aad caabudaysaa Ibraahimoow?
-Waa Ilaaha wax dila waxna nooleeya.
- Anba wax waa aan dilaa, waxna waa aan nooleeyaa. Ka aan rabo cunaha ayaa aan qabtaa oo waa aan dilaa, ka aan raba waa aan iska sii daayaa oo waa aan nooleeyaa.
-Ilaahay cadceedda bari ayaa uu ka soo bixiyaa, ee bal adigu galbeed ka soo saar.

Namruud waa la jebiyay dooddii, wax uu yidhaahdana waa uu garan waayay. Waxa uu amray in Ibraahiim la dilo, dil u dhigma gabboodfalka uu ilaahyada ku sameeyay oo kale. Waxa uu faray in la shido oog dab ah, oo Ibraahiim lagu rido. Reer Baabil bil dhan ayaa ay dabkii shidayeen, iyaga oo xaabo ku guraya. Dabkii ay shideen magaalada oo dhan ayaa uu ifiyay dabo illaa dacal. Iyaga oo wadhfiye "Maanjaniiq" adeegsanaya ayaa ay Ibraahiim ku tuureen dabkii. Maalmo iyo habeenno ayaa ay iska daawanayeen dabkii illaa uu ka demay. Ka dib waa ay ku soo yaaceen dabkii si ay u arkaan danbaska ninkii ilaahyadooda burburiyay. Waxa ay arkeen isaga oo iska taagan oo aan midhkaa qabin, xarriiqyarina aanu soo gaadhin.

Namruud wuu cadhooday cadho weyn, laakiin wuu qarsanayay cadhada markan. Cadhadu waxa ay ku wajahnayd xulafadiisii iyo gargaarihiisa ugu ballan qaaday tamarta iyo awoodda, waxa uu u cadhooday Luusifar.

***

Waxa soo socda ee uu sameeyay Namruud waxa uu ahaa mid yaab leh, waxa uu ahaa mid amakaag ku ah in uu qof bashar ahi sameeyo. Namruudba waxa loogu bixiyay ficilkan ayaa uu ahaa. Namruud waxa uu tagay buurtii Danbaawandi, gaar ahaanna godkii uu kula kulmi jiray Luusifar si uu sixirka u baro:

– Meeday awooddii dhammayska tirnayd ee aad sheegaysay. Sidee baa uu dab holcayaa u gubi waayay jidhka qof lafo iyo hilib ah?

– Maxaa yeelay waa shaydaan ila mid ah aniga.

-Dhabtii? Ma waxa aad ka waddaa shaydaan adiga kaa weyn? Oo soo annaga garanayna Ibraahiim iyo aabbihiisii dhagaxqoraha ahaa ee Aasara.

– Waajib ma aha in aad ogaato wax kasta oo aan garanayo. Aniga iyo adigu waxa aynu nahay uun xulafo keliyaata, oo aan anigu taliyaha ahay, halka aan joogo adigu ma soo gaadhi kartid. Ugu danbayna waxa aad tahay uun bashar kaaja, oo gaajoonaya oo dhimanaya.

– Meeday awooddii? Waxa aan koray sammada u sarraysa oo fooqaygu gaadhayo oo ma aan helin, waxaa aan u daadegay halka ugu hooseysa oo ah godkan aan kuugu imi oo ma aan helin.

– Awooddu waa in aad tahay boqorka toddobada gobol. Ma jiro qof aan magacaaga maqal oo aan kaa cabsanayni, marka uu magacaaga maqlo. Qoysas dhan oo jin ah ayaa kuu adeega.

– Dhammaantood illaa mid qudhaata…Ibraahiim. Waa maxay waxa uu haysto ee aanan anigu haysan ama aanad adigu haysan?

– Waa faqiir oo waxba ma haysto. Xeelad ayaa uu isticmaaalayaa, xeeladduna waa tii dabka ka badbaadisay.

– Waxa aad tahay beenaale, waxa aad tahay liid. Waxa aan kuu sheegayaa in aan ku dili doono oo aan kidif kidif kuu

jarjari doono marka aan awooddaa helo.

Namruud waxa uu ka fallaagoobay garabkiisii Luusifar, hore waxa uu uga fallaagoobay aabbihii oo waa uu dilay. Illaahay ayaa uu ka fallaagoobay oo waa uu ka gaaloobay. Waxa uu ka fallaagoobay sanamyadii iyo meerayaashii tolkii caabudayeen, oo maba uu danayn jirin. Waxa uu ka fallaagoobay xeerarkii, hiddihii iyo dhaqamadii, ka dib markii uu kibray ee uu ku qooqay dhulka. Intaas oo dhan ka dib waxa uu ka fallaagoobay kii sixirkaba baray, Ibliis ayaa uu ka fallaagoobay. Namruud waxa ay ka timi tamarud ama fallaago, Namruudna waxa uu ahaa aabbaha fallaagada inta taariikhdu xustay.

***

– Sayid Saahaak, waxa ina soo gaadhay cunta-kariyihii cusbaa, ka dib markii aad eriday kii hore.
-Soo daa ha soo galee. Horena hadalka ha u dhammeeyo.
Namruud waxa uu ahaa mid la gorfeynaya arrin la taliyaashiisa qaar ka mid ah, markii u dareemay shanqadha kabaha qof soo socda. Waa uu eegay, ka dibna waxa u sawirmay qof uu garanayo, oo loogu sheegay cunto-kariye. Oday duq ah, oo laangadhe ah, oo ilka la', oo xidhan cabbaayad madow oo jeexjeexan. Waa duq dhoolla-caddeynaya si dheeldhel ah. Duqii ayaa ku yidhi cod xanshaashaqa:
– Waxa aan u imid taliye in aan kuu kariyo cuntada ugu macaan ee gacmahaygu sameeyaan. Waxa uu duqii u soo dhawaaday Namruud isaga oo sida dabaq dahab ah oo cunto ku jirto. Waxa uu ku yidhi Namruud isaga oo ka boodsan:
– Uma baahni in aan arko waxa aad siddid. Waa aan ku diiday adiga.

Waa uu dhoolla-caddeeyay duqii waxaana muuqday ilkihiisii teelteelka ahaa oo foolxun. Waxa uu yidhi:

– Iga raalli ahow taliye. Ii ogolow in aan garabka kaa dhunkado, aniga oo ixtiraam kuu muujinaya.
Odaygii waa uu soo dhowaaday illaa uu dhulka madaxa saaray lugihiisa hoostiisa. Ka dib waa uu kacay oo waxa uu dhunkaday garabka midig ee Namruud iyo ka bidix. Ka dib waa uu iska baxay oo waa uu iska tagay.
- Maxaa aad u diidday taliye, waa uu cunto macaanaaye.

Namruud uma uu jawaabin, waxa uu ahaa mid tash ku furan yahay. Luusifar habkan ma raalli gelin ayaa uu uga jeeday mise wax kale? Mooji. Namruud waa uu kacay waxa aanu toos u aaday qolkiisii ay joogtay xaaskiisa Samiiraamis, oo uu u tagi jiray markasta oo dhib qabsato. Maskaxdeedda iyo xeelad badnaanteedu waxa ay la miisaan tahay buurta Danbaawandi oo dahab ah iyo wax la mid ah. Markii uu u galay Namruud qolka, waxa uu arkay Samiiraamis oo shanlaynaysa timaheedda dahabka ah ee bunniga ah. Markiiba waxa uu dareemay Namruud garbaha oo xanuunaya iyo lafihiisa oo la moodo in ay kala baxayaan. Waa uu qayliyay Namruud oo dhulka ayaa uu ku dhacay. Samiiraamis ayaa aragtay oo ku soo carartay. Ka dib waa ay istaagtay iyada oo ka fajacsan waallida horteeda ka socota.

Garbihii waaweynaa ee Namruud waxa ka soo baxay laba mas oo madmadow oo foolxun. Marna cunaha ayaa ay iskaga marayeen marna garbaha, marna dharkiisa ayaa ay dhex galayeen. Waa laba mas oo aan dabo lahayn. Labadii mas waa ay cartameen, oo fiiftameen, miciyaha ayaa aanay isla dhacayeen. Wax dhaqdhaqaaq ah ma ay samayan Namruud iyo Samiiraamis, maxaa yeelay labaduba waa ay suuxeen. Fiifta masaska oo qudha ayaa laga maqlayay qolka oo dhan.

***

Luusifar waxa uu farriin u soo diray Namruud , waxa uu u soo qoray: *”Quudi caloolaha qatan markasta. Haddii ay waayaan*

wax ay cunaan, madaxaaga ayaa ay quudan doonaan."

Xilligaa laga soo bilaabo caado cusub ayaa uu Namruud la soo baxay. Gacanyarayaashii waxa uu amray in ay laba madax oo dad u keenaan subax kasta. Waxa uu ogaaday in aanay labadan abeeso madax dad mooyee wax kale cunayn, weliba madaxa carruurta, waayo marar badan ayaa ay masasku diideen madaxa dadka waaweyn. Gacanyarayaashii maalin kasta magaalada ayaa ay ku kallihi jireen laba madax ayaa aanay u keeni jireen. Cidna ma ay fahmin waxa uu Namruud labada madax ku suubbinayo. Cid kasta oo ka hor timaadda amarkanna qoorta ayaa uu u dheerayn jiray Namruud. Cidna ma ay garan cabbaayaddan madow ee uu Namruud imika mar kasta xidho, cidna kama ay fahmin waxa kan ka hoos dhaqdhaqaaqaya cabbaayadda, qofna kuma uu dhiirran in uu weydiiyo Namruud.

Marar badan waxa uu isku dayay Namruud in uu gawraco labada abeeso. Markasta oo uu gawraco garabkiisa ayaa ay laba cusub ka soo bixi jireen. Samiiraamis hadalkii ayaa ku gudhay, wax ay samayso waa ay garan wayday oo ay ku badbaabiso ninkeeda. Dhakhtarro ayaa ay uga keentay dhammaan toddobadii gobol, dhakhtar kastaana waa uu ku guul darraystay in uu tirtiro labada abeeso. Markasta oo uu dhakhtar ogaado sirta labada abeeso ee Namruud ku maran waa la dili jiray.

Waxa maagalada dhinaca kale ka degganaa nin tummaal ah oo la yidhaahdo Kaawe, waxa wejigiisa ka muuqatay tamar xooggan. Murugo badan ayaa uu qabay, maxaa yeelay, gacanyarayaashii Namruud ayaa u yimid oo laba carruur ah ka qashay, oo Namruud u geeyay. Kaawe waxa uu ahaa tummaal muslin ah, oo raacsan diinta Nabi Ibraahiim. Waxa uu dhex lugayn jiray dadka dhibban ee dulman, ee carruurtooda madaxa laga guray. Waa uu dhex dagay oo waxa uu ku abuuray kacdoon lagaga soo horjeedo Namruud iyo taliskiisa. Guri guri, xaafad xaafad iyo tuulo tuulo ayaa uu

u gaadhay warkii kacdoonku. Waxa uu soo ururiyay Kaawe oo ka amar qaadanayay, ummad badan oo cadho u qabta Namruud.

Si kedis ah ayaa uu Kaawe u soo galay fooqii Baabil. Namruud ayaa soo daayay isaga oo moodaya in uu yahay tummaal soo bandhigaya waxa uu gacantiisa ku farsameeyay. Waxa uu ku yidhi Kaawe, lahjad adag isaga oo kula hadlaya, oo aanu Namruud u baran:

– Boqorkii Baabil, Caashuur iyo weynaheediiyoow, islaam aad nabad gashide, oo aan taliskaaga kuu daynee.

– Oo ma waxa jira Ilaah aan aniga ahayn kanoow?

– Ilaaha dhulka iyo sammooyinka ayaa jira.

– Ma sidii Ibraahiim ayaa aad u hadlaysaa?!

-Ibraahiim waa nebi Ilaahey soo diray, dacwaddiisana waa aanu rumaynay annagu. Adigana waxa aanu kuugu yeedhaynaa in aan Ilaahay keligii caabuddo, oo aanad u shirki yeelin. Haddaad diiddana waa aanu kula dagaalami.

– Waar miyaa aad waalateen? Anigu waxa aan ahay Saahaak, weynihii Baabil, Caashuur iyo gobollada toddobada ah. Soo ururiya ciidankiinna saddex cisho, anna aan soo kaxaysto huwantayda. Dhulkaba waa aan idinka tirtiri doonaa, oo raadkiinnaba waa la waayi doonaa.

Kaawe waxa uu saddex cisho ku soo ururiyay kooxo cadhaysan, Namruudna ciidankiisii ayaa uu isu keenay. Namruud isaga ayaa ciidankiisa soo horkacay, waxaana la socotay xaaskiisa fardofuulka ah ee Samiiraamis. Ciidanka Namruud waxa ay in badan ku soo labalaabmayeen kooxaha Kaawe. Labadii ciidan ban cidlo ah ayaa ay iska hor yimaaddeen. Kaawe iyo ciidankiisu waxa ay eegayaan weynida iyo badnida ciidanka Namruud iyo sida ay u hubaysan yihiin. Naftooda marka ay eegaanna waa ay isla yaabayeen yaridooda iyo hub yaraantooda. Si quudhsi leh ayaa ay Namruud iyo Samiiraamis u eegeen ciidanka Kaawe. Ciidanka Namruud waxa ay rabeen in ay cagta mariyaan ciidankan yar ee hor taagan, oo ay burburiyaan. Dhinaca

cadceed ka soo baxa waxa ka soo muuqda wax.
Awooddii uu in badan raadiyay Namruud ee uu waayay, waxa ay maanta goosatay in ay wax tusto. Awoodda Ilaahay ee ah abuuraha cirka iyo dhulka iyo waynahooda. Si kedis ah oo aan wargelini jirin waxa ay dhammaan ciidamadi arkeen ciidan kale oo dhinaca bari ka soo socda, ciidan sammada ka yimi. Ciidan badnidiisa cadceeddii qariyay, waa ciidan kaneeco ah.

Markii hore cidna ma ay fahmin waxa socda. Maxaa ay rabtaa kaneecadan cadceeddii qarisay. Waxyar kadibba ciiddankii kaneecadu waxa uu soo gaadhay meel laga arki karo. Waa uu fir-ka-naxay Namruud, cirka ayaanu eegay, isaga oo isku dayaya in uu fahmo waxa socda. Kaneecadi hoos ayaa ay u soo dagtay iyada oo ku dhex dhacday ciidankii Namruud. Waa ay isku dhexyaaceen ciidankii Namruud, iyaga oo mid kastaa isku dayayo in uu baxsado. Kaneecadani ma ay ahayn mid caadiya, waxa uu ahaa nooc kaneeco ah oo aanu dhulku hore u arag xataa casrigii Dhaynasoorta. Waa nooc bahal ah, waxa uu qaniinyo ku dhammeeyay cadkii ciidanka Namruud. Hilibkoodii dhulka ayaa uu wadhnaa, isaga oo dhiig ka qulqulayo. Namruud iyo xaaskiisu waxa ay isku dayayeen in ay meesha ka baxsadaan, oo aanay kaneecadu soo gaadhin. Namruud ayaa cirka eegay, kadibna waxa uu yidhi:
– Yaa aad tahay kan awoodda lehoow? Halkeed joogtaa? Ma shaydaan ayaa aad tahay?

Waa ay ordayeen isaga iyo xaaskiisu kaneeco badan ayaana eryanaysay. Waxa ay u muuqatay in uu faraskoodu ka dheeraynayo kaneecada, balse, hal xabbad oo kaneeco ah ayaa soo gaadhay, wax cajiiba ayaa aanay samaysay. Waxa ay ka gashay sanka, oo maskaxda ayaa ay fadhiisatay. Namruud waxa uu waayay dheellitirkii oo waa u dhici gaadhay, se waxa soo qabatay Samiiraamis, oo faraskeeda ku soo wareejisay. Waa ay oroday illaa ay kaneecadii kale ka dheeraysay, waxaanay galeen fooqii Baabil. Albaabadii ayaa ay soo xidhay.

***

Waxa lagu jabiyay Namruud dagaalkan jab weyn. Ciidankisii uu horkacayay dhammaantood waa ay go’een. Waxa u soo hadhay ciidan yar oo qasriga Baabil ilaaliya. Ciidankii Kaawe markii ay arkeen mucjisadaa Eebbe ayaa ay dhammaantood u sujuudeen, iyaga oo u mahad naqaya. Ciddii aan muslim hore u ahayn waa ay islaameen. Kaawe calankii ayaa uu kor u qaaday waxa aanu ciidankii ku hoggaamiyay dhanka qasriga Baabil, halkaas oo ahayd qasriga Namruud ee carshigu u yaallo.

Namruud xaaladdiisu waa ay ka soo daraysay. Kaneecadii sanka ka gashay, maskaxda ayaa ay fadhiisatay. Markasta oo ay dhaqdhaqaaqdo Namruud waa lagu kacayay, mana uu nafisayn illaa kab wejiga lagala dhaco. Samiiraamis waxa ay eegaysay ninkeeda oo kab lala dhacayo, waana ay ooyaysay. Waxa ay rabtay in ay nafteeda ku furato, haddii ay suurto gal tahay. Waxa ay xil iska saartay in ay quudiso labadii mas ee garabka ka saarnaa. Waa ay la yaabbanayd waxa Namruud ku dhacay, masas garbaha ka saaran iyo kaneeco madax kaga jirta. Waxa uu ka fallaagoobay awood aanu wax tamar ah u hayn, cid kalena aanay iska caabbin karin, balse waxa uu ahaa keenadiid fallaago ah.

Ciidankii Kaawe waxa ay hareereeyeen qasrigii Baabil. Hadhaadiga ciidankii Namruud dufaac adag ayaa ay galeen, oo qasrigii waa loogu geli waayay. Go’doomintii waxa ay socotay afartan cisho. Cidna ma ay ogayn waxa ka dhex socda qasriga Baabil. Indhaha Namruud waxa ay ahaayeen kuwo casaaday, wejigiisuna waxa uu casaaday sidii kab loogala dhacayay. Si kedis ah ayaa loo jebiyay afaafkii qasriga Baabil. Kaawe gudaha ayaa uu soo galay isaga oo ciidankiisii hoggaaminayay. Cidna ma ay joojin karayn Kaawe tummaal, waayo, waxa uu u socday aargoosi. Namruud waxa uu qashay labadiisii cunug, maanta isna isaga ayaa uu ka goosanaya.

***

Waa buurta Danbaawandi, habeen gudcur ah oo magangooyo ah. Waxa uu Kaawe garaacayay tiirar biro ah oo uu dhulka ku qotominayay. Namruud waxa uu jiifay dhulka isaga oo xidhxidhan. Codkii labada abeeso ayaa baxayay, oo dhegaha dadka tirayay. Kaawe ayaa eegay oo Namruud ku yidhi, isaga oo ku dheeldheelaya:

– Maxaa aad iigu sheegi weyday in laba abeeso kugu lammaan yihiin, waa aan kuu cudurdaari lahaaye.

Namruud eray qudha ma uu soo celin, ee waxa uu ka qaylinayay xakame uu Kaawe afka kaga xidhay. Waxa uu la barooranayay dhaqdhaqaaqa kaneecada xanuunjinaysa. Kaawe hawshii tiir samayna waa uu dhammeeyay. Afar tiir ayaa uu Kaawe lugaha iyo gacmaha u sudhay Namruud. Namruud tiirarkii ayaa uu ka soo laalaaday, dadkuna waa ay daawanayeen. Labadii mas ayaa cadcad madaxiisii u kala goostay, iyaga oo gaajoonaya. Kaawe isaga oo sii socda ayaa uu ku yidhi:

– Igu salaan ninkii lahaa labadaa mas. Iyaga ayaa madaxaaga soor ka dhigan doona, ee aniga ma aha.

Waxa ku soo xoomay raqdii Namruud carruur timo dhaadheer, oo indhahoodu dhalaalayaan. Labadii mas waxa ay cuneen xubnihii uugu danbeeyay ee cadkii Namruud, illaa ay ka soo baxday madaxiisa kaneeco u duushay meeshii ay ka timi. Sidaa ayaa ay taariikhdu u laabtay boggii ugu danbeeyay ee nin ku qooqay dhulka, oo ku kibray. Dhammaadkiisu waxa uu dhigmayay heerka qooqiisa; waa boqor Namruud.

DHAN

Iftiimin

Sheekada Namruud ha u malayn sheeko-baraley, waa sheeko dhab ah. Inkasta oo ay tahay sheeko sooyaal qiimo leh, haddana filin lagama sameyn, sheekana lagama qorin; waayo waa loo kasay in la qariyo. Namruud waa uu ku xusan yahay dhammaan kutubta taariikhda ee la aqoonsan yahay, kuwa Carabta iyo kuwa caalamkaba. Kutubta taariikhdu waxa ay xustaa sheeko nin xukumay isla dhulkan Baabil ama Ciraaq, isla xilliga uu Namruud xukumay.Waa nin la yidhaahdo Saahaak, carabtuna waxa ay u taqaannaa Daxaak. Kutubta taariikhdu waxa ay qiraysaa in labadaas qof ay isku qof kaliya yihiin; Saahaak iyo Daxaak.

Waxa kale oo la weriyaa nin saddexaad oo isna dhulkan Baabil xukumay, isla waqtiga nimankan sare. Waxa lagu sheegaa ninkaas in uu ahaa sixirroolihii ugu horreeyay taariikhda. Mar kale kutubta taariikhda waxa ay xustaa in ninkan danbe oo loo yaqaannay Soorostar[13] iyo Namruud ay ahaayeen uun qof keliya. Si aad u garato in ay waxaniba isku mid ahaayeen waxa aad akhridaa sooyaalka saddexdan magac Namruud, Daxaak iyo Soorostar; waxa aad fahmi doontaa in ay qof keliyaata yihiin. Marka aad sooyaalkooda akhrido ka dibna isha mari waxa ay Tawraad iyo Quraanku arrinkan ka yidhaahdeen, sheekada oo dhan ayaa kuu bixi doonta. Anigu

[13] Soorastar: Soraster.

waxa aan sameeyay oo keliya in aan baadhistaa kuu soo koobay.

Namruud waxa aad ku arki doontaa kutubta taariikhda magacyo kala duwan oo loo yaqaannay sida Mayn, Maynuus, Naynuus, Nayniib, Mardoosh, Mardook, Isdihaak iyo Biyuuraasab. Waxaas oo magac ah waxa loogu bixiyay waa shakhsiyad baraale ah, oo sheeko-baraley ay ku hayaan Beershiyaanka, Kurdida, Afgaanistaanta, Hindida, Turkumaanka iyo Carabtuba. Magaciisu waxa uu isla bedbeddelay dhalanrogga afeed iyo ka taariikheed ee ku dhacay dhami xadaaradaha. Waxa laga allifay Namruud tix-malxameed Iiraani ah oo loo yaqaanno Al-Shaagahanaama. Taallada tummaal Kaawe illaa hadda waxa ay ku taallaa magaalada Isfahaan ee Iiraan. Birtii lagu daldalay Saahaak ee buurta Danbaawandi weli waa ay jirtaa oo waa caan. Weli Iiraaniyiintu waxa ay u dabbaaldegaan dilkii Namruud, waxa aanay u yaqaannaan ciidda Nayruuska.

In kasta oo fooqa Baabil uu ahaa fooq ka dheer daruuraha, laakiin waa la burburiyay burburin dhammaystiran, wax raad ahina kama uu soo hadhin. Kuma arkaysid in fooqa Baabil lagu xuso toddobada fajiciso ee adduunka in kasta oo uu ahaa fajicii koowaad.

Qurruxley Samiiraamis waa gabadha sidata shamaca ee taallada gobonnimada Maraykanka, waana gabadha aad ku aragto iyada oo tooshka sidata astaanta caanka ah ee shirkadda filimaanta ee "Columbia Pictures". Dhimashadii Namruud ka dib shan sanno ayaa ay Baabil xukumaysay, waxa aanay u dhistay taallo weyn oo dahab ah ninkeedii Namruud. Waxa ay dhistay beeraha Baabil ee laalaada, oo noqday fajicii labaad ee adduunka. Sidaas ayaa ay dadku u barteen sixirka markii ugu horreysay. Namruud dad badan ayaa uu sixirka baray, waxa aana xertaas loo yaqaannay al-Maaji ama sixiroolayaasha; waana halka uu ka yimid erayga Ingiriisiga ah ee Magic.

Waxa aan filayaa in aad ka heshay dheeshii waraaqaha ee

aynu ciyaaraynay, weli meel bilow ah ayaa aynu maraynaa. Kooxda ku xigtaa waa lix waraaqood iyaguna. Aan hore kuu tuso inta aanu xiisuhu kaa dhammaan:

- **Waraaqda koowaad**: waa waraaqda rooxaan gubanaysa, waxa ka muuqda madaxyo shaydaan oo dab ka dhex holcaya.
- **Waraaqda Labaad**: waa waraaq tii hore u eeg, waxa ka muuqda qalfoofka madaxyo gubanaya.
- **Waraaqda saddexaad**: waa waraaqda naag sixirrooley ah, waxa ka muuqda gabadh sixirroole ah oo qurux badan.
- **Waraaqda afraad**: waa waraaqda malaa’igta, waxa ka muuqda baal cad, oo astaan u ah malagyada.
- **Waraaqda shanaad**: waa waraaqda ka-been-abuurka mucjisooyinka,waxa ka muuqda shaxan goobooyin afar gees ah oo madow iyo caddaan ah, ma kasayo waxa looga jeedo.
- **Waraaqda lixaad**: waa mida u danbaysa, waa na warqadda tafaafulka rogan, waxa ka muuqda sawirka sixirroole qaab daran.

Si wanaagsan ayaa aynu waraaqaha u habaynay, oo isku xigta, imika waxa la gaadhay markii aan kuu sheegi lahaa sirta 2aad iyo sheekada 2aad.

***

Soo Deg Inaana
(900 C.H)

Ku soo dhawow Baabil mar kale, dhulkii nacdalnaa. Waxa aynu joognaa xilli ka danbeeyay casrigii Namruud. Haku wareerin muuqaalka hortaada ka muuqda, ha u baqan quruxleydan waa "Inaana [14] " oo dhulka iyo cirkaba ka nacdalan. Ha qariibsan ninkan go'a xidhan waa Haasaadh, ninka ugu khatarsan sixirroolayaasha Baabil ee casrigan. Inta aanan muuqaalka idiin wada sawirin xog keliya waa in aad ogaataa: sixirroolahan waxa lagu naanaysaa Maansaaro, af Baabilina waxa ay ku noqonaysaa Nakroomaansar, Nakroomaansarna waxa ay la macne tahay … la soco sheekada si aad u fahanto.

Ninkii waxa uu dhex istaagay goobooyin, waxa aanu xidhnaa go' dheer oo cas, liidad madmadow oo dhaadheerina ay ku yaallaan. Waxa uu xidhnaa dhar wadaad caan ah, waxa uu akhriyay ducooyin iyo tafaaful uu cod dheer ku akhriyayo. Mar sare ayaa uu u hadlayay marna hoos ayaa uu u dhigayay hadalka. Gacmaha marna kor ayaa uu u taagayay marna hoos ayaa uu u dhigayay. Inta uu goobooyinkii ka dhex baxay ayaa uu u kacay dhanka Inaananadii nacdalnayd, timaheedii ayaa uu qabtay quruxda badnaa ka dibna waxa uu sameeyay wax la yaab leh. Waxa uu ku cadaadiyay madaxeedii marmarka dhulka, kolba dhinac ayaanu dhulka ugu xarriiqay madaxeedii, meelo gaar ah ayaanu ku xoqayay. Ninkani waa

[14] Inaana: Inanna.

uu garanayaa waxa uu samaynayo. Adigu ma garan kartid waxa uu samaynayo, illaa uu dhammeeyay hawshii uu waday, madaxii Inaanana meel fog ayaa uu ku tuuray. Ninkani wax baa uu qorayay! Qalinkiisu waxa uu ahaa madaxa Inaana , khadkiisuna waxa uu ahaa dhiiggeeda. Hal xaraf ka fahmi maysid waxa uu qoray, maxaa yeelay, waxa uu ku qoray far Baabili duug ah, xarfaha luuqadani waa kuwo cabsi leh.

Waxa uu bilaabay in uu kor u akhriyo tafaaful sixir ah:

– Ii kaalay, ii kaalay. Iiga imo meerahaagii nacdalnaa ee wareegsanaa, soo deg Inaana.

-Tii ay dibnaheeda u foorarsadeen qabkii ragga iyo madaxoogiba'eey, ii kaalay, ii kaalay. Tii ay qalbiyadu aragtideeda la kibir jabeeneey ii kaalay.

Wax badan ayaa uu akhriyay haddana, illaa uu dab ka kacay xarriiq goobo ah. Waxa uu holaca ka dhex arkayay madaxyo shaydaan, madaxyo shaydaan oo uu gubayo dabka baxayaa, ee tafaafulku kiciyay. Madaxyada dhexdooda madax ayaa ka soo muuqday, oo haddana qarsoomay. Waa madaxii Inaana, ama sidaas ayaa loo sawiray isaga. Waxa aan hubaa in uu ninkani qalbi adag yahay, madaxyada shaydaanka oo la sheego in ay argagax leeyihiin, heerka argagaxooda oo gaadhsiisan in madaxii bilnaa ee Inaana ee ka soo dhex muuqday uu is dooriyay. Dabkii waa uu bakhtiyay haddana meel kale ayaa uu ka oogmay. Waxa uu ka kacay dab madaxii go'naa ee Inaana ee dhulka yaallay.

Waxa kan aynu arkaynaa ma uu ahayn dab, ee waxa uu ahaa khayaal uu shaydaanku u muujinayo indhaha Haasaadh. Waxa ay u muuqataa in wax kasta oo uu samaynayay ay u guulaysteen, waxa timi gabadha ay quruxda ka amaahdaan

dhammaan dumarka adduunku, waxa timi Inaana. Roomaanku waxa ay u yaqaannaan Faynuus[15], Giriiggu waxa ay ugu yeedhaan Afroodet[16], Carabtii hore waa ay caabudi jireen iyaga oo u yaqaannay Laata. Waxa timi Cushtaar sidii ay reer Baabil u yaqaanneen. Waxa timi ilaahaddii quruxda [sida dadkii hore ku sheegeen] waxa ay xidhnayd dharkii ugu wacnaa iyo dhabankii ugu bilnaa.
Waxa ay timi iyadda oo aad mooddo jeegaan nuurisay qolkii madoobaa oo dhan. Waxa uu la ashqaraaray ilbidhiqsiyo Haasaadh weynaanta quruxda hortiisa ka muuqata. Inta uu is adkeeyay ayaa uu ku yidhi:
– Inaana boqorad yahay, iiga sheekee warka labadii sixirroole ee Cusaasiil iyo Shamhaasi, iiga sheekee socdaalkaagii boqranaa Inaana.

Faynuus waxa ay ku soo eegtay indhaheedii quruxda badnaa, iyada oo la moodo in ay yasayso, waxa aanay tidhi:
– Ma ay ahayn laba sixirroole, magacyadooduna kuwa aad sheegtay ma ay ahayn. Midkood waxa la odhan jiray Haaruud midka kalena Maaruud. Socdaalkaygi muu ahayn mid barakaysan, ee waxa uu ahaa mid nacdalan.
Wejiga Haasaadh waxa laga dareemayay yaab, waxa aanu yidhi:
– Waa aan ku tuugayaa boqoradda quruxdaay, iiga warran wax kasta oo aad aragtay iyo qaabkii ay u dhaceen.
Faynuus waxa ay u soo dhaqaaqday dhanka goobooyinkii dhulka, hab maamuus boqortooyo leh, maradii weynday ayaa ay iska fayday. Waa ay fadhiisatay, ka dibna sheekadii ayaa ay

[15] Faynuus: Venus.
[16] Afroodet: Afrodet

biloowday. Faynuus waxa ay tidhi:
Waxa i soo diray sixiroolayaashii Oorook[17], waxa aanay ii soo direen magaalada Baabil. Waa aad kasaysaa weynaanta magaalada Oorook iyo sida ay hormood ugu ahayd cilmiga sixirka. Waa markii ugu horreysay ee aan ka soo baxo magaaladayda Oorook, waana markii ugu danbaysay sida oo kale. Sheekadu waxa ay ahayd waxa soo gaadhay waaweynka sixirroolayaashii Oorook, in ay jiraan laba sixirroole oo ka wareeriyay dadkii Baabil, oo sixirroolayaashii kale oo dhan jebiyay. Midkood waxa la yidhaahdaa Cusaasiil ka kalena Shamhaasi. Waxa nalagu yidhi labadan sixirroole waxa ay dadka barayaan sixirka si bilaasha ah. Qofka ay baraanna waxa ay farayaan in ay dunida sii gaadhsiiyaan sixirka, oo ay faafiyaan; waa sida naloo sheegaye.

Waxa ay ujeeddadaydu ahayd in aan labadaa sixirroole sixirka ka soo barto, oo aan ogaado waxa ay dadka barayaan iyo waxa ay ka qariyeen ba. Adigu waa aad ogtahay in aanu jirin nin –boqor ha noqdo ama sixirroole eh, ha yaraado ama ha weynaado e, oo hor istaagi kara sixirkayga gaarka, sixirkayga dheddignimo iyo quruxdayda. Hadalka oo kooban waxa aan ahaa qofkii ugu habboonaa ee hawshan geli lahaa. Waxa la i faray in aan soo qoro wax kasta oo aan barto oo aan soo gaadhsiiyo sixirrooleyda Oorook.

Dhibtu waxa ay ka taagnayd in sixirka labadan sixirroole uu buriyay ama ka badiyay dhammaan sixirkii yaalay magaalada Baabil, oo waa ay furfureen sixir kasta. Labadooduba la yaab ayaa ay lahaayeen. Waxa jiray noocyo sixirka ka mid ah oo ay yaqaanneen reer Baabil oo ay waaweynka sixirroolayaasha Oorook fahmi waayeen, in ay

[17] *Oorook: Uruk.*

furaan iska daaye. Waxa ka mid ahaa sixirka samuuradda. Waa sammurad lagu sawiray dhammaan webiyada mara Baabil. Haddii uu qof ka mid ah reer Baabil ka hor yimaaddo talada sixirroolayaasha, waxa ay irbad ku mudi jireen sawirka webiyada, ka dibna waxa istaagi jiray webiga caadiga ah, ama waa uu fatahi jirey oo dadka ayaa uu qarqin jiray. Waxa ka mid ahaa sixirka muraayadda. Qofka uu ka maqan yahay qof ku qaaliyi waxa uu u iman jiray sixirroolayaasha Baabil, marka uu siiyo waxa ay ka dalbadaan, ka dib muraayadda ayaa ay ka tusi jireen xaalka uu ku sugan yahay qofkii ka maqnaa. Labadan sixirroole ee cusubi waxaas oo dhan waa ay buriyeen iyo wax ka badan ba.

Alla qurrux badnaydaa Baabil. In kasta oo aan hawl u socday haddana waxa qasab ahayd in aan soo arko fooqa Baabil ee weyn iyo beereheeda laadlaada. Inkasta oo labadan goobood aan loo ogollayn in ay booqdaan cid aan ahayn reerka boqortooyada Caashuur, laakiin waa aad iska garanaysaa xidhiidhka aniga iyo boqorrada naga dhexeeya. Waxa aad xusuusataa boqorkii ugu danbeeyay ee aan booqdo in uu lugahayga ku hoos rukuucay, waxa kale oo aan hubaa in labadan boqor ay i hoos fadhiisan doonaan oo ay lugaha iga dhunkan doonaan markooda. Waxa aan hubaa in ay i bari doonaan dhammaan sixirkii ay barteen illaa markii ay ahaayeen carruurta.

Markii aan dadka weydiiyay warka Cusaasiil iyo Shamhaasi wax la yaable ayaa la iiga sheegayay. Waxa la igu yidhi waxa ay joogaan god ku yaalla buuraha ku teedsan Baabil, godkaasna waxa booqda ama taga dad badan oo reer Baabil ah. Qofka godkan taga waxa lagu imtixaamaa imtixaan yaab leh, haddii uu qofku ku fashilmana waa la eryayaa. Qofka ka gudba imtixaankan godka ayaa uu joogayaa muddo sannad ah, oo aanu dibadda u soo baxayn. Marka uu dhammaysto qofku sannadkaa waxa uu ka soo baxayaa isaga oo ku xeeldheer fanka iyo cilmiga sixirka, isaga oo ka aqoon badan dhammaan sixirroolayaasha Baabil, ama kuwa

deegaannada kale. Sixirroole kuuma sixri karo sida loo sixro dadka caadiga ah.

Afaafka godka lama furi jirin maalin keliyaata mooyaane sannadkii, sannadka ayaamaha kale oo dhan waa ay xidhnaan jirtay, ma ay furi karayn dadka ugu awoodda badani. Maalintii godka la furayay waa ay soo dhowaatay, waxa aan ahaa mid nasiib leh. Waxa ii kaxeeyay dhanka godka adhiile la ashqaraaray qurruxdayda, oo faraskiisa igu qaaday, hoggiina waa uu i geeyay.

– Waa kan, waxa aynu soo gaadhnay godkii quruxleyeey. Ma garanayo waxa ku qasbaya boqorad boqoradaha insiga ka mid ah in ay gasho hog.

– Shaqadaada ma aha adhiiloow, halkan igu sug, haddii aanan soo noqonna gurigaagii iska qabo.

– Cimrigayga oo dhan waa aan ku sugi karayaa boqoraddaydaay, guryahayguba adiga gadaashaa waxa ay noqonayaan xabaalo.

Xaq baa uu u leeyahay adhiiluhu in uu hadalkaa yidhaahdo iyo wax ka badan ba, waxa uu siday Faynuus lafteedii, inaga daa isaga hadda. Muuqaalka godku ma uu ahayn mid wax badan laga dheehan karo, waxa uu ahaa dalool yar oo buur ku yaalla. Rag iyo dummar badan ayaa hor taagnaa godka, anna waa aan la istaagay illaa ay labadii sixirroole noo soo baxeen. Alla hoogaygee maxaa aan u arkay! Waa markii ugu horreysay ee aan arko bashar iga qurux badan. Mid ma uu ahayn ee laba ayaa ay ahaayeen, dumar ma ay ahayn ee laba nin ayaa ay ahaayeen. Waa markii ugu horreysay ee qalbigu sidan ii garaaco. Goorma ayaa ay raggu waxa kan oo qurux ah la soo baxeen, illaa goorma ayaa ay ragannimadu sidan u xoogganayd. Waxa aan mooday in ay hawshaydii fashilantay. Markasta oo aan labadan nin eego waa aan illaabayay wixii aan u imi meeshaba.

Waxa aan hoggii la galay labadii sixirroole ee quruxda badnaa, wixii aan ku arkay godka dhexdiisu waxa uu igu riday af-kalaqaad. Ugu horreynta si aan kuugu sifeeyo wixii

aan arkay, maskaxda ka saar sawirka aad godadka ka haysato oo dhan, ee kuu muujinaya daloolo yar yar oo madow. Godkani waxa uu ahaa mid balaadhan sida qasriga. Saqafkiisu waxa uu ahaa mid aad uga fog madaxyadayada. Waxa hortayda ka muuqday webi agtayda ka bilaabmaya oo ku dhammaanaya hirka fog. Waxa ka soo durdurayay biyo macaan. Gidaarradu waxa aad moodaysay in ay si kale yihiin. Ma ay ahayn kuwo sallaxyo ah, ee waxa ay lahaayeen daldalool yar oo badan, waxa aad moodaysay marka aad ka fog tahay in la sharraxay. Tani waxa ay ahayd sawirkii koowaad ee ay ishaydu qabtaan.

Labadii nin ayaa na kexeeyay, waxa aanay na dul geeyeen wabigii socday. Waxa ay naga dalbadeen codsi yaab leh. Waxa aan filayaa in uu kani yahay imtixaankii ay sheegayeen. Qof kasta waxa ay ka codsadeen in uu candhuuf ku tufo saddex jeer webiga. Qof qof ayaa ay nooga codsadeen arrinkaa. Waxa ay yidhaahdeen waa imtixaan ay ku kala ogaanayaan sixirroolaha iyo qofka aan sixir hore u soo baran.

Qofka saddexaad ayaa aan ahaa ee safka taagan. Ninkii safka ugu horreeyay ayaa saddex jeer ku tufay webigigii, waxa aan eegay biyihii in ay wax isbeddelaan. Waxa aan arkay xarriiq buluug ah oo biyaha raacaya, mar labaadkii iyo mar saddexaadkii uu ku tufay ba xarriiqaa buluugga ah ayaa aan arkay. Mid ka mid ah labadii sixirroole ee quruxda badnaa ayaa u soo dhowaaday, waxa aanu ka codsaday raggii la shaqaynayay mid ka mid ah in uu geeyo hog kale. Ninkii labaad ayaa biyihii candhuuf ku tufay. Waxa aan arkay xarriiq cas oo biyihii raacaya, mar labaadkii iyo mar saddexaadkii ba xarriiqaa cas ayaa aan arkay. Labadadii sixirroole ee quruxda badnaa ayaa ku yidhi iyaga oo canaananaya:

– Halkan loogu ma talogelin dadkii sixirka meel kale ku soo bartay.

Nin ayaa u saaray bannaanka. Imika waxa la gaadhay markaygii, waa aan fahmay imtixaanka oo waa aan dhoollacaddeeyay, maxaa yeelay meel kale anigu kuma aan

soo baran sixirka. Saddex jeer ayaa aan candhuuf ku tufay webigii, xarriiq buluug ah ayaana biyihii raacay. Mid ka mid ah raggii ayaa ii kaxeeyay dhanka dhagax weyn oo aan hadda magacisii illaabay.

Waxa uu ahaa dhagax weyn, oo si baaxad leh u dhex taagan webiga. Waxa uu lahaa daldaloolo yaryar oo xaradh ah, waxa xagga sare ee dhagaxa lagu qoray weedh af Baabili ah. Waa weedh odhanaysa: ” Qofka nagu fidnoobaa annaga naga mid ma aha, qofka nagu fidnoobaa waa uu gaaloobay.” Waxba kama aan fahmin, aadna uma aan sii dhuuxin. Waxyaalaha cajiibka ah ee aan godkan ku arkay waxa ka mid ah qolal laga qoday gidaarrada. waxa aan dareemayay in aanay meeshani god ahayn, ee ay tahay tuulo yar oo cajiib ah. Xog kale oo iga maqnayd ayaa aan hadda ogaaday, oo aanan doqoniimadayda markii hore kuba xisaabtamin. Kama baxayno hoggan sannad dhammaystiran, albaabka hogguna ma furmayo sida dadka meesha joogaa ii sheegeen. Maxaa aanu cunaynaa? Cunto qalalan oo aan xumaanayn ayaa noo taallay sida sabiibta iyo lawska oo wax badan laga keydiyay. Cabitaan waxa uu noo ahaa biyaha macaan ee webiga. Sidaas ayaa aan u fahmay waxa meesha ka socda, laakiin hawshii aan u imid weli waxba kama hirgelin, ma aan filayn waxa dhici doona. Labadii nin hal ilbidhiqsi wax ka badan ima ay soo eegi jirin, anigu waa aan garanayaa marka ay raggu i damci jireen. Waa aan fahmi jiray xanshaashaqooda iyo xiisaha ay ii qabaan, laakiin labadan nin sidii oo aan gidaar ahayn ima ay danayn jirin ba. Lama abuurin nin Faynuus hor istaagay, lamana abuuri doono.

Maalin kasta oo i dhaafta aniga oo hogga ku jira, waxa aan dareemi jiray heerka ay leeg tahay hawsha i sugaysaa. Waxa aan ogaaday in sixirroolayaashii aanu u adeegi jirnay berigii hore in ay ahaayeen qaar liita, Haasaadhoow. Xayawaanka ayaa idinka wacan Haasaadhoow. Waxa aan ogaaday in ay awooddiina cajsi-gelinta aadamuhu aanay ahayn tamar idinka idinka timaadda, oo aanay mucjisana ahayn. Waa tamarta

shaydaankii aad sharaftiina ka iibiseen. Waxa aan godka ku bartay macnaha mucjisada ee dhabta ah. Waxa aan ogaaday in meerayaasha toddobada ah, cadceedda iyo dayaxa –ee ay na bari jireen sixirroolayaashu in aanu ka barakaysano oo aanu u caabudno, in ay ahaayeen xiddigo qudha, oo leh Ilaah keliya; kaasina waa Ilaahii Ibraahiim. Ibraahiim oo kale ayuun baana mucjiso samayn kara.

Waxa aan ogaaday in wax kasta oo aad samaynaysaan uu yahay huuhaa, wax kasta oo aad tidhaahdaanna uu yahay been. Waxa aan ogaaday in sixirroolayaashu ay yihiin kuwa ugu tamarta yar dadka, shayaadiintu ay yihiin kuwo aan awood badan lahayn. Waxa aan bartay tafaaful kasta oo sixirroole duco baabiinaysa. Waxa aan ogaaday in Cusaasiil iyo Shamhaasi ay yihiin magacyo xun xun oo ay sixirroolayaashu ka faafiyeen labadan quruxda badan. Magacoodu waxa uu ahaa mid qalaad oo qurux badan, midkood waxa lagu magacaabi jiray Haaruud ka kalena Maaruud.

"Cidna ma barayaan,
illaa ay ku yidhaahdaan
annagu waxa aanu nahay
fidno ee ha gaaloobin"

Labadan saaxir (Sida lagu dacaayadeeyo) boqortooto iyo talis qofna ma ay siinayn, dahab iyo maarna cid ma ay siinayn. Qofka ay wax baraan waxa uu godka ka soo baxayay isaga oo xirsixidhan oo aanu sixirroole waxba ka qaadi karin, maxaa yeelay waxa uu ogaanayaa dhabta. Anigu waqtigaa aan meesha ku jiray waxa aan go'aansaday in aan laba kulansiiyo: in aan dhabta ogaado, si aanu sixirroole awood iigu adeegsan, iyo in aan xidho dahabka iyo maartaba! Taasina ma suurto galayso illaa an hawshayda dhammaysto, oo aan ku noqdo sixirrooleydii Oorook aniga iyo wixii aan bartayba.

Waxa aan doonayaa Haasaadhoow in aan boqorad noqdo, waxa aan madaxa ka qabsan doonaa dhammaan

sixirroolayaasha, waxa aanay boqorrada iyo sixirroolayaashu ku hoos rukuuci doonaan labadayda lugood hoostooda. Waxa ay iigu yeedhaan Suhra, maxaa yeelay dhammaan haweenka adduunka waa aan ka qurux badanahay, sida meeraha Suhra uu uga nuur weynyahay toddobada meere ee kale. Labada nin sida Haaruud iyo Maaruud waa qasab in ay dareen leeyihiin sida ragga kale oo dhan, iyo sida dadka oo dhan.

Habeen habeennada ka mid Haasaadhoow, dhammaan dadkii hogga ku jiray waa ay hurdeen. Waxa aan ka soo baxay qolkaygii qorqornaa, aniga oo sita go' yar oo khafiifa oo jidhkayga oo dhami ka dhex muuqdo. Faynuus ayaa soo socota, taliyihii lixda meera ayaa soo socota.

Waxa aan raacay liidkii godka, waxa aanan u kacay dhanka qolkii ay ku jireen Haaruud iyo Maaruud. Ma ay ahayn markii koowaad ee aan qolkooda arko, wax ku dhow sagaal bilood ayaa aan hoggan ku jiray. Balse waa markii ugu horreysay ee aan keligay xilligan danbe oo kale qolkooda tago. Ileys ayaa sudhna dhawr meelood oo hogga ka mid ah, oo qolkood iftiiminayay. Lama kala garanayn in aanu habeen ku jirno iyo in ay dharaar tahay. Waxa aan u dhukusay dhanka qolkooda aniga oo dacalka haysta go'ii yaraa ee khafiifka ahaa. Markii aan u soo dhawaaday waxa aan maqlay iyaga oo akhriyay ducooyin, ay ku qaadayaan cod macaan. Maxaa ay ku hadlayaan labadan nin, afkee ayaa aanay ku hadlayaan. Inta aan neefta isku dhejiyay ayaa aan u galay:

– Miyaa laga mamcuunay dadka in ay ku tarmaan deegaankiinna?

Iyaga oo aan dan iga lahayn ay i soo eegeen, Eebboow! waxa ay i dareensiinayaa in aan ahay wax aan jirin. Go'ii aan sitay ayaa aan sii daayay, jidhkaygii oo ah sidii ay hooyaday igu dhashay ayaana u muuqday. Waxa aan ku idhi waxa aan idinka doonayaa in aan idinka qaato wax aanu bashar hore idinka qaadan. Wejigayga oo qudha ayaa ay eegayeen. Haaruud ayaa si deggen iigu yidhi:

– In aad iska baxdo ayaa kuu khayr roon, si aanu kuu nacdalin

Ilaahay, oo aan lagugu darin kuwa naxariista laga dheereeyay.
– Ku noqo Oorook magaaladii ku taallay Furaad. Hana gaaloobin sidii ay tolkaa u gaaloobeen.
Aniga oo xanaaqsan ayaa aan ku idhi:
-Idinka waa aan idinka gaaloobay, Rabbigiinana waa aan ka gaaloobay, idinka waxa idin soo diray shaydaan.
Dhulkii ayaa mar qudha is beddeley, cirkii ayaa aan arkay markii ugu horreysay. Ma ay jirin godad, daloolo, mana ay joogin Haaruud iyo Maaruud. Tani waa sixir weyn, maya sixir maha waa mucjiso weyn. Waxa aan u cararay dhanka Baabil, aniga oo go'yar oo khafiifa huwan. Haasaadh oo cadhaysan ayaa yidhi:
– Miyaa aanad sagaal bilood wax ka badan la joogin? Miyaa aad qortay wixii aad soo baratay?
Faynuus dhulkii ayaa ay ka kacday, Haasaadh ayaanay u eegtay si debecsan oo dheddignimo leh.
– Dad liita oo kula mid ah ayaa iga faa'idaystay, waa sixirroolayaashii Oorook. Wax kasta oo aan soo bartay waa ay iga qorteen. Markii ay iga dan gaadheenna qoorta ayaa ay iga jareen. Inta ay qaab foolxun isu doorisay ayaa ay tidhi:
– Waxa aan noqday mid nacdalan if iyo aakhiraba. Laba jeer ayaa la i nacdalay: mar waa markii aan isku deyay in aan fidneeyo labadii malag ee wacnaa, marna waa markii aan ka gaaloobay, ee wixii ay i bareenna aan baray dad liita sidaada oo Oorook jooga.

Haasaadh dib ayaa uu u noqday, markii ay ku soo dhawaatay. Tani waxa ay ahayd fursaddeedii . Waa qasab in uu Nakroomaansar yeesho tamar uu ku xakameeyo rooxaanta uu u yeedhay, balse ma uu garanayn. Faynuus waa ay cadhaysnayd, oo waa ay nacdalnayd, naftiisiina waa ay jarjartay, oo waa ay dishay. Ruuxdiisi waxa ay cirka la kortay malaa'igta cadaabta. Sammada waxa habeenkaa ka bidhaamay meere cas oo qurux badan, waa meeraha Suhra.

DHAN

Iftiimin

Sida aynu hore u soo aragnay ‘‘Inaana’’ ama Faynuus waa ay diiwaangelisay dhammaan wixii ay bareen Haaruud iyo Maaruud, wixii ay qortayna waxa uu gacanta u galay sixirroolayaashii Baabil. Waxa ay sixirroolayaashi bilaabeen in ay u adeegsadaan xirsixidhkii iyo ducooyinkii labada malag hawlo sixir. Waa ay horumariyeen, waxna waa ay ku dareen ka dibna waxa ay u adeegsadeen ujeeddooyin gurracan. Haddaba sixirku waa laba jaad, jaad uu Ibliis baray Namruud iyo sixir ay Haaruud iyo Maaruud bareen reer Baabil. Sixirkan danbe wax badan oo ka mid ah ayaa soo gaadhay dadkii sixirka hore yaqaannay, ka dibna waa ay isku dareen oo ujeeddooyin xun-xun ayaa ay u adeegsadeen. Tani waa sirtii labaad ee aan doonayo in aad ogaato. Halla yaabin sida aan ku ogaaday anigu, waayo, waxa aan ahaa sixirroole hore.

Inta aynaan gudagelin in aynu ciyaarno dheesheennii waraaqaha, hal wax ayaa aan kuu sheegayaa, ma nihin keligeen, ee waa la inagu weheliyaa qolka. Waxa inala jooga toddoba shaydaan oo ina soo eegaysa, aniga ayaa ay i soo eegayaan aniga oo sheekaynaya, adigana waa ay ku soo eegayaan adiga oo akhriyaya sheekadan. Iyada oo ay taasi jirto haddana ha cabsan, waayo, waxa jira xirsixidh iyo ducooyin badan oo aan qolka ku akhriyay. Inkasta oo aanu xirsixidhkani wax badan ka tarayn shayaadiintan toddobada ah, balse, waxa uu i siinayaa saacado dheeraad ah oo aan sheekada kuugu dhammaystiro. I ogolow in aan rogo waraaqahan nacdalan, waxa aan ku tusayaa hadda qaybtii 3aad. Waa afar warqadood oo keliya.

- **Waraaqda koowaad**: waa warqadda faaliyaha, waxaana ka muuqda faaliyeyaal xidhan cabbaayado

madow, oo leh koofiyad ay madaxooda qarinaysa.

- **Waraaqda labaad**: waa warqadda fardofuulka, waxaana ka muuqda hummaagga fardofuul ka mid ah 'Fardofuulkii Macatabka' ee qarniyadii dhexe. Waxa uu xidhan yahay maryihii cadcaddaa ee ay caanka ku ahaayeen Fardofuulkii Macatabku, oo uu dhexda kaga xardhan yahay macatab cas oo weyn.
- **Waraaqda saddexaad**: waa waraaqda siraha, aan la ogolayn in dadka caadiga ahi ogaadaan. Waxa ka muuqda sawirka weji nin yaabban, oo la mooddo in uu wax ka yaabiyay helay.
- **Waraaqda afraad**: waa waraaqda Jimcaha 13aad. Waxa ka muuqda sawirro farriin gudbinaya madow, oo sheegaya kaltirsiga furan ee Jimcaha 13aad.

Sheekadan waxa kaaga sheekayn doona shaydaan ka mid ah toddobada shaydaan ee inagu xeeran, waayo waa sheeko isaga la xidhiidha. Ha i weydiin sida aan u farayo in uu sheekadan kaaga sheekeeyo. Isaga iyo xertiisu waxa ay isku deyayaan in ay buriyaan xirsixidhkayga oo ay madaxa iga jaraan. Arrimahan mar danbe ha I weydiin fadlan, waayo waa arrimo la xidhiidha sixirka madow oo aan beri ku xeeldheeraa, waana arrimaha jinka ee aanay habboonayn in uu ogaado qof adiga kula mid ahi, maxaa wacay sixirroole ma tihid umana qalantid.

***

Sagaal Aannu Siinnay Ileyska
(950-kii C. H – 1300 C.D)

Waxa ugu habboon ee aad samayn kartaa waa in aad iga iibiso ruuxdaada. Wax kasta aniga ayaa gacanta ku haya. Dadka aniga ayaa hantiyay, caqligooda aniga ayaa hantiyay iyo qalbigoodaba. Waxa aan anigu kuu furayaa irridaha, irridaha oo dhan. Halkee ayaa aad doonaysaa in aad gaadho? Ma lacag, ma talis, ma magac mise caannimo? Anigu si bilaa xisaab ah ayaa aan wax u bixiya, wax bixin degdega oo la taaban karo. Anigu waxa aan ahay kii la abuuray markii waqtiga la abuuray, waxa aanan noolaan doonaa illaa waqtigu ka dhammaanayo. Magacyga waa ay kaa qarinayaan, waxa ay kuu sheegayaan in aan xumahay,waxa ay doonayaan in ay keegga kelidoon cunaan. Iska dhaaf waxa aan kuu dubi doonaa keegaaga gaarka ah. Iga daba dheh, oo waxba haka cabsan, "Baafomiid [18] ". Magacayga weyni waa Baafomiid. Waxa laga yaabaa in aad rabtid in aad i aragto, weli uma aad bislaan in aad i aragto. Wax nusqaan ah ma lihid jaalle, taasi kaa dheer balse qalbigaaga dhibirsani waxa laga yaabaa in uu kala daato marka uu arko weynaanta muuqaalkayga.

[18] Baafomiid: Baphomet.

Waxa aan ku tusi doonaa tusaalahayga, waa tusaala hoos yimaadda xeerarka caalamkayga oo aanad hore u arag duni sidaa u weyn. Kaalay i raac jaalle, kaalay oo ha cabsan, kaalay soo gal kiniisaddan. Gacmaha fidi oo albaabka iska fur, waa aan kugu dhex sugayaa. Albaabka xoog u fur, oo labadaada lugood ta aad doonto soo horreysii. Waxba ha eegin nimanka qaawan ee is fuulfuulaya, isha ka qarso dhiigga afkooda iyo jidhkooda qariyay, waxaas oo dhan iska dhaaf oo soo soco. Ku soo dhowaw miiska weyn ee halkaa yaalla. Ma i aragtaa imika? Waa aniga dhexda taagan. Waa i kaa ''Baafomiid'' waxkasta waa aan kuu sheegi doonaa. Xaq baa aad u leedahay in aad wax kasta ogaato, kaalay ii raac Quddus. Ma aha Quddusta maanta. Waa Quddus kun sanno ka hor. Quddus ma ay ahayn Quddus, balse waxa ay ahayd dhiig qulqulaya sida webiga, dhiig qulqulaya oo gaadhaya jilbaha fardaha. Waxa uu ahaa dhiigga muslimiinta; waxa uu ahaa dhiiggii fardofuulkooda, carruurtooda, dummarkooda iyo waayeelkooda. Muslimiintu waa dad xun sida aan gadaal kaaga sheegi doono, laakiin taasi dooddeena ma aha maanta. Kama sheekayn doonno webiyadii cascasaa ee qulqulayay waddooyinka Quddus, ee la mooday webi Furaad oo kale ah oo khariiradda adduunka ku soo biiray, Furaad cas oo dhiig ah.

Kama sheekayn doono dumarkii ay "Fardooleyda Macatabku" kufsadeen. Kama sheekayn doono carruurtaa yaryar ee ay madaxooga googoogeeyn fadalka farduhu. Kama sheekayn doono dheryaha waaweyn ee ay Fardooleyda Macatabku inta ay karkariyaan ay ku dhex guri jireen ragga, dummarka iyo carruurta muslimiinta. Waxaas oo dhan kaaga sheekayn maayo, ee waxa aan kaaga warrami doonaa Quddus markii uu dhiiggaasi ka qallalay, balse dhiiggu waxa uu weli ka sii tif lahaa quluubta muslimiintii degganaa. Waa Quddustii la haystay, haa waa Quddustii la haystay; maxaa yeelay markii ay dhacdooyinkaasi dhaceen waxa qabsaday Masiixiyiinta, oo markii ugu horreysay kala wareegay

Muslimiinta. Aniga aragtidayda midkoodna xaq uma laha, ee annaga ayaa xaq u leh. Annagu yaa aanu nahay? Waa i kan kaaga sheekaynaya arrinkaa.

Aniga ayaa marka hore isku kaa sheegi doonaa. Waxa aan buugaag duug ah ku iibin jiray magaalada Quddus. Ha la yaabin arrinkaa, oo ha i weyddiin wixii aad ku aragtay miiskii kiniisadda aan ku geliyay. Taasi waa su'aal waqtigeedii ka soo hor maraysa. Waxa aan ahaa duq, badi ilkahaygu waa ay iga daateen, gadhkaygana waxa ku hadhsanaa dhawr miiq oo teelteel ah. Aniga oo qaarka sare qaawan ayaa aan fadhiyay xamaam ka mid ah kuwa Quddus, oo caan ah –xamaamkii Calaa al-Diin. Xamaam waxa casrigaa loo yaqaannay dhisme weyn oo islaami ah, oo saddex hool leh, oo ay dadku u iman jireen in ay ku maydhaan. Waxa aan ku jiray qolka is-kulaylinta, uumiguna waxa uu diirinayay jidhkayga gaboobay. Indhaha kama aan qaadin mar qudha wiilkaa murqaha kuusan, ee meel ii dhow fadhiyay isaga oo baxsan. Maalmo badan ayaa aan daba socday, waa tan fursaddii dahabiga ahayd ee aan ugu warrami lahaa. Magaca wiilkani waa magacii uu wax kastaaba ku bilaabmay, magaciisu waa Hiyuu Baayuun[19]. Waa fardofuul ka mid ah ''Fardooleyda Macatabka'' oo asalkiisu yahay Yuhuudi. Waxa aan kaa rabaa in aad xasuusnaato isirkiisa Yuhuudiga ah, si fiican.

– Hiyuu Baayuun, miyaa ay ogaatay xaaskaagii ''Kaatriin'' arrimihii foosha xumaa ee aad ku samaysay dummarka Carabta?

Wuu soo jeedsaday "***Hiyuu***" oo waa uu i soo eegay, isaga oo la moodo in ay abeeso qaniintay. Waxa uu yidhi:

[19] Hiyuu Baayuun: Hugues de Payens

– Maxay … Maxaa aad ku hadlaysaa waar? Yaa aad tahay, sidee ayaa aad ku ogaatay magaca xaaskayga?
Waxa aan ku idhi, aniga oo codkayga la moodo abeesadii qaniintay:
– ‘‘Kaatriin Kaleer’’ … Xaaskaagu waa ay ogaatay wax kasta oo aad sameysay. Gabadh kasta oo aad kufsatay, ka dibna aad jidhkeeda jarjartay. Waxa ay ogaatay in aad xanuunsanayso ‘‘Baayuun’’ . Waxa aan hadda maqlayaa codkeeda iyada oo xigtadaadii muxaafidka ahayd oo dhan u sheegaysa wixii aad samaysay.
Hiyuu oo yaabka indhaha galka ka saaray, ayaa yidhi:
– Maxay dee.. Sidee ayaa aad waxaa u odhan kartaa. Yaa aad tahay duqyahow asaasaqay?
Indhihiisii yaabbanaa inta aan eegay ayaa aan ku idhi:
– Waxa aan ahay camalkaagii xumaa Baayuun. Waxa aan ahay wejigaagii madoobaa ee aad dadka ka qarinayso, adiga oo iska dhigaya dagaalyahan diin leh.
Inta uu kacay isaga oo xanaaqsan, ayaa uu qoorta i qabtay, waxa aanu yidhi:
– Yaa aad tahay Carabyahow liitaa, sidee ayaa aad ugu dhiirran kartaa in aad ku hadasho hadalkan xun. Waxa kan oo dhanna yaa kuu sheegay?

Qof kasta oo xamaamka joogay waa uu joojiyay dhaqdhaqaaqii, oo waxa uu soo eegay xaggii ay qayladu ka baxaysay. Waxa ay arkeen Hiyuu Baayuun, oo kacsan oo qaylinaya, waxa uu haystay, oo uu ku qaylinayay tiir ka mid tiirarkii xamaamka. Hiyuu ayaa dhankoodii eegay, ka dibna dhankaygii ayaa uu soo eegay, mise maba joogo. Isaga oo la moodo in uu waalan yahay, oo hareeraha eeg eegaya oo aniga i deydayaya, ayaa uu eegay dadkii soo eegayay isaga oo yaabban:
– Laakiin, laakiin halkan ayaa uu joogay. Odaygaa duqda ah ee asaasaqay, miyaa aanu midkiinna arag?

***

Ciidda Saytuuna ee Masiixiyiinta ayaa aanu mar kale ku kulannay Hiyuu Baayuun. Waxa isku soo ururay Masiixiyiin badan oo sita laamaha Saytuunka, waxa aanay isugu yimaaddeen xaramka barakaysan ee Quddus. Waxa meesha ku soo xoomay Muslimiin badan oo daawasho u yimid. Dadka daawanaya dabbaaldegga ayaa aan dhex qaadayay. Hiyuu Baayuun dadkaas dabbaaldegaya ayaa uu ku jiray. Inta aan u soo dhowaaday, ayaa aan ku dhego hadlay:

– Nacasyadani ma garanayaan in ay iska dawaafayaan, hoostoodana uu ku jiro kayd qofkii helaa uu adduunka oo dhan hantiyayo, qofkii waayaana uu dunida oo dhan waayay.

Si anfariir leh ayaa uu 'Hiyuu' ii soo eegay, ka dibna yaabkiisi waxa uu isu rogay cadho, waxa aanu yidhi:

– Waaryaa i maqal. Haddii aad iga hordhaqaaqi weydo, ifkaba waxa aan kaaga tirtiri doonaa gacantayda oo qudha.

– Maya, i maqal 'Baayuun', warqad ayaa gabbal-dhaca kaaga iman doonta xaaskaagii Faransiiska joogtay, waxa ay kaaga warrami doontaa riyo ay aragtay oo ku soo noqnoqotay, oo hurdada u diidday habeen kasta. Waxa ay kuu sifayn doontaa nin. Haddii ay dhaci waayaan waxa aan kuu sheegayaa, iigu kaalay dukaankayga buugaagta oo qoorta ii dheeree. Haddii ay dhacaan waxa aan kuu sheegayaana iigu kaalay isla dukaankayga, waa aan kuu warrami doonaaye.

- Maxaa aad iigu warrami doontaa xashiish cabyahow? Maxaa aad leedahay, maxaa se kaa galay xaaskayga uskagyahow?

Dad badan ayaa na soo kala dhex galay, oo na kala qariyay aniga iyo Hiyuu. Galabnimadii waxa u timi Hiyuu farriin xaaskiisii ka timi, oo ku leh waxa aan arkaa riyo i wareerisay oo habeenkasta i hor timaadda. Waxa ay aragtaa nin duq ah oo ilka la', oo gaafwareegaya Qubbada Sakhra ee barakaysan, waxa aanay ku aragtaa barxadda Qubbada Hiyuu oo u galmoonaya gabadh madow oo madax go'an, seeftiisuna ay ag taallo.

– Ma sixiroole ayaa aad tahay kanoow?

Aniga oo buugaagtaydii ku dhex jira ayaa aan eegay, waxa aanan ku idhi:
– Waxa aan ahay mid gada buugaagta duugowday sida aad arkayso.
– Sidee ayaa aad ku garatay magaca xaaskayga, waxyahow nacdalan, riyada ay aragtana yaa kuu sheegay?
– Riyadeedu maa ay kaa xanaajisay? Miyaa aad doonaysaa in ay aragto wixii aad gabdhaha kale ku samaysay?
– Sidee ayaa aad waxan oo dhan u garanaysaa? Yaa aad tahay adigu shakhsi ahaan?
– Baafomiid.
– Maxaa aad tidhi?
Waxa aan u dhaqaaqay dhinaca rako buugaag saaran yihiin, waxa aanan soo qaaday mid uu ku sawiran yahay xaramka barakaysan ee Quddus. Waxa aan dhigay sawirkii miis hortiisa yaallay, waxa aanan ku idhi:
– Anigu waxa aan akhriyayaa caqligaaga sida buug furan, Baayuunoow. Imika waxa aad ku fikiraysaa in aad xamaantaada ka ursato Quddus, oo aad magaalada Shaambiin[20] aad ku noqotid. Waxa aad ku fikiraysaa in aanad dagaal danbe ka qayb gelin, maxaa yeelay xiisihii iyo xamaasaddii aad ka heshay dagaalkii Macatablayaasha ayaa aad ka dharagtay.
– Yaa aad tahay?
– Waxa aan ahay Baafomiid. Baafomiidkii kuu rogi lahaa ninka ugu hanti badan Yurub oo dhan, maya dunida oo dhan.
– Maxaa aad iga rabtaa aniga? Ma ihi nooca iska rumaysta khuraafaadka faaliyayaasha.

[20] Shaambiin: Champaign

– Waa runtaa. Waxa aad u tagtay Juuliyaan, sixirroolaha Kolomoon jooga.

Indhaha ayaa ballaadhay Hiyuu, cabsi iyo anfariir. Waxa aan uga warramay dhacdooyin aanu garanayn noole ifka ku nooli. Waxa aan u sheegay siro aanu naftiisa mooyee isagu cid kale u sheegin. Hadalkiisi waxa uu iska beddelay mid kacsan oo dagaalsan, waxa aanu iila hadlay sidii mid ila xaajoonaya oo ila ashqaraarsan.

Taasi waa wixii aan doonayay, in uu igu kalsoonaado. Qofka kugu kalsooni waa sidii xanjo aad calaashanayso oo kale, oo sida aad doonto aad u galayso. Waa aan calaaliyay Hiyuu, waxa aanan u qaabeeyay sidi kubbad aan u laadi karo dhanka aan doono. Markii koowaad waxa aan u laagay dhanka magaalada Shaambiin ee Faransiiska ku taalla. Waxa uu halkaa ka soo fulin doonaa waxa aan rabo in uu ka soo fuliyo.

Waxa uu u socdaalay "Hiyuu Baayuun" magaalada Shaambiin ee Faransiiska. Waxa uu halkaa ka soo kexeeyay siddeed nin oo ay qaarna walaalo yihiin qaarna ilmaadeer; dhammaantood waxa ay ahaayeen qaar isirkoodu yahay Yuhuud, maxaa yeelay qoys qudha ayaa ay ka soo wada jeedeen. Dhammaantood waxa ay yimaaddeen magaalada Quddus. Waxa ay u tageen boqor Baaldowiinkii 2aad [21] , boqorkii Quddus ee Masiixiga ahaa. Waxa uu Hiyuu ku qanciyay boqorka in uu u ogolaado in ay sameystaan guuto gaar ah oo ka mid ah fardooleyda, si ay u ilaaliyaan xujayd Masiixiyiinta ah ee Quddus imanaya, kuwaas oo dhac iyo boob ay u gaystaan Muslimiintu. Inkasta oo uu boqor Baaldowiin arrinkaa ku qancay, haddana Hiyuu been ayaa uu

[21] Baaldowinkii 2aad: Baldwin II.

sheegayay. Muslimiintu ma ay ahayn kuwo dilaya cidna , ee waxa dadka dhacayay waxa dhuljiif mujrimiin ah, hasayeeshee Hiyuu si yaableh ayaa uu boqorka u dhaadhiciyay arrinka, waana sidii aan ku waaniyay.

Sidaa ayaa ay u aasaasmeen fardooleydu 'Fardooleyda Haykalku [22] '! Waxa magacan loogu bixiyay maxaa yeelay boqorka ayaa ka siiyay fadhiisin u gaar ah dhinaca qasriga boqorka ee buurta Haykalka. Buurta Haykalku waa weedh Yuhuudi ah oo la macne ah Xaramka Barakaysan, maxaa yeelay Xaramka Barakaysan ee Quddus waxa uu ka dul dhisan yahay hadhaagii Haykalkii Nebi Saleebaan, ee ay Yuhuuddu Alle ku caabudijireen. Waxa uu fadhiisin ka siiyay boqorku meel u dhaw Masaajidka al-Aqsa, waana halkii aan rabay in ay degaan.

Ii ogolow in aan hal arrin kuu sheego inta aanan kuu sii wadin sheekada Fardooleyda. Sida aad is tidhiba waxa aan ahayn anigu shaydaan. Shaydaan haddii aan ahay waxa aan dhex raacaa dhiigga aadamaha, waxa aan helaa afkaartiisa oo la moodo buug aan akhriyayo, bog kasta waa aan u rogi karaa. Sidaas oo qudha ma aha inta aan afkaartiisa rogo ayaa aan qofka la doodi karaa, oo aan wax ku qancin karaa. Waa ay fududayd Hiyuu in uu ku qanco hadalkayga, sidaas oo kale ayaa ay u fududayd in uu boqorkuna ku sii qanco hadalka Hiyuu. Waxaas oo dhami waa ii fudayd maxaa yeelay waxa aan ahay Baafomiid, waa ii fudayd waayo waxa aan ahay shaydaan.

Taariikhdu ma ay xusin mar keliyaata oo ay Fardooleydu ilaaliyeen xujeyda Quddus imanaysa. Maalmihii ugu

[22] Fardooleyda Haykalka: Knights Templar.

horreeyay waxa ay bilaabeen in ay faagaan, in ay faagaan oo ay qodaan Xaramka Barakaysan hoostiisa.
– Kaalay duqyahow xumi. Maxaa aad u soo dhowaan la'dahay si aad u eegto hogaga aanu qodayno. Maxaa aad meeshaa durugsan la taagan tahay?
– Aniga ha igu mashquulin, wad waxa aad qodayso. Haddii aad weydo kaalay oo i dil aniga.
– Maya, dhiiggaaga ayaa aan cabbi doonaa Baafomiidoow. Hadalkaaga dabbaalnimada ah waa aan iska rumaystay. Anigu uma aan soo dhowaan karayn goobta Xaramka. Haddii aan u soo dhowaado waa aan gubanayay, sida ay shayaadiintu u gubato. Labadaydii indhood ee gaboobay waa ay yaryaraadeen, waxa aanan xasuustay maalmo, maalmo aad u qadhaadhaa.

Sannadkii 950 C.H

Isla halkan ayaa aan taagnaa waagaas, laba kun oo sanno ka hor ayaa ay ahayd. Waxa ay ahayd maalmo ay jinka iyo shayaadiintuba waayeen wax kasta. Illaa bilowgii abuurta waxa aanu ahayn kuwo sameeya waxa ay doonaan, marka ay doonaan. Waxa aanu ku ciyaari jirnay dadka sidii oo ay yihiin Laadhuu, waxa aanu ugu dheeli jirney sida Jesta. Waxa aanu kaga iman jirnay midig, bixid, hore iyo gadaal ba. Waxa aanu u kaxayn jirney sida doonyaha oo kale. illaa uu soo baxay nin insiga ka mid ah oo noo xakameeyay sida ayda afka xakamaha loogaga jiido.

Waa boqor aanu isaga hortii iyo gadaashii wax la awood ahi aanu iman. Waa nin ay ku magacaabaan Saleebaan. Waxa aan ahaa shaqaale ka mid ah jinka yaryar ee wax dhisa, kuwaasi waxa ay ahaayeen qaar uu Saleebaan u adeegsado in ay u dhisaan wax kasta oo aanay dadku dhisi karayn. Wixii ugu muhiimsanaa ee aanu dhisnay waxa uu ahaa qasriga, qasriga Saleebaan. Ma aanaan garanayn sida uu noo hantiyay ninkani ee uu noo maamulo. Sidee ayaa uu shinbiraha u la

hadaa iyo qudhaanjada? Sidee ayaa ay lugahiisa ugu hoos sujuudaan boqorrada jinka, oo ay foodda dhulka ugu dhigaan? Annagu waxa aanu ahayn kuwii dadka sixirka baray. Annagu waxa aanu ahayn kuwa ay ka cabsadaan dadku ee ay dhintaan haddii ay muuqaalkooda arkaan. Maxaa uu sidan noogu galayaa? Sidee ayaa sida xoolaha naloogu hoggaaminayaa? Sidee ayaa uu qof keliyaati nagu cabsi gelinayaa adduunka oo dhan aragti qudha. Saleebaan ma uu ahayn boqor, mana uu ahayn sixirroole balse waxa uu ahaa nebi. Nebi diinta noogu yeedhay oo aanu ka gaalownay, markii aanu diidnayna waa uu na muquuniyay kaayaga u yar iyo kaayaga ugu weynba.

Waxa aan taagnaa cidhifka barxaddan, sida ay u taagnaayeen shayaadiinta kaleba. Haddii uu qof naga mid ahi u soo dhawaado kursiga Saleebaan waa uu gubanayay. Waa aan eegay isaga oo ku fadhiya kursigiisa weyn. Qofna lama siin boqortooyo la mid ah ta Saleebaan ama kursi la mid ah ka uu ku fadhiyay. Waa aan necbaa anugu isaga, cuqdad ayaa aan u qabay. Dhammaan waa aanu samaynay wax kasta oo aanu sameyn karaynay si aanu dhib u soo gaadhsiinno, balse nooma ay suurto gelin. Waxa uu haystay wax aannaan heysan, mana garanayno waxaasi waxa uu yahay, balse waa uu haystay. Si kedis ah waxa noogu bidhaantay rejo, rejada ah in aanu ka aargoosanno iyo yididiilada ah in aanu kaga takhalusno.

Si kedis ah ayaa uu u xanuunsaday nebi Saleebaan. Waxa uu ahaa xanuun jidhkiisa oo idil ku faafay. Waxa uu ahaa xanuun ka dawakhiyay dhakhtarradii jinka iyo kuwii insigaba. Xataa shinbiraha ayaa meel kasta uga keenay dhir aan waxba u tarin.

Waxa uu xanuunku ka dhigay nebi Saleebaan mid ugu fadhiista kursiga sidii jidh bilaa ruux ah, waxaaba la mooday in uu dhintay heerka uu gaadhay xanuunkiisa iyo miyir la'aantiisu. Maalin ba maalinta ka danbaysa waa uu ku sii kordhayay xanuunkaasi , illaa uu ka noqday jidhkiisu mid

iska wadhan oo aan far dhaqaajin karay. Tani waxa ay ahayd fursaddii aanu kaga aargoosan lahayn.
Ma aannaan awoodin in aanu kursigiisa u soo dhawaanno, arrintaana uma aannaan baahnaynba maxaa yeelay jidhkiisa waxa galay unug xanuun ah oo ku samaysay wax ay kari waayeen shayaadiinta oo dhami. Waa ay iska caddayd in xanuunkani uu dili doono hadda ama dhowaan ba, sidaa darteed, waxa aanu ku dhaqaaqnay aargoosi nooc kale ah, jaad shaydaan oo si kale ah. Waxa aanu dhex joognay barxadda Haykalka sidii oo la moodo in aanay waxba ka jirin. Waxa la moodayay in aanu dhisayno qasriga Saleebaan, balse dhab ahaantii waxa aanu qodaynay kursiga Saleebaan hoostiisa.

Waxa aanu soo kaxaysannay qoraayadii jinka kuwii ugu khatarsanaa, waxa aanu farnay in ay qoraan wax kasta oo ku saabsan sixirkii aanu dadka bari jirnay berigii hore. Waa sixirka madow oo haddii aad hal tuduc ka akhrido adiga oo aan u kasin ay dhibtiisu ku taabanaysay . Intaas oo keliyaata ma aha waxa aanu qornay dhammaan wixii aanu ka baranay Haaruud iyo Maaruud, sixirkaas oo sixirka madow ku soo kordhiyay fajaciso burisay. Waxa aanu u qornay hab annaga noo gaar ah si ujeeddooyinkayaga loogu adeegsado. Waxa aanu ku kordhinnay labadii sixir xog kasta oo uu jinku ka maqlay warka sammada ee dhulka ku saabsan. Haddii aad i weydiiso sababta aanu waxaas oo dhan u samaynayno iyo waxa ka dhexeeya tan iyo aargoosiga Saleebaan? Aniga ayaa kaaga jawaabi doona.

Nebi Saleebaan waxa uu soo ururiyay dhammaan buugaagtii sixirka ee jirtay xilligii boqortooyadiisa, waa aanu gubay. Iska daa taase waxa uu dilay sixirroole kasta oo casrigiisii noolaa iyo cid kasta oo sixirroole loo maleeyay. Waxa kale oo uu amray in qoorta loo dheereeyo jin kasta oo isku daya in uu warka sammada dhegayso iyo qof kasta oo insi ah oo sheegsheega in jinku ay warka sammada og yihiin. Nebi Saleebaan waxa uu buriyay camalkayagii oo dhan,

waayo waa uu naga tamar badnaa. Sidaa darteed waxa na hurranayd in aanu marka hore cilmigayaga meel ku kaydinno, maxaa yeeley, Saleebaan waxa uu naga mabnuucay in aanu insiga la xidhiidhno gebi ahaanba, waxa aan ka wadaa xidhiidhka tooska ah. Laakiin weli waa aanu awoodi jirnayn in aanu caqligooda dhex galno oo aanu ku waswaasinno waxa aanu doonno. Waxa kale oo aanu awood u lahayn in aanu dad iska dhigno ama xayawaan. Laakiin kuma aanu dhici jirin in aanu dhibno haddii aanu doonno ama in aanu la xidhiidhno oo aanu barno wixii aanu doonno sida fanka aanu doonno, sidii aanu sameyn jirnay Saleebaan ka hor. Markii uu Saleebaan dilay Sixirroolayaashi, oo uu gubay buugaagtii sixirka madow, oo uu mabnuucay in uu xidhiidh dhex maro jinka iyo insiga; markaa wax sixirroole ahi kuma uu soo hadhin dhulka, marka laga reebo midhadh joogay tuulooyin fog fog. Sixirkii madoobaa ee reer bani Israa'iil Saleebaan waa uu gubay dhammaantood.

Kutubtan sixirka ee aanu qornay annagu uma aanu baahnayn, maxaa yeelay, dunidayada buugaag lagama adeegsado. Kutubtan waxa aanu u qornay dadka, si uu u sii jiro xidhiidhka naga dhexeeya annaga iyo dadku. Saleebaan marka uu dhinto ee uu cudurkiisu dilo, waxa aanu ku waswaasin doonnaa dadka kuwa ugu sharka badan in ay la soo baxaan buugaagtaas aanu xasaynay. Waxa aanu u sheegi doonnaa in ay buugaagtaasi yihiin kuwii nabi Saleebaan, waxa aanan tusi doonnaa sida uu Saleebaan u ahaa sixirroole jiitay. Sidaas ayaa ay u nacdali doonaan illaa qiyaamuhu ka dhacayo, sidaas ayaa aan annaguna u ilaalinay aqoontayadii, oo aanu uga aargoosannay kii gubay ee firkayagana bahdilay. Waa aanu qodnay oo waa aanu qodnay, sidii oo aanu wadno hawshii dhismaha. Saleebaan ma uu dareemin waxa aanu wadno. Waxa aanu qodnay joog dheer. Joog dheer oo kursiga hoostiisa ah oo aannaan gubanayn haddii aanu galno. Hawshayadi si nabdoon ayaa ay u dhacday, qalbiyadayada shaydaaniga ah waa ay garaacayeen naxdin, maxaa yeelay,

Saleebaan oo kale lama dhayalsan karo. Kursiga hoostiisa ayaa aanu dhisme ka dhisnay, kutubtii oo dhan ayaa aanu dhex dhignay. Ciid ayaa aanu ku rognay wixii aanu aasnay, oo meel caadiya ayaa aanu ka dhignay. Qorshahayagu si nabdoon ayaa uu ku dhammaaday, si nabdoon ayaa uu ku dhammaaday markii aanu bil dhan hawlgal shaydaani ah aanu ku jirnay, oo aan kala go' lahayn. Cudurkii Saleebaan waxa uu qaatay toddoba cisho illaa uu si kedis ah uu u bogsaday. Waxa uu ka soo noqday cudurkiisii isaga oo ka awood badan sidii hore. Saleebaan waxa uu hantiyay dabaysha, oo uu sida uu doono uu u amri jiray. Waxa uu hantiyay jinka quusa, kaas oo luulka uga soo saari jirey iyo dhagaxaanta qaaliga ah badaha guntooda, si uu ugu qurxiyo dhismayaasha aanu u dhisnay.

Waxa uu mulkiyay nebi Saleebaan nooc kale oo jinka ka mid ah, waa jin uu silsilado ku xidhay sida bahalaha. Waa jin uu ku jiro hoggaamiyahayagii Luusifar, oo la xidhxidhay. Waxba waa aanu fahmi weynay, dhabtii waxba maa aanu fahansanayn. Waqti xileedkii Saleebaan waxa uu nagu ahaa waqti adag oo dhib badan. Si kedis ah ayaa uu u dhintay Saleebaan oo aanu mar danbe ogaannay. Addoonnimadii waa aanu ka xorownay. Waxa aanu ahayn kuwo sugaya kooxdii ku habboonayd ee soo saari lahayd kutubtan, ee u adeegsan lahayd sida aanu annagu doonayno. Waa koox aanu waqti dheer sugnay runtii, illaa ay soo martay taariikhda koox Yuhuud ah, oo laabta ku haysata xumaan oo dhan, waana kooxdii aanu raadinaynay. Waa anigaa imika eegaya iyaga oo qodaya xaramka hoostiisa, si ay u gaadhaan kutubtii aanu berigii xasaynay. Waa kutubta sixirka madow.

***

Sannadkii 1300 C.D

– Baafomiid kaalay eeg gidaar ayaa halkan ka muuqdee, kaalay duqyahow.
Waxa aan jalleecay dhankooda, waxa aanan u duulay sida ay shayaadiintu u duulaan, aniga oo ka fogaanaya iyaga iyo barxaddaba. Maya dunida insiga oo dhan waa aan ka fogaanayay, waxa aan u duulay xaggii aan ka tirsanaa. Waxa aan ka tagay Fardooleydii Haykalka oo duminaya gidaarkii ka soo horbaxay, si xamaasad leh. Waxa aan maanta fuliyay shaqo weyn, oo tolkay reer shaydaan qarniyo badan sugayeen, oo aanu u malaynaynay in aanay weligood naga idlaanayn.
Waxa ay heleen Fardooleydii Haykalku kutubtii ay shayaadiintu qariyeen laba kun soo sanno ka hor. Ma ay fahmin macnaha aan uga jeeday in ay buugaagtani yihiin kinsi ama kayd qaalli ah. Waxa ay filayeen kinsi dahab ah ama luul ah, laakiin taa lagama yaabo in la helo. Saleebaan waxa uu Rabbigiisa weydiistay uu baryi jiray in aanu mulkigiisu cid kale gacanta u gelin. Waa uu dhammaan doonaa adduunku oo waa ay dhammaan doontaa taariikhdu iyada oo aanu qof dhulka ama cirka joogaa aanu heli gobol macdan ah oo ka mid ah hantidii Saleebaan. Mana iman doono boqor u hantiyay dhulka sidii uu Saleebaan u hantiyay.

Sidaas ayaa ay dhammaan aqoonta aadumuhu ugu guuldarraysatay in ay hesho wax raad ah oo ku saabsan boqortooyadii Saleebaan, illaa ay aqoonyahanka qaar sheegeen in Saleebaan iyo boqortooyadiisii ay ahaayeen sheeko-baraleyda diimaha. Sheeko-baraleyda ugu weyni se waa Haykalka Saleebaan.
Waxa jira dad adduunka qaylo ku wareeriyay iyaga oo sheegaya in Haykalkii Saleebaan uu ku hoos jiro Xaramka Barakaysan ee Quddus. Laakiin dhabtu waxa ay tahay in Haykalku uu la macne yahay macbad, Saleebaanna ma uu dhisin haykal ee waxa uu dhisay meel Alle lagu caabudo,

waxa uu dhisi jiray masaajiddo.
Waxa uu rumaysnaa Eebbaha Ibraahim iyo Muuse ay rumaysnaayeen. Nebi Saleebaan waxa uu dhabarka nagu jebiyay dhismayaal kale, waxaana ka mid ahaa dib-u-dhiska masaajidka al-Aqsa, ee u nebi Ibraahiim seeska u taagay. Waxa ka mid ahaa dhismayaasha qasrigiisii ashqaraarka ahaa ee lagu xardhay quraarada heerka sarreeya, kani waxa uu ahaa waxa ugu sarreeya ee uu Saleebaan hantiyay.
Annaga ayaa uun baa garannayna meesha uu yaallo kaydkii qaaliga ahaa ee nebi Saleebaan, annaga ayaa garannayna halka uu ku danbeeyay qasrigiisii. Koox naga mid ah [jinka] oo rumeysan nebi Saleebaan, dacwaddiisana raacay ayaa ku xasaysay kaydkan dhulka salkiisa, qasrigiina waxa ay u qariyeen hab aanu caqliga aadumuhu rumaysan karin.
Kinsigi waxa uu ku jiraa gunta hoose ee dalal Bariga Dhexe ka mid ah, gaar ahaanna waqooyiga Jasiiradda Carabta. Waxa ilaaliya hantidan mid ka mid ah kuwa noogu khatarsan haddii aanu jinka nahay, waxa ilaaliya jin, sidaas ayaa aanay ahaan doontaa mid la ilaaliyay illaa inta dhulku ka dhammaanayo. Waa dahab, luul iyo marjaan; waa kaydad u widhwidhaya sida dayaxa iyo cadceedda, balse jin iyo insi toona ma hantiyi doono Saleebaan ka dib.

Gebogebadii Fardooleydii Haykalku ma ay helin wax aan ka ahayn buugaagtii ay qoreen qoraayadayadu, kutubtaasi waxa ay ahayd kinsi qaali ah oo nooc kale ah. Kinsi aqoon ah oo beddeli doona wejiga taariikhda oo dhan. Waa kayd ay ku farayaraysteen gacmo shaydaan, caqliyo shaydaan, aqoonyahan shaydaan. Dadkii waa ay ka dhex baxeen Fardooleydii Haykalku, waxa aanay u banbaxeen in ay kutubtaa akhriyaan. Bog kasta oo ay rogaan waxa uuga soo dhex baxaysay xog ama sir ku saabsan adduunka, oo aanay habboonayn in uu qof insi ahi ogaado.
Haddii aynu ku soo noqonno kiniisaddii aan markii ugu horreysay sheekada ku geliyay, bal imika u fiirso wax kasta oo hareerahaaga ka muuqda. Kuwani waa Fardooleydii

Haykalka. Ma waxa aad i weydiinaysaa sababta ay isu orgeynayaan ama isu fuulfuulayaan sidan xamaasadda leh? Mise waxa aad i weydiinaysaa maxaa ay dhiigga u cabbayaan? Waa maxay waxa kan oo summado ahi? Waxa kani waa maamuus diimeed, waxa laga yaaba in aad la yaabto, laakiin waxa ay ku gaadhsiinaysaa salka ileyska.

Waxa ay cibaadadani kugu xidhaysaa dunidayada. Eeg mar kale miiskan, eeg madaxa dul yaalla eeg. Waa madaxii Baafomiid waa madax shaydaan, waa madaxa shaydaanka sheekada kuu wada hadda. Waa shaydaanka la hadla markasta oo ay maamuuskooda cibaado sameeyaan. Waxa ay ruuxdooda, jidhkooda iyo akhlaaqdooda ka iibiyeen shaydaanka Baafomiid.

Haddii aad i weydiiso maxaa ay heleen iyagu markii ay naftooda iibiyeen? Ma waxa aad rabtaa in aad waxooda oo kale aad hesho? Waxa ay heleen wax aanu hantiile dhulka ku nooli helin xilligoodii. Fardooleydii Haykalku waxa ay ku soo noqdeen Yurub. Waxa ay ahaayeen Fardooleey fuqaro ah, waxa aanay noqdeen dabaqadda ugu taajirsan Yurub, maya caalamka oo dhan iyaga ayaa ugu hodansanaa. Hantidoodu waxa ay gaadhay heer ay madaxda iyo boqorradu ay ka qaataan deymo. Sharaf iyo karaamona waxa ay noqdeen fardooleydii ugu maamuusnayd ee taariikhda Macatablayasha soo mara. Waxa ay ahaayeen guuto ciidan ah oo hoog iyo halaag dhadhansiiyay muslimiinta dagaalkii Macatablayaasha. Salaaxudiin mar uu maxaabiis ahaan u qabsaday iyaga, dhammaantood waa uu laayay, si ka duwan wixii uu ku sameyn jireyn maxaabiista kale. Dusha waxa ay ka ahaayeen kuwo wanaagsan, laakiin qofna ma uu ogayn sababta ay kiniisadahooda hoosta uga soo xidhan jireen. Annaga oo qudha ayaa ogayn waxa ay sidaas u samayn jireen. Annaga ayaa siinnay nuurka, waa aanan siin doonnaa ileyska illaa ay ka gaadhsiinayaan hantiilaha nuurka, illaa ay ka gaadhsiinayaan Antikiriistoos.

Wax kastaa waa ay kashifmeen, Yurub waxa ay ku soo toostay fadeexad ruxday, waa warka qabashada Fardooleydii Haykalka. Iyada oo aanu ogeysiis hore jirin ayaa uu soosaaray boqor Filib[23] amar lagu xidhayo dhammaantood. Waxa uu raadinayay waddo uu iyaga kaga takhaluso markii ay noqdeen dadka ugu hantida badan Yurub, ee ay deymo ku yeesheen dhammaan madaxda Yurub. Boqor Filib laftiisa ayaa ay lacag ku yeesheen. Waxa uu raadinayay sabab uu u baabiiyo iyaga. Waxa uu helay fadeexad daaha ka feyday Fardooleyda, oo sharaftoodiina tummaatiday: waxa soo gaadhay warka sheegaya in ay sixirka adeegsadaan oo ay macatabkana bahdilaan.

Waxa ay ahayd dhacdo taariikheed oo gilgishay Yurub, Jimcihii 13-ka bisha waxa la qotomiyay tiirar dhammaan goobaha la isugu yimaaddo ee Baariis. Waxa tiirarkaa ka laalaaday jidhka Fardooleydii, Fardooley ay reer Yurub u haysteen in sharaf kastaa ay hoos timaaddo sharaftooda. Waa xiddigo imika mar qudhaata uun demaya. Waa tiirar lagu xidhxidhay madaxdii Fardooleyda. Dadkii oo dhan ayaa isugu soo baxay iyaga oo yaabban dhanna ka cadhaysan si ay u daawadaan waxa ku dhacay ciidankii sharafta lahaa. Waxa ay fuuleen barxadda tiirarkii lagu xidhxidhay Fardooleyda. Waxa lagu qabtay dab Fardooleydii.

Dadkii dhammaantood waa ay wada qayliyeen, iyada oo aan la garanayn waxa ay u jeedaan. Waxa uu go'aansaday boqor Filib in uu gubo dhammaan hoggaamiyayaashii Fardooleyda: waxa la gubay iyaga oo lagu eedeeyay in ay adeegsadeen Sixirka Madow, eedda ah in ay bahdileen macatabka, eedda ah in ay isku fuulfuuli jireen kiniisadaha

[2323] Filib: Philip

dhexdooda, eedda ah in ay u yeedhan jireen rooxaanta iyo eedda ah in ay diideen in uu jiro Nebi Ciise. Dhammaan eedahan waa ay qirteen, markii uu boqor Filib soo ururiyay ee uu jidhdilay, si arxan daran.

Fardooleydu waa ay qariyeen dhammaan buugaagtii ay Quddus kala yimaaddeen, waxa aanay ku xaseeyeen hogag. Intii uu boqor Filib qabtay waa ay ka yaraayeen kala badh Fardooleydii. Fardooleydii soo hadhay waa ay baxsadeen, waxa ay u baxsadeen meel kale, meel aanu joogin boqor Filib. Waxa ay u firdhadeen meel doonaysa in ay ka madax-bannaanaato Ingiriiska, oo uu hoggaaminayo Wilyam Waalaas [24] . Waxa ay u baxsadeen Fardooleydi Haykalku Iskootland.

DHAN

[24] Wilyam Waalas: William Wallace.

Iftiimin

Waxa aynu sheekadii koowaad ku soo aragnay in Luusifar (Ibliis) uu Namruud baray sixirka. Taasi waxa ay ahayd kulankii ugu horreeyay taariikhda ee dhulka ku dhex mara Jinka iyo Insiga – si toos ah. Waxa halkaas ka samaysmay isbahaysigii ugu xoogganaa ee sharka. Reer Baabil iyaga oo yaqaanna sixirkii uu baray Shaydaanku ayaa waxa yimi labada malag ee Haaruud iyo Maaruud, oo uu Quraanku ku sheegay in ay labadaa malag ahaayeen fidno reer Baabil loo soo diray. Faynuus oo ka mid ahayd dadkii wax ka soo bartay labada malag waa ay qortay dhammaan wixii ay bareen, waxa aanay xogtii ay soo qortay ay gacanta ka gelisay sixirroolayaashii Baabil. Reer Baabil sixirkii hore ee ay yaqaanneen waxa ugu biirey sixirkii labada malag ee Haaruud iyo Maaruud. Sidaas ayaa ay reer Baabil ku noqdeen bud-dhigga dhammaan diimaha shirkiga iyo sanam-caabudka ah ee xaddaaradaha adduunka soo maray.

Nebi Saleebaan (C.S) xilligiisii oo uu Eebbe jinka iyo insigaba hoos geeyay taliskiisa, waxa uu amar ku soo rogay oo uu mabnuucay sixirka, waxa uu joojiyay kulamadii dhex mari jirey jinka iyo insiga, waxa uu gubay dhammaan kutubtii sixirka ee ay dadku haysteen. Xilligii nebi Saleebaan waxa uu jinka ku ahaa waqti adag oo ay ku tilmaameen gumeysi iyo addoonsi, sidaa darteed waxa ay go'aansadeen in ay mar uun ka aargoostaan Saleebaan. Qaabka ay uga aargoosanayeen waxa uu ahaa qaab shaydaani ah, waxa aanay ku tashadeen in ay dib u qoraan dhammaan kutubtii sixirka ee la gubay. Waxa ay u yeedheen dhammaan qoraayaashoodii jinka ahaa, waxa aanay diiwaangeliyeen dhammaan wixii ay sixir yaqaanneen. Fursad ay in badan sugayeen ayaa soo martay mar uu xanuunsaday Saleebaan, waxa aanay kutubtii sixirka ku hoos aaseen dhisme ay ka hoos sameeyeen kursiga Saleebaan.

Waxa ay dhaheen: ''*kutubtan waxa aanu u qornay dadka, si uu u sii jiro xidhiidhka naga dhexeeya annaga iyo dadku. Saleebaan marka uu dhinto ee uu cudurkiisu dilo, waxa aanu ku waswaasin doonnaa dadka kuwa ugu sharka badan in ay la soo baxaan buugaagtaas aanu xasaynay. Waxa aanu u sheegi doonnaa in ay buugaagtaasi yihiin kuwii nabi Saleebaan, waxa aanan tusi doonnaa sida uu Saleebaan u ahaa sixirroole jiitay. Sidaas ayaa ay u nacdali doonaan illaa qiyaamuhu ka dhacayo, sidaas ayaa aan annaguna u ilaalinay aqoontayadii, oo aanu uga aargoosannay kii gubay, ee firkayagana bahdilay.*''

Yuhuuddu saddex ayaa ay u qaybsameen dhimashadii Saleebaan ka dib: qaar waxa ay yidhaahdeen Saleebaan sixiroole ayaa uu ahaa sidaa darteed sixirku waa wixii uu jinka ku hantiyay, haddaba sixirku waa xalaal. Qolo waxa ay tidhi sixirku waa xaaraan, Saleebaanna waxa uu ahaa sixirroole, markaa Saleebaan waa gaal. Qolo waxa ay tidhi sixirku waa xaaraan , Saleebaanna sixirroole ma uu ahayn, ee sixirka waxa adeegsan jirey waxa ay ahaayeen jinka.

Dagaalkii Macatablayaasha, qarniyadii dhexe, markii ay Masiixiyiintu Quddus qabsadeen, waxa soo raacay koox asalkoodu Yuhuud yahay oo loo yaqaannay 'Fardooleyda Haykalka'. Kooxdani waxa ay ahayd koox ciil iyo cuqdad u qabta muslimiinta iyo bulshooyinka kale ee adduunkaba. Shaydaanku waxa uu helay fursad uu sugayay muddo badan, waxa aanu kooxdii Fardooleyda Haykalka ee Yuhuudda ahayd u sheegay in uu jiro kayd qaali ah oo ku hoos aasan masaajidka al-Aqsa. Kaydkan uu sheegayaa waxa uu ahaa kutubtii sixirka ee jinku qoray xilligii nebi Saleebaan. Kutubtii waa ay heleen Fardooleyda Haykalku, waxa aanay ka dhex baxeen dadkii iyaga oo dhuuxay nuxurka ay xambaarsan yihiin kutubtani. Yurub ayaa ay ku noqdeen Fardooleydi, waxa aanay noqdeen dabaqada ugu taajirsan Yurub, waayo, waxa ay is-bahaysi la ahaayeen shaydaanka, waxa aanay wateen mashruuc weyn oo ay adduunka ku qabsanayaan.

Kiniisado gaar ah ayaa ay Fardooleydu ku lahayd Yurub, waxa aanay ku dhex sameyn jireen wax kasta oo xun, iyaga oo caabudi jirey shaydaanka. Dusha waxa ay ka ahaayeen kuwo wanaagsan, laakiin qofna ma uu ogayn sababta ay kiniisadahooda hoosta uga soo xidhan jireen.

Wax kastaa waa ay kashifmeen, Yurub waxa ay ku soo toostay fadeexad ruxday; waa warka qabashada Fardooleydii Haykalka. Iyada oo aanu ogeysiis hore jirin ayaa uu soosaaray boqor Filib amar lagu xidhayo dhammaantood. Waxa uu raadinayay waddo uu iyaga kaga takhaluso markii ay noqdeen dadka ugu hantida badan Yurub, ee ay deymo ku yeesheen dhammaan madaxda Yurub, boqor Filib laftiisa ayaa ay lacag ku yeesheen. Waxa uu raadinayay sabab uu u baabiiyo iyaga. Waxa uu helay fadeexad daaha ka feyday Fardooleyda, oo sharaftoodiina tummaatiday: waxa soo gaadhay warka sheegaya in ay sixirka adeegsadaan oo ay macatabkana bahdilaan.

Fardooleyda intii la laayay mooyee intii kale waxa ay u baxsadeen Iskootland. Maxaa yeelay waxa ay ahayd waddanka keliya ee aanay maamulin kiniisadda Kaatoligu. Waxa si diirran u soo dhaweeyay boqorkii Iskootland Rooberti Alboroos[25]. Waxa ay noqdeen hubkiisa halista ah ee uu kula dagaallamo Ingiriiska, illaa uu gobonnimada ka qaatay Ingiriiska. Waxa ay Fardooleydii mar labaad bilaabeen in ay dhistaan goobo cibaado, oo lagu xardhay summado shaydaan ah.

Markan casharkii hore ayaa ay wax ku qaateen ee Ingiriisku u dhigay, waxa ay barteen in ay ururkooda ka dhigaan mid si hoose u shaqeeya, oo aan shacabku wax badan

[25] Rooberti Alboroos: Robert the Bruce.

kala socon. Magacii Fardooleyda waa ay beddeleen waxa aanay la baxeen magac cusub, oo soo jiidasho leh: waxa ay la baxeen Dhisaayaasha Xorta ah, oo Ingiriisi ku ah Freemasons. Waxa ay Iskootland ku sii wadeen shaqadii ay hore u hayeen, hadda kiniisadihii waa ay ka guureen waxa ay sameysteen goobo loo bixiyay Maxfal, oo hoosta uga eeg Haykalkii Nebi Saleebaan , sida ay sheeganayaan. Haykalka Saleebaan waa dhismaha qudha ee si faahfaahsan loogu faahfaahiyay Tawraad.

Mar labaad Fardooleydii Haykalku iyaga oo sita magacooda cusub ee Maasooniyadda [26] waxa ay noqdeen dadka ugu hantida badan Yurub. Ma jiro wax ay si bilaa xisaab ah shaydaanku ku bixiyo oo aan ka ahayn dahab iyo hanti. Dhuumashadoodu waxa ay noqotay sirta guushooda, cidna ma awooddo in ay baabbiiso wax qarsoon.

Wax badan waa laga yaabaa in aad maqashay Maasooniyadda, xogtaas oo aan ahayn mid wada sax ah, taas waa loo kasay. Waxa ay doonayaan in ay xaqiiqdooda ka qariyaan bulshooyinka. Qoraaga buugga Antikiriistoos waxa uu ku leeyahay: Aniga oo qudha ayaa xaqiiqda kuu sheegi kara, maxaa yeelay, waxa aan ahaa Maasooni hore. Waxa aan ahaa Maasooni heerka 23aad ah, waana heer aad u sarreeya, maxaa yeelay, heerarka laga gaadho Maasooniyadda waxa ugu sarreeya 33. Markii aan Maasooniyadda dhex qaaday waxa aan bartay sixirka, waxa aanan noqday sixirroole. Dad gaar ah oo iyagu doortay ayaa uun baa noqon kara sixirrooleyaal. Waxaas oo dhan anigu hadda waa aan ka dhex baxay, waxa aanan fadhiyaa hortaada si aan dhabta kuugu sheego.

[26] Maasooniyadda: Free Masonic.

Maasooniyaddu marka la isku soo xooriyo waa jilibka 13aad ee Yuhuudda! Sida aad ogtahay ama aanad ogayn ee Quraankana ku xusan Eebbe Yuhuudda waxa uu u qaybiyay 12 jilib. Jilib waxa ay ka dhigan tahay koox, markaa Alle waxa uu u qaybiyay 12 kooxood. Jilibkasta oo iyaga ka mid ahi waxa uu lahaa xeerar iyo hannaan nololeed oo u gaar ah. Maasooniyaddu haddaba waa koox Yuhuud ah oo ka madaxbannaan 12 jilib ee hore, waxa aanay ku heshiiyeen in ay samaystaan jilib 13aad oo gaar ah. Jilibkani waxa uu u xilsaaran yahay in ay dhisaan Haykalkii Saleebaan ee Quddus. Ha I weydiin waxa ay u rabaan in ay dhisaan Haykalkii Saleebaan, waayo gadaal ayaa aan kuugu sheegi doonaa. Immika waxa keliya ee aan kuu sheegayo ayaa ah in ay shayaadiintu u waxyoodeen in ay dhisaan Haykalka. Arrintani dheeldheel ayaa ay kula tahay se gadaal ayaa aad ka fahmi doontaa warka oo dhan.

Waxa aad ogaataa in Maasooniyadda iyo Kabaaluhu[27] ay yihiin wax isku mid ah, Kabaala waa sirihii afka ahaa ee Yuhuudda ee ay ku doodaan in uu Ilaahay Muuse af ahaan ugu sheegay. Maadaama ay sir tahayna Muuse ma uu qori jirin, balse waxa uu xulan jirey waaweynka taageerayaashiisa iyaga ayaa aanu u sheegi jiray. Kabaala waxa ay leedahay 32 heer oo murti ah, qofka heerarkaa raacaanaa waxa uu gaadhayaa heer uu Ilaahay la midoobo. Sidaas ayaa ayna Maasooniyadduna ku noqotay 32 heer oo kala sarreeya. Heerka 33 waa heer maamuus ah oo la siiyo dadka gaadha si ay ugu soo biiraan jilibka 13aad ee reer bani Israa'iil.

Sidaas ayaa aan u doortay in aan sixiroole noqdo, waayo waxa ku jira siro cajiib ah habkan. Tusaale ahaan, ma aha

[27] Kabaalla: Kabbalah.

dhammaan, waxa jira sir weyn oo ka mid ah siraha Kabaalaha oo aan ku bartay heerka 19aad. Waa habka qof dhan loogu dilo aragtida isha oo qudha, tani waa waxa loo yaqaanno isha dadka, ama waxa ay ugu yeedhaan ''In Haa Rac''. Waa hannaan laga soo dheegtay hababka isha iyo xasadka, isha iyo xasadkuna qofkasta waa ay dhibi karaan; balse sida isha iyo xasadka loo adeegsado ee tamartooda loo kiciyaa waa cilmi dhan oo la barto, tanina waa wixii aan bartay ee I xiiso geliyay.

Waxa jira kooxo badan oo Maasooniyadda ka farcamaya oo laga yaabo in aad maqashay sida: Macatabka Ubaxa ah[28] , Lafaha iyo madaxa[29], Kuluskalas kalan[30], Illuminaati[31] iwm. Koox kasta oo iyaga ka mid ahi waxa ay leedahay hawl u gaar ah, balse dhammaan waxa ay ka wada biyo cabbeen il qudha oo ah isha Maasooniyadda iyo Fardooleydii Haykalka ee hore.

Imika waxa jira saddex warqadood oo cusub, imika aynu la dheelno dheesha shayaadiinta nacdalan inta aanay xadhkaha soo goosan.

- **Waraaqda koowaad**: waa waraaqda galaaska barakaysan, waxa aanay u taagan tahay Ciise Masiix. Waxa ka muuqda sawirka galaaskii barakaysnaa ee uu nebi Ciise wax ku cabbay habeenkii cashada ee ugu danbaysay.
- **Waraaqda labaad**: waa gammuunka barakaysan, waxaana ka muuqda gammuunka barakaysan ee lagu

[28] Macatabka Ubaxa ah: Rose Cros; Rosicrucianism.
[29] Lafaha iyo Madaxa: Skull and Bones.
[30] Kuu Kulukus Kalaan: Ku Klux Klan; KKK.
[31] Illuminaati: Illuminati.

muday Ciise markii uu macatabka ku laanqeyreysnaa si loo hubiyo dhimashadiisa.

- **Waraaqda saddexaaad**: waa waraaqda jihaadka. Waxa ay astaan u tahay mujaahidiinta Islaamka.

Sheekadan waxa kaaga sheekayn doona shaydaan labaad oo ka mid ah shayaadiinta inagu xeeran. Adigu waa in aad aamusto oo aad dhagaysato uun. Waxa uu ku geyn doonaa duni ka baxsan Maasooniyadda iyo sixirka iyo dhammaan erayadan madow, waxa aanu ku geyn doonaa duni kale.

***

,

Sunta Nooca Ugu Halis Badan
(400 C.H – 660 C.D)

Si feejigan ayaa aad u eegaysaa khariiradda caalamkaaga, adiga oo aniga iga daydayaaya baallaheeda, balse ima heli kartid. Inkasta oo dunidaadu ay dabo iyo dacal gubanayso, haddana ima heli kartid, waayo waxa aad fiirinaysaa khariirad qaldan. Waa aad is badhqabatay oo waa aad iska fogaysay khariiraddii juquraafiga ahayd, waxa aanad furtay mid kale. Waxa aad kala furtay khariirad taariikheed, waa aanad fiirinaysaa bog kasta. Mar labaad ima aad helin. Mar kale waxa aad go'aansatay in aad dhanka tiraalaha u jeedsato, waxa aanad furtad kombiyuutarkii kuugu dhowaa. Dhalada kombiyuutarka ee cusub ayaa aad si wacan u eegaysaa, waxa aad shaashadda keentay khariirad taariikheed. Dhibco ayaa kaaga muuqday meelo cayiman oo khariiradda ka mid ah, si xiiso leh ayaa aanad dhibcihii u fiirfiirinaysaa. Hadda waa aad i aragtaa, aniga oo ku soo siqaya maabka adduunka si qunyar ah. Markii hore waa aan yaraa, balse markasta oo aan dhibic maabka ka mid ah miciyaha saaro waa aan weynaadaa, ka dibna waa aan siqaa. Haddana mar kale ayaa aan dhibic kale cantuugaa, kaddibna waa aan sii weynaadaa. Markasta oo aan sii weynaado waxa aan huriyaa dab, waxa aanan ku saydhaa waabaydayda goob kasta oo aan marayo. Hadda waa aad garatay cidda aad fiirinayso, waxa aad eegaysaa Siirbenti[32] maskii.

[32] Siirbenti: Serpent.

Siqitaankayga waxa aan markii ugu horreysay ka soo bilaabay Baabil, dhulkii nacdalnaa. Waxa ay ahayd 400 oo sanno ka hor dhalashadii Nebi Ciise. Waxa halkaa ku noolaa Yuhuud farabadan, oo laga soo caydhiyay Falastiin. Waxa la keenay Baabil iyaga oo ah addoomo ciillan, oo xiqdi iyo caloolxumo ka buuxdo. Waxa ay hiifayeen naftooda, diintooda iyo rabbigoodaba. Waxa ay gacmaha ku siteen Tawraad, ka dib markii ay qalbigooda ka dhacday. In yarna ma ay rumaysnayn wixii balanqaad ahaa ee Eebbe u sameeyay. Hadda waa addoomo, dumarkooda iyo dhiiggooduba waa xalaal. Waxa la dumiyay dhulkoodii, goobohoodii barakaysnaa iyo himiladoodiiba. Waxa ay ka hoos shaqayn jireen gacmo shisheeye oo daran, waa kuwa reer Baabile. Waxa la gubay dhulkoodii, waxa la gubay quluubtoodi, sharafkoodiina waa la bi'iyay.

Mar keliya waxa soo muuqatay rejo. Daruurtii reer Baabil ee madoobayd ee taariikhdooda tirtirtay waa ay sii dabayshanaysaa. Boqortooyadii Baabil waxa jebisay boqortooyadii Beershiya. Waxa ay Beershiyaanku Yuhuudda u ogolaadeen in ay dhulkoodii ku noqdaan. Intii aanay Yuhuuddu dib boodhka uga jafin Tawraad, waxa aan kala furay miciyahayga, waxa aanan ku afuufay Tawraad sun shaydaan oo ay quluubtoodii bugtay soo dhowaysay. Waxa uu waaweynkoodii la kulmay waaweynkoodii, waxa aanay ifka u soo saareen kitaab muqaddas ah oo cusub. Waa kitaab dhowrsan oo barakadiisu baro dhaafisay tii Tawraad. Waxa ay isku laaqeen cuqdaddooda iyo fikirkooda intii ugu madoobayd oo lagu daray sunta tii ugu halis badnayd. Waxa adduunka u soo baxay Talmuudka[33], oo la moodo shaydaan

[33] Talmuudka: The Talmud

cagta hoos geliyay Tawraad. Waxa ay yidhaahdeen Talmuudku waa sirihii qarsoonaa ee uu Muuse af ahaan Eebbe uga guntay. Waxa ay sirahan aan qornayn ku magacaabeen Kabaalla. Muuse waxa uu u sii gudbiyay sirahaas dadkii khawaasta ahaa, khawaastuna khawaasta ayaa ay u sii gudbiyeen. Markaa ka dib ayaa ay khawaastu qoreen si aanay u lumin, markii la qorayna waxa uu noqday kitaabka Talmuudka. Waxa cajiib ah in aad aragto dad ku kalsoon aragtidii aad nafahooda ku beertay. Waxa cajiib ah in aan fuulo madashan boqran oo aan eego Talmuudkan sida wacan loo qoray. Faduulinimo ayaa igu qaadaysa in aan akhriyo.

"Eebbe waa uu iska dhaafay in uu la ciyaaro nibiriga, waxa kale oo uu iska daayay in uu la dheelo Xaawa sidii uu hore u samayn jiray. Qoob-ka-ciyaar iyo dheeli toona uma taallo isaga oo sababay in la dumo Haykalka. Habeen kasta Eebbe waxa uu u gurxamaa sida libaaxa, waxa aanu yidhaahdaa hoog ayaa ii sugnaaday, maxaayeelay waxa aan ogolaaday in gurigayga la dumiyay. Waxa aan ogolaaday in Haykalka la burburiyo. Balse iska samra Yuhuudeey, Eebbe waxa uu idiin hayaa wax idinka farxiya. Iska samra waxa iman doona Badbaadiyihiiye, waxa uu ka soo dhex bixi doonna gudcurka. Waxa uu dib u dhisi doonaa Haykalka Eebbe."

Xusuusnaada Yuhuudeey:

"ma imanayo Badbaadiyuhu illaa la soo afjaro taliska Quwiimka. Idinka ayuun baa dad ah Yuhuudeey, waxa kale oo dhami waa Quwiim ee ma aha bashar. Waa xayawaan, xayawaan uu Eebbe u sakhiray in ay idiin adeegaan. Waxa dadka loogu eekaysiiyay si ay hawshiinna u qaban karaan. Ogaada Quwiimka oo aad dishaan waa qurbaan aad Alle ugu dhowaanaysaan. Haddii uu mid idin ka mid ahi uu arko Quwiim hog ku dhacay, waa in uu godka ku aaso, si uu u dhinto Quwiimku. Ogaada dumarka Yuhuuddoow haddii mid idin ka mid ahi ay musqul ka soo baxdo oo ay aragto ey, dameer, doofaar ama mid Quwiimka ka mid ah waa ay nijaasowday, waxaana faran in ay mar labaad soo maydhato. Haddii midkiin uu yahay Yuhuudeey dakhtar wanaagsan yaa aanu dawayn Quwiimka. Haddii uu yahay

dhakhtar liita ha daweeyo Quwiimka, si daaweyntiisu ay dhibaato ugu noqoto Quwiimka. Ciisihii magaalada Naasireed waa garac, hooyadii waxa ay uurka ku qaadday iyada oo xayd leh, waxaana ka dhalay askari dhiigyo-cab ah. Ciise waa beenaale, waa nin waalan, waa mid dadka lumiya, waa sixirroole, waa dabcaabud. Ogaada dumarka wadaaddada ah ee Masiixiyiintu waa dhillooyin. Waddaaddada kiniisadda ee Masiixiyiintu waa laga-roonayaal, kiniisaduhuna waa hoyga dhillaysiga, Yuhuudeey, marka uu u galmoodo nin weyni gabadh yar oo carruura wax dhib ah ma laha, xataa haddii ay jirto 3 gu'; arrinkuba waa sidii il aad far iska gelisay. In aad wiil yar u galmootaa ma aha faaxisho aad ka baqataan."

Ma garanayo sida ay suntaydii u dagtay wadnahooda, waxa ay barodhaafiyeen wixii aan la doonayay. Diintoodii waa ay qarribeen guud ahaan ba. Waxa aan qirayaa in reer bani Israa'iil ay iga fajaciyeen. Eebbe waxa uu Tawraaddii asalka ahayd ugu ballanqaaday in uu taliskoodi u soo noqoyo kaddib markii dhulkooda laga eryay. Marka ay dhulkooda ku soo noqdaan waxa loo soo diri doonaa nebi la yidhaahdo Ciise Masiix, oo dunida xaqsoor ku maamuli doonaa, isaga oo fadhiya carshigii Daa'uud. Markii uu Eebbe ballankii u rumeeyay ee ay Baabil jabtay, waxa ay ku soo noqdeen dhulkii Falastiin. Waxa ay dib u cusboonaysiiyeen masjidkii al-Aqsa ee uu dhisay aabbihii dadku "Aadam", masjidkaas oo uu ku tukaday Ibraahiim, Isxaaq iyo Yacquub ba. Kaas oo u dib u cusboonaysiiyay Saleebaan. Hadda dib ayaa ay u dhiseen, waxa aanay u bixiyeen Haykalka, Haykalka Saleebaan. Markii ay dhismihiisii dhammeeyeen waxa ay si xiiso leh u sugayeen in uu soo dego Masiixii loo ballanqaaday. Masiix oo dunida ka muumili doona carshigii Saleebaan.

Markii uu soo baxay Masiix, waa Ciise ina Maryama e', waa ay diideen, waxa aanay ku sheegeen in uu wicil yahay. Markii ay arkeen isaga oo ku dhimanaya laanqeyrta (isku-tallaabta) indhahooda oo shan ah, waa ay gadoodeen, waxa aanay isku raaceen in uu kani yahay marinhabaabiye wax dagaya.

Waa uu iska dhintay isaga oo aan dunida ka maamulin carshigii Daa'uud sida ay farriintu sheegtay. Midkoodna ma uu garan in nebi Ciisihii loo soo diray uu ahaa Masiixii dhabta ahaa ee ay Tawraadi sheegtay. Midkoodna ma uu garan in aanu wicil ahayn ee uu ahaa nebi Alle. Midkoodna ma uu ogaan in aanu macatabka ku dhiman, ee uu Eebbe kor u qaaday. Kuma baraarugsana in uu soo noqon doono aakhiru sabaanka, si uu u rumeeyo ballankii Tawraad, adduunkana uu uga xukumo carshigii Daa'uud ee Falastiin. Qofkoodna dhabtaa ma uu garan.

Waxa indhosaabay Talmuudka. Waxa ay yidhaahdeen qofka rumaysan Tawraad ee aan Talmuudka rumaysnayni waa gaal, Talmuudka ayaa ka muqadasan Tawraad. Waayo, waxa uu xambaarsan yahay sirihii afka, oo ka xoog badan Tawraadda qoran. Qofna ma uu fahmin in aanay meesha wax siri jirin, ee ay tahay buufis shaydaan. Waa mas ku soo siqay dhulkooda, oo cunay illaa uu ka dhargay. Kaddib waxa uu maskaasi sii watay siqitaankiisa isaga oo raadinay deegaan kale iyo qalbiyo kale, waana aniga maskaasi.

Gu’yaal ka dib dhimashadii nebi Ciise, waxa aan bilaabay in aan u siqo dhanka Quddus. Waxa Quddus joogay taageerayaashii nebi Ciise ee Xawaariyiinta ahaa, waxa ay akhriyi jireen oo ay faafin jireen Injiil. Waxa ay dadka bari jireen Injiishii nebi Ciise oo ku baaqaysay jacaylka iyo sinnaanta dadka, waxa aanay ahayd mid waafaqsan Tawraaddii Yuhuudda ee nebi Muuse lagu soo dejiyay. Ciise waxa uu ahaa mid dadka ugu bushaareeya nebi Aakhiru sabaanka soo baxaya oo Maxamed la yidhaahdo. Injiil waa ay ka duwanayd dhammaan suntaydii aan ku afuufay Talmuudka Yuhuudda, sidaas darteed waxa aan afuufay sun

cusub. Sidii aan sunta ugu afuufay qalbiyada reer Tawraadeed waxa aan sun kale ku afuufay qalbiyada reer Injiileed. Waxa Xawaariyiintii si kedis ah ugu soo galay nin ay la argagaxeen aragtidiisii. Waxa u soo galay Shaawul[34], oo ah nin Yuhuudi ah oo ay soo direen waaweynka Yuhuuddu si uu u soo qabqabto Xawaariyiinta, geeri iyo nololba, waayo waa gaalo beenisay kitaabka Talmuudka ee Yuhuudda. Waa nin uu soo diray kulan ay Yuhuuddu leedahay oo loo abuuray dilista iyo dabogalka Xawaariyiinta, si loo tirtiro Masiixiyadda. Kulankan waxa loo yaqaannaa "Awoodda Qarsoon". Waa kulan Yuhuudeed oo ay maalgeliso boqortooyada Roomanku. Waa ay soo dhiirradeen Xawaariyiintu markii ay arkeen Shaawul, balse waxa ay anfariireen markii uu Yuhuudigu ku yidhi:

- Waa aan idin necbaa, oo sallid ayaa aan idinku ahaa la idiin kay soo diray. Madaxyadiina go'ani ma ay dawayseen xiqdiga aan idiin hayay, balse nuur weyn ayaa cirka iiga muuqday markii aan idinku soo socday. Waa nuur uu jidhkaygii la suuxay weynaantiisa. Haatuf ayaa dhegta la ii saaray igu yidhi, “maxaa aad u dhibaysaa dadka i raacsan Shaawuloow?” kac oo gal Dimishiq halkaas ayaa laguugu sheegi doonaa wax aad qabatide'. Ileyskii ii yimi waxa uu ahaa Ciise, waxa aan maanta idiinku yimi waxa aan ahay nin rumaysan Ciise, oo gaal ma ihi. Waxa aan idiinku imi inaan idin gargaaro, ee uma aan iman in aan idin dhibo. Weli waa ay argagaxsanaayeen Xawaariyiintu, waayo? Shaawul waxa uu ahaa ninka dhibta ugu badan u gaystay iyaga. Waxa soo dhexgalay 'Barnaaba' oo heshiisiiyay, waxa aanay bilaabeen in ay dhegaystaan. Halkaas ayaa ay ka bilaabmatay in ay suntu

[34] Shaawul: Saul.

buuxiso diinta Masiixiyada, illaa ay suntii ka dareeray koobkii buuxsamay. Sunti waxa ay ku daadatay dunida oo dhan, indhahayguna waa ay ku doogsadeen. Waxa aan dhegaystay warkii uu u sheegayay Shaawul, kaas oo u magaciisa boqrani noqday Boollis[35], waxa aanu si rasmiya uga heli jirey waxyiga nebi Ciise, waxa aanu awood u lahaa in uu wax sharciyeeyo. Waxa jirey Ilaah qudha oo la caabudo caqiidadii nebi Ciise, waxa aanay noqdeen saddex Ilaah caqiidada Boolis: Alle, Ciise iyo Ruuxda qudduuska ah. Eebbe waxa uu ahaa mid aanay waxba u eekayn caqiidada Ciise, waxa se uu caqiidada Shaawul noqday Alle mid Aabbe ah, Ciisena yahay inankiisii. Waxa jirtay shareeco dhan oo ku dhammayd Tawraad magaceeduna ahaa xeer "Naamuus". Waxa ay ahayd shareeco xaaraantinimaysay khamriga, hilibka doofaarka, bakhtiga, oo salaadda iyo soonka faral yeeshay. Caqiidada Boolis dhammaan wixii xaaraanta ahaa waa la xalaaleeyay, wax faral ahi ma jiro: soon, salaad iyo faral kale toona dadka lama saarin. Dadka waxa la faray oo keliya in ay rumeeyaan, inay rumeeyaan Eebbe, inanka Eebbe iyo ruuxda Qudduuska ah: waa saddex-xagalka caanka ah. Badh ka mid ah Xawaariyiintu waa ay diideen waxa uu wado Boolis, halka qaar ka mid ahina ay ka rumaysteen. Hasayeeshee badankoodu waa ay ku diideen in uu tuuro shareecadii Tawraad. Masiixiyaddi waxa ay u qaybsantay kooxo kala duwan oo is khilaafsan, saddex qarni oo dhammaystiran ayaa ay si adag isaga soo horjeedeen. Saddexdaa qarni markasta oo aan furo Injiil waxa aan ugu tagayay hadal aan la fajaco. ''*Luudkii nebiga aha waxa uu dhalay laba hablood, labadaas hablood waxa ay s iin jireen khamri, waa ay isu qaawin jireen, oo waa ay doondoonan jireen heer uu uga galmooday, oo uu ka dhalay carruur wicillo ah.*''

[35] Boolis: Paul the Apostle.

"Wiilashii Yacquub mid ka mid ah oo Roobin la odhan jiray waxa uu u galmoon jirey hooyadii guriga dushiisa."

"Yuhuudda, oo ah ka ay ka tafiirmeen isirka Yuhuuddu, waxa uu jeclaa xaaska inankiisa. Mar ayaa uu ku godoomiyay waddada agteeda oo uu u galmooday, wicillo ayaa aanu ka dhalay."

Sinada qoyska oo cad ayaa ka buuxda Injiil. Runtu waxa ay tahay in aanay waxa kaasi ku jirin Injiil balse tani waa wixii ay qoreen kuwii aan qalbigooda iyo qalinkoodaba sunta ku beeray. Waxa mar danbe yimi Imbiraadoor Qusdandiin[36], oo caabudi jirey Ilaahaydii Roomanka ee sanamyada, waxa aanu soo ururiyay waaweynka kooxihii Masiixiyiinta hal meel ayaa aanu isugu keenay. Waxa uu isugu keenay Kulanka Niiqiya[37]. Si uu u tirtiro khilaafka u dhexeeya waxa uu cod u qaaday Ilaahnimada Ciise Masiix. Koox kastaa waa ay codaysay, waxa aana kulankii ku dhammaaday in la soo saaro qaraar rasmi ah oo sheegaya in uu Masiix yahay Ilaah Eebbe la mid ah iyo inankiisii. Taasi waxa ay ahayd arrin igu filan. Saameynta suntu waxa ay taabatay qalbiyo Eebbe rumaysnayd keligii, sunta ka dibna waxa ay noqdeen kuwo ilaahay u shariig yeela. Waxa ay tuureen dhammaan shareecadii xalaal iyo xaaraanba. Miyaa aad hore u aragteen sun tan la saamayn ah? Nebi Ciise waxa uu si kedis ah u noqday inankii Eebbe iyo Ilaah la siman Alle, shareecadiisiina waa la tuuray. Waxaas oo dhan waxa lagu dhisay nin Yuhuudi ah oo aan Ciise nolol kula kulmin. Nin ugaadhsanayay Xawaariyiinta si uu u dilo ayaa iska yimi oo mar qudha iska sheegtay in uu cirka ku arkay nuur ka soo degaya. Nuurkaasi waxa uu ahaa Ciise, Ciisena nebi ma aha ee waa Ilaah, waana inankii Ilaahay sida oo kale. Sinada qoyska

[36] Qusdandiin: Constantinople.

[37] Niiqiya: Nikaia

ayaa ka buuxda kitaabka Ilaahay ee Injiil, oo ay ku dhacayaan nebiyada Eebbe iyo carruurtoodi. Nin Roomaani ah oo sanam-caabud ayaa dadka faraya in ay u codeeyaan Ilaahnimada Ciise, iyaguna waa ay u codaynayaan sidii doorashada. Ceebtu kuma sugna garaadka raggaas ee waxa ay jiiftaa qalbigooda.

Sidaas ayaa aan u qarribay dhammaan shareecooyinkii uu Alle u soo dejiyay dadka. Waxa aan ku soo noqday khariiradda dunida, waxa aan soo noqday aniga oo doonaya qalbiyo kale oo aan fasahaadiyo. Waxa aan helay baadidaydii 300 oo sanno ka dib Kulankii Niiqiya. Si kedis ah ayaa aanu u maqalnay haddii aanu nahay shayaadiinta war cajiib ah oo cirka ka yimi. Dhammaan Malaa'igtii aanu warka ka soo xadi jirnay waxa ay ka sheekaysanayeen dhacdo weyn oo dhulka ku soo fool leh. Waa dhacdo waxkasta dhanka kale u rogi doonta. Waxa aan sugayay warkaa oo aan in badan filayay, maya ee dhammaantayo waa aanu sugaynay. Dhulku waxa uu u diyaargaroobayay dhalashadiisa, dhalashada Maxamed.

Ninkan arrinkiisa waxa aan ku arkay wax aanan arag noloshaydii dheerayd oo dhan. Dhalashadiisii laba bilood ka hor waxa dhacay wax baraale ah oo aannaan weligayo arag. Waxa aanu aragnay cirka Maka oo ay qariyeen shinbiro aan hore loo arag. Waxa ay ahaayeen shinbiro gorgorka laaleeg, oo luqun dheer oo lugo cas. Carabtu waxa ay u bixiyeen Qoordheer. Qoordheer waxa ay qariyeen cirka oo dhan, shinbir kastaana waxa uu afka ku sitay dhagax, lugahana waxa uu ku sitay dhagax. Maka waxa ku hareeraysnaa ciidan Yaman ka yimi, oo maroodiyo waaweyn wata; oo doonayay in ay kabcada dumiyaan. Waxa uu ahaa muuqaal khayaali ah oo argagax leh, ciidamaduna waxa ay eegayeen cirka iyaga oo cabsanaya oo firkanaxsan. Waxba ma ay kala garanayn, mar keliya ayaa aanay shinbirihii dhagaxaantuu ku soo daadiyeen ciidankii. Waxa ay ahayd quruurux yaryar, balse marka ay taabtaan jidhka ciidanka hore ayaa ay ka dhimanayeen. Qofkii

ka badbaadana jidhka ayaa daadanayay xubin xubin, sidii digaag la gawracay ayaa uu noqonayay.

Waxa aanu u yaacnay dhanka cirka si aanu bal wax uun xog ah uga soo helno, waana sidii aanu samayn jirnay waaqayo. Wax baa beddelnaa, oo ma ay ahayn sammadu sidii aanu ku naqaannay. Waa aanu is eegnay annaga oo yaabban, hore ayaa aanan u sii fuulnay. Si kedis ah ayaa aanu aragnay walxo holcaya oo nagu soo daadanaya. Hoos ayaa aanu u soo caymannay, balse holocii jidhkaya ayaa uu gubay, qalbiyadayadana dab ayaa uu ku shiday. Waxa ay u muuqataa waqtigii shaydaanku amar-ku-taaglayn jiray in uu jeedsaday. Waxa bilaabmay xilli Ilaahay oo cusub, waa xilliga Maxamed e'.

Waxa gariiray dhulkii Maka, waxaana dhulka ku soo daatay 360 sanam oo kacbada dusheeda qotomay. Waxa markii u horreysay demay dabkii Beershiya ee la caabudi jirey, kaas oo ay kumanaan sanno faaliyayaashu iska dhaxli jireen huritaankiisa. Waxa aanu u kacnay haddii aanu shayaadiin nahay dhanka gurigii dhalashada Maxamed, si aanu goobjoog uga ahaanno dhalashadiisa. Halkaas waxa aanu ku aragnay wax aanu rumaysan weynay: Maryan ina Cimraan, Aasiya gabadhii Fircoon iyo dumar kale oo aannaan weligayo bilicdooda arag ayaa meesha joogay. Waxa ay ku hareeraysnaayeen Aamina, Maxamed hooyadii, si ay uga qaybgalaan dhalashadiisa. Waa yaab ee sidee ayaa ay halkan u yimaaddeen. Markii uu ka soo baxay uurka hooyadii waxa aanu sugaynay qanjiidhadii shaydaanka si uu u ooyo, balse shaydaanki ma uu iman. Maxamed waa uu dhashay mana uu ooyin. Shaydaanki waxa uu noo sheegay in uu ku dhiirran waayay in uu Maxamed u dhowaado. Waa aanu is eegnay annaga oo fajacsan. Xilli kasta oo tagay waxa uu lahaa mahadho, xilliga ninkanina waxa uu leeyahay yaabab. Waxa aan qooshay sunta ugu halista badan sumahayga, waxa aanan u siqay dhanka Maka oo aan degay. Waxa aan yaqiinsaday in

aan halkan joogi doono waqti dheer.

Sannado badan ka dib waxa la soo saaray Maxamed oo nebi ah. Waxa uu buriyay ninkani dhammaan sun kasta oo taariikhdu intii ay jirtay aan dhulka ku beeray. Waxa uu daaha ka feyday dhabta oo qudhaata. Waxa uu qeexay in Ibraahiim, Muuse iyo Ciise ba ay dadka ugu yeedhi jireen diin keliyaata oo mid ah. Waxa uu sheegay in Yuhuuddu ay iska xooreen Tawraad oo ay samaysteen mid ay maskaxdooda ka curiyeen. Waxa uu caddeeyay in Masiixiyiintu Ciise oo ah ergay Alle ay ka dhigeen wiilkii Ilaahay, balse Alle waa Ilaah keliya oo aan waxba dhalin lana dhalin. Waxa uu yidhi Masiixiyiintu waxa ay Injiil ku qoreen wax kasta oo maskaxdooda ku soodhacay oo been ah, Ciise ma uu dhiman ee Eebbe ayaa kor u qaaday dhankiisa. Ciise waa uu soo noqon doonaa aakhiru sabaanka si uu u xaqiijiyo ballankii Tawraad ku xusnaa, isaga oo dunida ku maamuli doona diintii Ibraahiim, Muuse iyo Maxamed, waa diinta Alle ee aan labada ahayn. Waxa uu soo nooleeyay Maxamed xeerarkii iyo shareecadii ay xooreen Masiixiyiintu. Waxa uu Saleebaan ka beri yeelay tuhunkii sixirka ee ay Yuhuuddu ku ganeen, waxa aanu sheegay in uu nebi ahaa, oo uu ku mulkiyay insiga, jinka, shinbiraha iyo noolaha oo dhan mucjiso Alle, oo aan ahayn sixir.

In kasta oo aanay dawladda Maxamed dhaafin Jasiiradda Carabta haddana waxa uu sameeeyay rag ka danbeeyay, oo uu iimaankoodu u adag yahay sida dhagaxa una weyn yahay sida buuraha. Waa rag aanu ka lib helin shaydaan, iskaba dhaafe shaydaanka ayaa ka baxsan jiray. Si kale oo raggaas looga takhalusaa ma ay jirin in la dilo mooyaane, Maxamedna ha ugu horreeyee.

Waxa aan u siqay dhanka Madiina, gaar ahaanna deegaankii Yuhuuddu deganayd. Waa aan ka baxay ka dib markii aan quluubtooda ku shubay wixii aan ku shubay. Waxa aan u hibeeyay mid ka mid ah Yuhuuddaas lax la gawracay, oo la shiilay si loogu geeyo nabi Maxamed iyo asxaabtiisa. Waxa ay ka warsatay gabadhaasi odayaashii Yuhuudda sunta

ugu khatarsan ee la heli karayay. Mid ay u sheegeen ayaa ay hilibkii marisay. Waxa ay warsatay qaybta uu jecel yahay nebi Maxamed, waxa aana loo sheegay inuu garabka ka helo. Labanlaab sun ah ayaa ay garabkii marisay . Nebi Maxamed waxa uu ahaa mid hibada aqbala, waa aanu ka guddoomay hilibkii. Isaga iyo asxaabtiisiina waa ay dul fadhiisteen hilibkii. Si xiiso leh ayaa aan u daawanayay waxa dhacaya. Nebi Maxamed waxa uu qaatay garabkii waa aanu rudhay, mid ka mid ah asxaabtiisa ayaa isna hilibkii wax ka cunay. Nebi Maxamed waxa uu asxaabtiisii ka joojiyay in ay hilibkii cunaan, waxa aanu ku yidhi: "*Faraha ka qaada hilibkan, waxa uu garabkani ii sheegayaa in uu sumaysan yahay*.''

Indhaha ayaa i yaryaraaday, waxa aan hubay in rudhmadaa keliya ee uu nebigu goostay in ay ku filan tahay dhimashadiisa, xilli ka dib ba ha noqotee. Dhab ahaantii waa uu xanuunsaday nebigu xanuun daran saddex sanno ka dib markii uu hilibkaas cunay. Waxa uu yidhi xanuunkiisaas; "Weli waxa i soo ridaya hilibkii aan ka cunay laxdii, waxa la gaadhay xilligii ay suntu iga go'i lahayd." Sidaas ayaa ay dhabbadu ku noqotay mid ii xaadhan si aan sun kale u beero. Waxa aan si kasta isugu dayay in aan sumeeyo afkaarta diina Islaamka, balse Maxamed kama uu tagin kob bannaan oo la sumayn karo. Wax kasta waa uu caddeeyay. Quluubta asxaabta nebi Maxamed waxa ay ahayd mid ka adag dheemanta. Dhibta ugu weyn ee i haysatay waxa ay ahay in uu Ilaahay ballanqaaday in uu dhowri doono Quraanka, meel aan ka leexiyaana iima ay furnayn. Waxba kama uu tegin Quraanku waxkastna si hufan ayaa uu u qeexay. Uma aan baran in ay waxna hor istaagaan siqitaankayga, sidaa darteed waxa aan helay marin, ama wax marin u eg.

Waxa dhintay labadii saaxiib ee Nebiga waa Abu Bakar iyo Cumare, waxaana khilaafadii la wareegay Cismaan binu Cafaan. Waa ay balaadhatay diintii nebi Maxamed, waxa aanay fidday inta ka dhaxaysa Shiinaha illaa Tunuusiya. Haddii laga tegi lahaa dhowr sanno waxa ay qabsan lahayd

adduunka oo dhan. Maxamed waxa uu dhisay jiil dhan oo ah qofaf widhwidhaya oo dhif ah, kuwaas oo tamar iyo daacadnimo isku darsaday si aan weligeed taariikhda u dhicin, dibna aan u dhici doonin. Xadaaradaha dunida oo dhan waxa faan ugu filnaan lahaa haddii ay qof ama dhowr qof oo jiilkii Maxamed ah heli lahaayeen, haddaba ka warran xadaaradda ay ku jiraan boqol kun oo kuwaas ka mid ahi. Suurto gal ma ay ahayn in aan helo qof aan suntayda sii dhex mariyo markan, waxa waajib ahayd in aan anigu shakhsi ahaan goobta dhacdooyinka u yimaaddo. Waxa aan iska saaray qaabkii maska, waxa aanan iska dhigay qaab aadame. Waxa aan degay magaalada Madiina, magaaladii lagu koriyay waxaas oo rag ah. Waxa aan u soo degay aniga oo iska dhigaya nin madow oo Yaman ka yimid. Waxa aan ahaa shaydaan lagu magacaabo Cabdillaahi, Cabdillaahi ibnu Saba'. Waxa aan diyaariyay sun fikradeed oo daran si aan ugu beero quluubta raggaas. Waxa aan eegay caqiidadooda, kitaabkooda iyo rasuulkooda mana aan helin goldaloollo ka bannaan. Maskaxda ayaa aan tuujiyay, waxa aanan helay dalool aan ka geli karo. Waxa aan helay godkii aan sunta oo dhan kaga shubi lahaa. Markii uu dhintay nebi Maxamed, waxa ay isugu soo urureen waaweynkii asxaabta nebigu goobta Saqiifa binu Saacida, si ay mid ka mid ah ugu doortaan khaliifka muslimiinta. Balse waxa ay hilmaameen mid ka mid ah asxaabta kuwa ugu mudan. Waxa uu ahaa nin aad u muhiim ah oo aan Saqiifa la joogin, oo ku mashquulsanaa maydhista jidhka ee Nabiga, si loo aaso. Kaasi waxa uu ahaa Cali, Cali binu Abi Daalib, nebiga inaadeerkii, oo ahna soddogiisii.

Suurto gal ma ay ahayn in la saameeyo caqiidada raggaas, aniga oo shaydaan ah ayaaba ka baqanayay in ay saameeyaan caqiidadayda. Sidaa darteed, waxa aan go'aansaday in ay suntu markan noqoto mid siyaasadeed, siyaasad qudhaata. Cali binu Abi Daalib waa Ehlu Baytka nebiga, waxa aanu nebigu ku magacaabay weligii muuminiinta, sidee ayaa ay

haddaba markaa ugu kulmayaan Saqiifa oo ay u dooranayaan khaliifo, iyaga oo aan xata ra'yiga Cali warsan. Waa aan u guuxay aragtidaas, waxa aanan qaaday dhabbadaydii aniga oo faraxsan. Waxa aan ka soo baxay Madiina aniga oo dulaysan oo niyad jabsan. Waxa ay isku raaceen reer Madiina oo dhami go'aankii Saqiifa, qof kastaana waxa uu la baayactamay khaliifka cusub ee Abu Bakar. Cali ayaa xataa baycada siiyay Abu Bakar si fudud. Kuwani waxa ay si wacan u dhuuxeen hadalka rasuulkooda, marar badan ayaa uu nebigu u taxay sida loo kala fadli badan yahay: Abu Bakar kaddib Cumar kaddib Cismaan kaddib Cali. Anigu waxa aan dhoodhoobay in saddexdaa hore ay khilaafada ka xadeen Cali, oo ay saddex jeer taliska dhaafiyeen. Sidee ayaa ay khilaafada u xadi karaan iyaga oo aan xukunka weligood dhar cusub ka gadan, iskaba dhaafe waxa ay dhinteen iyaga oo dhammaantood deyn lagu leeyahay. Waxa ay naftooda iyo maalkoodaba u hureen jidka Ilaahay.

In kasta oo ay suntaydaasi wax raad ah ku yeelan weyday raggaas iyo waaweynka saxaabada, waxa ay haddana saameyn ku lahayd kuwa qalbiyada hooseeya iyo kuwa ku cusub Islaamka. Sidaa darteed, waxa aan u guuray Shaam. Waxa aan isku dayay in aan fikirkaygii halkaas ku faafiyo, balse aniga oo dullaysan ayaa aan Shaamna ka soo baxay. Taliyaha Shaam Mucaawiye ina Abu Sufyaan, waxa uu Shaam u maamulayay hab ay adag tahay in fidno lagu dhex faafiyaa. Shaam markii aan ka imi waxa aan u kacay dhanka Ciraaq, halkaas oo aan baadidaydii ka helay. Waxa aan markii hore faafiyay dhaliil badan oo aan dusha ka saaray maamulayaashii arliga oo dhan. Haddii ay dadku qaataan dhaliishaas aan taliyaasha u jeediyay, waa ay fududahay in ay qaataan dhaliisha aan u jeediyo khaliifka Islaamka Cismaan binu Cafaan. Dad badan ayaa qaatay dhaliishaydii waxaana ka mid ahaa hoggaamiyayaashii ciidanka sida al-Ashtar Alnukhaacii. Taliyayaasha gobolada dhaliishii aan u jeediyay waa ay aqbaleen, waxa kale oo ay aqbaleen dhaliishii aan u jeediyay

Cismaan binu Cafaan. Waa aan dhaliilay dhaliilay Cismaan, illaa aan gacanta ku dhigay saddex kun oo nin, waxa aananu galnay magaalada Madiina, annaga oo ka soo horjeedna khaliifka muslimiinta Cismaan binu Cafaan. Dhalleecayntii ayaa aanu ku gannay, waxa aanan farnay inuu siibo khilaafada oo uu Cali ku wareejiyo. Tan lafteeda Rasuulku waa uu uga warramay Cismaan, waxa aanu ku yidhi waxa iman doona munaafiqiin, kuwaas oo kaa dalban doona in aad iska bixiso shulug uu Ilaahay kuu geliyay, ee ha bixinnin. Sidaas ayaa uu Cismaan u diiday in uu khilaafada iska wareejiyo. Waa aanu go'doominnay Cismaan, biyahana waa aanu u diidnay, ka dibna waa aanu dilnay.

Sidaas ayaa ay dadku baycada u siiyeen Cali binu Abi Daalib, oo uu u noqday khaliif. Badh saxaabadii waaweynayd ka mid ah ayaa is khilaafay, koox waxa ay ka dalbatay Cali in uu u qisaaso kuwii dilay Cismaan inta aanay baycada siin. Kuwaas waxa ugu cadcaddaa Caa'isha, gabadhii Rasuulka; Dalxa binu Cubaydullaah iyo Subayr binu Cawaam. Kooxda kale waxa ay ahayd kuwo raacsan Cali, waxa aanay rabeen in qisaasta dib loo dhigo. Sababta waxa ay ku sheegeen mid siyaasadeed, waayo, dadka Cismaan dilay waa qabiilooyinka ugu waaweyn Ciraaq iyo bariga boqortooyada Islaamka, waana dad Islaamka ku cusub. Haddii si degdeg ah qisaasta loogu fuliyo kala badh taliska khilaafadu waxa uu ka go'ayaa Islaamka. Waxa aan u adeegsaday ra'yigaas Cali ee siyaasadeed sida ugu halista badan. Waxa aan ku dhex faafiyay mucaaridka Cali aragtida ah Cali waxa uu neceb yahay Cismaan, sidaa darteed ayaa aanu waxba uga qaban kuwii dilay. Waxa uu ra'yigan siyaasadeed u qabaa waxa uu rabaa in uu kuwii Cismaan dilay siiyo fursad ay ku baxsadaan. Run ahaantii waxa aan ku guulaystay in aan dab shido.

Waxa ay go'aansadeen Dalxa iyo Subayr in ay u socdaalaan Ciraaq si ay u soo qisaasaan ciddii Cismaan dishay, waxa aanay kaxaysteen shan kun oo nin. Waxa ay sii kaxaysteen Caa'isha xaaskii Rasuulka, si ay ugu soo dabcaan

qolooyinkaasi. Markii ay gaadheen qabiilooyinkii waxa ay fareen in ay soo dhibaan kuwii dilay Cismaan, si loogu qisaaso. Hasayeeshee qabiilooyinki waa ay diideen arrinkaasi, waana sidii uu Cali filayay. Waxa bilaabmay dagaal, ciidankii Dalxa waxa uu qabiilooyinkii ka dilay dad badan, waxaana la dilay inyar oo ka mid ah kuwii Cismaan dilay, sidii uu Cali filayay.

Cali ayaa u kacay dhanka Ciraaq si uu xal uga gaadho muranka oogan. Waxa uu Cali ku canaantay Dalxa, Subeyr iyo Caa'isha in aanay rumaysan aragtidiisii siyaasadeed. Waa ay is dajiyeen dhammaan waxa aanay baycada siiyeen Cali, ra'yigiisii ayaa aanay raaceen. Waxa ay u muuqatay in uu Cali ku guulaystay in uu dabkaa bakhtiiyay, balse ma ay suurtogelin. Habeenkii markii ay dadki wada seexdeen, aniga iyo rag ila socday waxa aanu si dhuumasho ah ku galnay taandhooyinkii ay hurdeen ragga Dalxa, xoogaa ayaa aananu ka dilnay. Ka dibna waxa aanu u kacnay dhanka taandhooyinka ragga Cali, xoogaa ayaa aananu ka dilnay. Marka ay qaarna na soo weeraraanba waxa aanu u dhawaaqnaa kuwii kale, sidaas ayaa ay raggi u soo wada kaceen oo seefta la isula dhacay. Cali ayaa u dhawaaqay dadkii oo dhan, isaga oo faraya in ay dagaalka joojiyaan. Caa'isha waxa ay soo kaxaysatay awrkeedii iyada oo ku baaqaysa in dagaalka la joojiyo. Waxa la dhaawacay awrkeedii oo leeb badani ku dhacay, lamana garanayn cidda soo ganaysa. Cali ayaa isku gudbay awrkii Caa'isha si geesinimo leh, waxa aanu u banneeyay meel si ay goobta uga baxdo, waxa aanu raaciyay dumar ehelkiisa ah si ay Madiina ugu raacaan. Waxa lagu dilay Dalxa leeb habow ah oo aan la garanayn cid soo gantay, markii uu Cali arkayna waa uu ooyay. Waxa lagu dilay Subeyr oofwareen gaadmo ah isaga oo tukanaya salaaddii Duhur. Waxa yimi qaar ugu bushaaraynaya Cali dhimashada Subeyr, waxa aanu Cali yidhi kii Subeyr dilay naarta ugu bushaareeya. Cali ayaa aasay Subeyr, waxa aanu yidhi: 'Waxa aan rajaynayaa in aniga,

Dalxa, Subeyr iyo Cismaan aanu ka mid noqono kuwa uu Ilaahay ka yidhi: "*Waxa aanu ka siibnay wixii xin laabtooda ku jiray, (waxa aanu ka dhignay) walaalo (ku jiifa) sariiro iska soo horjeeda.*"

Ciraaq oo ahayd gobol aan xasilloonayn dartii Cali waxa uu doorbiday in uu taliskiisa ka dhigo magaalada Kuufa. Sidaas ayaa uu mar labaad Cali u bakhtiin gaadhay dabkii aan shiday. Taasi ma dhacayso, waayo halkan ayaa aan ku suganahay. Weli waxa halkan jooga ninkii madoobaa ee ay ta madoobi dhahay Ibnu Saba'. Waxa ii samaysmay hogag badan oo aan Islaamka ka geli karo. Cali markii uu dejiyay siyaasaddii uu ku soo dhowaynayay qabiilooyinka Ciraaq rag badan oo taliska ciidanka ka mid ahaa sidoodii ayaa uu u daayay. Kuwaas uu daayay waxa ka mid ahaa al-Ashtar Alnukhaacii oo ka mid ahaa horjoogayaashii ka fallaagoobay Cismaan isaga iyo qaar kale oo badan. Waxa aan dadka ugu dhawaaqay waar eega sida uu Cali binu Abi Daalib uga guuray magaaladii Nebiga ee Madiina, ee uu u degay Kuufa oo ah hoyga kuwii Cismaan dilay. Waar eega sida uu ciidanka Cali ula dagaalamay ciidankii Caa'isha, Dalxa iyo Subeyr oo uu ka dilay dad badan. Iyo sida uu u diiday in uu la dagaalamo kuwii Cismaan dilay. Waxaas oo dhami miyaa aanay tusayn caloolxumada uu u hayo Cismaan binu Cafaan? Qayladaydaasi waxa ay saamaysay oo keli ah kuwii Islaamka ku cusbaa. Muslimiintu si dhab ah ayaa ay u garanayaan ka uu yahay Cali binu Abi Daalib: waa Nebiga inaadeerkii, waxa uu qabay inantii Nebiga, waxa uu ahaa la taliyihii saddexdii khaliif ee ka horreeyay. Nebigu waxa uu ka yidhi: "*Ilaahay nebi kasta tafiirtiisa waxa uu u geliyaa dhabarkiisa, tafiirtaydana waa uu diiday in uu dhigo meel aan dhabarka Cali ahayn*" iyo "*Qofka xigtadayda ah, Cali na waa xigtadiisa.*" Sidaas ayaa aanay qayladaydi u helin cid dhagaysata.

Waxa i kaalmeeyay waxa uu ahaa waxa jirey deegaan dhan oo lagaga kacsan yahay Cali iyo siyaasadihiiisa. Deegaankaasi waxa uu diiday in uu Cali la baayactamo illaa la qisaaso kuwii

Cismaan dilay. Waa deegaan qudha balse aad u muhiim ah, waa Shaam. Taliyaha gobolka Mucaawiye ina Abu Sufyaan iyo koox saxaabadii waaweyn ahayd oo uu ugu mudnaa Camar ibnu Caas.

Mar aan imi Shaam dilkii Cismaan ka hor waxba iima ay suurto gelin, hadda se oo ay qaateen mawqifkan mucaaridnimo in dab laga dhex huriyaa waa mid fudud. Qayladaydii waxa aan kula dhex dhacay taageerayaashii Cali binu Abi Daalib, waxa aanan ku idhi Mucaawiye binu Abi Sufyaan waxa uu u diiddan yahay in uu Cali baycada siiyo waayo Cali waxa uu dilay abtigii iyo walaalkii. Sidoo kale maaddaama uu yahay horjooga qabiilka reer bani Umaya oo uu ka dhashay Cismaan binu Cafaan waa xigtada leh dhiigga Cismaan. Xigtanimadiisa dhiigga ayaa uu ka doortay xigtada khaliifka. Qayladaydu ma ay helin dhego daloola maalmahaa, waayo, dadku waxa ay garanayeen ka uu yahay Mucaawiye: waa kuwii farokutiriska ahaa ee uu Nebigu ku aamminay qorista Quraanka, isaga ayaa ay ka qaybeen Axaadiis badan, Nebiga ayaa u duceeyay oo yidhi: "Ilaahayoow ka dhig mid hanuunsan oo dadka hanuuniya." Muslimiinti ducada Nebiga waxa ay u dhaqan geliyaan sida dastuurka oo kale. Sida oo kale Mucaawiye walaashii waa xaaskii Nebiga, waxa aana lagu naanaysaa Mucaawiye abtigii Muuminiinta. Aad baa ay ugu kalsoonaayeen, maxaayeelay, Cumar binu Khaddaab xilligii Khilaafadiisa waxa uu casilay rag badan oo hoggaamiyayaashii iyo taliyayaasha Islaamka ka mid ah sida: Khaalid binu Waliid, Abu Musa al-Ashcari, Sacad binu Abi Waqaas iyo Cammaar binu Yaasir, balse Mucaawiye ma uu casilin. Mucaawiye waxa uu ahaa nin maskax badan oo maamul yaqaan ah, oo caddaalad badan.

Markii uu dheeraad diiditaankii uu Mucaawiye diiddanaa baycada Cali, waxa ay saxaabadu kula taliyeen khaliifka Muslimiinta Cali in uu u baxo Shaam, oo uu gobolkaas taliskiisa hoos keeno. In ay Shaam ka maqnaato gacanta Khilaafadu waxa uu gobolada kale ku dhiirrigelinayaa in ay

fallaagoobaan. Sidaas ayaa uu Cali ku duulay Shaam isaga oo wata ciidan dhan boqol iyo labaatan kun oo nin, si uu Shaam u soo celiyo. Mucaawiye waxa uu diyaariyay ciidan dhan sagaashan kun oo nin. Aad ayaa aan u faraxsanaa, saxaabadii qalbiyada dahabka ah lahaa ayaa inyar u jira in ay dagaalamaan. Dagaalkoodu waxa uu ka dhigan yahay dhicitaanka dawladdooda, taasi waxa ay fursad siinaysaa masku in uu helo raq kale. Madaxa ayaa ay is dareen labadii ciidan, waxaana dhintay rag lagu qiyaasay afartan kun oo nin. Arrin cajiib ah ayaa aan ku arkay raggan oo aan la fajacay, oo aan qaadan kari waayay. Iyagu maalinkiina waa ay diririyaan habeenkiina waa ay is booqan jireen. Quraan ayaa ka baxaya ciidankaa dhexdiisa, kuwan kalena Quraan ayaa ay akhriyayaan.

Dhinac kastaa waxa uu rumaysnaa in uu u diririyo diinta darteed. Darafka Mucaawiye waxa uu u dagaalamayaa si loo fuliyo xadka qisaasta, maxaayeelay hakintiisa waxa ka dhalanaya in la khilaafay shareecadii Eebbe. Dhinaca Cali waxa uu u dagaalamayaa si loo dhawro xasilloonida dawladda Islaamka. Waa ay diririyaan balse qolana qolada kale ma necba, taa lidkeeda qaarba kuwa kale maamuus ayaa ay u hayeen. Dagaalka dhexdiisa labada nin waa ay diririyaan iyaga oo aan is dilayn, dhammaan dilkii dhacay waxa sababay taageerayaashayda. Waa kuwii dilay Cismaan oo ku jiray ciidanka Cali. Waxa aan dhex istaagay kuwan iyo kuwaasba, kuwan suntaydu ma karayso. Waxa aan shiday wax aan moodayay in uu yahay dab quluubtooda ka oogan, dabkiina waxa uu noqday nabad iyo qabow sidii oo aanu jirinba. Waqtiga ayaa uun baa aan iska lumiyay, kuwani muddo ka dib ba waa ay iska heshiinayaan, iyaga oo sidii hore ka xoog badan ayaana la arki doonaa.

Sidii aan filayay waa ay heshiiyeen raggii, waxa aanay sameeyeen dagaal joojin. Sannadkaa dhexdiisa waxa aan ku siqay kuwa naftooda iyo iimaankoodu daciifka yahay, kuwaas mooye cid kale awood kuma lihi. Waxa aan ka dhaadhiciyay

in badan oo kuwaas ka mid ah in qof kasta oo ka qayb qaatay dagaalkii saxaabadu uu yahay gaal. Waxa aan ku booriyay in ay afgenbiyaan khaliifka Islaamka Cali. Cali waa uu la dagaalamay kuwaas, si adag ayaa aanu ula diriray, balse mid ka mid ah ayaa dilay kaas oo ahaa Cabdiraxmaan binu Maljam. Kaasi waxa uu moodayay in uu jannada ku galayo dilka Cali, alla maxaa aan sun qalbigiisa ka buuxiyay. Waxa uu Nebigu yidhi kii Cali dilaa waa ka ugu hoog badan Aakhiro. Waxa kale oo uu Nabigu yidhi kooxda la dagaalanta Khawaarijtu waa kuwa xaqa u dhow, markaa waxa ay noqonayaan kooxda Cali binu Abi Daalib. Kooxda disha Camaar binu Yaasir xilliga fidnada waa kooxda gardaran, markaa kuwaasina waa kooxda Mucaawiye. Waxa yaable in uu nebi Maxamed sii sheegay Axaadiis ka warramaysa waxyaabo dhacay dhimashadiisii kaddib. Ummadani waa mid fajaciso ah, taariikhda ma ay soo marin ummad tan la mid ahi.

Markii uu dhintay Cali binu Abi Daalib waxa taliskii Khilaafada la wareegay inankiisii Xasan. Xasan waxa uu sameeyay arrin fudud oo wax kastaa ku hagaageen: lix bilood ka dib khilaafadiisii waxa uu u tagay Mucaawiye waxa aanu uga tanaasulay Khilaafada. Sidaas ayaa ay ku heshiiyeen dhammaantood, cidna qalbiga waxba kuma ay sii qaban. Ninkani yaabab ayaa uu lahaa, bilowgiiba waxa uu aabbihii Cali ku waanin jiray waanooyin haddii uu Cali qaadan lahaa ay wax badan hagaagi lahaayeen. Waxa uu ku waaniyay in aanu ka dabategin Caa'isha markii ay Ciraaq aadday, waxa uu kula taliyay in aanu u bixin dagaalka Mucaawiye; haddana waa kaas Mucaawiye uga tanaasulay xukunka. Awowgii nebi Maxamed waxa uu odhan jiray Ilaahay waxa uu ku kala furdaamin doonaa laba kooxood oo muuminiin ah oo waaweyn. Mar kale ayaa ay dhabawday odhaahdii nebi Maxamed sidii uu u yidhi. Sidaas ayaa ay fidnadaasi ku dhammaatay dabkeediina uu u demay, suntiina waa laga caafimaaday. Waxa aan eegay naftayda, waa aan ku fashilmay

arrinka raggan. Maxaa laga sameeyay quluubtooda talow? Maxaa laga sameyay?

DHAN

Iftiimin

Shaydaanka Siirbenti waa astaanta halleynta, Tawraaddu waxa ay ku sheegaysaa in uu yahay shaydaankii marinhabaabiyay Aadam iyo Xaawa markii jannada ku jireen. Dhabtu taas waa ay ka duwan tahay shaydaankii marinhabaabiyay Xaawa iyo Aadan ee jannada ka soo saaray waa Luusifar (Ibliis). Siirbenti waa shaydaan u xilsaaran burburinta caqiidooyinka iyo diimaha, iyo in uu fidno ama dab ka dhex shido dal kasta.

Lama yaabbani marka aan shaashadaha ka arko dilka waxshinimada ah ee ay Yuhuuddu u gaysanayaan carruurta reer Falastiin iyaga oo gawracaya maatida, xaqiiqda aynu soo aragnay ayaa ah in askariga Yuhuudiga ahi aanu u arag in u qof dilayo balse waxa uu u arkaa sida Talmuudka ku qoran in uu dilayo xayawaan leh muuq aadame. Yuhuudda oo dhami ma rumaysna Talmuudka waxa jira kooxo rumaysan Tawraad oo qudha, waa sida kooxda loo yaqaanno al-Qarraa'uun[38]. Waxa ay rumaysan yihiin in Ciise iyo Maxamedba ay yihiin nebiyo Ilaahay soo diray. Waxa ay sheegaan in xataa Yuhuuddii noolayd xilligii Nebi Maxamed isaga oo aan soo bixin ba ay u yaqaanneen sida ay u yaqaannaan carruurtooda, oo Tawraad loogu sheegay.

Aragtida ah in dadka aan Yuhuudda ahayni ay yihiin xayawaan leh muuq aadame waxa ka dhashay aragtiyo lagu badhitaaray maxfaladda Maasooniyadda sida aragtida Daarwin [39] ee sheegaysa in uu dadku daanyeer ka yimi. Yuhuudda caadiga ahi ma rumaysan aragtida Daarwin, balse waxa ay qabaan in in ay tahay aragti madaxa loogu rido Quwiimka doqomada ah, oo lagu bahdilo. In kasta oo aynu

[38] Qarraa'uun: Karaite Judaism.
[39] Daarwin: Charles Darwin.

soo aragnay sida uu u galay maska Siirbenti si uu u leexiyo diinta Masiixiga haddana kuma aan arag Injiil oo aan wada akhriyay, meeris qudha oo uu Ciise ku sheeganayo in uu yahay Ilaah, ama inankii Eebbe ama uu ku yidhi i caabuda. Waxa aan ku arkayba marar inta loogu yeedhay 'ninka wanaagsan' uu yidhi ha iigu yeedhina ka wanaagsani waa Ilaahay.

Waxa uu dadku gaadhay heer maskax badnaan ah oo aanu qof ku sheegi karin in uu Ilaahay yahay. Xaggee ayaa uu ku maqnaa Ilaahani intii aanu dhalan ka hor, sidee ayaa aanu u dhimanayaa marka ay ajashiisu dhammaato? Waxa ay leeyihiin waxa uu u dhintay dadka dartiis! Sidee ayaa uu u dhintay isaga oo Ilaah ah? Waxa aan akhriyay in la guday Ciise markii uu yaraa, markii uu wadaadku gudayay ma waxa uu gudayay Ilaahay? Markii uu macatabka ku xidhnaa ee la dilayay waxa ay sheegaan in uu ku qayliyay isaga oo cirka eegaya: maxaad iiga tagtay? Ma suurtogalbaa in Ilaahu cid kale ku yidhaahdo maxaa aad iiga tagtay? Mar kale sidee ayaa ay caqligal u tahay in ay yidhaahdaan Eebbee waa gooni, Masiix waa gooni, Ruuxda qudduuska ahina waa gooni; ka dibna ay u yidhaahdaan waa isku wax keliya oo Ilaah loo yaqaanno! Ma garanayo sida uu waxaa Siirbenti uga dhaadhiciyay, se waxa aan hubaa in uu qalbigooda madoobeeyay inta aanu garaadkooda maqnaysiin.

Kuma aan sheegin (ayuu leeyahay qoraagu) ee waxa aan ahay muslin, balse arrimahan oo dhan waxa aan ogaaday aniga oo aan diinta ku ogaan.Waxa aan ku ogaaday nolosha sixirka iyo Maasooniyadda. Inkasta oo uu maska Siirbenti uu ku fashilmay in uu waxyeelleeyo caqiidada Saxaabada, haddana saddex qarni ka dib waxa uu suntiisii ku afiifay nafo. Jiilkii dahabiga ahaa ee saddexda qarni ee hore waa uu dhaqaajin kari waayay, waa aanu ka quustay, se dad kale ayaa uu helay.

Saddex qarni ka dib waxa uu ku guulaystay maska Siirbenti in uu muslimiinta ka soo dhex saaro koox weyn oo la yidhaahdo

Shiico. Aasaaska kooxdanina waxa uu bilawmay markii Xuseen binu Cali lagu dilay Karbala.

Markii hore waxa ay shiicadu ku bilaabmatay koox la yidhaahdo Saydiya, kuwaas oo ku abtirsada Sayid binu Xuseen binu Cali. Sayid waxa uu ahaa nin mujaahid ah oo guud ahaan muslimiinta ku waafaqsan waxa ay rumaysan yihiin oo dhan marka laga reebo isaga oo u arkayay in Cali binu Abi Daalib uu khilaafada ka mudnaa Abu Bakar. Waa uu qirsanaa fadliga ay leeyihiin Cumar iyo Abi Bakar ba , intii aanu dhimanna waxa uu naxariis u weydiiyay Eebbe labada khaliifba. Markii uu Sayid dhintay, badh ka mid ah Saydiyadii waxa ay diideen naxariis dalabkii Sayid ee Abu Bakar iyo Cumar waxaana loo bixiyay Raafido. Kuwaasina waxa ay u sii qaybsameen dhawr iyo toddobaatan kooxood.

Taariikhda Raafidada waxa ka buuxda khiyaano iyo dhagar badan oo ay u dhigeen dawladihii Islaamka, waxa aanay la midoobi jireen cadawga Islaamka. Waxyaalaha aan la yaabo waxa ka mid ah sida ay u soo baxeen waxa kan oo ah kooxo Shiico ahi, iyada oo ay Muslimiintu xoogga saareen in axaadiista Nebiga si xidhiidh ah looga soo weriyo, oo aan waxba la dhex galin karin. Xaqiiqda iga hortimid ayaa se ah in Muslimiintu ay xoogga saareen xadiiska, fiqiga iyo tafsiirka halka ay ka hilmaameen in ay qoraan taariikhda. Markii muslimiintu ay taariikhda hilmaameen ayaa ay Shiicadu xoog isugu hawleen qorista taariikhda, waxa aanay taariikhda ka buuxiyeen dhacdooyinkii fidnada ee saxaabada dhex maray. Qof kasta oo raacraaca xidhiidhka dhacdooyinka fidnada waxa uu arkayaa in dhammaan werinta duraysa Mucaawiye ama kuwa la mid ah ee saxaabada ay qoreen afar nin oo Shiico ah, kuwaas oo lagu yaqaannay axaadiista beenta ah iyo abuurista sheekooyinku. Waxa murugada leh ayaa ah in werinta dhacdooyinkaas ee Shiicadu ay xataa soo gaadhay manhajka dawlado Islaam ah. Halkaas waxa ka soo baxay dad ku talaxtagaya Mucaawiye binu Abi Sufyaan, iyo Yasiid iyo aabbahood Abu Sufyaan.

Waa la caayay oo wax badan ayaa laga sheegay Mucaawiye iyo inankiisa Yasiid, waxaas oo been ahna waxa laga soo qaatay kutubta Shiicada. Warka keliya ee sugan ee Yasiid laga sheegay waa ka uu yidhi Maxamed Binu Cali binu Abi Daalib, oo ah Xuseen iyo Xasan walaalkood. Isaga oo Yasiid ka hadlaya waxa uu yidhi: ''Waa aan la noolaa oo waa aan la dhaqmay Yasiid binu Mucaawiye, akhlaaq ahaanna weligay uma aan diidin." Dadkii ka soo horjeeday in Mucaawiye uu taliska u dhiibo inankiisa Yasiid waxa ugu cadcadda saddex saxaabi oo kala ah: Xuseen binu Cali, Cabdillaahi binu Subeer iyo Cabdiraxmaan binu Abii Bakar, markii ay ka soo horjeedsadeenna waxa ay ku yidhaahdeen weedh kaliya oo ah: ''*Ma sidii Kisra mise sidii Qaysar ayaad doonaysa in laguu dhaxlo*" Waxa ay ka soo horjeedeen dhaxalka oo qudha. Shiicadu se waxa ay soo werisaa war badan oo ay sheegaan in ay saxaabadu ka yidhaahdeen Mucaawiye iyo qoyskiisa, taasi waxba kama jiraan.

Innaga oo aan ku daalin sheekooyinkaa adag ee caqiidada la xidhiidha aynu mar kale ku soo noqonno dheesheennii. Imika waxa aynu haysannaa laba warqadood oo qudha.

- **Waraaqda koowaad:** waa isku-dhexyaaca, waxaana ka muuqda nin indhaha isku haya madax xanuun dartii, oo laga dareemayo in uu khalkhalsan yahay.
- **Waraaqda labaad**: waa warqadda shirqoolka.

Sheekadan kaagama sheekayn doono wax shaydaan ahi, shayaadiinta waa aynu iskaga tagnay. Sheekadan waxa kaaga sheekayn doona mid Shiicada ka mid ah, gaar ahaan kooxda Nasaariyada. Waa nin ka tirsan waaxda halista ah ee loo yaqaanno Xashaashiinta [40] . Ha i weydiin sida uu uga sheekaynayo balse dhagayso uun.

[40] Xashaashiinta: Assassins.

***

Fardofuul ka Yimid Jannada

1000 C.D – 1250 C.D

Markii ugu horreysay ee aan jannada galo waxa jidhkayga saarnaa maro xariira oo cad oo qudha. Waxa garbaha i hayay laba malag oo cadcad oo aad u dhaadheer. Gacmaha ayaa ay iga sii daayeen, taasina waxa ay ka dhignayd soco ruuxyahay Eebbe ka raalida yahay, oo ku baashaal waxa nimco uu Alle kuu diyaariyay. Hareeraha ayaa aan eegay aniga oo ashqaraarsan. Markii ugu horreysay waxa aan arkay webi qulqulaya, waxaaba la moodayay webi caano ah. Dhanka kale ayaa aan eegay, waa geedo timir ah oo cirka ku shareeran, oo ay midhaheedu dhulka wadhan yihiin si aad carrabka u laalaadinayso. Waxa kan aad akhriyaysaa waa dhab, ma aha riyo. Waa aan u jeedaa waxa aam arkayo oo dhan, baraadkayguna waa uu joogaa. Keliya waxa aan dareemayaa in maskaxdaydu ay maahsan tahay sidii qof suuxsan. Waa aan soo jeedaa, waxaana ii soo gashay dabayl. Hareeraha ayaa aan eegay, waxaabad mooddaa in ay tahay neecaw, waa neecawda aan neefsanayo.

"Jannadu waa ay idin sugaysaa gargaarayaasha Aala Baydkoow.
Kuwii Cali jeclaayoow jannadi wataa muuqata,
waxa idinka xiga uun in aad albaabkeeda riixdaan."

Wax kale ayaa si kedis ah iigu soo galay, waa hees ku farxad gelinaysa. Weligay ma aan arag wax ka cod macaan. Xaggii heestu ka baxaysay ayaa aan eegay. Waxa halkaa ka muuqday afaaf la moodo in dhir laga sameeyay. Heesuhu halkaas ayaa ay ka baxayaan, iyaga iyo codad kale. Dad ayaa ku jira gudaha. Waa dareen cajiib ah adiga oo ku jira jannada in aad daahfurto kolba goob kugu cusub, kaddibna aad u dhaqaaqdo dhankeeda. Waxa aad ogtahay in nimcada

dhextaala goobtaasi ay la heer tahay magaca janno. Weedhahan aan leeyahay ma suurayn karaan waxa aan dareemayo, laakiin waxa aan doonayaa keliya in aan macnaha idiin soo dhoweeyo. Waxa aan u dhaqaaqay dhanka afaafkaas, aniga oo aad mooddo in heesahaa macaani ay i hoggaaminayaan.

"Waxa xume ka nasahan mahadnaqa ka hore,
waxa aanu maamuusayna boqortooyada ka danbe:
waa laba ilaah oo waaqjireen ah oo waaweyn.
Cidna kama ay horreyn cidna ma saddexayso."

Dhab ahaantii gudaha waxa aan ku arkay ashqaraar. Waxa ay ahayd markii ugu horreysay ee aan dhadhamiyo farxad. Naftaydu waxa ay ahayd mid faraxsan, riyaaqsan, oo maaweelo ku jirta. Farxaddaydu waa ay sii laba jibbaarantay markii aan goobtaa hore u galay. Waxa dhagahayga ku soo dhacayay codadka laxammo aan toos u garanayo. Waxa aan arkay dad badan oo aan weji garanayo, waa walaalihii caqiidada. Waxa aan arkay iyaga oo ku dangiiga sariiro, oo ay garab joogaan hablo aad u qurux badan, kuwaas oo la dheelaya oo la qoslaya. Waxa ay xidhnaayeen maryo leh midab furan, oo leh midabbo casaan iyo caddaan ah. Markii ay arkeen aniga oo soo galaya waxa igu soo orday laba hablood oo aad quruxdooda yaabto, oo ii dhoollocaddaynaya. Gacmaha ayaa ay ii soo fidiyeen si dheddignimo leh oo aanan weligay arag. Waxa ay ii soo kaxayeen dhanka madasha si aan ugu biiro kooxdan faraxsan.

"Dila khaliifka xataa haddii la idin dilayo.
Haddii aad dishaan jannada ayaa aad gelaysaan,
haddii la idin dilana jannada
ayaa aad gelaysaan sida oo kale."

Waxa ay i fadhiisiyeen mid ka mid ah sariiraha, ka dibna labadoodiiba waxa ay dhunkadeen gacmahayga si dhibirsan. Waa aan idin tuugayaa ii sheega in aanan riyoonayn, haddii aanan riyoonayna ii sheega in aanan sirkhaansanayn. Haddii aanan sirkhaansanayn maxaa ay maskaxdaydu la mirqaansan tahay. Ma aan moodayn in ay jannadu xataa leedahay nimcada maskaxda, maskaxda nimcadeeduna waa mirqaanka. Kaasi waa mirqaankii weynaa ee uu i dhadhansiiyay markii ugu horreysay sheekha buurtu, imaamkii weynaa al-Xasan al-Sabaax. Madasha lafteeda ayaa aan ku arkay imaamka weyn laftiisa, alla haybad badnaayee ninkaasi. Waxa aan xusuustaa maalin uu imaamka weyni wiil barbaar ah faray in uu ku istaago gidaarka qalcadda Alaamuud, oo uu iska tuuro. Wiilkaasi waxa uu koray qalcadda waxa aanu iska tuuray gidaarka qalcadda dusheeda, waxa aanu ku hoobtay dhulka oo aad u fog, waa aanu dhintay. Waxa uu iimaamku wiilka u faray in uu is dilo waayo waxa uu tusayay Macatable gaal ah oo ku soo booqday qalcadda sida ay xertiisu ugu daacadda yihiin, xataa haddii uu faro in ay is dilaan. Waxa aan hubaa in wiilkaas barbaarta ahi uu ku baashaalayo jannada waaritaanka. Muu fahansanayn Macatabluhu waxa aanu diyaarka ugu nahay in aanu is dilno annaga oo raalli ku ah. Haddii uu arki lahaa waxa aan arkayo hadda waa uu fahmi lahaa. Waxa uu nagu yidhi imaam al-Xasanka weyni: "Taageerayaasha Eebboow, nimcada aad ku jirtaan waa mid yar yar marka loo eego jannada uu Alle idiin yaboohay. Darajooyinka sare waxa hela uun shuhadada oo keliya. Maanta waxa aan idiinku imi waxa aan wadaa fursad weyn qofkii doonaya in uu gaadhoow, waa shahaadada muuminiintaay. Yaa doonaya shahaado ama in uu dar Alle u dhinto."

Dhammaantayo waa aanu istaagnay isaga oo qof kastaa doonaya in la doorto. Haddii ay nimcadani tahay ta sidaa u wacan, bal ka warran jannada ka sii sarreysana. Naftaydu ma dulqaadanayso illaa ay gaadho nimcada sare. Nasiib wanaag

aniga ayaa uu i doortay iimaamku markan. Waxa ay ahayd fursad ka mid ah fursadaha uu bixiyo Iimaamku markii xilli la joogaba. Waa in aanu jannada ka soo yara baxno oo aanu nolosha adduunyada yara nimaadno si aanu u soo afjarno shar ka mid ah shararka ka jira ifka. Hawlaha aanu qaban jirnay waxa ay ahaayeen in aanu dilno khaliifyada Cabbaasiyiinta mid ka mid ah, waayo kuwaasi waa cadowga Alle iyo Rasuulkiisa sida naloo sheegay. Ama waxa aanu dili jirnay mid ka mid ah Macatablayaasha, kuwaas oo ah iyaguna cadowga Ilaahay iyo Rasuulkiisa. Ama waxa aanu dili jirnay mid ka mid ag culimada fikirka sumaysan ku dhex faafinaya maskaxda dadweynaha, kuwaas ayaa ka halis badan khaliifyadaba.

Markan hawlgalka la ii diray waxaas oo dhan waa uu ka duwanaa, mana uu ahayn hawlgal dil. Hawlgalku waa uu fududaa doorkan, waxa la ii diray in aan farriin gaadhsiiyo boqor Amuuri[41]; boqorka Quddus ee Macatablaha ah. Alla ayaan badaniyaa. Waa aan jecelahay imaamkayaga, kaas oo uu Ilaahay noogu soo diray si uu gacmahayga jidka xaqa ah ugu jiido. Xaq baanu u leennahay in aanu hoggaamiye yeelanno, sidii ay qolo kastaa nebi u lahayd beryihii hore. Waxa aanu xaq u leennahay in aanu yeelanno hoggaamiye dhowrsoon oo xagga Eebbe laga soo diray. Kaas oo wax na fara waxna naga reeba, oo wax noo jideeya waxna nagu bara magaca Ilaahay.

Jidka aan marayaa waxa uu ahaa mid aad u dheer. Waxa aan fuushanaa oo aan eryayay faras Carbeedkayga asiiliga ah, waxa aanan u jeeday dhanka Quddus oo aan illaa bil u sii socon doono. Xiddigaha ayaa i tusayay dhanka aan u socdo.

[41] Amuuri: Amaury

Hummaagyo iyo maandhur farabadan ayaa maskaxdayda ku soo dhacayay, marna ka tagayay. Waa maandhur faan i gelinay. Waxa aan xasuusanayaa sidii aan ugu soo barbaaray qalcadda Alaamuud ee weyn. Aniga oo yar agoon ah oo tamar yar ayaa uu gudcurka habeenka dhexdiisa ka soo dhex baxay oo uu i geeyay qalcadda, maya waa uu i dejiyay qalcadda aniga iyo carruur badan oo dibjir ah. Iimaamkayagu waxa uu na siiyay hoy, maya ee wax intaa ka badan ayaa uu noo qabtay.

Wax kasta waxa nala baray annaga oo yaryar. Waxa nala baray fardofuulka, legdanka, gacmo-ku-dagaalanka, soodhka iyo ganista warmaha. Waxa nala baray ganista leebka, soodhka iyo waranka. Waxa nala baray ragonimada, adkeysiga, sabirka iyo dhug yeelashada degdega ah. Waxa nala baray daacadnimada, waxa nala baray diinta Shiicada; shiicda Cali; shiicada Aala Baydka. Waxa nala baray in aannaan wax dareen ah u muujin cadowga diinta ee gaalada ah, kuwa caabuda lugaha iyo siilka dumarka; waa khaliifyada Cabbaasiyiinta iyo wixii taageersan e'. Iimaamku waxa uu ahaa mid na quudiya oo na waraabiya cuntada iyo cabbitaanka ugu wanaagsan. Wixii ugu wanaagsanaa ee uu na siin jiray waxa uu ahaa cabbitaan ur cadar leh. Waa cabbitaan ka dhigaya garaadkayagu in uu ka sarreeyo ka dadka kale. Waa cabbitaan korinaya maskaxdayada, garashadayada iyo xasuustayadaba. Sharaabkii ayaa aan xasuustay, waxa aan kala soo baxay agabkayga waa aanan cabbay, maankayguna waa uu cokonaaday. Waxa aan dareemayay faan, waxa aan noqday dagaalyahan daran oo daacad ah. Waxa uu iga dhigay Iimaamku waxa ugu xoogga weyn dunida, anna waxa aan doonay in aan noqda ka ugu xoogga weyn aakhirona. Taasna waa uu i gaadhsiiyay Iimaamku jannadiina waa aan galay. Gelitaankaygii jannada waxa uu lahaa sheeko weyn oo aan xusuusto, ii ogolow in aan kaaga sheekeeyo si aan waqtiga isugu dhaafinno.

Xilli laga joogo saddex gu' annaga oo joogna tuulada Nahaawandi [42] , waxa aan dusha kala socday geeddiga suldaanka markii uu ka soo baxay Isbahaan[43]. Waxa geeddiga la socday wasiir ka mid ah wasiirrada dawladda Cabbaasiyiinta, oo magaciisa la yidhaahdo Nidaam al-Mulki. Waxa uu ahaa Saljuuqi[44] ka mid ah Salaajiqada uu khaliifka Cabbaasiyiintu u ogolaaday in ay wax ka qabtaan xilalka dawladda. Nidaam al-Mulki waxa uu ahaa yoolkayga aan raadinayo. Ninkani waxa uu curyaamiyay horumarkii dawladdayada Nasaariyada, waxa aanu dhantaalay yoolkayagii ahaa in aanu burburino dawladda khilaafada Cabbaasiyiinta. Si kedisa ayaa uu geeddigii u istaagay, waxa aanan arkay yoolkaygii oo faraskiisa ka soo degaya, dhammaan geeddigiina fardahoodii ayaa ay ka soo wada degeen. Fursadii aan inta badan sugayay hadda ayaa ay i soo martay, haddii aan ka faa'idaysan waayana waqti kale oo dheer ayaa ay iga qaadanaysaa. Waxa aan qariyay faraskaygii, waxa aan iska bixiyay cabbaayaddii timahayga iyo dharkayga qarinaysay. Dharka aan cabbaayadda ka hoos xidhnaa waxa uu ahaa dhar xayraan. Waxa aan ku masaxay timahayga boodh, waxa aanan ka dhigay mid basaasaysan. Soodhkaygii waxa aan ku soo hoos qariyay maryahayga , kaddibna waxa aan ku soo dhowaaday geeddigii aniga oo xayraan iska dhigaya.

- Halkan waxa lagu dilay mudanayaal, tuuladan lafteeda in badan oo saxaabadii Rasuulka ka mid ah. Wanaag oo dhan ayaa u sugnaaday kuwa xabaalaha ku sugan, wanaag oo dhan ayaa u sugnaaday kuwa kaga dabataga jannada sare.

[42] Nahaawandi: Nahavand.
[43] Isbahaan: Isfahan.
[44] Saljuuqi: Seljuk

Wasiirkan maska ahi, maxaa uu ka garanayaa jannada sare ee uu ka sheekaynayo. Kuwan doqomada ahina waxa ay u dhagaysanayaan sidii nebi. Waxa aan u soo dhowaaday wasiirkan maska ah, waxa aanan iska yeelyeelay mid miskiin ah oo diifaysan. Waxa aan ku idhi:
- Taliye, waxa kaa muuqda wanaag iyo khayr, isii wixii ay jeclaato naftaada wacani. Waa aan ku baryayaa taliye.
- Waxba ha siinnin taliye, waxa uu u eegyahay dhagarwade, waanu iska ladan yahay.
- Maya waa aan siinayaa. Rasuulku waxa uu yidhi (NNKH): "*Ka wax idin weydiista siiya, farasba ha saarnaadee*." Ciise Binu Maryamana waxa laga weriyay in uu yidhi: "*ka wax baryaa xaq buu leeyahay, haba kuu yimaaddo isaga oo fuushan faras lagu goglay dahab.*"

Iyaga ayaa uu ku jeeday oo uu la had-hadlayay markii aan ku aamusiiyay soodh aan geliyay. Si yaab leh ayaa uu ii soo eegay. Badh ka mid ah geeddigi waxa ay ku mashquuleen in ay gargaar u fidiyaan wasiirka , badhna seefaha ayaa ay la soo baxeen si ay qoorta iiga jaraan, balse waxa joojisay hadal uu wasiirku ku yidhi intii aanu dhiman:
- Ha dilina kii i dilay, waa aan saamaxay anigu. Hal ilbidhiqsi ma aan sugin, inta aan miskiinnimadii iyo xayraannimadii xooray ayaa aan baxsaday. Waa aan ogaa in aanay i soo gaadhay wax kasta haddii ay sameeyaan.

Dhacdadan waa aan xasuustaa waxa kale oo aan xusuustaa markii aan ku soo noqday qalcadda Alaamuud iyo sidii uu ii soo dhoweeyay imaamka dhowrsani al-Xasan al-Sabaax. Habeenkii markii aan seexday ma aan toosin ee waxa i qaaday laba malag, waxa aanay i geliyeen jannada waaritaanka. Haddii idinka la idin dilana waxa aad gelaysaan jannada waaritaanka.

Sidii ayaa aan kolba xasuus u dhex maaxanayay illaa aan ka gaadhay yoolkaygii, waxa aan gaadhay Quddus. Waxa aan tagay qasriga boqor Amuuri, boqorkii Macatablayaasha ee

maalmahaas haystay Quddus. Waa aan u galay boqorka waxa aanan u dhiibay farriinta ka timi Iimaamka weyn. Waxa ku qornaa: " Ku socota boqorka weyn ee Amuuri, haddii ay kuu timaaddo farriintani ogow waxa aan ka mid ahay dadka ku raacsan. Waxa aan kuu soo bandhigayaaa in aynu tamarteenna midayno, si aynu uga hortagno cadow aniga iyo adigaba jiifka inoo diiday. Waa dawladda Cabbaasiyiinta xun ee qooqan. Waxa ay u diyaar yihiin xertayda daacadda ahi in ay kuu hoggaansamaan marka aad amar siiso Fardooleyda Haykalka. Waa in aad naga qaaddo cashuurta sanadlaha ah ee ay nagu soo rogeen Fardooleyda Haykalku, taas oo dhan 12 kun oo wiqiyad dahab ah, taas oo nalagu soo rogay markii ay raggaygu dileen Koomti Di Tiriiboli [45] . Taasi waxa ay dhabbada u xaadhaysaa in aynu is kaashanno dhexdeenna si aynu u baabbiino cadawga aynu wadaagno. Allaa mahad leh." waa uu waafaqay boqor Amuuri iskaashigaas. Waxa ay u muuqataa in uu Iimaamku dejiyay qorshe ka mid ah qorshayaashiisa aan weligood fashilmin, waayo Eebbe ayaa u waxyooday. Taasi ima ay khusaynin aniga, waxa aan ku faraxsanaa in aan hawlgalkaygii ku guulaystay. Marka aan ku noqdo Iimaamkana waxa aan arki doonaa janno ka mid ah jannooyin sare ee aan weligayba ku riyoon jirey in aan u gudbo. Waxa aan soo fuulay faraskaygii aniga oo u soo jeeda dhanka qalcadda Alaamuud. Maankaygu waxa uu ka fikirayaa badhaadhaha, heesaha iyo webiyada caanaha ah ee ay hareerihiisa jiifjiifto xuuralceyntu.

- Waxa la ii sheegay in aan weligiin la idin jebi Fardooleyda Nasaareey.

[45] Koomti di Tiribooli: Comte de Tripoli.

Si degdeg ah ayaa aan u eegay, aniga oo taabanaya soodhkayga. Waxa aan arkay fardofuul xidhan cabbaayad gaar ah oo uu dhexdana kaga xardhan yahay macatabku. Waa cabbaayad jidhkiisa iyo madaxiisaba qarinaysa. Waxa uu wataa faras xoogweyn oo ay isagana saaran tahay hagoogta macatabku. Dharkan toos ayaa aan u garanayaa, waa fardofuul ka mid ah Fardooleydii Macatabka; Fardooleyda Haykalka. Dareemayaashayda dagaalka oo dhan ayaa wada kacay, waxa aanan u eegay si feejigan. Isaga oo cadhaysan ayaa uu igu yidhi:

- Waxa aad u malaynaysaan in aanu u baahannahay gargaarka dhowr fardofuul oo wax liita sidaada, ma waxa uu hilmaamay iimaamkiinna doqonka ahi cidda uu yahay?

Waxa aan si adag ugu idhi:

- Ka tag meeshan macatableyahaw qudhunka ahi. Haddii aad hal weedh oo kale ku tidhaahdo iimaamkayga dhiiggaaga ayaa aad dhami doontaa.

Cabbaayaddii ayaa uu iska saaray, si degdeg ah ayaa aanu ii soo wareeraray. Waxa uu la soo baxay seeftiisii faraskiisuna waa uu dananayay. Waa aan ka booday faraskaygii dib ayaa aanan u yara joogsaday aniga oo ka fogaanaya seeftiisa widhwidhaysa. degdeg ayaa aan isu kala wareejiyay, waxa aanan iska saaray cabbaayaddii. Waxa aan la soo baxay soodhkii si aanu filayn, waxa aanan ku tuuray si kediso ah. Waxa uu ku dhacay soodhkii cunaha faraskiisa, kaas oo lugaha kor u qaaday xanuun dartii. Waxa uu si xariifnimo ah uga soo degay fardofuulihi faraskii, hortayda ayaa aanu soo istaagay isaga oo diyaarsan. Wajigiisa ayaa aan markii ugu horreysay toos u arkay. Waxa uu ahaa nin il la' oo muuqaal qallafsan leh. Cod argagax leh ayaa uu ku yidhi:

- Uga warran walaalahaaga jaxiima ku jira ee aan kaa dabadiri doono oo u sheeg in fardofuule Gaawatiir Maysniil uu ku soo diray waxyahow liitaa.

Xaggayga ayaa uu isku qaaday mar kale isaga oo cadhaysan, dib ayaa aan u booday si aan uga baxsado seefta,

dhulka ayaa aanan istuuray aniga oo isrogaya. Seeftaydii ayaa aan galka kala soo baxay, si dhiirran ayaa aanan u eegay. Si dheeldheel ah ayaa uu ii soo eegayay, oo aanan fahmin markii hore. Balse waxa aan fahmay markii aan eegay gadaashayda, waxa halkaa iga soo fiiriniyay toban indhood, oo galka seefaha kala baxay. Ma ay ahayn indho dad caadiya, waxa ay ahayd indhaha fardofuul kale, Fardooleydii Haykalka.

Mar labaad ayaa aan u eegay si cadho leh, balse iima uu kaadin. Intii aan kolba gadaashayda eegayay ayaa uu aad iigu soo dhowaaday. Markii aan is idhi eegna waxa ila kulmay seeftiisii oo uu laabta iga geliyay. Jilbaha ayaa aan u dhacay, lugaha ayaa uu si bahdil ah kor iigu qaaday, waxa aanu seeftii iigu cadaadiyay hore illaa ay dhabarkayga ka dhex baxday.

Ilbidhiqsiga aad ogaato in aad dhimanayso waa mid cabsi leh. Wax kasta oo kugu hareeraysan ma arkaysid, waayo, waxa aad ku mashquulaysaa eegmada wax kale. Marka hore waxa lagu soo hormarinayaa noloshaada oo dhan, waxkasta oo ku jiray iyo qof kasta oo soo maray ayaa dhowr ilbidhiqsi ku hor imanaya. Marka uu muuqaalkaasi dhammaado ee uu daahu rogmado ayaa aad u soo jeedsanaysaa waxa hareerahaaga ka dhacaya. Kaddib waxa aad dareemaysaa meeshii nabarku kaa wareemay, kaddibna waxa aad dareemaysaa dareen cajiib ah. Nafta ayaa aad isku xejinaysaa, oo waxa aad rumaysanaysaa in aanad dhimanayn. Kuma saameynayso waxa kan oo dhiig iyo xanuun ahi inta aad weli neefsanayso. Weli waa aan jilbo joogaa. Cod dheer oo qosol leh ayaa ay ku sheekaysanayeen Fardooleydu. Kor ayaa aan u eegay, aniga oo is leh waa aad jebinaysaa geerida. Cid kasta oo dhimatay waa ay is dhiibtay balse anigu is dhiibi maayo.

"Haddii aad dishaan waxa aad gelaysaan jannada,
haddii la idin dilona waxa aad gelaysaan jannada."

Jannada, jannada waaritaanka, hablihii heesayay iyo webiyadii durdurayay. Waa aan geli doonaa sidii uu iimaamku ii ballan qaaday haddii ay i dilaan. Cidhiidhi badan ayaa ay naftaydi dareentay, qalbiga ayaana la i qabtay. Waxa

aan tufay dhiig. Waxa aan u hiinraagay xoog si aan isugu qasbo in aan caadi u neefsado balse waa aan awoodi kari waayay. Waxa aan gartay in ay dhammaadkaygii tahay, waa aan dhimanayaa. Dhulka ayaa aan jiifsan doonaa, oo waa aan dhiman doonaa. Barbarka ayaa aan u dhacay, waxa aanan eegay muuqaalka geddisan ee iga soo horjeeda. Waa lugaha fardaha, ciid, qudhaanjo dhulka socota; waxa kan oo dhani noloshooda ayaa ay sii wadan doonaan anna waa aan dhimanayaa. Waxa aan maqlayay shanqadha fardaha Fardooleyda oo iga sii fogaanaya, dhankooda ayaa aan eegay. Dadkii deegaanka ayaa dhankayga u soo kacay, waa ugu danbayntii. Waxa aan filayaa in uu midkood i badbaadin doono. Mid ka mid ah ayaa ii soo dhowaad waxa aanu isku dayay in uu seefta ka soo saaro jidhkayga, waa aanu ku guulaystay. Dhammaantood dushayda ayaa ay isku soo xeereen, waxa aan ku eegay indho jeedsaday, waxa aan eegay wejiyadooda Carbeed ee ka xun xaalkayga.

Sidee ayaa uu noqonayaa dareenkaagu marka aad arkayso boqol qof oo si naxariisle kuu eegaya adiguna aad sii dhimanaysid. Waa kuma ninka halkaa ka muuqdaa?
Dadka madaxyadooda ayaa aan ka dhex arkayay, waxa uu ahaa nin madow. Si adag ayaa uu ii eegayay, indhaha ayaa aan la raacay illaa uu ka libdhay aragtidayda iyo qoortayda, xagayga danbe ayaa aanu u kacay. Dadku kolba madaxa ayaa ay i qabanayeen iyaga oo ii laab qaboojinaya. Markii danbe madaxayga dhulka ayaa ay dhigeen, anna cirka ayaa aan eegay. Xagal hoose ayaa aan ka arkayaa madaxyadooda, madaxiisii ayaa mar kale ka soo dhex muuqday dadka, waa ninkii madoobaaye.

Waa la i dagay, si dhab ah ayaa aan u hubaa in la i dagay, balse waa aan kibirsanaa. Waa aan garanayay in ay wax uun qaldan yihiin. Iimaamkii weynaa, jannada waaritaanka, dilka culimada Islaamka, la heshiiska Macatablayaasha; salaad, soon iyo xaj la'aanta. Waxa aanu gaadhnay heer aanu Alle u dhowaanay oo waxaas oo dhan nalaga dhaafay. Waxa uu

nagu qancinayaa in aanu dhimanay oo uu jannada na geliyay, kaddibna uu na soo nooleeyay marka uu doono, waxa uu filayaa in aanu rumaysannay. Ma diidayo in ay wax badan iskaga kay dhex daateen intii aan ku sugnaa jannadaas waaritaanka, balse garaadkaygu ma uu joogin. Waxa aan markasta dareensanaa in aan sikhraansanahay, ama aan duulayo dadka dushooda. Waxa uu na siiyay Iimaamku raaxo oo dhan iyo dumar, waajibaadkii oo dhanna waa uu naga dul qaaday. Alla wanaagsanaydaa diintaa dadka uu ugu baaqayay. Diintaas doonistayada ayaa raacday, balse garaadkaygu ma uu aqbalin marna, balse garaadkayaga annaga ayaa xoornay.

Janno ma galayo maanta, balse waxa aan galayaa naar uu holaceedu ruuxdayda gubi doono. Eebboow waa saacad qudha, haddii aad dib ii dhigto hagaaggaygii ayaa aan ku soo noqon doonaa. Maya ee waxaaban gacantayda ku dili doonaa iimaamkaas. Dunidii oo dhan ayaa madoobaatay, waxaana la moodayay in jiritaankayga oo dhami uu dhaqaaqayo. Haddana waxa aan arkay in aanu waxani madow ahayn balse waa hog madow oo ay ruuxdaydu ku sii socoto. Mar kale ayaa aan daloolkii ka soo baxay waxa aanan ku soo noqday ileyskii dhulka. Isla muuqaalkii ayaa aan mar kale ka arkay xagal hoose, waa madaxyo aan waxba ii qaban karin oo i soo eegaya. Alla yaab badanaa. Waa aan is toosiyay si aan isu dhaafiyo xagasha hoose ee aan dadka ka arkayo, waxa ay u muuqdeen dad waaweyn. Weli dadku waxa ay ka sheekaysanayeen dhibta i haysata, aniga ayaa ay i soo eegayeen ama dhulka. Mid ka mid ah ayaa ii soo dhowaaday, waa duq. Waxa ka muuqday wejigiisa dhoollacaddayn digasho ah. Waa uu ii soo dhowaaday illaa uu madaxeyga yimi. Waa uu ii dhoollacaddeeyay isaga oo igu diganaya, ilkihiisa teelteelka ah ayaana muuqday iyo timaha dhowrka miiq ah ee gadhkiisa ku yaalla, indhahana waxa uu uga bidhiqsiiyay sidii indho mas. Indhaha ayaa aan yaab la kala qaaday, meel fog ayaa aanan eegay. Iftiinkii ayaa ka demay meesha oo dhan, waxa

aana la moodayay in daruur madow ay i dul timi, taa soo qorraxdii qarisay. Waa geeridii, alla Eebboow waa geeridii.

Dhulka ayaa uu wejigaygu ku dhacay, dadkina waxa ay isku dayayeen in ay i soo toosiyaan, iyaga oo isku deyaya in ay si uun ii caawiyaan. Dheh, ''laa Ilaaha illa laah. '' Wax culus ayaa indhahayga soo dul maray, hareeraha oo dhan ayaa aan ka eegay balse ma aan helin. Fardofuuloow dhe, ''laa Ilaaha illa laah. '' Wejiga odaygii duqda ahaa ee maska ayaa iiga dhex muuqda wejiyada dadka, isaga oo keliya ayaanu iftiin ku lammaan yahay. Carrabkiisa jeexjeexan ayaa uu ii soo saarayaa. Waa ayo kani Alloow, ma malagii geeridaa? Eebboow ii ballanqaad, sidaas ha igu samayn. Waxa aan isku dayay in aan qayliyo, balse shuban ayaa aan sii daayay. Qof ha i badbaadiyo, ama qof ha i dilo. Ma doonayo in aan arko waxa aan hadda arki gaadhayo. Midkiin indhaha ha iga tuuro, igu akhriya Quraan waa intaas oo uu ii shafeeco qaado e', wax uun sameeya.

Muruqyo jidhkayga ka mid ah ayaa bilaabay in ay soo laabmaan, labadaydii lugood ayaa isku dhagay, dhabarkaygiina waa uu soo xoodmay, qoortaydiina bidix ayaa ay u dhacday. Waxa aan dareemay neefqabad hoose oo aan la xidhiidhin qoortayda, waa neefqabad laabta ah. Waxa aan maqlayaa garaaca wadnahayga si toos ah. Waa aan arkay, haa waa aan arkay iyaga. Waxa ay ahaayeen saddex: midkood waa kii madoobaa ee aan dadka ku dhex arkay, labada kalena mid waa madow sida walaalkii, ka kalena waa uu ka duwan yahay labadoodaba. Waxa aan arkayaa malaa'ig, malaa'ig dhab ah. Ma aha malaa'igtii dad-la-moodka ahayd ee uu igu tusay jannada al-Xasan al-Sabaax, alla magacaasi xumaa, aad baan u necebahay.

Wixii intaa kaddib dhacay waxa uu ahaa wax aan laga sheekayn karin. Waxa la iga siibay ruuxda... Saddexdooduba gacmo adag ayaa ay ku jiidayeen si daran. Ruuxdaydu waxa ay ahayd mid qadhmuun oo uraysa sidii qabriga. Alla Eebboow ma sidaas oo dhan ayaa aan u xumahay. Xanuunkii

aan dareemay cidna ma ay dareemin, halbawlahayga ayaa ay ka gooyeen garaacii, indhahana waxa ay ka jareen noloshii. Cidna waxba ma ay arkayn, anna waxa aan arkayay ruuxday oo ka baxaysa jidhkayga lagu hareeraysnaa. Markii ay soo baxday waxa qaaday malaa'igta oo ku riday sanduuq xun. Kaddib sare ayaa aan u kacay, raad kasta oo ku saabsan dadkii iyo walxihii dhulkuna waa uu baaba'ay. Goobtoodii waxa soo galay noole iyo waxyaalo kale oo aanay il aadame hore u arag. Waa waxyaalo aanay habboonayn in uu dadku garto illaa ay ka dhintaan.

DHAN

Iftiimin

Saacadaha iiga hadhay dunidu waa ay kooban yihiin, dhaqdhaqaaqa saacadduna waxa uu ii sheegay arrin murugo leh, balse dhib ma laha. Weli waxa aynu haysannaa waqti inagu filan. Iska-horimaadka sare waxa uu ahaa kuwii ugu adkaa ee taariikhda soo mara, waxa iska hor yimid laba fardooley oo halis ah waa Fardofuulka Haykalka iyo Xashaashiinta, oo ahayd koox ka mid kuwii ugu khatarsanaa ee Shiicada. Waa kooxda gabbaadka ka dhigatay qalcadda Alaamood iyo toddobaatan qalcadood oo kale oo ku yaallay Beershiya, Ciraaq iyo Shaam.

Qalcadda Alaamood oo u dhisnayd si la moodo sheeko-baraley ayaa uu joogi jirey Xasan al-Sabaax, weligiina kama uu bixin intii uu qabsaday. Halkaas ayaa uu ku samayn jirey si uu wax u qorsheeyo, iyo si uu u baadho cilmiga dhirta oo uu aad u yaqaannay. Awooddiisu waxa ay gaadhay heer uu soo daabacday lacag ay ku sawiran tahay qalcadda Alaamood. Caqiidooyinkiisu waxa ay ahaayeen kuwo aad u leexsan, waxaana ka mid ahaa in uu magaca diinta wax ku dilo. In diinta la difaacaa waa dilka ugu sharafta badan balse in aad dadka ku shirqoosho magaca diinta waa gabboodfal. Xashaashiintu waxa ay ku xeeldheeraayeen shirqoolka ee dagaalka kuma ay wacnayn. Saddex jeer ayaa ay isku dayeen in ay dilaan Salaaxudiin al–Ayuubi, saddexduba waa ay fashilmeen. Waxa uu dhammaaday xilligii Xashaashiintu markii uu Maqoolku ay ka yimaaddeen bariga iyaga oo ugaadhsanaya waxkasta oo ka soo horbaxa. Waa ay gummaadeen Xashaashiintii gebi ahaantood ba, wixii ka soo hadhayna waxa rujiyay Daahir Beebras rujin daran.

Waxa laga yaabaa in aad maqashay ciyaarta Fiidiyowga ee caanka ah ee la yidhaahdo "Assassins Creed" ama Caqiidada

Xashaashiinta, waa ciyaar laga soo dheegtay kooxdii Xashaashiinta, dharkoodii, hubkoodii, hannaankoodii iyo xumaantoodii. Waa aan ogahay in ka sheekaynta caqiidooyinka leexsani uu jidhka sun ku mudo, sheekadan ayaana ugu danbay sheekooyinkaas. Aynu eegno haddana waraaqaha inoo hadhsan ee dheesheenna. Hadda waxa inoo soo hadhay laba waraaqood oo qudhaata , kuwaas oo kala ah:

- **Waraaqda koowaad:** waa waraaqda Faanbaayarka ama dhiigyocabka, waxaana ka muuqda nin dhiigyo cab ah.
- **Waraaqda labaad**: waa waraaqda Koont Daraakoola. Waxaa ka muuqda Koont Daraakoola isaga oo xidhan cabbaayadiisii caanka ahayd, oo dhoollacaddaynaya, gadaashiisana waxa ka muuqda qalcaddiisii madoobayd.

***

Akhri Daraakooloow
(1450 C.D)

- Akhri Daraakoola [46] , iga daba akhri gacaliye, "Acuudu billaahi mina shaydaani alrajiim...Wa huwa Alada alkhisaam." Waxa uu uga daba akhriyay Daraakoola si caajis ah iyo dhawaaq la garanayo in aanu Carabi ahayn. Waxa aan eegay wajigiisa, ma garanayo maxaa aan u necebahay wiilkan.
- I soo eeg si feejigan, maxaa uu ku maqan yahay garaadkaaga yari. Iga daba dheh: "wa idaa tawallaa sacaa fil ardi li yufsida fiihaa." Wax ka xumi ma jiraan in Daraakoola uu walaalkaa noqdo, wax ka xumi ma jiraan in Daraakoola uu dhinacaaga seexdo. Waa wax xun.
- Wa yuhlikal xarsa wa nasal Wallaahu laa yuxibbul fasaad.

Daraakoola wuu ku celcelinayay aayadaha marka uu sheekhu akhriyo. Waa ay iska caddayd in Daraakoola uu sheekha necbaa, taasi la yaab ma laha waayo walaalkay cid walba waa uu neceb yahay. Aniga ayaa uu i neceb yahay, goobtan ayaa uu neceb yahay, Quraankana waa uu neceb yahay. Waa aad yaabban tahay oo baadadka ayaa bannaanka ku yimi, waxa aad moodaysaa in aan sheeko majaajillo ah kaaga sheekaynayo. Maya saaxiib kani waa aniga, waxa aan ahay Raadoo [47] oo dhiiggiisii iyo dheecaankiisiba halkan fadhiyaan masaajidka, kaasi waa walaalkay Daraakoola isaga laftiisii, oo dhinacayga fadhiya Quraankana ku

[46] Daraakoola: Vlad Dracula.
[47] Raado: Radu.

celcelinaya. Sheekhu waa uu ku qaylinayaa, waxa kan oo doqonniimo ahina waa ay dhibayaan.

Ii ogolow in aan sheekada kaaga sheekeeyo illaa bilowga, si uu yaabku kaaga tago. Aabbahay waxa uu ahaa madaxweynaha Wallaayka [48] , waxa aanay dadweynaha Wallaayka u yaqaanneen magaca Daraakool, oo af Roomaani ku ahaa Mas duulaa. Sidaas waxa loogu bixiyay aabbahay waxa uu xubin seesdhige ah ka ahaa urur sir ah oo fardooleyda ka mid ah, oo loo yaqaannay ururka Daraagoonka. Aabbahay waxa uu ku xardhay astaanta Daraagoonka lacagta Wallaayka, waxa kale oo uu ku xardhay gaashaanka dagaalka. Sidaas ayaa ay ku shaacbaxday in loogu yeedho Masduulaa; Daraakool.

- Mudane Daraakool waa farriin kaaga timid suldaankii Cismaaniyiinta.

- Haa, dhibaatooyinkii ayaa bilaabmay. Dhibta oo dhami waa in Wallaayka ay dhextaalo dubbaha Cismaaniyiinta iyo birta Hangariyiinta. In ay badhba badh ku dhuftaan ayaa ay doonayaan, oo ay Wallaayka cadaabta u diraan.

Daraakool waxa uu u akhriyay warqaddii Cismaaniyiinta si deggan. Dawladda Islaamku waxa ay faraysaa in uu iska bixiyo jisyada si looga ilaaliyo Hangariyiinta[49]. Waxa kale oo la faray in uu soo diro ciidammo marka uu u baahdo ciidanka Islaamku dagaalyahanno. Waxa lagu amray in uu si degdega uga soo jawaabo farriinta oo uu caddayna soo raaciyo. Caddayntii uu doortay aabbahay waxa ay ahay mid yaab leh, waxa uu u diray aniga oo ah Raadoo iyo walaalkeyga iga

[48] Wallaayka: Wallachia.

[49] Hangari: Hungari

weyn Daraakoola magaalada Adriyaanool ama Idrana [50], hoyga suldaanka Cismaaniyiinta ee muslimka.

- Wax ka baro walaalkaa Raadoo, waxa uu xifdiyay toban suuradood, adna hal aayadna illaa hadda ma aad qaybin.

Tani waxa ay ahayd caddayntii ugu cuslayd ee u hoggaansamidda, suurto gal ma aha in ay dawladi weerarto suldaan ay u dirtay ubadkeedii. Aniga iyo Daraakoola waxa aanu dhex tagnay dhul shisheeya annaga oo aanay da'dayadu dhaafin 12 sanno. Waxa aanu noqonnay shisheeye dhul shisheeye jooga; guryo shisheeye, dhar shisheeye, cumaamado waaweyn, gadh iyo qasriyo. Waxa kan oo dhan walaalkay waa uu necbaa. Inkasta oo suldaanka Islaamku uu na daryeeli jirey, oo uu na bari jiray fardofuulka, dagaalka iyo dhammaan laamaha aqoonta kala duwan -gaar ahaanna ta islaamiga ah, haddana Daraakoola ma uu ahayn mid faraxsan. Waxa uu dareemayay in uu yahay maxbuus iyo in ay kuwan uu la joogaa yihiin cadawgiisa, oo doonaya in ay cabsiiyaan dhaqankooda iyo aqoontooda uu neceb yahay ee aan u cuntamin. Aniga se xaalku waxa uu ahaa mid sidaa ka duwan.

- Magacaa wiilyahaow fariidka ah ee timaha dahabiga ah lihi?
- Magacaygu waa Raadoo, adna?
- Anigu waxa aan ahay Maxamed binu Muraad, wiilka suldaanka.

Ma aan filayn in aan carruurnimadaydii la noolaan doono Maxamed binu Muraad, waa ninkii ay sannado badan ka dib dadku ula baxeen Maxamed al-Faatix, waa halyeygii weynaa ee furtay Qusdandiiniya.

[50] Idrana: Edirne.

Aniga iyo Maxamed al-Faatix waxa aanu ahayn laba saaxiib oo isku dheer, markasta oo ay saaxiibtinimadayadu xoogaysato waxa ay cadaawaddayadu sii badanaysay Daraakoola. Daraakoola iyo Maxamed isma ay furin jirin illaa yaraantoodii inkasta oo lagu qasbay in ay isku meel ku wada noolaadaan, oo ay isku meel ku tabobartaan. Taasi la yaab ma laha midkood waxa uu ahaa fardofuul dhab ah, ka kalena waxa uu ahaa shaydaan dhab ah.

- Tuur leebkaaga Raadoo, tuur leebkaaga. Waa aan tuuray leebkaygii waxa aanu badhtanka kaga dhacay goobadi wareegsanayd ee looxa, halis ayaa aan ahaa illaa yaraantaydii. Waxa aan gacanta gacanta ugu dhuftay Maxamed al-Faatix, dhiniciisa ayaa aanan istaagay aniga oo ku faraxsan in aan la keenay hibadiisii u dhalashada ahayd.

- Waa markaagii Daraakoola, tuur leebkaaga? Waxa uu u jeediyay Daraakoola leebkiisii xagga goobada, haddana si kedisa ayaa uu qaansadii leebka xagayga aniga iyo Maxamed al-Faatix u soo fiiqay. Waxa uu noo soo eegay si xaasidnimo leh, anna indhaha ayaa i weynaaday yaab dartii.

-Maxaa aad samaynaysaa Daraakoola, miyaa aad waalatay? Waa uu sii daayay leebkiisii Daraakoola isaga oo xaggayaga u soo jeeda, xaggayga uma uu soo ganinin balse ilbidhiqsigii u danbeeyay ayaa uu u jeediyay xaggii yoolka. Badhtanka ayaa aanu goobadii kala helay.Waxa aan dareemayay in uu rabay in looxu uu noqon lahaa qalbiga Maxamed al-Faatix ama qalbigaygaba.

Lix sannadood ayaa tagay annaga soo sidii ah. Waa aanu waaweynaannay oo waxa aanu noqonnay dhallinyaro barbaar ah. Waa na kan saddexdayadiiba ku tartamayna fardahayaga asiiliga ah ee Carbeed. Ma u jeeddaa qaabka aanu u eekaannay hadda? Qaabkaygu waxa uu ahaa mid heersarreeya, waxa aan lahaa timo dahabiya oo furan oo xariir ah oo dhaadheer. Waxa ay timahaygu ka dhaceen garbahayga, waxa ay ahaayeen timo aanay lahayn gabadha Idrina ugu qurxooni. Waxa aan lahaa weji qurxoon iyo cod labeed sooc ah.

Daraakoola waxa uu lahaa timo madow oo adag, timihiisuna sida oo kale garbaha ayaa ay ka dhaceen. Waxa uu lahaa shaarubo waaweyn oo gorgorku ku istaagi garo iyo laba indhood oo fiiqfiiqan; waxaaba la moodayay indhihii gorgorka shaaribihiisa ku taagan. Maxamed al-Faatix waxa uu lahaa gadh yar, timo bunni ah iyo sandheer iyo laba indhood oo laga dheehanayo maskax badnaan iyo fardofuulnimo.

Waxa yimi war muuqaalladan luudaya oo dhan dhaqaajiyay. Waxa dhintay aabbahay Daraakool, si kedis ah ayaa uu Wallaayka ugu dhintay. Waxa uu ku dhintay shirqool ay soo abaabuleen Booyaarku[51]. Booyaarku waa magac loogu yeedho dabaqadda sare ee hodanka ah ee dhulkayaga Wallaayka. Waxa uu warkani noo yimid annaga oo ku jirna xilligii ugu mashquulka badnaa dawladdii Cismaaniyiinta. Waxa aanu isu diyaarinaynay in aanu furanno magaaladii ugu dhufaysyada adkayd xilligaas, Qusdandiiniya. waxa aan u leeyahay 'Annagu' maxaayeelay waa aan islaamay, waxa aan noqday fardofuul muslim ah. Daraakoola waxa uu weli haystay diintiisii. Suldaan Maxamed al-Faatix waxa uu u diray Daraakoola Wallaayka, si uu u noqdo hoggaamiye aabbihii dhaxla, oo sidii aabbihii taageere u noqda Cismaaniyiinta oo taladooda ku socda. Anigu waxa aan doorbiday in aan halkan sii joogo. Waxa aan rabay in aan wax ka qaato sharaf furashada magaalada Qusdandiiniya.

Waxa ka jirtay duco weyn Wallaayga, duco marti loo ahaa Daraakoola, oo ay goobjoog yihiin waaweynka Booyaarku. Waa ay dhargeen oo waa ay sirkhaameen, kaddibna Daraakoola ayaa si deggan u weydiiyay:

[51] Booyaar: Boier.

- Ii sheega kuwo yahay hodanka ee waaweyni, imisa hoggaamiye ayaa ay Wallaayka yeelatay taariikhdeeda?
Badhkood ayaa yidhi toban hoggaamiye, qaar kale ayaa yidhi laba iyo toban hoggaamiye, kuwo kale saddex iyo toban hoggaamiye. Darakoola oo sidii shaydaanka u kacsan ayaa ku yidhi:
- Taasi waxa ay u dhacday waxa aad tihiin khaayimiin, waxa aad cuntaan hilibka hoggaamiyaha inta aanu laba sanno dhammaysan. Imisa sanno ayaa aad go'aansateen in aad i siisaan Booyaaroow?
Ilbidhiqsiyo kaddib ilaaladii qasrigu waxa ay dhankasta ka soo weerareen Booyaarkii. Waa ay garaacayeen qaarkoodna si daran ayaa ay u dilayeen. Daraakoola meel dhow ayaa uu ka daawanayay waxa dhacaya, seeftiisii ayaa uu la soobaxay, qaar badan ayaa uu uuna qoorta ka jaray. In badan oo iyaga ka mid ah ayaa noolaa, Daraakoola inta uu eegay ayaa uu yidhi isaga oo cadhaysan:
- U qaada dhanka qalcadda, kaxeeya ha ka garab shaqeeyaan beeralayda qalcadda dhisayee.
Hadal ujeeddo leh ayaa uu ku yidhi:
-Ha ka shaqeeyaan dhanka waqooyi.

Dhanka waqooyi ee qalcaddu waa hoobad, waa hoobad kun cagood ah. Mid kasta oo ka mid ah Booyaarkii uu halkaas u diray Daraakoola waa uu dhintay. Badhkood gaajo ayaa ay u dhinteen, badhna daal, intii soo hadhayna hoobadka ayaa laga tuuray, Waxa uu bilaabay Daraakoola hawlgal lagu ugaadhsanayo dhammaan Booyaarkii deggenaa boqortooyada Wallaayka. Rag, dumar iyo carruur ba waa uu isir tirtiray. Daraakoola waxa uu la soo baxay miciyaha. Dhanka kale anigu waxa aan ka dagaalamayay Qusdandiiniya. Maxamed al-Faatix waxa uu ahaa dhabtii sida ay kutubta taariikhdu ku sheegtay, waxa uu ahaa nin maskax badan.Waxa ay ahayd dagaal hilbo-wadhad ah oo aan faahfaahinteeda oo dhan wada sheegi karin, balse yoolkayagii waa aanu gaadhnay kama danbaystii. Qusdandiiniya annaga

ayaa yeelanay, iskaba dhaafe waxa ay noqotay caasimaddii dawladda Islaamka ee weyneyd.

"Qusdandiiniya waa aad furan doontaan,
hoggaamiye hoggaamiyeheeda ayaa ugu wanaagsan,
ciidanna ciidankeeda ayaa ugu wanaagsan."

Maxamed al-Faatix ayaa igu yidhi annaga oo goobta dagaalka joogna, isaga oo madaxayga eegaya:
- Raadoo madaxa ma waxa ay marsadaan xinne ragga Wallaayka.
Waxa aan qabtay timahaygii dahabiga ahaa, aniga oo dhoollacaddeynaya ayaa aan ku idhi:
- Maya ee waxa aan marinayay xinnaha seeftayda, waxa laga yaabaa inuu madaxaygana ku duulduulay.
Madaxayga waxa caseeyay dhiigga cadawga, balse madaxaygu muhiim ma uu ahayn, muhiim waxa ahaa warka uu keenay ergaygii dawladdu. Wallaayka waxa ay ku dhawaaqday in ay ka fallaagowday suldaanka, Daraakoola waa uu fallaagoobay, haa dhab ahaantii waa uu sameeyay oo waa uu fallaagoobay. Maxamed al-Faatix ma uu doonayn in uu warkani ka qaso dhadhankii guusha, waa uu iska aamusay oo keliya. Anigu waa aan garanayaa marka uu Maxamed xaalladan oo kale aamuso, waxa ay u muuqataa in ay maalmuhu foolanayaan dagaallo hor leh, dagaal lala geli doono xigtada.

Daraakoola wax kale ayaa uu ka samaynayay Wallaayka, waa uu dhaafay heerkii uu dhoollaha la soo baxayay, waxa aanu hadda la soo baxay geeso iyo miciyo. Ii ogolow aan ku yara geeyo Wallaayka iyo waxa ka dhacaya. Halkaa waxa ka muuqda shan nin oo ku hareeraysan nin qaylinaya. Aad ayaa ay u socsocdaan oo waxa aad mooddaa in ay wax daran ku samaynayaan. Waa kuwaa ka yara fogaaday oo hadda waa aad arki kartaa waxa ay samaynayaan. Waxa ay xadhig ku xidheen gacantiisa bidix, midna waxa ay ku xidheen gacantiisa midig. Xadhig saddexaad waxa ay ku xidheen

lugtiisa midig, xadhig kalena lugtiisa bidix. Labadii ugu xoogga weynaa ninka ayaa ay dhulka ku xejinayaan, saddex ka mid ahina gadaal ayaa ay u laabteen. Ma aragtaa? dacalkii xadhkaha waxa ay ku xidhayaan fardo, ninkuna waa uu qaylinayaa isaga oo gargaar dalbanaya. Fardihii waxa ay u kala jeediyeen afarta jiho, ee ay lugahiisa iyo gacmihiisu kala tilmaamayaan. Waxa ay dhaqaajiyeen fardihii si qunyar ah, ninkiina kor ayaa u u qaadmay isaga oo qaylinaya. Fardihii marna waa ay istaagaan marna waa ay dhaqaaqaan illaa uu ninkii kala googo'ayo. Fardihii usha ayaa ay ku dhufteen oo waa ay yaaceen xoog, ninkiina afartii dhinac ba waa ay go'een, mid kastana waxa la orday faras.

Waa kaa nin kale laba nin oo muruqyo waaweyni qabanaya, waxa ay ku qasbeen in uu rukuuco isaga oo qaylinaya. Nin kale oo tiir loox ah oo af dhuuban oo dheer sita ayaa dabada ka gelinaya ninkii, waa mudniin aan dilayn. Ninku waxa uu isku dayayaa in uu fakado, laakiin uma suurtogelayso. Tiirkii ayaa ay hab gaar ah ninkii lugaha iyo gacmaha ugaga xidhayaan. Saddex nin ayaa isku gaashanaya in ay tiirkii oo ninkii ku xidhan yahay dhulka ku qotomiyaan. Ninku qoriga ayaa uu ka sarreeyaa sidii oo uu ku fadhiyo, sidaa ayaa looga tagayaa illaa uu ka dhimanayo. Dhibtu ma aha in uu gaajo iyo harraad u dhinto, balse qorrigan ninka dabada kaga jiraa si qunyar ah ayaa uu kolba ugu sii siqayaa mana dilayo, xanuun ayaa uu ku cadaabayaa. Ninku waxa uu dhimanayaa marka uu tiirku jidhkiisa ka soo dhex baxo ama waxaabu u dhimanayaa xanuun. Tiirkan aad aragtaa hadda waa wixii loo bixiyay Khaasuuqa, waana ciqaabtii uu ku caan baxay Daraakoola buugaagta taariikhda dhexdeeda.

Arrinta Khaasuuqu waa uu ka helay Daraakoola, ka dibna waa uu ku farayaraystay qaababka kala duwan ee uu dadka ugu cadaabo. Mar tiirka waxa uu ku mudayaa afka qofka, kadibna waxa uu ka laalaadinayaa tiirka. Mar dumar ayaa uu xubinta taranka tiirka kaga mudayaa, mar caloosha ayaa uu

dad ka sudhayaa, marna qoorta ilmo yar ayaa uu ku mudayaa oo kaga tagayaa. Walaalkay waxa uu ahaa mid waalan ama waxa uu ahaa shaydaan. Habkan uu dadka u cadaabo waa uu jeclaa, waxa aanu ka dhigay ciqaabta rasmiga ah ee dawladdiisa. Qof kasta oo khalad gala Khaasuuq ayaa lagu xidhi jiray, ka wax xada, ka been sheega iyo labada is dhirbaaxaba Khaasuuq ayaa lagu xidhi jiray. Maya ee waxa uu gaadhayba heer kan ka sii sarreeya, ila arag muuqaalkan.

Waa qalcadda Daraakoola, waa goob u diyaarsan dhammaan qaababka kala duwan ee wax loo ciqaabo. Wax ka mid ah waa aan kaaga sheegi doonaa haddii aanay xasuusti i dagayn. Kursiga Daraakoola, waxa ku fadhiya shaydaan qaab aadame leh. Waxa horyaalla cunto iyo cabbitaan midab cas leh oo la moodo dhiig, waxa aana la fadhiyay nin dabaqadda sare ee Booland ka mid ah, oo wax la cunayay. Waxa hortooda ka laalaa Khaasuuqa dhibbanayaal cabaadaya xanuun dartii. Waxa uu ku raaxaysanayay Daraakoola cabaadkoooda, waxaaba la moodayay in uu hees laxan wanaagsan dhagaysanayo. Boolandigii sanka ayaa uu iska qabtay waxa qadhmuun meesha ka uraya dartii, waxa ay ahaayeen mayd mar hore dhintay oo uu Daraakoola u daayay in aan meesha laga qaadin. Daraakoola ayaa eegay ninkii, waxa aanu ku yidhi:

- Maxaa ku haya?
- Mudane, uma dulqaadan karo waxa kan oo qadhmuun ah.

Waxa uu farta ku fiiqay ciidankiisii Daraakoola, waxa aanay u soo weerareen ninkii mar keliya. Waxa uu amray in ay ku xidhan Khaasuuq ka wada dheer ka dadka. Ninkii laandheeraha ahaa ee reer Booland waa uu qayliyay, illaa uu cabaadkiisii oohin isu rogay. Markii ay tiirkii dabada ka geliyeen oo ay Khaasuuqii ku qaadeen, oo ay xagga sare ka soo laalaadiyeen ayaa uu eegay Daraakoola, waxa aanu ku yidhi:

- Adaa ugu sarreeya imika saaxiib oo kuma soo gaadhayso urta qadhmuuni.

Kadib waxa uu cabbay daraakoola galaasyadii casaa ee hor yaallay, marka aad eegto waxa kuu caddaanaysa in aanay khamri ahayn; waa dhiig, waa dhiig daray ah. Waa dhiiggii dadka uu laayay oo khamri lagu daray, waa cabbitaanka uu ugu jecel yahay Daraakoola. Waxa uu jecelyahay in uu cabbo dhiigga dadka uu ciqaabayo, weliba waxa uu jecel yahay marka uu dhiiggu gadhkiisa dareero. Kaasi waaa Daraakoola, waxa uu lahaa Daraakoola dheri uu ku kariyo dadka iyaga oo nool. Iskaba dhaafe waxa uu ciidankiisa fari jiray in dadka marka dheriga lagu rido seefaha lagu jarjaro iyaga oo nool. Gabadha caajisleyda ah gacan ayaa laga jari jirey, gacantaasna waxa la sudhi jirey Khaasuuqa si ay cibro ugu noqoto dumarka kale oo dhan. Mar waxa uu u yeedhay dhammaan dadkii saboolka ahaa ee magaalada ku noolaa, waayeelkii iyo carruurtii, waxa uu u sameeyay duco weyn. Ducadii kaddib waa uu dilay dhammaantood, isaga oo sheegay in ay yihiin dad aan wax dheef ah ku soo kordhinayn dawladdiisa. Intan aan ku joojiyo masiibooyinkii uu dhigay Daraakoola, haddii aan sheego wax kasta waxa buuxsamaya buugaag dhan. Soo ururiyoo, dunida ma ay arag wax ka bahalsan walaalkay.

Xilli badani kama uu soo wareegin markii ii Maxamed al-Faatix u soo dhaqaaqay dhanka Wallaayka. Waxa uu watay ciidan cadceedda qarinaya, anna waa aan la socday. Ciidanki waa uu soo ruqaansaday illaa uu soo gaadhay webiga Daanuub, waxa aanu arkaynay ciidanka Daraakoola oo webiga dhanka kale ka jooga. Sidii uu samayn jirey Maxamed al-Faatix isaga oo ku dayanaya nebi Maxamed, waxa uu u diray Daraakoola laba nin oo ka mid ah kuwii ugu wanaagsanaa ciidankiisa, si ay ula soo gorgortamaan ama jisyo iyo dagaalna u soo kala dooransiiyaan. Waa kan wixii ku dhacay labadii ergay.

Labadii ergay ee muslinka ahaa waxa ay ugu galeen Daraakoola qalcaddiisii. Dhammaan waa uu tirtiray raadkii Khaasuuqa ujeeddo uu lahaa darteed.

- Salaama Calaykum taliyaha Wallaaykoow, waxa aanu ka soconna suldaanka oo na soo faray farriin ku bilaabmaysa.
- Hus!
- Madaxa ka qaada marada.

Ergaygii hadalkii ayaa uu joojiyay isaga oo yaabban. Daraakoola ayaa yidhi isaga oo cadhaysan:

- Adiga iyo isaguba ka qaada madaxa hagoogta, waa maxay cumaamadan foosha xun ee dhaadheeri?
- Waa dhaqan Cismaaniyiintu leeyihiin hoggaamiye. Weyneynta hiddahayaga ayaa ka weyn dareenkaaga kacsan.
- Dhib ma laha, sidaas ayaa aan idiinku dayn doonaa aad doorateen.

Ciidankiisii waalwaalnaa waxa uu faray in ay qabqabtaan labada ergay, kaddibna waxa ay ku dhaqaaqeen arrin yaableh oo bahalnimo ah. Waxa ay soo qaadeen masaabiir yaryar, labadii ergayna waa ay xidhxidheen. Kaddib cumaamadihii madaxa u saarnaa ayaa ay masaabiirtii ku garaaceen illaa ay isku dhajiyeen madaxii iyo maradii, dhiig ayaana ka qulqulayay madaxooga.

Daraakoola ayaa ku yidhi:

- Sidaa ayaa ay cumaamadihiinu madaxiina u saarnan doonaan weligiin. U taga suldaan Maxamed al-Faatix, una sheega sida aanu Daraakoola u illaabin hiddihii Cismaaniyiinta, gaar ahaan ta ku saabsan in aan cumaamadaha madaxa laga qaadin.

Labadii ergay waa ay soo noqdeen iyaga oo dhiiggu madaxa ka qulqulayo. Waxa ay u sheegeen suldaanka wixii dhacay, isna waxa uu cadhooday cadho aanu weligii cadhoon. Waxa uu faray suldaanku ciidan dhan labaatan kun oo nin in ay jiidhaan ciidanka cadowga. Waa ciidan u dhigma saddex laabka ciidanka Daraakoola. Ciidanka waxa hoggaaminayay fardofuul muslin ah oo la yidhaahdo Xamse. Waxa uu ahaa fardofuulka u wanaagsan ee ciidanka suldaanka xilligaas. Arrinta la yaabka leh ee dhacday waxa ay ahayd in nala soo jebiyay, si aan cidna filayn. Waxa aanu ku war helnay

Maxamed al-Faatix oo faraskiisii ku taagan, hore ayaa aanu u dhaqaaqay annaguna waa aanu ka daba tagnay. Waxa uu hoggaaminayay ciidan dhan labaatan kun oo kale, oo cadho iyo aargoosi jiq la ah.

Waxa aanu ka gudubnay webiga Daanuub. Qab iyo cisi halkii ugu sarreysay ayaa aanu ku sugnayn, alla diintani wanaagsanaa. Waxa ii soo noqotay xasuustaydii dagaal ee Qusdandiiniya. In aad faraskaaga dhex wadato labaatan kun oo fardofuul oo muslin ah, kuwaas oo adduunyada iska hilmaamay oo aan arkayn wax aan shahaado ahayn, waa arrin ay adagtahay in aan maankaaga u sawiraa. Waa arrin weyn. Waa annagaa kidinkii magaalada sii galayna, waa annagaa.

Waxa aan ka dareemay dhaqdhaqaaq aan caadi ahay qaybta hore ee ciidanka, anigu waxa aan ku jiray ciidanka dhexe. Waxa aan arkay hugunkii oo socodkoodii gaabiyay, waxa aan maqlay cod la moodo baroor. Ma aan fahmin arrinka jira, maxaa ay ciidanku u istaageen? Waxa aan jiidhay safafkii hore si degdega, waxa aan arkay wixii dhacay. Waa sawirkii ka dhigay indhahayga kuwo galka ka soo bixi gaadhay, waayo waxa aan arkay wax argagax leh. Ciidanki waa uu istaagay, suldaankii waa uu istaagay si geesinnimo leh. Hortaada eeg, miyaa aanad arkayn waxa aanu arkayno.

Waa kayn jiq ah, maya waa laba kaymood oo jiq ah. Kayni waxa ay naga xigtaa bari midna waxa ay naga xigtaa midig. Waa laba kaymood oo jirridahoodu ay yihiin tiirar loox ah, laamaheeduna ay yihiin gacmo iyo luga dad oo nool nool, qaarna ay dhinteen. Caleemaheedu waa jidh laga soo daldalay tiirar, waa jidh ruuxdi ka baxday qaarna ay nool yihiin. Waa jidh indhaha nagu soo eegaya oo leh Allaahu Akbar. Labada kaymood cod ayaa ka baxayay, taah, baroor iyo codad Alle xusaya. Waa ciidankii gaadmada ahaa ee uu diray Maxamed al-Faatix, dhammaantood waxa daldalay shaydaankii oo tiirarka ka soo laalaadiyay. Toban kun oo tiir ayaa midig naga xiga, toban kun oo tiirna bidix. Ciidanku waa uu yara firkanaxay. Waxa la maqlayay qaylada iyo oohinta loo ooyayo

ehelka iyo asxaabta ee walaalaha muslimiinta ah ama dadnimada.

Maxamed al-Faatix waa uu istaagay isaga oo fajacsan, waxa uu xasuustay carruurnimadii uu la soo qaatay Daraakoola. Wiilkaas xiqdiga badan ee markasta tamartiisa jirrabi jiray. Imika ma aha cunug yar, balse waxa uu noqday shaydaan la fogeeyay. Waxa uu soo eegay dhankayga, sidee ayaa ay idiin dhashay calool qudhaati, sidee ayaa uu idiin soo koriyay aabbo qudhaati. Sidee ayaa uu midkiinna u noqday fardofuul muslin ah midna u noqday shaydaan ka mid ah shayaadiinta la iska naaro. Maxamed al-Faatix waxa uu eegay ciidankiisii, waxa hoos u dhacay dhiirranaantii iyo xamaasaddii oo dhan. Markii ugu horreysay noloshii ayaa uu Maxamed al-Faatix waxa uu gadaal u eegay faraskiisii si uu u noqdo, waxa aanu yidhi:

- Maanta ma aha maalintii ciidanku ruqaansan lahaa. Balse waxa ballan u ah ruuxdan daahirka ah iyo xaqa dhiig kasta oo daatay in aanu keeni doonno madaxa shaydaankan annaga oo qori sudhnay. Waxa aanu sudhi doonnaa tiir badhtamaha magaalada Qusdandiiniya, si ay carruurti dhagaxaan ula dhacaan.

Waxa uu eegay ciidankii muslimiinta oo dib u sii noqonaya. Dagaalku markan ma uu ahayn mid hoggaamiye caadi ah lagaga soo horjeedo, Daraakoola ayaa aan la diriraynay, shaydaankii. Xilligaas suurtogal ma ay ahayn inta aad wax ku samayso muslimiinta in aad iska badbaaddo. Waxa uu diyaariyay Maxamed al-Faatix ciidan dhan lixdan kun oo nin, oo u badan fardooley, madaafiic iyo cadho. Aniga ayaa uu iga dhigay hoggaamiyaha ciidankaas, waxa aanu yidhi:

- Orod Raadoo oo ii keen madaxii walaalkaa. Taliska Wallaayka looma abuurin in ay qabtaan shayaadiin, carshiga Wallaayka waxa loo abuuray in aad adigu fuushid.
- Waa aan kuu keeni doonaa taliye inta aanay qallalin dhiigga shuhadadeenni ee Wallaayka.

Waxa aan u dhaqaaqay dhanka Wallaayka aniga oo hoggaaminaya lixdan kun oo nin. Markan waxa uu maqlay Daraakoola warkayagaii iyo tiradayadii, waxa aanu sameeyay wax fajaciso ah. Waxa uu ka tagay caasimaddii Wallaayka waxa aanu dhuftay jidka Booyinaar. Ciidankayagu si cadho leh ayaa uu u eryanayay. Waxa yaab lahaa waxa uu gubay dhammaan kaydkii raashinka iyo cuntada, waxa aanu sumeeyay dhammaan ceelalkii magaalooyinka oo dhan, si uu nooga dhigo bilaa sahay. Ciidamadu berigaas waxa ay guuri jirtay uun hubkeeda, waxa aanay ku tiirsanayd cuntada magaalooyinka ay galayso. In badan ayaa aanu eryannay Daraakoola, dagaallo door ah ayaanu la galnay ciidankiisa. Laba waa aanu ka guulaysannay saddexna waa nala jebiyay. Shaydaanku waxa uu ahaa mid habeen badhka na soo weera. Waxa aanu muujinnay geesinnimo waxa aanan ku godoominnay qalcaddiisii Booyinaar. Aniga ayaa hor kacay ciidanka, iyada oo ay i daba socdaan rag badani. Waxa aanu rabnay in aanu qoobabka fardaha ku jebinno afaafka qalcaddiisa. Waxa aan ka soo degay faraskaygii, waxa aanan la soo baxay seeftaydii aniga oo daydayaya madax, madaxii shaydaanka.

Waxa uu igu yidhi Daraakoola isaga oo taagan goob dibada ka ah qasrigiisa:

-Waxa aad khiyaantay dalkaagii Raadoo, waxa aanay kuu xidheen cumaamaddoodii dheerayd ee madhnayd?

- Maya ee qalbigayga ayaa gartay jid uu in badan ka lunsanaa, waa jid uu madaxaagu dhaco kama danbayntiisa.

Kor ayaa aan u qaaday seeftaydii sida ay fardooleydu samayso, waxa aan arkay Daraakoola oo seeftiisii ku tuuraya meel fog, oo samaynaya wixii ugu danbeeyay ee maskaxdayda ku soo dhaca. Waxa uu ku booday ceel qasriga ku dhex yaallay. Ceelkii ayaa aan ku soo orday si aan gudihiisa u eego, waxa aan arkay Daraakoola oo si dheeldheel ah iigu qoslaya, kaddibna waxa uu u cararay meel hoose oo

ceelka ah. Waxa aan goostay in aan ka daba galo, balse waxa aan arkay ciidankii oo ceelka xaggiisa hoose ka shiday dab weyn oo ololkiisu uu bannaanka u soobaxay, oo uu wajigaba iga leefi gaadhay. Kani waxa uu ahaa god sir ah oo ka mid ah godad badan oo aan gadaal ka ogaaday in uu ka qoday dhamaan qalcooyinkiisii. Waa uu baxsaday Daraakoola, waa uu firdhaday annagana waxa uu nooga tagay Wallaayka.

Daraakoola waxa uu u baxsaday Hangari si uu kaalmo uga raadsado boqorkeedii. Boqorkeedu iska daa in uu kaalmo u fidiyee waa uu qabtay waxa aanu ku xidhay Hangari. Halkaas ayaa uu ku xidhnaa sannado badan. Aniga ayaa noqday amiirka Wallaayka waxa aan ku maamulay hab caddaalad ah, shacabka Wallaaykana waxa aan illowsiiyay dhammaan wixii uu ku sameeyay Daraakoola. Sagaal sannadood ayaa aan xukumayay Wallaayka, waxa aan guursaday gabadh muslimad ah, waxa aanan dhalay inan muslimad ah oo qurux badan, Maariya. Kaddib waxa dhammaatay ajashaydii, ruuxdaydiina waxa ay qabatay saldhigeedii. Ninkii taliska iiga danbeeyay waxa uu ahaa nin ka soo baxay xabsi uu in badan ku jiray oo Hangaariya ku yaalla. Waa nin loo yaqaanno shaydaanka, Daraakoola. Bil keliyaara ayaa uu isku dayay shaydaanku in uu soo celiyo maamulkiisii hore ee Wallaayka, balse bil keliyaata ayaa uu ku go'ay madaxiisii, waxa haleeyay waranka uu soo ganay mid ka mid ah Xashaashiintii ka soo hadhay markii uu Hoolaako dawladdooda baabiiyay. Xashaashkaasi waxa uu soo qaaday madaxii Daraakoola waxa aanu mariyay malab kaddibna waxa uu u diray Qusdandiiniya. Waxa uu u diray Maxamed al-Faatix si uu u guddoomo isaga oo daray ah. Madaxiisii waxa la sudhay Qusdandiiniya gaar ahaan qasrigii Cismaaniyiinta, si ay candhuuf ugu tufaan ciddii doonta ama ay dhagaxaan ula dhacaan ciddii doontaa. Waxa uu ahaa madax leh laba indhood oo qooqan, imikana waxa ay noqdeen laba indhood laabmay oo dhulka eegay iyaga oo dullaysan.

Daraakoola waxa uu ahaa mid dhimirka ka jirran. Waxa na loo sheegay in uu ku samayn jiray waxyaalo yaable xabsigii Hangari. Waxa uu ugaadhsan jirey cayayaanka iyo jiirka waxa aanu sudhi jirey qoryo yaryar oo laamaha geedaha ah, waxa aanu ku raaxaysan jirey dhimashadooda. Alla shaydaansanaa kaasi, qof xanuunsanaya ayaa uu ahaa, annaga se wixii uu naga mudnaa waa uu naga helay. Waxa nala abuuray annaga oo ah fardofuul si aanu uga hor tagno kan oo kale, kamana cabsanayno xataa haddii uu baalal uu ku duulo uu yeesho. Kama cabsanayno wax aan ahayn cadhada Abuurahayaga. Sidaas ayaa naloo abuuray annaga oo fardofuul ah, sidaas ayaa naloo abuuray annaga oo muslimiin ah.

DHAN

Iftiimin

Ma jiro qof ay ka soo dheegan karayeen shakhsiyadda Daraakoolaha dhiigyocabka ah ee filimada oo aan ka ahayn Daraakoolaha dhabta ah. Runtii waxa uu jeclaa in uu cabbo dhiigga dadka uu laayay oo khamri lagu daray. Runtii Daraakoolaha aynu filimaanta ku aragnaa ilmo yar ayuu u noqonayaa marka aynu barbar dhigno Daraakoolaha shaydaanka ah ee dhabta ah. Sababta aan sheekadan u keenay waxa weeye Daraakoola waxa uu ka dhaxlay aabbihii hoggaaminta ururka 'Mas-duulaaga[52]', ururkaasina waa mid ka mid ah ururada sirta ah ee la aasaasay Fardooleyda Haykalka ka dib. Waa ururo Maasooni ah oo xoogga saaray waqtigaas in ay diyaariyaan kooxo weerar ku qaada dawladda Cismaaniyiinta. Waxa ay ahaayeen ururro dusha ku baaqa walaalnimo, kalgacal iyo sinnaan sida ay sameeyaan dhammaan ururada Maasoonigu, se waxa ay lahaayeen ujeedooyin gurracan oo kale. Daraakoola aabbihii oo la odhan jirey Daraakool muu awoodin in uu wax dhiba gaadhsiiyo Cismaaniyiinta, dhammaan hawlgalladii uu ku kacayna waxa jebiyay ciidanka Cismaaniyiinta. Illaa markii danbe uu Suldaankii Cismaaniyiintu ka adkaaday ee damiin ahaan looga soo qaatay labadiisi wiil. Markii wiilkiisa Daraakoola uu noqday hoggaamiyaha ururka Maasooniga ah waxaaba la moodayay in shaydaanka laftiisii uu madaxweyne noqday. Waxa uu abaabulay guutooyin hoog badhan dhadhansiiyay Cismaaniyiinta, taas oo ay la yaabeen boqorradii Yurub iyo

[52] Mas-duulaa: Dragon.

raggii diintuba iyaga oo indhaha ka qarsaday bahalnimada Daraakoola ama ka aamusayba. Iyagu waxa ay ugu dhammayd in uu la dagaalamayo cadawgooda oo uu hoog dhadhansiinayo. Waxa laga matalay sheekada Maxamed al-Faatix, Raadoo iyo Daraakoola musalsal Turki ah oo la dhaho Faatix , oo ka sheekaynaya illaa carruurnimadii saddexdooda illaa furashadii Qusdandiiniya iyo dhimashadii Maxamed al Faatix.

Iska soo dhaaf sheekadaa i daa aan kaaga sheekeeyo Maasooniyadda iyo sidii aan ugu biiray e. Cidna kaaga warrami mayso sida aan kaaga warrami doono waayo waxa aan ka gaadhay heerka 21aad. Inkasta oo aan dhiman doono waxyar ka dib, laakiin waxba kama baqanayo. Noloshayda waxa aan u huri doonaa waxa aan kaaga warrami doono, sidii ay dad kale oo badaniba noloshooda ugu hureen. Anigu se waa aan ka duwanahay dadkaas hore waayo waxa aan madhax kaaga tagayaa buug, buug ay waajib kugu tahay in aad akhrido dabo iyo dacal, ka dibna aad gubto si aanu kuu soo gaadhin waxa i soo gaadhayaa.

Qofka ku cusub Maasooniyaddu ma dareemayo wax dhib ah, taa lidkeeda waxa lagu dhaarinayaa kitaabka caanka ka ah dhulka uu ka yimid. Muslinku waxa uu ku dhaaranayaa Quraanka, Masiixigu Injiil, Yuhuudiguna waxa uu ku dhaaranayaa Tawraad. Marka la gaadho heerka 18aad waxa lagu dhaaranayaa Tawraad oo qudhaata. Astaamaha Maasooniyaddu marka hore waa kuwo macneyaal caadi ah iska wata, ka dibna macne dhexe ayaa ay yeelanaysaa illaa ugu danbaynta ay noqdaan astaamo Yuhuudeed. Iyagu cid kasta uma doortaan in uu Maasooniyadda soo galo, dad gaar ah ayaa ay xushaan. Dad bulshada saameyn ku leh; saameyn siyaasadeed mid diineed ama mid dhaqaale. Waxa jiro kooxo korjoogayaal ah oo dad gaar ah dusha kala socota, qofkaas oo ay soo sharraxeen Maasooniyiin kale. Dad ayaa dusha kala soconaya xog kasta oo isaga ku saabsanna waa ay soo ururinayaan. Iyagu waxa ay jecelyihiin in ay miidhaan dadka

haldoorka ah, dadka xilalka haya ama dhaqaalaha leh, si ay ujeedooyinkooda ugu fuliyaan. Marka uu qofku ku soo biirayo waxa la mariyaa laylis isku xigxiga oo qofka kolba heer u gudbinaya. Maasooniyadda lama soo codsado si loogu biiro, waa in uu ku soo sharraxo qof Maasooni ah oo maxfalka joogaa. Saddexda heer ee ugu horreeyaa waa sidii daahfur oo kale inuu qofku u qalmo iyo in kale ayaa la eegayaa Maasooniyadda. Qofka xilka haya iyo qofka heellan sida qofka hanka leh ama doonista dhaldhalaalka sida naagaha, lacagta ama awoodda, qofkaas waa ay u fuliyaan waxa uu rabo oo dhan. Ka dibna waa la dalacsiiyaa qof iyada oo heer marka uu gaadhaba afkaarta laga beddelayo. Haddii uu gaadho heerka 33 oo loo yaqaanno heerka sarreeya, waxa buug u furaya Ustaadka weyn ee maxfalka. Waxa lagu odhanayaa adiga , aabbaha iyo awoowgaaba waxa sharaf u ah in ay ku soo biiraan reer bani Israa'iil. Imika waxa aanu saxaynaa nasabkaaga magacaagana waxa aanu ku qoraynaa liiska jilibka 13aad ee reer bani Israa'iil. Waxa aad helaysaa sharafka ku soo biirista jilibkan maamuuska ah iyo ka qayb qaadashada dhammaystirka hawsha weyn ee inoo taalla, waa dhammaytirka dibudhiska weyn, haykalka weyn; haykalka Saleebaan.

Marka hore waxa ay ku odhanayaan Ilaaha aanu caabudnaa waa Injineerka weyn, waa weedh sarbeeb ah oo aad moodayso in ay Ilaahay u jeedaan. Marka aad gaadhid heerar sare waxa uu Injineerku isu geddiyayaa Luusifar. Ha u malayn in ay shaydaanka u caabudayaan in uu yahay wax xun, waxa ay u haystaan in uu yahay kii dadka ku hagayay aqoonta iyo waxgarashada. Waa kii dadka baray beerashada, ganacsiga, wershadaha ee baray sida badda loo maaxo, waana kii ku hagay dhammaan qaybaha nolosha oo dhan, sidaa darteed in la caabudaa waa wax caadi ah. Markii uu Aadan iyo Xaawa uga sheekeeyay cunista tufaaxa taasi waxa ay ahayd wax caadiya waayo waxa uu la doonayay khayr, mana ay ahayn shar sida ay diimuhu sheegaan. Marka danbe waxa

aad ogaanaysaa in aanu Eebbe nacdalin Ibliis ee uu la dagaalamay, waayo Luusifar waxa uu dadka la doonayay aqoon halka uu Eebbe la doonay in ay jaahiliin iska ahaadaan. Ilaahay waxa uu markasta kuu ballanqaaday ballamo aan fulayn, waa aad baryaysaa in ducadaada la aqbalaana waa nasiib, Luusifar se haddaad caabuddo waxa aad ka doontaba waa aad ka helaysaa. Jannadiisa adduunka ayaa uu kugu gelinayaa, waxa aanad ogaanaysaa in ay aakhiro iska tahay wax huuhaa ah oo aan jirin; waxkasta oo lagu sheegaa ma jiraan sida naar iyo janno iwm. Sidaas ayaa ay i bareen markii aan galay, laakiin qayb naftayda ka mid ah ayaa waxaas oo dhan diidaysay, gaar ahaan markii aan ogaaday sababta ay u doonayaan in ay Haykalka dib u dhisaan, taas oo aan kuu sheegi doono mar kale.

Sheekada soo socotaa waxa ay leedahay waraaqo badan, waxa aan kuu soo bandhigi doonaa hadda waraaq keliyaata, inta kalena marka ay sheekadu dhammaato.

- **Waraaqda koowaad** waa waraaqda Illuminaatiga, waxaana ka muuqda sawir aad in badan aragtay, waa haramka aan dhammayska tirnayn ee ishu ka muuqato, ishaas oo nuur badan ku xeeran yahay.

Sheekadan waxa kaaga sheekayn doona laba qof, nin iyo gabadh. Midkood run ayaa uu sheegayaa midkoodna been. Sir yar aan kuu sheego si aad u kala garato ka runta sheegaya iyo ka beenta sheegaya. Ka runta sheegayaa waa ka hor dhimanaya, aad u xasuuso, imikana iyaga ayaa aan uga baxayaa.

***

Wiiro-Komooko
(1600 C.D)

Xasuus-qorkii Joon Ismiit[53]

Xasuusqorkayga qaaliga ahoow, maanta waa maalin cusub oo ka mid ah maalmahayga wacan. Waa isbiimayn cusub oo ka mid ah nafhurkaygii bogagaaga buuxiyay. Isbiimaynta maantu waa wax ay naftaydu jeceshahay, waa daahfurka duni cusub. Maanta aniga iyo jaallayaashay oo wadana doon weyn ayaa u socdaalayna dhanka galbeed. Waxa aanu u soconnaa dhanka qaarad dihin, dawalado ma laha, muran ma laha. Waa dhul u dihin qofkasta oo doonaya in uu wax ka sameeyo. Waxa aan maqlay in ay dhulka deggen yihiin Hindi cascas, oo madaxa baal ku xidhaa. Waxa aan maqlay in ay bahalo yihiin oo ay neceb yihiin shisheeyaha. Qofka shisheeyaha ah ee u yimaadda waxa uu ku danbeeyaa in lagu dhex kariyo dheri ka mid ah dheryahooda, iyada oo ay koox ka mid ahina si bahalnimo ah ugu dul dhaantaynayaan.
Wakaa berrigi soo dhowaaday, doonyahayaga ku daalay ka soo tallowgii badweyntunu waa ay qotomaan.

Waxa aanu aragnaa geedo, timir, cagaar, ciid dahabiya, neecaw qabow iyo Hindi cas oo waran sita oo xagga doonta si waalli ah ugu soo ordaya. Eebboow, waxa uu nagu soo tuuray

[53] Joon Ismiit: John Smith.

Hindigii cadhaysnaa waran uu ganay nin aad u yaqaannaa. Waxa uu wadnaha ka cuskaday warankii Kiriis, wiilkaa qaangaadhka ah ee ay garaadkiisa ka buuxday sheekooyinka nafhurka badmaaxyada. Waxa ay riyadiisu ahayd in uu maalin uun badmaaxyada ka mid noqdo, hasayeeshee maanta waxa wadnaha kaga dhacay waran, warankaas oo soo gabogabeeyay dhammaan sheekooyinkii iyo nafhurkii uu doonayay in uu muujiyo. Wax kastaa waa ay idlaadeen intii aanay bilaabmin. Qolodani waa ay ka bahalsan yihiin shabeelkii Amuur ee dadqaadka ahaa ee aan ku arkay Ruushka, Kiriisna waa dhibbanihii ugu horreeyay ee ay dilaan.

Waa uu baxsaday Hindigii casaa, dhab ahaantii ma garanayno in uu firdhaday iyo in uu u yeedhayo dadkoodii kale. Waxa muuqata in hayaankaagu uu yahay mid adag. Doontayadii waxa ay ku xidhatay berriga, annaguna si qunyar ah ayaa aanu u soo degnay. Waxa aanu bilownay in aanu diyaarsanno fadhiisin annaga oo werwersan, alaabtiina waxa aanu ka soo dejinnay doontii. Kolba bidix iyo midig ayaa aanu eegaynaa, waa aan feejigannahay kolba marka aanu cod maqalno. Waxa soo galay habeenkii, welina wax weerar ah oo labaad lama aanu kulmin.

***

Xasuus-qorkii Bookahoonataas[54]

Boohaataan[55] waa boqortooyadayda ay hoos yimaaddaan dhammaan tuulooyinka ay maamushaa. 'Wiiro-Komooko' waa tuuladayda oo ka tirsan tuulooyinkaas. 'Waan-Siinaakaa' waa aabbahay, waa dadka qofka aan ugu jecelahay. Anigu waxa aan ahay 'Maatuwaaka' yar jirta toban gu', dadkana waxa aan ugu jecelahay aabbahay. Magacyga macnihiisu waa 'Ubaxii labada qulqul u dhexeeyay' maxaa yeelay tuuladayadu waxa ay dhacdaa laba webi dhexdood. Magacyga labaad waa 'Amaanutii', aabbahayna waa hoggaamiyaha boqortooyada Boohaataan oo dhan. Anigu ma ihi inantiisa qudha, aabbahay waxa uu dhalay wax ku dhow soddon gabdhood, waayo waxa uu qabaa soddon dummar ah. Waxaas oo hablo ah haddana anigu waxa aan ahaa ta uu ugu jecel yahay, taasi waa waayo waxa aan ahay 'Bookahoonataas', sabab kale ma jirto.

Bookahoonataas waa magacyadayda ka ugu caansan, waana magac leh macno sida magacydada kale oo dhan. Macnihiisu waa yartii shidnayd, shidan waxa laga wadaa maad badan oo qalbi wanaagsan. Maxaa aan u ahay ta uu aabbaheed ugu jecel yahay? Maxaayeelay markii uu aabbahay guursaday soddon dummar ah, iyada oo ay ku qasbayso taa hiddahayaga oo dhigaya in hoggaamiyaha boqortooyadu uu tuulo kasta gabadh ka guursado oo uu carruur ka dhalo. Marka dhiigga boqortooyadu uu galo tuulo kasta waxa ay taasi muujinaysaa in tuulo kastaa u hoggaansan tahay boqorka boqortooyada Boohaataan. Hooyaday se' aabbahay uma uu guursan sabab siyaasadeed, waxa ay ahayd gabadhii ugu

[54] Bookahoonataas: Pocahontas.

[55] Boohaataan: Powhatan.

horreysay ee uu aabbahay guursado, waxa aanay ahayd gabadhii ugu horreysay ee uu jeclaado. Magaca hooyaday waxa uu ahaa sida oo kale Bookahoonataas, waxa uu aabbbahay guursaday intii xataa aanu boqor ka noqon Boohaataan. Anigu waxa aan ahaa curaddii aabbahay, hooyadayna waxa ay dhimatay markii ay i dhashay. Taasi waxa ay murug gelisay aabbahay, murugo ayaa aanu la madoobaaday. Markiiba aabbahay waxa uu go'aansaday in uu ii bixiyo magaca Boogahiinataas sidii hooyaday loo yaqaannay. Taas waxa uu uga gol lahaa in aan noqdo dhalashada farxad timaadda oo aabbahay ka dulqaadda murugada naftiisa haysa, taas oo ka dhigto murugada bus ay dabayli ku dhabatay.

Kooykuruus waxa uu noo sheegay in ay yimaaddeen xeebaha boqortooyadeenna qolo cad cad oo doonyo wataa. Waxa uu Kooykuruus na lagu taliyay in aanu soo dhowayno oo u dhibrinno iyo in aanu tusno martisoorka wacan ee reer Boohaataan. Kooykuruus sida aad ogtahay waa wadaaddada diinta ee Boohaataan iyo kuwa wadatashiga. Markii ay soo gaadheen dadkaa cad cadi xeebahayaga waxa ka hortagay kooxo ka mid ah ragga iyo dumar ugu wanaagsan Boohaataan si ay u soo dhoweeyaan, waxa aanay sideen weel uu ku jiro cuntada ugu wanaagsan ee Wiiro-Komooko laga helo. Si weyn ayaa ay ugu farxeen soo dhowayntayda, waxa aanay na siiyeen gobollo maar (nixaas) ah oo qaaliya. Maartu waxa ay u joogtaa Boohaatan halka dahabku dunida u joogo, dhab ahaantii waxa ay ahaayeen dad cad cad oo fiican.

***

Xasuus-qorkii Joon Ismiit

Xasuus-qorkayga qaaliga ahoow, afar bilood ayaa laga joogaa halkan oo aanu weli dhisanaynaa saldhigayaga, oo aanu hub ururSanaynaa. Waxa aanu markasta iska waabinnaa weeraro kulul oo ay nagu soo qaadayaan Hindida cascasi. Runtii waa bahalo, ma aha bahalo qudha balse waa kuwo dad cun ah sida aan maqlay. Waxa aanu isku daynay dhowr jeer in aanu soo dhowaysanno, waxa keliya ee aanu helnayna waxa uu ahaa ganacsi aanu la samaynay qaar si nabad ah noogu yimi. Waxa aanu siinnay gobollo maar ah iyaguna waxa ay na siiyeen cunto. Kaydkayagii cuntada ee aanu Ingiriiska kala nimi waa uu naga dhammaaday, sida oo kale waxa naga madhay dhammaan goboladii maarta ahaa ee aanu sidanay. Kuwan Hindida ahi waxba bilaash kuma bixiyaan, sidaa darteed waxa aan go'aansaday in aan kaxaysto raggayga kuwa ugu xooggan oo aanu gudaha u galno tuulada, si aanu bal uga raadsanno wax la cuni karo.

Markii aanu maraynay hareerta tuulada quruxda badan, oo aan la moodin ba in ay deggen yihiin dad sidaas u bahallo ahi. Waxa aanu aragnay koox kuwaa bahalaha ah ka mid ah oo xoog waaweyn, oo wata laash webiga maraya oo annaga na soo qishaya.

Intii aana sugin ilbidhiqsi waxa aan la soo baxay qorigaygii iyaga ayaa aanan ku fiiqay, aniga oo raba in ay jidka noo banneeyaan. Balse mid ka mid ah ayaa aad u qayliyay, waxa aanu ku warhelnay shanqadha dhirta noo dhow. Waxa dhirtii ka soo baxay tobonaan iyaga ka mid ah. Raggaygi waa ay baraq jabeen oo dib ayaa ay u yaaceen, anna ragii ayaa aan ka daba jeestay aniga oo raba in aan baxsado. Waxa kan oo noole dadcun ah ee baalka xidhan awood uma lihin aan kula dagaalanno.

Raggaygii waa ay baxsadeen anna waa aan carari kari waayay. Ma aan filayn in aan sidan foosha xun leh ku

danbayn doono, oo aan gacanta u geli doono qoladan Hindida cascas ee baalasha xidhan. Si kasta waa aan isugu dayay in aan u baxsado balse waa ay i go'doomiyeen. Hubkaygii waa aan tuuray gacmahana kor ayaa aan u taagay. Waxa aan doonayay in aan la hadlo balse leeb ayaa garabka igaga dhacay oo hadalkaygiiba ka soo dheereeyay. Indhaha ayaa i madoobaaday dhulka ayaa aanan ku dhacay.

***

Xasuusqorkiii Bookahoonataas

Afar bilood ayaa ka soo wareegtay intii aanu ku martigelinnay qolodan cadcad dhulkayaga. Mid iyaga ka mid ahi waxa uu ahaa nin aad u qurux badan oo timo bunni ah leh. Waxa aanu arkaynay Ilaah ka mid ah Ilaahyada. Waxa uu gacmihiisa midkood ku sitay seef daran, gacanta kalena waxa uu ku sitay Usha Onkodka. Waxa ay ahayd ul fajaciso ah, waxa uu ku fiiqi jirey cidda uu doonayo in uu dilo. Onkod daran ayaa usha ka baxayay qofkuna waa uu dhimanayay. Nin argagax leh ayaa uu ahaa ninkani. Qaabkaas ayaa uu u dilay rag badan oo Boohataan ah. Dhibtu waxa ay ahayd maalmaha qaar waxa uu iska soo geli jirey tuulooyinkii martisooray, waxa uu u soo galayaa sidii saaxiib oo kale, kadibna waxa uu ugu hanjabi jirey hoggaamiyaheeda Ushii Onkodka si raggiisa loo siiyo cunto dheeraad ah. Waxa uu sidaas samayn jirey maalmaha aanay cidna cunto u geyn. Annagu waxa aanu nahay dad martisoor leh, laakiin suurtogal ma aha in aad boqol nin maalin kasta aad quudisid muddo afar bilood ah. Maalmaha qaar ayaa aanan waxba siin jirin, ka dibna jinni ayaa ku kici jiray Ilaahan quruxda badan, oo waxa uu dhex wareegi jirey tuulooyinkayaga isaga oo cunto doonaya.

Kooykuruusku sidan ma ay jeclayn, sidaa darteed waxa ay go'aansadeen in aanu Ilaahan soo qabanno oo lagu marti sooro

Wiiro-Komooko, si uu aabbahay ula hadlo oo uu ula gorgortamo, wax badanna isla meel dhigaan. Maalin maalaha ka mid ah waxa baxay adeerkay Oobi-Shaanka, waa walaalka ugu yar ee aabbahay, waxa uu ahaa nin xoog weyn. Waxa uu ku kediyay Oobi-Shaanka webiga , raggii Ilaaha quruxda badani waa ay baxsadeen isna waxa uu soo hadhay keligii, waxa aanu gacanta u galay Oobi-Shaanka iyo ciidankiisii. Kooykuruusku waxa ay odhan jireen ninkani Ilaah ma ah ee waa qof caadi ah, Usha Onkodka ee uu sitaaana wax kale ma aha ee waa hub casri ah oo si aqoon leh loo sameeyay. Waxa uu booqday Oobi-Shaanka dhammaan beelaha oo dhan si uu dadka ugu sheego in ninkan quruxda badani aanu ahayn Ilaah, taasna waxa caddayn u ah waa annagaa qabanay. Waxa aanu u gaynaynaa boqor Waan-Siinkaa si uu u arko. Runtii qof ka mid ah reer Boohataan wax dhib ah uma uu gaysan ninkaas, markii la qabanayay iyo markii uu booqanayay ba. Taasi waxa ay ahayd akhlaaqdii Boohataan ee weynayd.

***

Xasuusqorkii Joon Ismiit

Waa aan booday mar keliyaata. Waxa aan arkay afar Hindi ah oo igu hareeraysan oo xoog ii haya, waxa ay ii wadeen goob aanan garanayn. In aan ka fakado ayaa aan isku dayay balse waxa aan dhex joogay tuuladooda oo ay ka buuxaan Hindi cascas oo si faduuli ah ii soo wada eegayay. Waa aanu soconnay illaa ay i geeyeen dhisme dheer oo yaab leh. Waxa ka uraysay hawada ur nooc kale ah, waxa aana lagu wada hadlayay af bahalnimo ah, iyo cod dhaadheer oo aan markasta maqlayay. Waxa ay iigu muuqatay in dhismahani uu ahmiyad gaar ah leeyahay. Dadkani waa kuwo bilowjir badow ah, dhismahooda, gogoshooda, dharkooda iyo habdhaqankooda ayaa aad ka garanaysaa. Waxa la i hor geeyay nin dharkiisu uu ka duwan yahay dharka kuwa kale, waxaana madaxa u

saarnaa baal ka badan baalasha kuwa kale. Waxa uu wejiga marsaday midabbo yaabab leh. Waa ay iska caddahay in uu kani yahay hoggaamiyahooda, waa ay iska caddahay in aanu faraxsanayn. Waxa uu leeyahay muuqaal aan u malaynayo in aanu aqoon dhoollacaddeynta.

Waxa uu igu yidhi cod adag, hadal adag iyo af adag oo aanan garanayn sida ay u fahmayaan.Waa aan eegay aniga oo yaabban, garabka ayaa aanan dhaqaajiyay si aan ugu muujiyo in aanan fahmin. Waa uu cadhooday, balse waa maxay waxa kan oo carruur ah ee ku hareeraysani. Waxa uu si cadho leh ula hadlay raggii igu hareeraysnaa. Waa ay soo dhaqaaqeen waxa aanay ii qabteen si adag, dhabarka ayaa aanay ii jiifiyeen badhtamaha qolkii yaabka lahaa. Midkood ayaa si xaasidnimo ah ula soo baxay seef, jaallayaashiina waxa ay ii qabteen si xaasidnimo ah. Baqo ayaa qalbigayga ku soo dhacay. Sida muuqata waxa ay kuwaasi u socdaan ilbidhiqsiyo kaddib in ay madaxa seef igaga jaraan. Waxa aan isku dayay in aan ka farabaxo awood kasta oo aan leeyahay, laakiin taasi ma dhacayo in ka badan toban gacmood ayaa si adag ii haya, oo madaxaygana kor u qaadaysa si loogu diyaariyo in qoorta la iga jaro. Waa aan cabaaday cabaaday. Waxa aan maqlayay weedho badan oo Hindi cadhaysan ah, taas oo u muuqatay in ay yihiin weedhihii ugu danbeeyay ee dhagtay maqli doonto. Si baqo leh ayaa aan seeftii u eegay. Nin gacmo waaweyn, oo indhihiisa laga cabsanayo ayaa seeftii kor u qaaday, waxa aanu u diyaar garoobay in uu madaxayga ku dejiyo. Indhaha ayaa aan isku qabtay oo waa aan qayliyay qaylo dheer.

Waxa dhagtayda ku soo dhacay cod ka duwan kii hore aan u maqlayay oo dhan. Waa cod dheddig oo meel fog ka soo hadlaya, waana uu ii soo dhowaada illaa uu agtayda yimi. Waa laba gacmood oo dheddignimo la debecsan oo igu hareeraysan, waa ur dheddignimo oo u dhibirsan sida ubaxa oo uu wejigaygu dareemay. Indhaha ayaa aan kala qaaday si qunyar ah, waa aan arkay. Maankaygu waxa uu joojiyay in uu

baraad u yeesho waxa kale ee hareerahayga jira oo dhan, dhammaan hummaagyadii kale waa ay qarsoomeen hummaageeda oo qudha ayaa ay indhahaygu hayaan. Waxa aan arkay iyada oo qaylinaysa oo igu gedaaman. Gacanta waxa ay ku taagaysay ninkii seefta sitay, wejigeedana waxa ay ku beegtay kayga, luqunteedana luquntayda.
Waa cadar dheddignimo, waa timo dhaadheer oo gobol habeenka ka mid ah la moodo. Waa laba indhood, laba indhood baadad iyo dibno. Ma jannadii ayaa aan ku dhex jiraa? suurtogal ma aha in aan weli ku suganahay tuuladii Hindida. Gacanteeda ayaa ay wejigayga saartay, indhahaygana waxa ay u eegaysaa si werwersan iyagana waxa ay u eegaysaa si cadhaysan. Bookahoonataas, waa kaas magaceedu. Waa gabadh dhallinyaro oo da'dii 18 jirka ku jrta. Waa gabadh maarriin ah, waana inanta boqorka Hindiga ah ee cadhaysan. Waxa ay u soo gadhay si ay iiga ilaaliso ad-adkaanta qoyskeeda. Waxa uu kula hadlay hadal weydiin u eeg, waxa aanay ugu jawaabtay weedhi malaa'iki ah oo aan jeclaystay in aanay joojin ba. Ninkii seefta sitay seeftii hoos ayaa uu u dhigay, waxa dabcay muruqyada raggii i hayay, dadkina waa ay wada aamuseen, keliya waxa hadashay Bookahoonataas.

***

Xasuusqorkiii Bookahoonataas

Waxa aan fadhiyay aabbahay agtiisa sidii ii caadada ahayd. Waxa noo soo galay Oobi-Shaanka oo wada ninkii quruxda badnaa oo ka yaabban waxa ku hareeraysan. Waxa aan ahaa toban jir wakhtigaas, waxa ay ahayd markii ugu horreysay ee aan arko qof naga isir duwan, si yaab leh ayaa aan u eegayay. Aabbahay waxa uu ka kacay meeshii uu fadhiyay, waxa aanu ku bariidiyay salaantii Boohaataan isaga oo

dhoollo-caddeynaya. Ninku waxba kama uu fahmin hadalkii aabbe, balse waxa joogay nin Kooykuruuska ka mid ah oo quruxlowga bariidada afkiisa Ingiriisida ugu turjumay. Madaxa ayaa uu ruxay quruxlowgu salaan darteed, waxa aanu soo fidiyay gacanta si uu aabbahay u salaamo. Aabbahay waxa uu ahaa siyaasi jiitay, waxa uu markii hore ku canaantay waxa uu ku sameeyay tuulooyinka qaar isaga oo cunto daydayaya. Waxa uu u soo bandhigay in ay Boohaataanku siin doonaan dhul ka wacan ka ay saldhigga ka samaysteen, dhulka Kaabaahoosiik. Waxa uu dhulkaasi leeyahay biyo macaan iyo biyo dhanaan, iyo afaaf ay dhigan karaan doonyahooda. Waxa uu u bandhigay in ay noqdaan tuulo ka mid ah Boohaataan, oo isaga hoos timaadda. Boohaataanku waxa ay siin doonaan cunto, waxa ay ku kaalmayn doonaan in ay guryo dhistaan, waxa aanay u guurin doonaan hablaha Boohaataan kuwa ugu quruxda badan.

Waxa uu nala joogay ninkii quruxda badnaa -oo aan gadaal ka ogaaday in la yidhahdo Joon Ismiit- afar cisho. Sida ugu wacan ayaa aanu u martisoornay. Aniga ayaa u gayn jirey cuntada, waa aanan la ciyaari jirey, gacantana waxa aan ku taataaban jirey timihiisa dahabiga ah markasta. Waxa uu i baray weedhi Ingiriisi ah, anna waxa aan baray weedho afkayaga ah -afka Aljoonkoo. Waa uu ogolaaday Ismiit in aanu iskaashanno, waxa kale oo uu ogolaaday dhammaan wixii uu u soo bandhigay aabbahay isaga oo aan shuruud ku xidhin. Aabbahay waxa uu ka codsaday in uu ka caawiyo Isbaanishka wax qarribaya, kuwaas oo markasta soo weerara boqortooyada Boohaataan. Wuu ogolaaday arrintaas Joon Ismiit waxa aanu ballan ku qaaday in isaga iyo Ingiriiskuba ay aabbahay hoos iman doonaan.

***

Xasuusqorkii Joon Ismiit

Markii ay Bookahoonataas ay hor istaagtay ninkii seefta sitay, waxa uu isu rogay habdhaqankii qoladu sidii hore lidkeeda. Waxa ay u muuqataa in ay tahay mid ay jecel yihiin tolkeed, dhammaantood waxa ay iila dhaqmeen hab wanaagsan, waxa aanay i siiyeen cunto iyo cabbitaan. Cuntadoodu waa mid cayn kale ah haddana dhadhankeedu waa mid wanaagsan. Bil dhan ayaa aan Hindida la joogay tuuladooda bilan. Waxa aan jeclaa in aan afduubo Bookahoonataasta quruxda badan, oo aan kala baxsado dhulkan, oo aan la tago dhul aanay aniga iyo iyada mooyee cid kale joogin.

Waxa aanu ku heshiinnay boqorkii -oo aan u bixiyay Baalaatiin, aniga oo u nisbaynaya Boohaataan- in aanu maamulkiisa hoos nimaadno, oo aanu joojinno fadqalalada joogtada ah ee na dhex marta. Waxa uu noo sheegay in uu cuntada si joogto ah noogu soo diri doono. Qasab ayaa ay ahayd in aan xabadjoojin la sameeyo oo aan la heshiiyo, isagu se ma oga niyadda Ingiriiska weli. Niyaddayadu waxa ay ahayd in aanu qabsanno dhulka boqortooyadiisa oo dhan, ha ogolaado ama yaa aanu ogolaane. Dhulkani waa dhul heersare ah, waxa ay u baahan tahay dad ilbax ah oo sare. Uma baahna dad qalafsan sida dadkiisa, keliya waxa loo ogolyahay haddii ay doonayaan in ay kor isu qaadaan oo ay nabadgelyo nagaluna noolaanayaan.

Waxa aan ku noqday saldhigayagii, raggiina waa ay la yaabeen soo noqoshadaydii. Maxaayeelay waxa aan soo noqday iyada oo ay ila socdaan Hindi badan oo sida weel cunto ku jirto. Markii aan saldhigga joogay Bookahoonataas saddexdii cisho ama ka yar ba waa ay noo iman jirtay, si aanu anu maalinta ugu qaadanno webiga Yoork. Waa aan jeclaaday Bookahoonataas iyaduna waa ay i jeclaatay. Dhibtu waxa ay ka jirtay in aan aabaheed boqorku aanu ogolayn in uu hoos

yimaaddo boqortooyada Ingiriiska, waxa uu rabay in Ingiriisku uu hoos yimaaddo calankiisa. Taasi waxa ay ka dhignayd loolan dhowaan bilaabmaya iyo dil badan oo loo gaysan doono reer Bookaahoonataas. Taasi waa ay igu adkayd balse danta dalkayga ayaa ka sarreysa doonista naftayda, sidaas ayaa aan bartay. Qaddarku iima uu kaadin in aan goobjoog ka noqdo dagaalka ciidanka. Annaga oo ku mashquulsan diyaargarowga iyo is diyaarinta ayaa ay si kama ah iigaga qaraxday xabbad ka mid ah rasaastu wejiga.

***

Xasuusqorkiii Bookahoonataas

Si kedis ah waxa u dhintay Joon Ismiit, waxa ay nagu yidhaahdeen waa uu dhintay oo waxa raqdiisii loo qaaday Ingiriiska. Aabbahay waxa uu sugayay hoggaamiyaha cusub si u ula galo heshiiskii uu la galay Joon Ismiit oo kale. Balse dhimashadii Joon Ismiit kaddib ba Ingiriisku waxa uu bilaabay in uu na soo weeraro. Tuurtuurkii noo dhaxeeyay waxa uu isu rogay dagaal kulul oo lagu hoobtay, oo lagu dilay dad badan oo ka mid ah Boohataan. Hubka uu Ingiriisku adeegsanayay waxa uu ahaa mid laayaan ah, waxa aanu u noqonayay hubka Boohaataanku agabka carruurtu ku dheesho oo kale. Waqtii dheer ayaa uu u baahnaa Boohataanku si ay hubkooda u horumariyaan, si ay uga hor tagaan hubkaas halista ah. Dagaalku waxa uu socday muddo ku dhow afar sanno. Waxa aanu dhadhaminay dhadhanka cadaabta dhabta ah. Ingiriisku waxa uu ahaa dad qalafsan oo koox koox dadka u laaya, waxa aanay adeegsan jireen habab liita, ballan kastana waa ay ka bixi jireen.

Labada kooxood weli waa ay diririyeen illaa maalin aan tagay -arrin uu aabbahay iiga diray- tuulada Baataawomiikis. Waxa ay ahayd tuulo aan hoos iman maamulka boqorka. Waxa aan u tagay halkaa in aan kaga qayb galo munaasibad

bulsho oo muhiim ahayd. Markii aan halkaa gaadhay waxa ay ii dhigeen dabin, waa ay i dageen oo waa ay i qabeen. Baataawomiikiska ayaa dabinka ii dhigay. Waa aan gartay in ay Ingiriiska raacsan yihiin oo ay aabbahay ka soo hor jeedaan. Cunaha ayaa cadho ila karay. Waxa ay doonayaan in ay i adeegsadaan si ay aabbahay cidhiidhi u geliyaan. Geerida ayaa iiga fudud in aan sabab u noqdo jabka ummadayda ee dagaalkan. Waxa aan ku xidhnaa doon ka mid ah doonyahooda waaweyn qolyar oo ka mid ah. Xaalkayguna waxa uu ahaa mid aad u xun sababta oo ah ruxanka doonta ee joogtada ah ee biyaha dushiisa. Wax kasta waa aan matagi jiray, waa aan dawakhi jiray, baraadkana waa aan waayi jirey. Kuwani ma ay fahmayn in aan rabo in la ii kexeeyo meel doonta ka durugsan, waxa ay moodayaan in aan la sillanahay werwer iyo baqdin darteed. Waar hooga, ma aha Bookahoonataas dumarka la baqda ama la daciifa marka la xidho. Arrinku keliya waxa uu la xidhiidhaa madaxwareerka badda.

Madowgii habeen badhka -wax u dhexeeya ruxanka doonta iyo gariir- waxa furmay kadinkii qolkayga. Waxa soo galay noole aan caadi iigu muuqan. Waxa uu ahaa nin xoogweyn dhab ahaantii. Sida sanamka ayaa uu afaafka u istaagay. Wax buu qiijinayay, madowga iyo sigaarka uu qiijinayo ayaa siiyay muuqaal baqdin leh. Ninki waa uu ii soo dhowaaday waxa aanu af Ingiriisi igu weydiiyay su'aal aanan wax ba ka fahmin. Kaddibna waa uu igu soo durkay gacantiisuna waxa ay taabatay luquntayda. Waa aan xidhxidhnaa, balse jiqilayga ayaa aan kor u qaaday oo caloosha ayaa aan kaga dhuftay. Caloosha ayaa uu is qabtay erayo cadhaysan ayaa aanu ku hadlay. Kaddib waxa bilaabmatay ibtiladii. Jinka ayaa uu isku kiciyay ninkii, waxa aanu igu sameeyay wax kasta oo uu yey ku samayn karo inan qurux badan oo xidhxidhan. Kaddib waa uu iga kacay waxa aanu sii lahaa dhawr eray. Dharkiisii ayaa uu hagaajistay waa aanu iska dhaqaaqay. Waxa uu iga tagay aniga oo dhex

dabbaalanaya dhiiggii ugubnimadayda iyo ilmadii iga qubanaysay. Halkan, habeenkan iyo qolkan baas waxa aan ku waayay - aniga oo ah Bookahoonataas inantii boqorkuriyadii ugu wanaagsanayd riyooyinka hablaha, waxa iga xaday xayawaankaas, waxa aan waayay bikranimadaydii. Waxba kuma hagaagsani, maa aan iska dhinto hadda ka hor. Haddii aanan xadhkahan ku xidhxidhnayn waxa aan isku tuuri lahaa badda.

***

Xasuusqorkii Joon Ismiit

Waxa wejiga igaga qaraxday xabbad ka mid ah rasaasta si kedis ah. Si aad ah ayaa aan u gubtay balse ma aan dhiman, waxa aan caafimaad u aaday Ingiriiska. Waxa ay Ingiriisku ku yidhaahdeen Hindidii Joon Ismiit waa uu dhintay, taasi waxa ay ahayd isku day ay doonayeen in ay kaga baxsadaan heshiiskii aan la galay iyaga. Bil iyo laba bilood ayaa uu socday, qoomkaygu intaa wax ka badan ma ay dulqaadan karayn. Waxa ay qaadeen weerar culus. Markasta annaga ayaa guulaysan jirnay maxaa yeelay waa aanu ka hub sarreynay haba naga tiro badtaane. Dagaalka noo dhexeeyay annaga iyo iyagu waxa uu socday sannado badan. Markii danbe waxa ay Ingiriisku ku qafaasheen Bookahoonataas weerar ka mid ah weeraradii. Waxa ay garanayeen sida uu waalidkeed uga lushay, sidaa darteed ayaa ay u qabsadeen si ay ugu cidhiidhyaan, iyo si ay u noqoto hab dhowra. Isagu ma waalna marka uu na soo weerarayo annaga oo gacanta ku haynaa wixii ugu qaalisanaa agtiisa. Waxa aanu ka dalbannay madaxfurasho weyn oo lagu baraqjabinayo balse ma uu bixin, sidaas ayaa ay Bookahoonataas gacanteenna ugu sii jirtay.

Intii ay Bookahoonataas gacantayada ku jirtay iniintii ashqaraarka iyo fajacaha ahayd ee ay u qabtay

ilbaxnimadayadu waa ay kortay oo waa ay weynaatay. Intii aan xidhiidhka la lahaa waa ay jeclaanaysay ilbaxnimadayada, waxa aan ka dareemayay ilbaxnimo jacayl iyo nacayb ay u qabtay dibudhaca iyo duurjoognimada ay tolkeed ku arkaysay. Iniintaasi waa ay sii weynaatay intii ay noo xidhnayd, gaar ahaanna waxa ay ka heshay habdhaqankayaga sarreeya ee aanu kula dhaqmaynay. Waxa ay qaadatay diinta Masiixiyada oo ay u soo wareegay. Waxa loo sameeyo bandhigyo lagu soo dhowaynayo, waxaana magaceeda loo rogay Rabeeka. Waxa aanu magacaas ugu bixinnay annaga oo ugu magacdarayna Rabeekada lagu sheegay Tawraad, oo ah Yacquub iyo Ciisoo hooyadood. Yacbuub iyo Ciisoo labadaba waxa ka tafiirmay ummado, Rabeekana waxa ay ahayd hooyadii labadaas ummadood. Bookahoonataas waxa ay astaan u ahayd kulanka laba ummadood, ummada Ingiriiska iyo ummada Hindida Cascas.

Jacaylkii ay u qabtay ilbaxnimadaydu waxa uu u gudbay in ay nacdo tooda. Xataa markii ay xidhnayd mar aanu u ogolaannay in ay la kulanto wafti uu aabbaheed ku jiray markii ay aragtay waa ay ku qaylisay aabbaheed, waxa aanay u sheegtay in ay neceb tahay, waayo waxa u caddaaday in ay kala jaban tahay agtiisa seefo iyo faashash gaboobay. Waxa ay u jeeddaa madaxfurashadii aanu ka dalbannay aabbaheed oo koobsanaysay hubka qoladiisa. Waxa u soo geedfadhiistay Bookahoonataas mid ka mid ah hantiilayaasha ugu waaweyn Ingiriiska Joon Roolf, si farxad leh ayaa aanay u aqbashay guurkiisa. Waxa uu ahaa guurkaasi baahinta nabadgelyo dhex marta laba ummadood dagaal dheer kaddib, sidaas ayaa ay dhab ahaan u ahayd hooyada laba ummadood. Waxa ay u socdaashay Bookahoonataas iyada iyo Roolf Ingiriiska, waxa aana loogu soo bandhigay Ingiriiska sidii oo ay tahay qoolley nabadgelyo ee laba ummadood oo waaweyn. Dhibtu waxa ay ahayd anna Ingiriiska ayaa aan ku sugnaa, si kedis ah ayaa aanay Bookahoonataas iigu aragtay horteeda.

***

Xasuusqorkiii Bookahoonataas

Waa aan nacay naftayda, aniga ayaa u sabab ah in tolkay jabo. Anigu waxa aan ahay bilaa sharaf, bilaa qiimo, bilaa culays. Ma garanayo kii i kufsaday ka uu yahay. Maalintii xigtay waxa ii yimi nin u muuqday hantiile oo magaciisu yahay Joon Roolf, waxa aanu ii soo bandhigay guur si uu u dhammaado dagaalka ciddayda iyo ciddiisa u dhexeeyaa. Aniga oo ku jira heerkii ugu sarreeyay ee xanuunkayga iyo xeelad la'aantayda waxa aan u arkayay fursad aan wax kasta ku sixi karo. Aniga oo dareensan in aan ahay sababta bayhooofka dadkayga waxa uu guurkani joojin doonaa dhiiggooda qaaliga ah, iyo sharaftaydii uu lumiyay xayawaanku oo guurku kabi doono. Inkasta oo uu yahay guurka dad aanay jirin sida aan u nacay cid aan u nacay, waxa aan nacay is-qaaliyayntoodii, qalafsanaantoodii iyo dagistoodii badnayd; haddana waa aan ku qasbanaa tolkay dartii. Si uu guurku u dhammaystirmo waxa ay igu waajibiyeen in aan galo diinta Masiixiga, waxa aanay ii bixiyeen magac cusub oo ah Rabeeka.

Waxaas oo dhan waa aan ogolaaday aniga oo aan wax shuruud ah ku xidhin. Waa aan guursaday ninkaas hodanka ah, dhabtiina waa uu joogsaday dagaal sannado badan socday oo ay tolkay mar kasta dhibbanaha ahaayeen. Waxa aan ula socdaalay Roolf Ingiriiska. Halkaas waxa aan ku ogaaday in aanu guurkaygu ahayn mid nabad looga dan lahaa sida ay ugu muujinayeen dadkooda Ingiriiska, waxa uu ahaa iidheh, iidheh loo samaynayay dhulkayaga ay gumaysanayeen, taas oo ay u bixiyeen mustacmaradda Firjiiniya. Waxa ay doonayeen in ay dunida tusaan sida uu yahay xaalka qaaradda cusub ee ay u tageen in ay gumaystaan. Xaalku waa uu wacan yahay, dadkii qaaradda degana waa ay jeclaysteen waxa aana caddayn u ah amiiradda Bookahoonataas, inanta boqorka Hindida Cascas.

Intii aan joogay Ingiriiska waxa aan ogaaday in Joon Ismiit -dagahaa weyni- in aanu dhiman. Waxa ay sidaa noogu yidhaahdeen waayo isagu waxa uu heshiis la galay aabbahay, heshiiskaas oo aanay isaga iyo ciddiisuba doonayn in ay fuliyaan.

Maalin ayaa aan la kulmay Joon Ismiit si kediso ah, waxa aanan hortiisa ka sheegay in uu yahay dage weyn, iyo in aan aniga iyo tolkay u malaynaynay in uu yahay qof wanaagsan. Balse dhabtii waa gumayste dhiigyacab ah oo qashin ah uun. Kor ayaa aan u dhawaaqay anigu oo ka soo horjeeda waxa kan oo dagitaan ah ee ay rabaan in aanu ku noolaano. Muran adag ayaa aan la galay Joon Roolf, si adag ayaa aanan u diiday in aan ka qayb galo xafladaha iyo bandhigyada ay igu qasbi jireen in aan tago.

Joon Rool hal xal ayuun baa u bannaanaa, oo aan mid labaad lahayn.

Maalin inta aan biyo cabbay ayaa waxa aan dareemay in dunidu ila wareegayso, oo ay madaxayga ka dhex wareegayso. Jidhkayga ayaa tamar gabay oo dhulka ayaa aan ku dhacay. Waxa aan gartay in Roolf in uu sun biyaha iigu daray. Waxa aan gartay in ay doonayaa in ay ka raaxaystaan buuqayga, oo ay ilaashadaan hummaaga ay iiga sawireen caalamka. Inanta tolkeeda duurjoogta ah neceb, ee Ingiriiska jecel, ee Ingiriiska ugu baaqaysa in ay yimaaddaan dhulkeeda oo ay qabsadaan; si ay ilbaxnimadooda ugu faafiyaan. Taasi waa waxa ay rabeen in dunidu rumaysato, caalamkuna waa uu rumaystay, welina waa uu rumaysanayaa, waa aanu rumaysan doonaa illaa dhammaadka. Boohataan se iyo ilbaxnimada Boohataan ee weyni iyo dhiigga qaaliga ah ee Boohataan ee u dareertay dhulkayaga sida webiyada cidna wax kama soo qaadayso. Maxaa uu u dhigmaa dhiiggaasi marka loo eego dhiigga boqortooyada Ingiriiska? Waxba.

DHAN

Iftiimin

Sidaas ayaa uu Ingiriisku ugu duulay Maraykanka, waa duulimaad bahalnimo ah oo aan garanayn xuquuqda aadamaha iyo wax la mid ah. Dhammaan dadka oo dhan waa ay laynayeen. Xaqiiqda qadhaadh ee taariikhda Maraykanku qariso ayaa ah in taallada xorriyada dhabtii laga dul dhisay maydka malaayiin Hindida cascas ah. Dhibta ka hor timid Yurubiyaankii cadcaddaa waxa ay ahayd in ay heleen dhul dihin oo beereed oo balaadhan, oo u baahan shaqaale badan. Markii hore waxa ay isku dayeen in aanay Hindida Cascas laynin ee ay addoonsadaan. Waxa kuu muuqanayay boqolaal gawaadhida xammuulka ah oo sida carruur iyo dumar Hindi ah, dumarka ayaana aad loogu baahnaa. Waayo shaqada gacanta ee ay ka qabanayaan beeraha waxa u dheeraa in ay ahaayeen qalab galmo oo madaxda caddaanku ku raaxaystaan. Qofka diida in la adoonsado ee Hindida ka mid ah waa la dili jiray, taariikhdu waxa ay ka sheekaysaa kummanaan dhacdo oo tuulooyin la gubay iyo Hindi la gummaaday ah iyo ceelal la sumeeyay. Tirada Hindida la dilay waxa ay gaadhay 80% tiradooda guud ah, tanina waa tiro weyn oo tirakobyada khajilaa ay ku sheegaan illaa 50 milyan oo Hindi ama ka badan in la dilay.

Dhulku waa uu balaadhnaa sidaa darteed Hindida oo qudhi kama ay wada shaqayn karayn, waxa jiray boqollaal hiktar oo u baahnayd cid ka shaqaysa. Sidaa darteed waxa uu gumaystihii caddaa ujeedsaday dhanka qaarad soo saarta rag xoog waaweyn, waxa ay ujeedsadeen dhanka Afrika. Tobonnaan milyan oo madow ah ayaa la soo ururiyay iyaga oo silsilado ku xidhan, oo la soo saaray doonyaha Ingiriiska waxa aana loo dhoofiyay Maraykanka si ay beeraha uga shaqeeyaan. Kuwaasi waxa ay ahaayeen shaqaale xoog weyn

oo bilaash ah. Madowgii loo raray Maraykanka badankoodu waxa ay u dhiman jireen ama gaajo ama harraad ama neefqabatow marka la is dulsaarsaaro ee sida alaabta la isugu rakeeyo, ama waxa dili jirtay ba rasaasta ninka cad ee kibirsan. Waxa ay ahayd hilbo-wadhadkii ugu weynaa ee taariikhda soo mara, waa dagaal dabargoyn ah oo Hindida lagu qaaday iyo dagaal addoonsi ah oo madowga ku dhacay, sidaas ayaa Maraykanka lagu dhisay; waddanka xorriyadda iyo dimoqraadiyadda wanaagsan. Xataa aabbaha xorriyada Maraykanka Joorj Waashintong [56] waxa uu haystay saddex boqol oo addoon iyo adeegto ah oo beertiisa ka shaqeeya, mid ka mid ahna muu xorayn illaa uu ka dhimanayay.

Sheekada sare Bookahaantoos ayaa runta sheegaysa Joon Ismiitna waa beenaalaha. Laakiin runta Bookahaantoos waa loo kasay in la qariyo meel kalena waa ay adagtahay in aad ku aragto oo aan buuggayga ahayn. Haddii aad isweydiinayso sirta ka danbaysa waraaqdii aan ku tusay sheekada ka hor, waraaqdii Illuminaatiga ee haramka iyo ishu ku sawirnaayeen; sawirkan laftiisu waxa uu ku yaallaa doollarka Maraykanka. Inta aanan wax kale kuu sheegin waxa aan doonayaa in aad wixii hore oo dhan iska dhaafto oo aad i dhagaysato. Haddii aad u fiirsatay Joon Ismiit waxa uu garanayay xog ku saabsan Hindida intii aanay doontiisuba deegaankooda ku xidhan. Xogtan uu hayay oo dhan waxa hore u soo ururiyay nin lagu magacaabo Sir Waalter Raalij[57], ninkani waa Ustaadka ugu weyn ee ururka sirta ah ee loo yaqaanno Macatabka Ubaxa ah "Rose Crosen[58]" waana ururka

[56] Joorj Waashintong : Goerge Washington
[57] Sir Waalter: Sir Walter.
[58] Macatabka Ubaxa ah: Rose Crose.

farcamay Maasooniyadda balse ka sir iyo xidhxidhnaan badan.

Waxa uu gartay Waalter in dhulka Maraykanku uu yahay dhul ka madhan caqabado, oo aanu wax talis ahi joogin, oo aan taariikh lahayn oo aanay caqiidooyin ka jirin. Waa dhul aanay oollin teed diidaya in laga dhiso bulsho cusub, oo wata fikirkiisa isaga, waana fursad ay haystaan kooxaha dahsoon oo dhami oo mar la arag ah. Waa fursad ay kooxaha sirta ahi ku dhisan karaan dawlad ay iyagu iska leeyihiin, oo ka fog saxmadda Yurub iyo caqiidooyinkeeda. Waxa muuqatay in kooxa sirta ah oo dhani ay marayaan marxaladdii ugu mudnayd taariikhdooda, waa marxalad loo bixiyay Ameerika. Waxa samaysmay saddex iyo toban mustacmaradood oo Ingiriisku leeyahay, oo ay hoos qulqulayso webiyo dhiigga Hindida ahi. Markaas waxa uu ururka Maasooniyaddu u diray Ameerika nin la yidhaahdo Laafayt[59], waa nin heerka 33aad ka gaadhay Maasooniyadda. Ninkani waa ninkii mideeyay mustacmaraadka 13ka ah ee Ingiriiska. Waxa ay Maasooniyaddu mar kale soo dirtay nin kale oo muhiim ah oo la yidhaahdo Firidirik Shotoobin[60], waa Jeneraal dagaal yahan halis ah, waxa uu yimid mustacmaradihii maleeshiyaadkoodiina waxa uu ka dhigay ciidan xooggam, ka dibna waxa dhacday kacaankii Maraykanka.

Kacaanka Maraykanku waxa uu ka bilaabmay waxa loo yaqaanno xafladda shaaha ee Booston. Waxa u soo dusay rag Maasooniyiin ah oo xidhan dharka Hindida doon siday shaah, dhammaan xamuulkii shaahana waxa ay ku daadiyeen badda. Xukuumaddii Ingiriiska ayaa cadhootay ama waxa ay iska

[59] Laafayt: Lafayette.

[60] Firidirik Shotoobin: Freidrich Steuben.

dhigtay mid cadhootay tallaabo adag ayaa aanay qaadday, ka dibna waxa dhacay waxa loo yaqaanno Kacaanka Maraykanka.

Maraykanku waxa oo gobonimadiisa ka qaatay Ingiriiska waxa aanu noqday dal weyn oo xooggan oo madaxbannaan. Warqadda gobonimada Maraykan waxa saxeexay 40 nin 19-ka ugu horreeyaa waxa ay ahaayeen Maasooniyiin. Kani ma aha hadal aan iska leeyahay balse waa hadal sugan oo kaydsan. Dastuurka Maraykan waxa saxeexay 56 qof oo ay 26-ka ugu horreeyaa yihiin Maasooniyiin. Waxa ka mid ah madaxweynihii ugu horreeyay ee Maraykanka Joorj Waashintong waxa uu ahaa Maasooni, dhammaan dadkaasna si rasmiya ayaa loo yaqaannaa. Sannadkii gobonimada uu qaatay Maraykanku ee 1776-kii isla sannadkaa waxa gobolka Bafaariya ee Jarmalka laga aasaasay kooxda sirta ah ee Illuminaati, astaanteedu waa haramka aan dhammayn ee ay ka sarrayso isha nuurku ka baxayaa. Waxa kooxdan salka u dhigay nin la yidhaahdo Aadam Wayshawbat[61] waxa aanu ku daray Maasooniyadda si ay u noqdaan koox keliya oo xooggan. Imika aynu eegno waraaqda doollarka Maraykanka , gaar ahaan waraaqda halka doollar($1) ah oo ah ta qaran kasta matasha. Gadaal u rog, soo ma aragtid haramka iyo isha ONE bidix ka xiga? Astaantani lama xidhiidho taariikhda Maraykan ee waa astaantii Illuminaatiga! Isha dusheeda waxa aad ku arkaysaa weedha ANNUIT COEPTIS waa weedh laatiini ah oo la macne ah " Isagu. Waa ka oggolaaday in uu na ilaaliyo". Haramka hoostiisa waxa ku qoran NOVUS ORDO SECLORUM oo la macne ah " Hannaanka dunida cusub".

[61] Aadam Wayshawbat: Adam Weishaupt.

Haddii aad xubin ka tahay Maasooniyadda ama Illuminaatiga waa aad garanaysaa waxa looga jeedo astaamahan markasta oo aad heer sare u sii kacdo. Isha marka hore waxa lagu odhanayaa waa isha Ilaahay ee waxkasta arkaya, ka dibna waxa lagu odhanayaa waa isha Osiiris[62], ka dibna waxa ay noqonaysaa isha Luusifar 'Ibliis' . Ibliis waxa uu raacaa dhiigga aadamaha sidaa darteed wax kasta oo qofku samaynayo waa uu la socdaa. Mar danbe oo aad heersare gaadhid ayaa aad ogaanaysaa in ay ishani tahay isha Antikiriistoos, nidaamka dunida cusubina uu yahay nidaamka Antikiriistoos. Isha nuurka ku hareeraysan macneyaal badan ayaa uu leeyahay, marka hore waxa lagu dhahayaa waa nuurka Ilaahay, ka dibna waxa uu noqonayaa nuurka Yahuwa [63] , Yahuwaana waa Ilaahay sida ay qabto Yuhuuddii hore. Qof kasta waa ka mabnuuc in uu magacan ku dhawaaqo waayo waa magaca Eebbe ee sare, ka dibna ugu danbaysta waxa lagu odhanayaa waa ileyska Luusifar. Haramku waxa uu astaan u yahay xadka galbeed ee riyada Israa'iil ' Niilka illaa Furaad'. Xadka galbeed waa Niilka, maxaayeelay Niilku waxa uu markii hore mari jiray haramka, sidaas ayaa haramka loo dhigay bidixda doollarka. Mar ka danbe waxa aad ogaanaysaa in uu haramku yahay goobta lagula kulmo Ilaaha Luusifar. Gorgorka ama galaydhka midigta ka xiga ONE waxa dusha ka saaran xiddigo 13 ah oo u dhigan sidii xiddig lix geed ah, taas oo ah xiddigta Daa'uud, waana qaabka uu u samaysan yahay Haykalku. Waxa madaxa gorgorka xiddigaha loo dhigay si loo muujiyo in xiddigtan lix geeska ahi ay dul taallo Maraykanka oo ay ka sarrayso

[62] Osiiris: Osiris.

[63] Yahuwa: Yahshua.

astaanta Maraykanka.Astaamahan waxa sameeyay guddi xubnaheedu ay dhammaan si rasmiya uga tirsan yihiin Illuminaatiga waxaana ugu caansanaa Benjamin Farankalin[64], Joon Aadamis[65] iyo Toomas Jeferson[66].

Madaxda Maraykanka soo maray dhammaantood waa Maasooniyiin kii ugu horreeyay Illaa Obaama. Nin keliya ayaa aan ahayn Maasooni kaasina waxa uu ahaa Joon Kenedi, isna markii uu sheegay in ay dalka maamulaan kooxo sir ahi waa aad ogtahay sidii loo dilay. Dadka Joon Kenedi dilay waa isla dadka dilay boqor Faysal binu Cabdicasiis markii uu shidaalka ka jaray Maraykanka, waana kuwa dilay Saadaat. Uma jeedo isla qof ayaa dilay balse isla kooxo ayaa dilay.

Imika waxa la gaadhay waqtigii aan kuu sheegi lahaa war muhiim ah, dheesha ciyaaraha nacdalan ee aynu ciyaaranno waxa la yidhaahdaa ciyaarta Illuminaatiga: nidaamka dunida cusub. Waxa ay ka kooban tahay illaa 500 oo waraaqood, oo ay waraaq kastaa sir gaar ah xanbaarsan tahay. Qaar ka mid ahi waxa ay sidaan sirta dhacdooyin dhacay oo dunida wax ka beddelay, waxa ka mid ah waraaqo lagu kaydiyay siraha Maasooniyadda iyo Illuminaatiga iyo waraaqo ay ku qoran yihiin qorsheyaal mustaqbalka la dhigay. Waxa ciyaartan sameeyay Istiif Jaakson oo ka tirsan Illuminaatiga. Ciyaartan inkasta oo la sameeyay 1990-kii haddana waxa ay ka warramayaan dhacdooyin beri danbe dhacay sida gubashadii daaraha Maraykanka, gubashadii Bentagoonka iyo kacdoonkii Carabta ee dhawaaba. Waxa ka mid ah waraaqaha mid muujinaysa boqorad Diyaana iyo Saddaam Xuseen. Mid waxa

[64] Benjamin Farankalin: Benjamin Franklin.
[65] Joon Aadamis: John Adams
[66] Toomas Jeferson: Thomas Jefferson.

la dilay 1997-kii halka Saddaam Xuseenna la dilay 2006-dii, ciyaartuna waxa ay soo baxday 1990-kii.

Imika aynu sheekada dhammaystirno, dhammaan shayaadiinta caalamka, Illuminaatiga , Maasooniyadda , sixirooleyaasha iyo shar oo dhan ayaa doonaya in ay i dilaan, in ay i dilaanna waa ay soo dhawaatay. Markaa aynu dhammaystirno sheekada. Imika sheekooyinka sare oo dhan waxa aad soo baratay sidii uu sixirku dunida uga bilaabmay. Waxa aad baratay sidii uu Luusifar ugu soo degay sixiroolihii ugu horreeyay ee uu u baray waa Namruude. Waxa aad soo aragtay sida uu sixirku ugu dhex faafay reer Baabil heer ay gaadheen in ay dadka ku maamulaan. Waxa aad soo aragtay sidii uu Eebbe u soo dejiyay labada malag ee Haaruud iyo Maaruud si ay dadka u baraan sixirka lidka ah. Waxa aad soo aragtay sidii uu Eebbe u soo diray nebiga weyn ee Saleebaan, oo sixiroolayaashii oo dhan laayay. Waxa aad aragtay sida ay jinku u dhagreen Saleebaan ee ay kutubtii sixirka iyo culuumta shaydaanka ugu aaseen carshigiisa hoostiisa. Kun sanno ka dib sidii uu ugu soo degay shaydaanka Baafomiid 9 fardofuul oo Faransiis Yuhuud ah, ee uu u baray meesha ay kutubtii sixirku ku aasan yihiin. Ka dib markii ay kutubtii la soo baxeenna waxa ay sameeyeen koox noqotay ta ugu hodansan Yurub, ururka Fardofuulka Haykalka, taas oo magaceeda markii danbe u rogtay Maasooniyadda. Waxa ururkaasi noqday hooyada ururo badan oo sir ah, waxqabadkii ugu weynaa ee ay fuliyaanna waxa uu noqday aasaaskii Maraykanka.

Si la mid ah waxa aad la socotay dhaqdhaqaaqii maska Siirbenti iyo sida uu u fasahaadinayay caqiidooyinka Yuhuudda, ka dibna Masiixiyadda ka dibna caqiidada Islaamka. Caqiida kasta waxa ka hoos baxay kooxo waxaana la gaadhay xilligii ay midoobi lahaayeen maska Siirbent iyo Maasooniyaddu si ay u fuliyaan hawlgallo waaweyn oo u dhiman. Waa hawlgallo u adeegaya yoolka weyn ee shayaadiinta iyo kooxaha sirta ah, waa dhismaha Haykalka

Saleebaan ee Quddus. Garanmaysid waxa ay kooxahan oo dhami u doonayaan in ay u dhisaan waxa kan ee xun, goor dhow ayaa aad se ogaan doontaa.

Aynu dheelno mar kale ciyaarteennii, waxa hadda inoo saaran miiska 12 waraaqood. Markan waraaquhu waa ay badan yihiin laakiin waa sheeko subag leh.

- **Waraaqda koowaad**: waa Ingiriiska, waxa ka muuqda sawirka hanad Ingiriis ah oo faraxsan, gadaashiisana waxa ka muuqata saacadda Big Ban ee caanka ah.
- **Waraaqda labaad:** waa waraaqda laaluushka, waxa ka muuqda laba gacmood oo isa salaamaya oo ay gacmahooda ku dhex jirto lacag cagaarani.
- **Waraaqda saddexaad:** waa waraaqda dadka. Waxa ka muuqda dad badan oo gacmaha kor u taagaya oo aad mooddin ay kacdoon wadaan.
- **Waraaqda afraad**: waa waraaqda bangiga Ingiriiska, waxaana ka muuqda mishiin weyn oo lacagi ka buuxdo.
- **Waraaqda shanaad**: waa waraaqda kacdoonka liddiga ah. Waxa ka muuqda sawirka niman askar ah oo u hanjabaya rag shicib ah.
- **Waraaqda lixaad:** waa waraaqda Jarmalka. Waxa ka muuqda wershada Jarmalka iyo gaadhiga Foolkis Faagan.
- **Waraaqda toddobaad:** waa waraaqda Faraankfort. Waxa ka muuqda sawirka magaalada Faraankfort ee Jarmalka oo habeen ah.
- **Waraaqda siddeedaad**: waa waraaqda Faransiiska, waxaana ka muuqda sawirka taallada Iifal oo xagal hoose ah.
- **Waraaqda sagaalaad**: waa waraaqda dad cunaya keeg. Waxa ka muuqda hanad Faransiis ah iyo marwo Faransiis ah oo sida dabaq keeg la cunay ah.

- **Waraaqda tobnaan**: waa waraaqda deymiyayaasha xun xun. Waxa ka muuqda sawirka nin cadhaysan oo dayn leh iyo nin cabsanaya oo dayn lagu leeyahay.
- **Waraaqda kow iyo tobnaad**: waa waraaqda borobagaandada.
- **Waraaqda laba iyo tobnaad**: waa waraaqda sunta.

Waxa kaaga sheekayn doona sheekadan maska Siirbenti, markan waxa uu ku siqayaa Yurub sidaa darteed hab cusub ayaa uu kuugu sheekayn doonaa.

***

Filin Uu Soo Saaray Shaydaan

(1648 – 1800 C.D)

Gudcurka habeenkan mugdiga ah ee qabow dhammaan jabaqdi waa ay joogsatay, keliya waxa aad maqlaysaa guuxa iyo gariirka carrabkayga bannaanka yaalla. Waxa ay u muuqataa in guuxaygu kaaga tagay xaalad sakhrad ah oo yaab leh markii aad arrinkayga maqashay. Maanta waxa aan kuu wadaa goosgoos siro ah oo aanu garaadkaaga bashariga ah ee koobani wada qaadi karin. Waxa aan kuu diyaarin doonaa cabbitaanka ugu macaan ee aad jeceshahay. Waxa aan isku duubi doonaa qoortaada si aan u diiriyo, waxa aanan caawa ku tusi doonaa fajaciso. Maadaama oo aad tahay qof casri ah waxa aan kuula dhaqmi doonaa hab cusub markan. Waxa aan kuu diyaariyay filin xogeed shaydaani ah oo aanad ka helahayn maktabadayda mooyee meel kale, maktabada maska. Ku dangiigso saaxiib kursigan, oo fiiri dhaladaas cusub ee hortaada taalla. Si wacan ii dhagayso, waxa aan kaaga sheekayn doonaa sheekada oo dhan, weliba hab casri ah oo aan ku eryayn.

Dhaladi waxa ay bilowday in ay shaqayso, waxa aanay ku soo hordhigtay muuqaal cabsi leh. Waa dad ku ururs an meel waddo ah. Dharkooda markii aad eegtay waxa aan garatay in ay yihiin dad xilli hore oo duug ah noolaa. I daa aan kaa furto dhibta malaha e', kuwani waa bulsho Ingiriis ah. Ma aragtaa sida ay u taagan yihiin iyaga oo aamusan, ma maqlaysid xataa dhaqdhaqaaqa jidhkooda. Waxa ay sugayaan boqorka, aan kuu saafee waxa ay sugayaan dilka boqorkooda, boqor

Jaarles[67]. Waa ay jecel yihiin, waxa aanad mooddaa in lagu qasbay dilka boqorkooda qasab. Waxa furmay albaab loox ah waxaana ka soo dhex baxay nin, waa nin xidhan dhar boqortooyo iyo koofiyad. Ninkii waxa uu dulmaray buundo loox ka samaysan oo la siman madaxa dadka. Waxa ay u eegaan si aamusan oo cabsi leh, badhkood waa ay ooyayaan badhna waa ay taahayaan. Badhkood waxa ay gacmaha u fidinayaan in ay taabtaan lugaha boqorka ee buundada maraya. Boqorki waxa uu gaadhay dhammaadka buundadii, waxa aanu eegayay sagbad uu saaran yahay cudbi cadi. Waxa ag taagnaa sagbadda nin xoogweyn oo gacanta ku haysta faash afaysan. Waa aad garatay waxa ay sagbaddu tahay, waa goobtii uu madaxa saarayay boqorku si uu ninka faashka sitaa qoorta uga jaro.
Boqorku waxa uu u dhaqmayaa si qab leh, dhabtii waa sidaa boqorradu xataa marka la dilayo. Waxa uu saaray madaxii sagbaddii, waxa aanu ku yidhi ninkii faadhka sitay tilmaantayda sug.
- Tilmaantayda sug.

Dhabtii waa ay iga yaabiyeen boqorrada illaa ilbidhiqsiga ugu danbeeya noloshooda boqorro ahaadaa. Waxa uu tilmaantii siiyay ninkii, wakaa faashkii cuskaday qoortii boqor Jaarlas si uu u gooyo. Jamaahiirtii waa ay qayliyeen, qaar waa ay ooyeen, waxaa na dhacay buuq. Waxa aamusiiyay nin sita dhar hoggaamineed, waxa uu taabtay dhiiggii boqorka gacanta ayaa aanu kor u qaaday, waxa aanu yidhi:
- Ma aragtaan? Waa dhiig cas sideenna ee ma aha buluug. Ma aha ergay uu Alle soo diray sidii uu ina odhan jiray.

[67] Jaarles: Charles I.

Kamaradda waxa lagu soo dhoweeyay wejiga ninkaas inyar, ninka waxa la yidhaahdaa Koroomayl [68] . Sida filimaanta Hollywood ee aad ka hesho waa uu qarsoomay muuqaalki Koroomayl, si laguu dul-geeyo muuqaal kale oo hore. Waa muuqaalka ninkan oo warqad u qoray koox aanad garanayn cid ay tahay. Warqadda waxa ku qornaa: "waa aan ogolahay in Yuhuuddu ay Ingiriiska soo degaan aniga oo ku doorsanaya lacag la i siiyo. Taasi se suurtogal ma aha inta uu boqor Jaarles nool yahay; boqor Jaarlesna lama dili karo iyada oo aan maxkamad la saarin." Dhaladu waxa ay mar kale kuu soo bandhigtay muuqaalka ninkan oo jawaabta farriintii guddoomaya, waa uu furay farriintii waxaana ku qornaa: "Waxaa aanu ku siin doonnaa taageero dhaqaale marka aad Jaarles disho ee aad ogolaato in Yuhuuddu Ingiriiska degto. Waa in aad soo abaabushaa hab aad ku fadeexadaynayso Jaarles kaddibna loo qabto. Taasi waa sabab lagu qanci karo oo lagu maxkamadayn karo."

Imika dhaladii waxa ay ku dulgeysay muuqaal waqti hore ah. Waa boqor Jaarlas laftiisii, oo fadhiya madal loox ah oo ku dhextaalla hool ay ka buuxaan rag xidhan dhar rasmi ahi. Waa maxkamadayntii boqor Jaarles. Koroomayl waxa uu fuliyay wixii ay u yeedhisay dhambaalkii uu helay, waxa aanu isku dubbariday fadeexaddii boqor Jaarley iyo qabashadiisii, imikana waa la maxkamadaynayaa. Waxa uu ku yidhi afhayeenku:

- Maxaa aad ka leedahay tuhunka lagugu soo eedeeyay ee ah in aad ku tagri fashay awoodda uu ku siiyay xeerku kaas…..

[68] Koroomayl: Cromwell.

Waxa ka dhex galay hadalkii boqor Jaarles, waxa aanu u yidhi si qab boqor leh:
- Xeerkee ayaa aad ka hadlaysaa. Yaa aad tahay adigu si aad xeer uga hadasho? Anigu waxa aan ahay boqorkii dhammaan ragga hoolka ku jiraana waa raggaygii adna ka mid ayaa aad tahay.
Koroomayl ayaa si adag u yidhi:
- Waxa halkan laguugu maxkamadaynaa waxa aad si xun u adeegsatay awoodda, waxa aanad cabudhisay shacabkii...
Boqorkii ayaa hadalkii ka dhex galay:
- Aniga ayaa garanaya xorriyadda dadkayga in ka badan inta uu garanayo mid idinka mid ahi. Xukuumad uu baarlamaan hoggaaminayo, oo uu hagayo ciidan waa sallidka ugu daran, kaas oo ka daran qooq kasta oo aad sheegaysaan in uu aniga iga soo fulay.

Waxa laga yaabaa in aad la amakaagtay qofnimada boqorkan, nasiib darro waxa ay ahaayeen ragga ku hareeraysani xubnahii baarlamaanka Ingiriiska oo ka soo horjeeday. Koroomayl waxa uu ahaa xubin iyaga ka mid ah, waxa aanu ahaa kuwa sida daran uga soo horjeeda boqorka. Dhambaallada uu helayay ee uu ka falcelinayay waxa ay ahaayeen farriimo uga imanayay hantiilayaasha dahabka iyo lacagta Yuhuudda. Waa Yuhuuddii laga eryay Ingiriiska 400 sanno ka hor, waxa ay ku dhagganaayeen in ay mar labaad ku soo noqdaan waqtiba ha qaadatee. Waxa ay lacag ku harqiyeen Koroomayl si uu boqorka u rido. Dhalada waxa kaaga muuqda Koroomayl oo riday hannaankii boqortooyada Ingiriiska, oo ku dhawaaqay hannaanka Jamhuuriga ah. Taliska Jamhuuriga ahi waxa uu ahaa mid kelitalis ah baaddil ah. Koroomayl waa kaas waxa uu fulinayaa ballantii uu u qaaday Yuhuudda, waxa uu soo ururiyay dad waxgarad iyo aqoonyahan ah si uu ula falanqeeyo habkii Yuhuudda loo soo celin lahaa. Dhalada waxa uu ka muuqdaa isaga oo leh:
- Waxa lagama maarmaan ah in Yuhuudda loo bandhigo diinta Masiixiga. Sidee ayaa aynu ugu bandhigi karnaa diinta

Masiixiga innaga oo aan xataa u ogolayn in ay inagu dhex noolaadaan.
Mid ka mid ah goobjoogayaashii ayaa yidhi:
- Kuwaas Yuhuudda ahi waxa ay inaga faromaroojin doonaan ganacsiga, waxa aanay kooto ku xidhan doonaan hantida oo dhan.

In kasta oo aannu wax sharci ahi ka soo bixin soo noqoshada Yuhuudda ee dalku, haddana waxa uu u ogolaaday in ay si aamusan u soo galaan. Dhaladu waxa ay ku dulgeysay muuqaal yaab leh. Waa raq googo'day, oo ay qoorteedu ka laalaaddo madal loox ah oo si wacan loo dhisay. Kamaraddu waxa ay ku soo dhowaysay wejiga raqda, marka aad u fiirsato waxa aad garanaysaa in uu yahay Koroomoyl . Haddii aad i weydiiyo maxaa ay raqdiisu sidan u la urtay? Waayo markii uu dhintay ee la aasay, waxa taliska Ingiriiska qabsaday Jaarlaskii Labaad inanka Jaarlaskii Koowaad. Waxa uu Ingiriisku ku soo noqday hannaankii boqortooyada markii habkii Jamhuurigu uu fashilmay. Waxa uu amray Jaarlaskii Labaad in laga soo saaro dhammaan kuwii ka danbeeyay shirqoolkii aabbihii xabaalaha, oo la sudho raqdooda iyaga oo daldalan Taaybiirin. Haddii aad booqato Landhan maalin uun oo aad tagto waddada Idguwaar ee lagu naanayso jidka Carabta, waxa aad halka uu ku bilaabmo ku arkaysaa meeshii daldalaadda. Halkaas ayaa la sudhay khaayimiinta. Dhalada waxa kaaga muuqda muuqaalka rag murugaysan oo madow, waa rag aan rabin sida xaalku noqday. Waa Yuhuud hantiilayaashii dahabka iyo lacagta, waa Yuhuuddii ribooleyda ahayd. Inkasta oo ay ku guulaysteen in ay Ingiriiska so galaan markii laga caydhiyay kaddib, haddana qorshohoodu waa uu ka weynaa in ay soo galaan oo keliya. Qorshohoodu waxa uu ahaa in ay gacanta ku dhigaan dhaqaalaha dalka, kaddibna ay ku gumaystaan.

Kamaraddu aad ayaa ay ugu soo dhowaatay raggaas, waxa aanad ka aragtaa dhalada raggaas hoostooda rag kale oo badan oo kuwaa ka jimidh yar. Dhalada waxa kaaga muuqda

'Bulshada Yuhuudda' , kaddibna waxa ku hortaalla khariiradda Yurub, filinkina waxa uu bilaabay faahfaahin. Kuwaas Yuhuudda ah waxa laga eryay xilli ku siman 400 sanno Ingiriiska kaddibna Holand kaddibna Usteri, kaddibna Faransiiska kaddibna Saksooniya, Hangari ugu danbaynna Isbayn. Maxaa loo eryay? Maxaa yeelay xumaantoodii ayaa bad iyo berriba saamaysay. Dhaladii waxa ka soo muuqday raggii waaweynaa ee hore, waxaana ku hoos qoran ' Hantiilayaasha Yuhuudda ee Ribooleyda ah'. Waxa wejigooda ka muuqdo cadho, waxa ay go'aansadeen raggaasi in ay u soo aargudaan bulshadooda.

Dhammaantood waxa ay ahaayeen hoggaamiyaal Maasooniyiin ah. Falaadha ragga hoose iyo kuwa sareba waxa ay ka soo baxday Holand, falaadh kalena waxa ay ka soo baxday Jarmalka. Markii ay noqdeen ee hore waxa ay ku noqdeen labadan waddan, maxaa yeelay waxa ay ahaayeen laba dal oo u dhibyar.

Raggii sare ee waaweynaa ayaa ay kamaraddu haysaa iyaga oo Holand ku sugan, ninkasta waxa ka hoos muuqda gabadh reer Holand ah. Haa waxa ay Yuhuuddii ribooleyda ahayd ka guursadeen bulshadii Holand, halkaasna waxa ay ka sameeyeen qoysas. Ninkaas Yuhuudda ribooleyda ah ee kuu muuqdaa waa Manaasix bin Israa'iil [69] , qoyskiisuna waa qoysaska ugu waaweyn ee Holand. Hadda waxa kuu muuqda nin kale oo la yidhaahdo Wilyam, kaasi waa inankii Manaasix. Wilyam waxa uu ka tagay Holand waxa aanu tagay Ingiriiska, hadda waxa ka ag muuqata gabadh Ingiriis ah, gabadha dusheedana waxa ay kamaraddu qabatay nin la yidhaahdo

[69] Manaasix: Menasseh.

Doog Yoork[70]. Haa waxa uu guursaday Wilyam inantii Doog Yoork. Waa kuma Doog Yoork? Ninkani waa ninkii noqday boqorka Ingiriiska kaddib Jaarlaskii Labaad. Ma aragtaa sida ay Yuhuuddii ugu dhowaadeen taliskii Ingiriiska, balse waxba ma aad arag adigu weli. Waxa aad ka aragtaa shaashadda qoraallo iyo dhambaallo wargeyseed oo badan, kuwaas oo sumcadda ka dilaya boqorka dalka Doog Yoork, taasina waxa ay ku qasabtay in uu Faransiiska u baxsado. Hadda waxa shaashadda kaaga muuqda boqorka cusub ee Ingiriiska, Wilyam inanka Yuhuudiga Ribooleyda ah ee Manaasix. Shashadda waxa la soo dhigay rag iyo dumar ku xardhan khariiradda Ingiriiska, waxaana lagu hoos qoray ' Qoyska Boqortooyada Ingiriiska', dhanka kalena waxa ka muuqda rag iyo dumar badan oo lagu hoos qoray 'Qoysaska Boqortooyada ee Yuhuudda ah', dushana waxa ka muuqda nin keliya oo la yidhaahdo Wilyam.

Dhammaan qoyskii boqortooyada Ingiriiska waxa lagu dooriyay mid kale oo Yuhuud ah, waana qoyska ay ka farcamaan dhammaan boqorrada Ingiriiska ee maantu. Waa qoys Yuhuud ah. Weli waxba ma aad arag. Kamaraddu waxa ay dusha ka qabatay kiniiisad, kaddibna waxa ay kuu soo dhowaysay albaabkeeda xidhan, kaddibna gudaha ayaa ay ku tustay. Waxa aad aragtaa Wilyam oo miis qudhaata la fadhiya koox rag ah. Kuwani waa wakiilada waaweynka Yuhuudda ribooleyda ah. Eeg waxa uu la samaynayo imika Wilyam, waxa ay qorayaan waraaqo door ah. Waraaqihii ayaa kuu muuqda, warqadda koowaad waa qaansheeg dayn ah oo uu boqor Wilyam kaga amaahanayo Ribooleyda Yuhuudda lacag dhan hal milyan iyo laba boqol iyo kon Jinayh (Pound) oo

[70] Doog Yoork: Andrew, Duke of York.

Istarliini ah. Si lacagtan loo daymiyana waxa ay Yuhuuddu ku xidheen shuruudo shaydaani ah, waana kuwan kaaga muuqata warqadda labaad. Xogteedu waa: in magacyada kuwa daynta leh ay qarsoonaadaan weligood iyo in kuwa daynta leh loo ogolaado in ay seeska u dhigaan bangiga Ingiriiska iyo in la siiyo maamulayaasha bangiga Ingiriiska awoodda ay ku soo daabici karaan lacagta kuna jaangoyn karaan sicirka dahabka iyo ka lacagtaba. Si uu isaga bixiyo Wilyam lacagta daynta ah iyo dheefkorkeedaba waa in ay xukuumaddu cashuur toos ah ku soo rogtaa bulshada Ingiriiska. Ugu danbayntii waxa shaashadda kaaga muuqda taariikhda daynta la siiyay Wilyam waana 1660-kii, taariikh kale ayaana taa ku ag qoran oo ah 1950-kii. Hadda waxa shaashadda kaaga muuqda xaalka deynta. Dayntu waxa ay ahayd Hal milyan iyo laba boqol iyo konton Jinayh imikana waxa ay maraysaa 33 milyan oo Jinayh, oo ay Ingiriiska ku leeyihiin ribooleyda Yuhuuddu. Sidaas ayaa ay Yuhuuddu u fuushay dhabarka dameerka Ingiriiska.

Hadda waxa kuu muuqda maabkii Yurub, waxaana ka dul muuqda maskii. Kaasi waa aniga miyaa aanad i garanayn? Muuqaalki waxa uu ka dhaqaaqay Ingiriiska waxa aanu u socday dhanka Faransiiska. Kamaraddi wataa u soo degaysa sida ay diyaaraduhu u soo degaan, waxa ay dulmaraysaa Yurub waa aanay soo dhowaatay dhowaatay oo hadda waxa muuqda Faransiiskii. Kamaraddu Faransiiska ma ay gelin, inyar ayaa ay ka leexatay. Waxa ay tagtay dariiqa taga Faraankfoort ee Jarmalka halkaas oo Baariis loo sii maro. Waa jawi roobban, onkodku waa uu hanqadhayaa sida onkodka lagu yaqaannay. Waxa jidka maraya fardofuul ku sii jeeda Baariis isaga oo dhex maraya waxa dhacaya oo dhan. Hillaac ayaa baxay waxa aanad mooddayba in duhur la joogo. Waxa baxay gariir weyn, waxa aanu ahaa danab xoog badan. Isha ayaa aad la raacday si aad u ogaato meesha uu ku dhacay. Waxa uu danabku ku dhacay ninkii faraska watay ee jidka hayay ee doonayay in uu ka dheereeyo cadhada Ilaahay. Ha

isku sii mashquulin waxa ku dhacay, waxa ku dhacay onkodkii isaga iyo faraskiisiiba waa ay gubteen. Waxa aad aragtaa muuqaalka laba nin oo askar ah oo maraya jidkaas markii ay roobkii iyo onkodkiiba joogsadeen, waxa aanay eeg eegayaan ninkii dhintay. Waa ay qaadeen, waxa aanay agabkii uu sitay u dhiibeen saldhigga booliska.

Xaalad kacsanaan ah ayaa ka jirta saldhigga kaddib markii la baadhay agabkii ninka. Waxa uu sitay xog aad u fajaciso ah, waa xog argagax leh. Faduulinimadaada waxa aad doonaysaa in aad ogaato xogta uu siday, haddaba si aad u ogaato xogta uu siday kamaradda aan ku soo dhaweeyo xogta, waa shandaddii ninka oo dul taala miiska saldhigga. Warqad warqad ayaa ay kamaraddu kuu dul geysay, waa aan ku ogahay ma jeclid akhriska iyo warka badan ee aan kuu soo koobo. Warqadahan waxa diray nin la yidhaahdo Rootsheeld [71] oo ah madaxa mid ka mid ah madalaha Maasooniyadda ee ku yaalla Faraankfoort ee Jarmalka, waxa aanu u dirayay taliyaha weyn ee Maasooniyadda Faransiiska ee Baariis Doog Doorliyaan Xogtu waxa ay ahayd nuqul la soo koobay oo ka mid ah Borotokoolka Guurtida Sahyooniyadda, haddii aad akhriday. Nuxurka waxa ay xogtani xanbaarsan tahayna waxa uu ahaa ka hadalka guud ee shirqool kacdoon caalamiya oo lagu ridayo madaxda Yurub oo dhan. Waxa ku qornaa dhaliilaha kacaanka Ingiriiska iyo sida uu gaabiska u yahay. Iyo qorshaha sidii kacaan weyn looga samayn lahaa Faransiiska.

Xogtu waxa ay si guud uga warramaysaa in dimoqraadiyaddu ay huuhaa iyo in boqortinimada kelitaliska ee bulshooyinku uu yahay xalka. Haddaba waxa habboon in

[71] Rootsheeld: Rothschild.

loo dhoofiyo fikirka dimoqraadiyadda beenta ah dhammaan bulshooyinka Yurub, si ay u afgenbiyaan boqorradooda. Taasina ma suurtogelayso illaa laga abuuro dalalkaa dhibaato dhaqaale oo daran. Yuhuudduna waa ku macalimiin waaweyn isku dubbaridka dhibaatooyinka dhaqaale, waayo waa hantiilayaasha maalka iyo dahabka. Dadku waxa ay moodayaan in boqorradooda kelitaliska ahi ay sabab u yihiin saboolnimadooda, iyo in ay dimoqraadiyaddu ay tahay xalka. Waxa ay xogtu sheegaysaa muhiim ma aha cidda ku guulaysanaysaa kacdoomadani, qofka guulaysaa waa qasab waxa uu u baahan yahay hanti, innaga oo qudha ayaana maalka gacanta ku hayna. Waxa aynu u fidin doonna laan uu qabsado inta aanu qarqoomin, haddii uu qabsadana waxa uu inoo noqon doonaa addoon sida Ingiriiska, haddii uu sii daayana waa uu qarqoomi doonaa. Waa intaa xogta ku jirtay waraaqihii uu siday fardooluhu ee uu maamulku ogaaday. Waxa laga yaabaa in aad maqashay magaca Rootsheeld ninka soo diray waraaqahan. Rootsheeld waa qoyska ugu hodansan dunida, maya ee taariikhda oo dhan. Waa qoys Yuhuud ah oo ka mid ah waaweynka ribooleyda Yuhuudda. Inkasta oo aanay ahayn qoysaskii ka danbeeyay Kacaankii Ingiriiska, balse kacaan kasta oo kaa ka danbeeyay iyaga ayaa dabada ka riixayay. Taasi waa Rootsheeld oo... Joog maxaa aan hadalka kuugu badinyaa? Akhri oo adiguba arag.

Hadda waxa kuu muuqda goob yar oo sarrifle ah oo ku taalla Faraankfoort, Jarmalka. Meeshii ayaa aad ku soo dhowaatay, waxa aad hadda u jeeddaa astaan sooc ah oo ka muuqata dusha meheradda, waa astaanta gaashaanka cas. Hore ayaa aad u soo gashay, waxa aad aragtaa nin gudaha ku jira waxa aana ku hoos qoran magaciisa Aamshal Muusa

Baawar[72]. Waa Yuhuudi markii hore ahaa dahable imikana waxa uu furtay sarrifle. Kamaraddi waxa ay u dhaqaaqday in ay ku tusto wiilkiida Aamshiil Maayar Baawar, kaas oo dhinac taagan aabbihii oo si xamaasad leh ula socda waxa uu samaynayo. Kamaraddi waxa ay soo dhowaysay wejiga wiilka yar durtaba waa uu koray oo waa barbaar. Kamaraddi waa ay ka fogaatay hadda waxa aad arkaysaa isaga oo sii galaya bangiga Oobinhaaymar. Wiilkii yaraa waa uu weynaaday waxa aanu noqday shaqaallaha bangigag. Waxa uu ahaa mid xariif ah oo aad u xeeldheer sidaa darteed waxa laga dhigay wadaage qaybeed oo mulkiyadda baanka ah. Kamaraddi waxa ay hadda ku soo noqotay goobtii gaashaanka cas ee Faraankfoort, waxa aanad arkaygaa ninkii dhallinyarada ahaa oo meheradda furaya. Aabbihii waa uu dhintay sidaa darteed waxa uu go'aansaday in uu sii wado hawshii aabbihii waayo waxa uu noqday hantiile. Waxa uu eegay wiilkii xagga sare ee ay ku qoran tahay gaashaanka cas, waxa aanu goostay maalintaa kaddib in uu qoyskooda u bixiyo “Root Sheeld” oo af Jarmal ku noqotaysa “Gaashaanka Cas”.

Xariifnimadii Rootsheeld darteed hawshiisii waa ay hanaqaadday, hantidiisiina waa ay badatay badatay illaa uu ka mid noqday ragga ugu hodansan Jarmalka.

Hadda waxa kamaradda kaaga muuqda Rootsheeld markii uu noqday nin isaga oo la kulmaya laba iyo toban nin oo Yuhuuddii ribooleyda ahayd ah. Waxa uu hadal ugu faahfaahinayay dhammaan nuxurkii xogtii la helay aan kuugu soo koobay. Waxa uu doonayay in la abaabulo kacdoonno caalamiya oo gilgila Yurub, Ruushka iyo Maraykanka. Maya waxa uu doonayay wax intaa ka badan, taasina ma aha wax ay

[72] Aamshal: Amschel Moses.

habboon tahay in aan halkan kuugu sheegaa. Hadda waxa aad garatay cidda uu yahay Rootsheeld, waxa kale oo aad garatay in xogtii uu dirayay in ay kashifmatay, maxaa dhacay haddaba intaa kadib?

Hadda waxa aynu joognaa Baalii Rooyal ee Faransiiska, waa qasriyada boqortooyo ee ugu waaweyn taariikhda. Kaalay aynu ka galno afaafka innaga oo kamaradda raacayna, balse waa in aan indhahaaga laabataa saaxiib. Muuqaalka soo socdaa ee filinku waa mid aanay cidi xakamaynayn, ama waxa aad noo raacaysaa bandhig xor ah. Waa bandhig waxkasta ka xor ah: waxa uu ka madaxbannaan yahay xishood iyo maamuus. Waa bandhig ay ragga la dheelayaan dummar ka tuurey hu'gii xishoodka jidhkooda iyo laabahooda, waxa ay cabbayaan dhammaan cabbitaankii dhaqanxumada. Waxa ay ugu yeedhaan naftooda magaca kacaanyahan, maxaa yeelay kacaanyahanka dhabta ahi waa ka iska siiba akhlaaqda oo dhan. Waxaas oo dhan iska dhaaf oo ila eeg wejiyada dhowr qof oo xafladda jooga. U fiirso waxa aan ku odhan doono, ma rabo in aan hadalka mar labaad ku soo celiyo. Eeg ninka halkaas taagan, kamaraddu waxa ay haysaa nin xidhan dhar caynka kuwa muhiimka ah, waa nin weji iyo san weyn, nabar ayaana wejiga kaga yaalla. Ma aha nin soo jiidasho leh, sidaa darteed waa aad la yaabban tahay gabadhan quruxda badan ee xorta ah ee legga ugaga jirta sida faaxishka ah. Ninkani waa hantiile “Koont Dii Miiraabo”[73]. Gabadhan dhaqanka xun ee quruxda badani waa gacalisadiisa marwo Hiiras.

Ninkan ku jira da'dii afartameeyaha ee leh timaha weyn ee cufani waa salkii uu ka qarxay Kacdoonkii Faransiisku. Waxa uu ahaa nin deyni ay hafisay, xidhiidhkiisa dummarku waa

[73] Koont Dii Miiraabo: Comte de Mirabeau.

mid aanu isagu xataa xasuusan, aftahan jiitay weeye, waa mid saameyn leh oo dadka qanciya. Carrabkiisu waxa uu awood u leeyahay in uu kaa dhaadhiciyo waxkasta oo liita oo uu doonayo in uu kugu qanciyo. Sidaas ayaa uu u noqday mid la saaxiib ah dhammaan dabaqaddii gobta ee sare. Waxa intaa u dheeraa waxa uu ahaa kacaanyahan mucaarid ku ah nidaamka. Kamaradda mar kale ayaa aynu wareejinnay, waxa ay qabatay dad badan oo dhaqanbiis ah. Isku day in aad indhaha is yara qabato si aad ii dhugato. Waa aan kasayaa in waxa kan oo xumaan ahi ay xadka ka baxday, se garaadkaaga yara toosi oo waxkasta oo kale iska demi. Hadda waxa ay kamaraddu haysaa nin timo cad, oo koodadka ay timuhu ka go'een, taas oo muujinaysa in ay bidaari ku soo socoto. Dharkiisu waa dharka sooca u ah boqorrada iyo hoggaamiyayaasha. Ninkani waa Doog Doorliyaan, waa ina-adeerka boqorka Faransiiska ee hadda Luwiiska[74] 16aad. Gurigan dheeri waa qasrigiisa. Wakaas iskaga dhaqaaqay dadkii u la sheekaysanayay, waxa aanu u kacay dhanka Koont Dii Miiraabo kaas oo weli la ciyaaraya quruxleydii si qaawan.

Sir baa aan kuu sheegayaa, waxa ay soo dhowaysteen Yuhuuddii ribooleyda ahayd Koonti Dii Miiraabo, waayo waxa uu ahaa ninka keliya ee kicin karayay jamaahiirta, waxa uu ku habboonaa in uu noqdo hoggaamiyaha kacdoomayaasha si aanay cidna kula tartami karin. Waxa uu ahaa nin ay hafisay dayntu, waxa aanay amaahiyeen xoolo, waxa aanay ka bixiyeen dayn lagu leeyahay. Balse sida uu yahay dhaqanka Yuhuuddu cidna xoolo ma amaahiyaan, haddii ay amaahiyaanna deyntu waa ay labanlaabantaa illaa ay ka noqoto sida buurta. Sidani waxa ay ahayd xaalka

[74] Luwiis: Louis XVI.

Miiraabo, ka dhex taagan hadda qasrigan. Yuhuudda ayaa baray marwo Hiirista la qabo ee dhaqanbiisadda ah si ay ugu noqoto maaweelo iyo mashquul, sidaa ayaa ay xataa foodda madaxiisu u quustay daynta Yuhuudda. Maadaama oo uu ahaa mid la saaxiib ah Dooq Doorliyaan inaadeerka boqorka, oo ay isaga laftiisa dhibaato dhaqaale haysatay, waxa uu baray Miiraabo Yuhuudda. Waxa uu u sheegay sida ay u yihiin deeqsiyiin iyo sida ay dadka u amaahiyaan xoolo xad dhaaf ah. Sidaas ayaa uu Dooq Doorliyaan isna u bartay Yuhuudda, oo uu madaxa ula galay dhooqada Yuhuudda. Dhabtu waxa ay ahayd in ay Yuhuuddu u diyaarinayeen Dooq Doorliyaan in uu fuulo carshiga boqortooyada marka la rido boqor Luwiis. Waxa ay ka dhigteen qasrigiisa iyo guryihiisa kale goobo ay isugu yimaaddaan kacdoomayaashu, oo lagu qabto bandhigyada kacdoomayaasha ee dhaqanbiiska ah. Waxa kale oo guryahaas lagu daabici jiray baahinta farriimaha kacdoonka. Sidaas ayaa ay Yuhuuddu ku diyaariyeen labadii sees ee ugu muhiimsanaa kacdoonka; nin jamaahiirta kiciya Miiraabo iyo boqorkii mustaqbalka Doorliyaan.

Sida filimaanta dhaladu waa ay degdegtay dadkii xafladda joogayna degdeg ayaa ay u socdeen, waxa aanay soo gabogabeeyeen bandhiggoodii waa aanay ka tageen qasrigii boqortooyada. Kamaraddi waa ay ka soo baxday qasrigaas hoyga dhillaysiga ahaa waxa aanay ku gaysay qasri kale, waa qasriga Fiirasaay. Gaar ahaan waxa ay ku gaysay beerta dibadda, waxa aanad aragtaa nin buuran oo la fadhiya gabadh xidhan maryo heersare ah. Gabadha dhabarkeeda ayaa kuu muuqday, magaceeda ayaa shaashadda ka muuqda waa Maariya Andooniit boqoraddii Faransiiska iyo xaaskii boqor Luuwis. Kamaraddu waa ay soo wareegtay waxa aanay hadda haysaa wejigeeda, calaamad isku-tallaaba oo weyn ayaa la saaray magaca Maariya Andooniit ee hoosta ku qornaa. Waxa ay shaashaddu kuu soo qortay midab cas iyada oo kuu digaysa “Ma aha Maariya Andooniit”. Ninki waa uu qabsaday oo waa uu dhunkaday, waxa shaashadda

kaaga muuqda magaciisa “Roohaan”. Waxa uu la soo baxay gal qaali ah, markii uu ku furay galkii gabadha horteeda waxa dhalada ka soo muuqday, oo lagu qoray 'Heshiiskii Dheemmanka ahaa' . Waxa lagu qoray qiimaha heshiiska Milyuun Liire.

Kamaraddu waa ay ka soo baxday qasriga Faarasaay waxa aanay kuula haadday qasri kale oo boqortooyo, waa qasriga boqorka Faransiiska. Gudaha waxa ka jiray muuqaal xoogaa yaab leh. Waxa ay kamaraddu ka soo gashay daaqad, waxa aanad aragtaa gabadh u dhar eeg gabadhii aad ku soo aragtay qasriga Faarasaay. Hadda waxa kuu muuqata gabadhaas oo qof la hadlaysa wejigeeeda, waxa shaashadda ku soo qormay magaceeda 'Maariya Andooniit dhab ah'. Codka ayaa kor laguugu qaaday si aad u maqasho hadalka boqoradda. Waxa ay ku lahayd boqorad Maariya ninkii ay la hadlaysay si adag:
- Anigu kaama aan iibsan fargalkan, wax war ahna uma hayo warqadda xun ee aad doonayso in aad i tusto. Anigu ma aan qorin wax warqad ah oo heshiis la xidhiidha fargal iyo mid aan la xidhiidhin ba. Soco iga hor dhaqaaq inta aanan farin waardiyaha in ay xoog kugu saaraan.
- Raalli noqo marwooy, balse waxa lagaaga yeedhayaa maxkamadda sare.

Mar kale kamaraddi waxa ay kula aadday qasriga Faarasaay, waxa aanad aragtaa gabadhii beenta ahayd oo fargalkii galka nin ka qaadanaysa una mahadnaqaysa oo ka dhaqaaqday. Waxa aad mar kale aragtaa gabadhii beenta ahayd oo ka soo baxaysa guri ka mid ah guryaha Baariis oo fargalkii u dhiibaysa quruxley la yidhaahdo Jiin. Jiin waa ay dhoollacaddeynaysay iyada oo dheeldheelaysa waxa aanay eegaysay weynaanta iyo dhaldhalaalka fargalkan. Ii ogollow in aan kuu fasiro muuqaallada filinkan. Yuhuuddu waxa ay bilaabeen olole oo lagu fadeexadaynayo boqorad Maariya Andooniit, iyada oo sumcaddeeda dhooqada lagu ridayo sidii ay ahayd caadada Yuhuuddu. Waxa ay doonayeen in ay bulsho dhegoxidhan ku kiciyaan boqorkooda.

Waxa ay suuqa galiyeen in boqoraddu ay xidhiidh galmo oo aan bannaanayn ay la leedahay nin ka mid ah ragga kiniisadda oo loo yaqaanno Roohaan iyo in Roohaan uu u iibiyay fargal dheemman ah oo qiimihiisu dhan yahay saddex milyan oo Liire, kaas oo ah hadiyada uu siiyay iyada oo lagu jiro dhibaatadan dhaqaale ee daran ee dalku marayo, iyaduna si ay ugu hibayso jidhkeeda kasjiidadka ah ee boqoradnimo. Dhanka kale gabadha beenta ah ee u eeg boqorad Maariya waxa ay Yuhuuddu isku dubbarideen in ay la kulanto Roohaan, ragga kiniisadda ka ugu musuq badan. Markii hore waxa ay u qoreen dhambaallo jacayl ah oo been ah oo isaga ku socota oo ka yimid iyada. Kaddibna waxa ay foojari gareeyeen farta iyo saxeexa boqoradda, waxa aanay qoreen dhambaal ay kaga codsanayso in uu u iibiyo fargal dheemman ah oo ah ka ugu qaalisan Yurub, si uu jidhkeeda quruxda badan ugu raaxaysto. Sidaas waxa ay u samaynaysaa iyadu ma iibsan karto waayo waxa ay ka cabsanaysaa bulshada, iyadu se lacagta in ay gadaal ka bixin doonto ayaa ay ballan qaadday. Ninkii xumaa waxa uu u cararay dhanka dahable caan ah, waxa aanu u sharaxay fargalkii. Dahablihi waa uu sameeyay fargalkii, waxa aanay isku afgarteen Roohaan in uu lacagta dib ka bixin doono. Waxa uu guddoonsiiyay Roohaan fargalkii gabadhii beenta ahayd isaga oo moodaya boqoraddii. Gabadhu waa ay siisay wixii ay ugu ballan qaadday oo jidhkeeda ah. Gabadhii waxa ay fargalkii ku wareejisay marwadeeda shirqoolka soo abaabushay Jiin.

Markii ay gaadhay ballantii lacag bixinta waa ay dhuumatay gabadhii beenta ahayd, Roohaanna dhiigga ayaa ku kacay cadho darteed. Waxa uu u diray boqorad Maariya farriintii ay ku ballan qaadaysay xilliga ay lacagta bixinayso. Boqoraddi waxa ay xataa diidday in ay isaga garanayso iska daa heshiise. Ninkii dahab laha ahaa waxa uu gartii geeyay maxkamadda. Maxkamaddii ayaa la qabtay. Maxkamaddii waxa u caddaaday been abuurka waraaqaha, waxa aanay maxkamaddi soo xidhay Jiin tii shirqoolka ka danbaysay,

waxa aanay ku caddeeyeen in ay tahay tuugad. Inkasta oo ay boqoraddi giraantan madaxa kala baxday iyada oo beri ka ah waxa lagu soo eedeeyay, balse Yuhuuddu intii lagu gudajiray maxkamadda iyo kaddib ba waxa ay faafiyeen warar been ah oo sheegaya in ay awood dheeraad ah adeegsato boqoraddu iyo in ay tahay mid hantida daadaadisa. Waxa ay faafiyeen in maalin boqoradda la weydiiyay maxaa uu shacabka Faransiisku la cadhaysan yahay? Markii loo sheegay in aanay haysan lacag ay roodhi ku iibsadanaan, waxa ay tidhi maxaa dhib ah ee jira maa ay keegga iska cunaan. Waxa kan oo been ah iyo kuwo kale waxa ay abuureen in shacabkii Faransiisku uu gadoodo, gadood aan kala joogsi lahayn oo aan degayn. Waxa bannaanka magaalooyinka u soo baxay kacdoomayaasha oo doonaya madaxyada, waxa la gaadhay xilligii la goosan lahaa madaxyada. Waxaana iska cad in madaxyo badan la jaray intii kacdoonkaas lagu jiray. Kamaraddu waxa ay ku dulgeysay muuqaalka dilkii boqorad Maariya Andooniit. Wataas boqoraddu dhex maraysa bannaanbaxayaasha iyada oo fuushan gaadhi furan. Waxa ay kacdoomayaashu ku tuurayaan uskag iyo waxkasta oo ay ku tuuri karaan. Wataa gaadhay meeshi lagu daldalayay, waxa ay bilaabeen in ay ka xiiraan timaheeda dheer. Waxa ay sudheen madaxeeda meeshi loogu talogalay ee deldelaadda. Intii aanu madaxa u gelin deldeluhu ayaa ay eegtay waxa aanay ku tidhi: - Raalli noqo oo ha ii qabannin. Show lugta ayaa ay kaga istaagtay markii uu ku sii waday deldelaadda.

Kamaraddu waxa ay kuu hoggaamisay muuqaal kale oo faduulinimadaada dherginaya. Waa wefdi weyn oo argagax leh. Waa boqor Luuwis oo wata gaadhigiisii boqortooyada oo ku xardhan dhammaan dahab bilic wacan. Waakaas ka soo degaya gaadhigii oo ku sii socda goobtii dilitaanka. Wataa madaxa kaga soo degtay ee ka jartay, waxa aana uu qulqulay dhiiggiisii dhulka. Dhiiggii ayaa ay bannaanbaxayaashi ku tunteen oo ku dul boodboodeen, iyaga oo muujinaya sida ay u neceb yihiin. Waa nacay ay ku beertay agabka warbaahinta

Maasooniyadda, taas oo haddii qof diiraddeedu qabsato ugu tuuraysa. Kamaraddi muddo ayaa ay dansanayd, kaddib markii Dooq Doorliyaan la saaray madaxtinimada faransiiska -markii uu guulaystay kacaanku sidii ay kuwa qorsheeyay u qorsheeyeen- waataas kamaraddu kuu muujinaysa gudaha gaadhi qafilan oo jamaahiirta dhex socda, iyada oo la maqlayo cayda iyo cadhadooda ay ka qaadeen fadeexadihiisa la been abuuray. Waxa uu eegayaa iyaga isaga oo ooyaya oo aan u jawaabi karin. Waxa la geeyay goobtii dilka, waxa uu eegay eegmadii ugu danbaysay kaddibna waxa uu madaxa saaray bartii dilitaanka isaga oo dullaysan.

Miiraabo markii uu arkay sida loo galay Dooq Doorliyaan waa uu gartay in ay tani tahay shirqool meesha looga saarayay dabaqadda sare ee gobta oo dhan, ee aanay ahayn mid lagu nadiifinayo siyaasadda boqortooyada sidii ay sheeganayeen. Markii fahmay waxa socda waxa ay Yuhuuddii garteen in madaxiisu uu bislaaday, oo loo baahan yahay in isagana la goosto. Se Yuhuuddu ma ay haysan waqti dheer oo ay ku sharaf dilaan Miiraabo si ay sidii raggii hore ugu sameeyaan, markaa sun ayaa ay u qoosheen oo waa uu dhintay. Waxa aanay dhimashadiisii ku sheegeen in uu is dilay.

Waxa jiray laba nin oo kale oo ka mid ahaa raggii kacdoonka, midkood waa Roobiseer ka kalena waa Daantoon. Waa la fadeexeeyay labadoodaba oo waa la dilay innaga oo aan faahfaahintooda sii gelin. Hasa yeeshee waxa uu filinku ku tusayaa midkood oo ah Roobiseer oo maalin ka hor khudbadaynaya bulshada isaga oo leh:

“Kuma dhiirran karo in aan magacaabo, gaar ahaan xilligan, sida aanan u jeexjeexi karin dahaadhka qariyay halxidhaalahan soo taxnaa tan iyo jiilaal abaaday.”

Intii lagu sii waday Roobiseer goobta dilka waxa ku dhacday rasaas uu midkood soo riday, daanka ayaa anay kaga dhacday. Sidaa ayaa ay ku soo dhacday warqad kale oo ay Yuhuuddu ku ciyaareen oo ay ka dan gaadheen. Dhammaadkii kacdoonkan filinku waxa uu kuu muujinayaa

waxqabadkiisii: waa kuwaa Yuhuuddii u fidinaya gacanta kaalmada oo ah amaah Faransiiska si uu uga baxo dhibaatada dhaqaale ee haysata. Waxa ay shardi ka dhigeen in ay iyagu qoraan heshiiska daynta. Waxa shuruudda ka mid ahaa in mudane Niikar laga dhigo wasiirka maaliyadda Faransiiska, waayo waxa uu ahaa nin xariif ah oo muddo yar ka saari kara Faransiiska dhibaatada dhaqaaale. Dhammaadka filinka waxa kuu muuqda dhalo madow oo ay ku qoran tahay: " Waakaas waxa uu sababay Niikar in ay gaadho daynta ay Yuhuudda ribooleyda ahi ku leeyihiin Faransiiska lacag dhan 170 milyuun oo Liire.

DHAN

Iftiimin

U sacabibya Yuhuudda, u sacabbiya maska Siirbenti ee shaydaanka ah, kaas oo hadda isoo eegaya isaga oo ay weheliyaan lix shaydaan oo kale; dhammaantood u sacabbiya. Waa Kacaankii Ingiriiska iyo fuulistii ay Yuhuuddu fuushay dameerka Ingiriiska, ka dibna Kacaankii Faransiiska iyo fuulistii dameerka Faransiiska. Waa Kacaankii Maraykanka iyo fuulistii dameerka Maraykanka, ka dibna Kacaankii Isbaanishka iyo fuulistii dameerka Isbaanishka. Waa Kacaankii Ruushka iyo fuulistii dameerka Ruushka iyo kuwo badan iyo kuwo kale oo badan. Haddii aan is idhaahdo kaaga sheekee sidii loo riday boqortooyooyinkii Yurub oo dhan laba buug oo aan kan ahayn ayaa aan buuxin lahaa. Waxa imika kugu filan in aan kuu sheego in Maasooniyaddu ay hurisay dhammaan kacdoonnadii Yurub oo dhan, laba tusaale oo muhiim ah ayaana uu inoo sheegay Siirbenti. Rootsheeld iyo ubadka Rootsheeld iyo carruurta uu awoowga u yahay Rootsheeld waa dadka ugu hodansan duni illaa maanta, waa qoyska haysta kala badh hantida dunida taalla. Waxa ay haystaan Bangiga Adduunka, waana bangiga aanay jirin dawlad aanu malaayiin deyn ah ku lahayni, sidaas ayaa ay dunida oo dhan u maamuli karaan xataa Maraykanka. Waa bangiga waxna fara waxna ka reeba bangiyada dunida oo dhan, taasina waxa ay ka dhigan tahay in ay dawladaha ka sarreeyaan. Arrintan waxa aad ku ogaan kartaa baadhis yar oo aad Internetka ku samayso. Waxa jira qoys kale oo reer

Maraykan ah oo la yidhaahdo Rookifiilar[75], labadan qoysna waxa ka dhexeeya isdhexgal guur iyo shaqooyin badan.

Si aan kuugu fududeeyo ka soo qaad in dunidu haram tahay, innaga shacabku waxa aynu naallaa halka ugu hoosaysa haramka, waxa inagu xiga oo inaga sarreeya dawladaha inoo taliya, dawladaha waxa ka sii sarreeya shirkadaha waaweyn sida Microsoft, Sony iyo kuwa la midka ah; shirkadahani waxa ay gacanta ku hayaan dhaqaalaha dawladaha. Shirkadaha waaweyn waxa ka sii sarreeya bangiyada waaweyn ee raasomaalka gacanta ku haya. Bangiyada waaweyn waxa ka sii sarreeya bangiyada dhexe sida bangiga Federaalka Maraykanka ee Keydka. Halka ugu sarreysa haramka waxa ku fadhiya isha ay ka timaaddo lacagta dunida oo dhami waana Bangiga Dheellitirka Caalamiga ah (Bank for International Settlements), waa bangiga haga dhammaan bangiyada dunida ee shaqadoodana la socda. Bangigan waxa iska leh qoyska Rootsheeld iyo wadaagayaashooda. Waa bangiga daaha dabadiisa ka riixa dawladaha oo dhan.

Waxa aan indhahaaga ka dareemayaa in aanad i rumaysanayn. Ma suurtogalbaa in Maasooniyaddu ay ka danbaysay waxa kaas oo dhan? haa waa maangal. Ma doonaysaa in aad aragto daliil la taaban karo? kaalay haddaba ii raac kaynta Boohiimiya. Ina mari kuguma ciyaarayo e'. Waa kayn ku taalla waqooyiga Kalifoorniya, waxa ku kulma qaafada iyo madaxyoweynta Maraykanka sannad kasta, waana kulan weyn. Madaxweynaha Maraykanka, wasiirrada, hantiilayaasha waaweyn, siyaasiyiinta, waaweynka ciidanka, horjoogayaasha warbaahinta iyo xataa madaxda jaamacadaha

[75] Rookifiilar: Rockefeller.

ayaa isugu yimaadda. Dhammaantood dadkaa sare waa dad heer sare ka gaadhay Maasooniyadda. Kulankan looma ogolla warbaahintu in ay tebiso, ama ay wax xog ah ka hesho. Waxa dadweynaha caadiga ah loo sheegaa in uu yahay kulan laba toddobaadle ah oo ay ku nastaan madaxda sare, oo ay isku illowsiiyaan hawlaha culus ee ay hayaan. Waa laba toddobaad oo qudha sannadka dhan.

Waxa la qabtaa kulankan bandhig ruwaayado sir ah iyo wax la mid ah. Maalin maalmaha ka mid ah waxa uu ku guulaystay weriye Maraykan ahi in uu si dhuumasho ah ku galo kaynta Boohiimiya oo uu maqal iyo muuqaal soo sawiro waxa dhacaya. Waa weriye la yidhaahdo Alikis Joonis[76]. Wixii uu sawiray waxa uu ahaa wax la yaab leh, waa fadeexad caalamiya oo ruxday Maraykanka oo dhan. Wixii uu duubay waxa uu ahaa wax alle-bari u eeg oo ah waxa rasmiga ah ee kaynta Boohiimiya lagu qabto. Waxa uu ahaa xus iyo maamuus loo samaynayo cibaadada sanam. Dhabtu waxa ay tahay in madaxda dawladdu ay caabudayeen sanam casri la moodayo in sanam caabudkii uu dabar go'ay. Haddii aanan ku xeeldheeraanayn waxa dhacayay ee fiidiyowga ka muuqday waxa uu u eekaa wixii ay samayn jireen Baabiliyiintii hore marka ay sanamyada caabudayaan, ama wixii ay samayn jireen gaaladii Qureysheed.

Qofka Fiidiyowga arka marka ugu horreysaa waxa uu moodayaa ruwaayad Giriig ah, waxa aad arkaysaa dad xidhan maryo xafladeed oo muuqaal ruwaayadeed jilaya. Waxa ay taagan yihiin masrax dhagax ka samaysan oo u dhow haro yar, kaasi waa waxa aad arkaysid marka ugu horreysa. Ka dibna waxa aad arkaysaa in uu meesha ka muuqdo taallada

[76] Alikis Joonis: Alexander Jones.

weyn oo leh muuqaalka guumays weyn oo foolxun. Jilayaashu waxa ay ku wareegayaan guumaysta iyaga oo gacmaha ku sita nalal ifaya iyaga oo aad mooddid wax jimidh yar marka guumaysta loo eego. Ka dibna waxa aad maqlaysaa codka ku hadlaya lahjadda sixiroole maamuus gudanaya oo kale. Dhammaan dadkii daawaday waxa ay arkeen muuqaalkan oo wata cod saafiya, balse qofna ma uu fahmin. Sida aad ogtahay waxa aan halkan kuugu joogaa in aan wax ku fahansiiyo. Waxa aan kuu soo gudbin doonaa goosgoos ka mid ah muuqaalladaas, waayo waxa ka buuxa hadaltiro badan oo aan naf lahayn. Fiidiyowgana waa aan joojin doonaa si aan kuugu sharraxo. Ila soco.

Marka koowaad waxa uu odhanayaa qofka hadlayaa, isaga oo jilaa la moodo: "*Mudane guumays, macbadkaaga ka samaysan caleemaha geedka, dhammaan dadka meesha joogaa wuu ku weynaynayaa. Kor u qaada madaxa geedoyahaw waaweyni, fooddaada kor u qaad doogyahow yaryari. Digtoonaada waxa idiin muuqda dhismaha qabriga Boohiimiya ee barakaysan. Waxa barakaysan tiirarka sida gurigiisa.*"

Intani waxa ay sheegaysaa, meesha waxa yaalla guumays barakaysan, waxa aanay leedahay bar cibaado 'macbad'. Dhammaan dadka meesha jooga ee madaxda ahina waa ay maamuusayaan. Meesha waxa yaalla dhismaha qabri barakaysan, waana sida maqaamka oo kale. Waxa uu yidhi weriyihii muuqaalka duubay tani waa maamuus sanambari ah. Sanamka la caabudayaana waa Ilaahii Baabiliga ahaa ee Moolook. Arrintaasi sax ma aha, waayo Moolook waxa uu ahaa orgi ee ma uu ahayn guumays. Marna guumays isuma uu doorin dhammaan ilbaxnimooyinka oo dhan. Waxa dhab ah in kuwani Allebarigooda ay caabudayeen shaydaamadda

Liiliis[77], taas oo dhammaan ilbaxnimooyinka sumaddeedu ay ahayd guumays. Waxa ay u caabudayaan waayo waxa ay astaan u tahay fallaagonimada. Waxa ay noqotay astaanta fallaagada sida Talmuudka Yuhuudda ku qoran waxa ay ahayd shaydaamadda Liiliis xaaskii nebi Aadam intii aan Xaawa la abuurin. Liiliis waxa ay ahayd abuurane madax bannaan sida Aadam oo kale, Xaawo se waxa laga abuuray feedha Aadam. Markii uu Aadam isku dayay in uu maamulo Liiliis waa ay ka fallaagowday, markii ay ka fallaagowdayna Ilaahay ayaa nacdalaya oo guumays u nasakhay. Sidaa darteed waxa ay u tahay dhammaan madaxyoweynta iyo saqaafada reer Maraykan astaan fallaago oo lagaga fallaagoobayo dhammaan xariijimaha oo dhan sida ku kuwa diinta, caqiidada iyo wax kasta. Iyaga waxa ay u tahay Liiliis mid barakaysan, Eebbena waa uu nacdalay waayo waa wax xun, oo dadka neceb oo aan khayr la doonayn

"Xusuusuhu waxa ay soo celinayaan magacyo la jecel yahay oo ay leeyihiin saaxiibbo wacani, kuwaas oo gartay kayntan oo jeclaaday. Gacaliyeyaal, jaallayaasha soo-jireenka ahoow -haa aynu u yeedhno si ay innoogu soo biiraan maamuuskan- innooma dhexeeyo wax fakaag ahi. Kaalaya sheekadayada, kaalaya oo kulma jaalleyaasha kayntoow. Kaalaya ku tufa aadamaha, indhahooda taabna demta ah idinka oo dunida dhawraya. Ku fura indhahooda beentoodaa, raaca xusuusihii shalay."

Halkan waxa ay u yeedhanayaan shayaadiintoodii, waa saaxiibbadood illaa bilowgii taariikhda. Waxa ay ugu yeedhanayaan in ay ku soo biiraan si ay uga badbaadiyaan

[77] Liiliis: Lilith.

jidka mugdiga iyo baadida, oo ay ugu hagaan jidka ileyska. Waxa aad si kedis ah u arkaysaa laash ka imanaya dhanka harada oo ku soo xidhanaya dhanka masraxa dhagaxa ah. Mid ka soo dhex baxay ayaa soo saaray wax duuban oo hagoog madow leh, ka dibna waxa uu odhanyaa wartebiyuhu:

"Kani waa qurbaankii xumaa iyo shaqadiisii oo dhan,
waxa uu buriyay riyooyinkeenna,
sidii loo burburiyay Baabil.
Waxa inagu waajib ah in aynu isaga dabarjarno,
sida uu xayaabada ugu sameeyay
dhagaxaanta Baabil ee burbursan."

Qurbaanka xumi waa ka dumiyay Baabil ayaa uu leeyahay, waana dhulkii ugu horreeyay ee ay ku midoobaan insiga, jinka iyo shayaadiintu. Kani waa kii la dagaalamay huwantaas ee la diriray sixirka, ka ay sheegayaan waa Ilaahay.

"Reer Boohiimiyoow iyo af-ku-tuflayaashoow, yeedhmadiinnii quusta ahayd ee aad ka yeedheen quluubtiinna cuslaatay waa la aqbalay, waxa lagu aqbalay awoodda asxaabta soo-jireenka ah. Qurbaankan waa la tirtiri doonaa, waa annagaa jidhkiisa keennay si loogu gubo jinaasadan. Ha heesto jinaasadan faraxsani, gubitaankeenna jinaasadu waxa ay sugaysaa jidhka qurbaanka. Kan aanu kaga soo gudubnay xeelligoow qurbaankani waa cadowga daran ee quruxda. Uma ay sugnaan kuwa la midka ah danbidhaaf iyo raaxo ku sugaysa qabrigu. Dabka dabka ayaa idiin fulin doona doonistiinna oo dhan."

Waxa ay u eegtahay in guumaysta muqaddaska ah ee Liiliis ay yeedhmadoodii ajiibtay oo ay u soo dirtay shayaadiin ah jaalleyaasha soo-jireenka ah si ay u gubaan Ilaahay. Ka dib waxa aad arkaysaa iyaga oo dad oogay. Wartebiyihii waxa uu leeyahay:

"Keena dabka. Doqommo, doqommo, doqommo,

goorma ayaa aad ogaan doontaan in aydaan i gawrici karin. Gu'ba gu'ga ka danbeeya ayaa aad kayntan igu gubtaan, qayladiinnana xiddigaha ayaa aad gaadhsiisaan, marka aad kayntan ka huleeshaanna, ma waxa aad iga heshaan aniga oo sidii idiin sugaya? doqommo, doqommo, doqommo ayaad tihiin haddii aad moodaysaan in aad i disheen."

Eebbe ayaa la hadlaya oo qarinaya, isaga oo u sheegaya in aanay dili karin. Markasta oo ay gubaan sannad kasta waa uu soo noqonayaa uun haddana.

"Dheh ruuxyahay dheeldheelaysaa, ma aha waxa kan oo dhami riyo. Waa aanu ognahay in aad na sugayso marka uu dhammaado fasaxa kayntani, waanu se kula diriri oo waxa aanu kaaga hor iman sida caadadii guunka ahayd. Badh naga mid ahi waa ay kaa guulaysan, badhna waa aad burburin doontaa. Imikana na dhaaf aanu ku gubno markale e, dabkan ruuxdaada holcinayaa waxa aannu tabeelle ku qori doonnaa: waxa na xoraynaya xagaaga."

Ilaahay ayaa ay la caragsanayaan. Ciwaanka xagaaga ayaa na xoraynaya waa astaanta iyo yoolka kulankoodan ay kaynta ku qabtaan xagaaga, iyaga oo ka wada in ay Eebbe ka xoroobeen.

"Mar kale ayaa aad i gubi doontaan,
balse ma aha dabkan ka i gubayaa ee aad halkan keenteen.
Dhulka aan ka taliyo ayaa aan doqommo
iyo af-ku-tuflayaal yahow
ku bakhtiin doonaa dabkiinna."

Ilaahay ayaa mar kale carinaya.

"Guumaysyahay, boqoradda murtida aadamaha oo dhameey,
guumaystii Boohiimiya eey, adiga ayaa aanu kaa dab qaadanaynaa,
si aad noo siiso murti."
"Maya dab, maya dab, maya dab lagu shido kayntan,

ee dunida oo dhan ayaa aanu gaadhsiin, dunidaas oo uu dheefsado qurbaankan xumi nacaybka dadka awgii. Ka erya kayntan, waa dhinbiil keliya oo dabkan shidaysa, waa dhinbiil saafiya oo waareysa, iyada oo kaashanaysa midawgan weyn, ee gawraca Boohiimiya."

Waxa ay ka dalbanayaa guumaysta muqaddaska ah ee Liiliis in ay ka badbaadiso Ilaaha u cudud dhiganaya.

"Guumaysta Boohiimiya ee weyneey, waa aanu kaaga mahadnaqaynaa dhiirrigelintaada, tag qurbaanyahaw xumi, tag. Mar kale ayaa aanu fogaynaynaa, tag qurbaanyahow, dabka ayaa qaadi doonistooda, tag qurbaanyahow. Dabka huwanta waaraysoow, mar labaad xagaaga ayaa ina xorayn doona."

Halkaas ayuu dabkii ku gubay qurbaankii xumaa, waana Ilaahay sida ay sheeganayaan. Waxa ay ka takhaluseen laba toddobaad oo ah muddada ay joogayaan kaynta. Ilaahay ayaa ka nasahan xumaan oo dhan iyo waxa ay sheegayaan. Waa Eebbaha abuuray cirk, dhulka iyo dabkaba. Waa Ilaaha abuuray jinka iyo insigaba, wax la mid ahi ma jiraan. Ilaahay ayaa aan u toobbad keenayaa oo aan danbidhaaf weydiisanayaa kun jeer haddii qalinkaygu ku dhiirraday in uu qoro hadalka dadka liita. Ii ogolow in aan hadalka joojiyo oo aynu dhammaystirno wixii aynu bilownay, maxaa yeelay dunida wax badani iigama ay hadhin. Haddii aanad i rumaysanayn orod oo daawo muuqaalka oo arag Joorj Buush, aabbihii, Roonal Reegan iyo Riijad Nikson oo kaynta jooga. Badhkood waxa ay tagi jireen iyaga oo aan madaxba noqon.

Orod baadh kooxda "***Madaxa iyo Lafaha*** [78] " oo ah farac Illuminaatiga ka mid ah Maraykanka. Daawo waraysiga lala yeeshay Buush isaga oo musharrax ah, waxa uu weriyuhu weydiinayaa ma xubin ayaa aad ka tahay ururka "Madaxa iyo Lafaha?" Waxa uu ku jawaabay: taasi waa koox sir ah awoodna uma lihi in aan ka hadlo. Sidaas si la mid ah ayaa uu musharraxii la tartamayayna uga jawaabay su'aashaas Joon Keeri, isla barmaamij isla telefishan qudhaata.

Ka warran diintan yaabka leh, kuwan caabudaya Luusifar. Diintani waxa ay ku siinaysaa kaash, mustaqbal, dumar iyo caannimo haddii aad doonto; awood ayaa lagu siinayaa haddii aad doonto. Wax kasta waa lagu siinayaa sida usha sixirka ah, laakiin waa sida diin kasta waa inaad adeecdo rabbigaaga si indhola'aana. Haddii aad adeecdo waxa aad helaysaa nimco joogto ah, maha ballanqaad ee hadda ayaa aad nimcadaas helaysaa. Haddii aad ka fallaagowdana cadaab ayaa laguu dirayaa, waa cadaab aad dareemayso oo degdeg ah.

Aynu ku noqonno dheesheenni, imika waxa ina horyaalla 12 waraaqood.

- **Waraaqda koowaad**: waa waraaqda guurtida reer Sahyoon. Waxa ka muuqdo wadaaddo Yuhuud ah.
- **Waraaqda labaad:** waa waraaqda janalada muuqbaahiyaha 'TV'. Waxa ka muuqda nin daawanaya in ka badan toban shaashadood.
- **Waraaqda saddexaad**: waa waraaqda saameynta warbaahinta. Waxa ka muuqda rag badan oo TV ku xoonsan.

[78] Madaxa iyo Lafaha: Skull and Bones

- **Waraaqda afraad**: waa waraaqda dabarka xorriyada warbaahinta. Waxa ka muuqda nin weriye ah oo afka ay kaga xidhan tahay maro ay ku qoran tahay CENSORED.
- **Waraaqda lixaad**: waa waraaqda isku-milanka bangiyada. Waxa ka muuqda shan kalluun oo kala jimidh duwan oo ka weyni ka yar uu cunayo, dhammaantoodna uu kalluun weyn oo bahal ahi uu cunayo.
- **Waraaqda toddobaad**: waa dimoqraadiyadda. Waxa ka muuqda nin madow iyo inan Shiine ah oo isku illaah caabudaya, illaahaas oo ah dibi dahabi ah.
- **Waraaqda siddeeddaad:** waa waraaqda fadeexadda. Waxa ka muuqda laba nin oo xafiis ku jira oo wax shaki leh samaynaya iyo kamarad cidhif ku taalla oo shidan REC.
- **Waraaqda sagaalaad:** iyo ta tobnaad waa waraaqo isku mid ah oo ka hadlaya doorasho xalaal ah. Waxa ka muuqata gabadh calanka Maraykanka sidata.
- **Waraaqda kow iyo tobnaad**: waa waraaqda saameynta hoose ee garsoorka. Waxa ka muuqdo garsoore dubbaha garaacaya waxa ka danbeeya daah cas oo uu ka muuqdo nin koofiyad xidhani.
- **Waraaqda laba iyo tobnaad**: waa waraaqda fadeexadda galmada. Waxa ka muuqda nin iyo naag sariir wada saaran, cid ayaa ku kedisay oo kamarad ka duubaysa iyaguna iyaga oo yaabban ayaa ay gacmaha taagayaan.
- **Waraaqda ugu danbaysaa:** waa waraaq gubista caddaymaha. Waxa ka muuqdo waraaqo muhiim ah oo la gubayo.

Sheekada soo socotaa ma aha sheeko waa muxaadaro ay goobjoog ka ahaayeen 300 boqol oo ka mid ah ragga

Sahyuuniyadda ugu hodansani. Waa ragga jilibka 13aad ee Yuhuudda. Shirku waxa uu dhacay ka dib Kacaankii Faransiiska iyo waxyar ka hor Kacaankii Ruushka.

***

Guurtidii Reer Sahyoonoow
(1900 C.D)

Sheekada soo socotaa ma aha sheeko, balse waa muxaadaro, waxa goobjoog ka ahaa 300 nin oo ka mid ah ragga ugu hodansan Sahyuuniyadda. Waa rag dhammaantood gaadhay heerka 33aad ee Maasooniyadda. Waa waxyar ka dib kacaankii Faransiiska iyo wax yar ka hor kacaankii Ruushka. Qofka muxaadarada jeedinaya waxa la yidhaahdaa "Tiyoodar Hertisal[79]" kana mid ah waaweynka Sahyuuniyadda. Waxa ay muxaadaradani caan noqotay markii duubisteeda laga qoray buug ka mid ah kuwa ugu khatarsan oo loo yaqaanno ' Borotakoollada Guurtida Reer Sahyoon' . Muxaadaradani waa mid dheer oo qaadatay 3 cisho oo isku xiga, balse waa aan kuu soo koobay. Waxa aan ka jaray wixii dhurmid ah oo dhan, waxa aanan kuu soo reebay hadalka intiisa nuxurka leh oo qudha. Ii raac imika magaalada Baal ee Iswiisarland, waa maxfal ka mid ah maxaafisha Masooniyadda ee waaweyn ee magaalada ku yaalla. Aynu dhex fadhiisanno waaweynka meesha fadhiya oo aynu dhagaysanno Hertisal, oo iyaga la hadlaya. Waxa aan kugu boorrinayaa in aad khudbadda dhowr jeer dib u dhuuxdo, maxaa yeelay, waa hadal adag oo aanad sahal u fahmayn. Waxa laga yaabaa in hadalka uu ninkani jeedinayaa uu dhawyahay waxa dawladdaada ka dhacaya, xataa haddii aad cidhifka dunida ku nooshahay.

[79] Tiyoodar Hertisal

Maalintii 1aad

Guurtidii reer Sahyoonoow, xulkii dadka dhulka joogayoow, hantiilayaashii dahabkoow: Eebbe waxa xaq ku ahayd in uu bulsho ahaan idinka idin doorto, waxa uu idinka dhex doortay bulshooyinka caalamka ee xoolaha ah ee xun xun (al-quuyiim) si aad dhulka uga taagtaan boqortooyada Eebbe ee weyn. Maanta waxa aynu ku kulannay maxfalkan, berri iyo saadanbena sidoo kale; gu'yaasha soo socdana sidaas oo kale ayaa aynu u kulmi doonnaa. Maanta waxa aynu isugu nimi si aan warbixin u kala qaadanno, innaga oo ka warramayna arrinka istiraatijiyaddeenna weyn ee dhammayska tiran, ee ay hore u bilaabeen awowyaasheen. Awowyaasheennii hore waxa ay u soo dhiibeen awowyaasheennii danbe, awowyaasheenni danbena innaga ayaa ay istiraatijiyaddan inoo soo gacan geliyeen, innnaguna waa in aynu facyowga danbe u sii gudbinnaa. Haddii aynu arrinkaa ka leexanno waxa aynu burburinnay hawl qarniyo badan la soo waday, sidaa darteed digtoonaada reer bani Israa'iiloow.

Waa aad wada garaneysaan dhammaantiin salka uu ku taagan yahay qorsheheennu. Waa aad wada garanaysaan hawsha baaxadda leh ee malagga soo degay ee Baafomiid uu dadkeenna u qabtay. Waa aad xasuusan tihiin hawsha laxaadka leh ee uu inoo qabtay isaga oo wax ka beddelay khariiradda dunida malagga soo degay ee Siirbenti. Ma habboona in aan sii galo faahfaahin taariikheed oo aad dhammaantiin kor ka qaybsan tihiin. Guurtidii reer Sahyoonoow waxa la gaadhay xilligii aynu innaguna kaalin ka qaadan lahayn sheekadan mugga leh ee socota. Waa in aynu ka ridno dhabarkeenna wax kasta oo culaysiyay oo aynu hore u dhaqaaqno. Waa in aynu u kacno sidii aynu dunida ugu jeedin lahayn dhanka aynu doonno.

Habka ugu wanaagsan ee lagu burburiyo mabda ama fac, ha ahaado mid diineed ama mid bulsho e, ma aha in la tirtiro

ama la buriyo mabda'aas, balse waa in laga leexiyo dhabbadiisa, waana in loo sameeyo fasiraad ka duwan tii ay ugu talagaleen dadkii dhigay. Sidaa darteed waxa nala shaqeysay barakada rooxaanta maska Siirbenti, si uu u dhalanrogo seeska diinta Masiixiga, taas oo uu ka soo saaray wax cusub oo aan ahayn sidii loo soo dejiyay. Sidoo kale Islaamka Shiicada ee dhalanrogan, ayaa aanu u jeedinnay dhan ka weecsan Islaamkii Nebi Maxamed. Iska ba dhaafe waxa aanu ka dhignay mid la dagaallama Islaamka, oo soo bahaysta cadawga Islaamka si uu u burburiyo. Tani waa maskax badnaanta Yuhuudda oo is-muujisay.

Waxa laga yaabaa in aanu qorshaha ku soo darno waxyaabo aan damiir ahaan wanaagsanayn, oo aanu ku qasbannahay in aanu sameyno. Xusuusnaada mar kasta in arrimahani ay damiir ahaan u bannaan yihiin shacab sida shacabkeena oo kale ah, oo dul iyo hoosba loola dirirayo. Waxa kale oo aad xusuusnaataan in xilligan la galay uu sharku yahay waddada qudha ee khayrka lagu gaadhi karo. Awooddeennu waa ay ka weyn tahay tamar kasta, maxaa yeelay waa ay qarsoonaan doontaa illaa aynu ka gaadhayno heer aanay ka hor iman karin awood kale ama qorshe dhagareed oo kale. Dhab ahaantii awoodda dahsooni waa tamarta ugu weyn, yaa awoodda in uu baabiiyo awood qarsoon oo aan muuqan.

Haa, reer Sahyoonoow inkasta oo aynu nahay bulsho kala firidhsan, haddana kala fogaanteennu waa sirta tamarteenna. Maxaa yeelay, waxa aynu awood u leennahay in aynu dhex galno dhammaan dhismaha shucuubta caalamka ee kala duwan, innaga oo gacanta ku dhigayna meelaha halbawlaha ah ee bulshadaasi leedahay. Sidaa ayaa ay tamarta bulshooyinka dunidu u noqotay wax labadeenna gacmood ku kala dhex jira oo aynu u jeedin karno meesha aynu doonno. Waxa la gaadhay xilligii aynu jihayn lahayn bulshooyinka adduunka, waa aanu dhammaaday xilligii dhuumashadu.

Waxa aanu ku guuleysannay in aanu shidno dabkii kacaankii Faransiiska, annaga ayaa ay ahaayeen dadkii ku dhawaaqayay: gobonnimo, walaalnimo, sinnaan. Waa weedho mar kasta oo ay dadku ku celceliyaan xorriyaddooda la sii dabrayay. Waxa jirta weedh liidata oo markasta lagu soo celceliyo: dimoqraaddiyad. Ma jiro wax la yidhaahdo dimoqraaddiyad ama xorriyad iyo wax la mid ahi, waxaas oo dhami waa dhalanteed. Annaga ayuun baa garanayna in waxaasi uu yahay dhalanteed, waxa aanu garanaynaa marka aanu dhalanteedkaa ka dhigayno dheef si aanu dadka safkayaga ugu soo biirinno. Marka hore waa in aad maanka ku haysaan in dhammaan bulshooyinku ay yihiin jaantaa-rogan bahalo ah,oo indho la' oo u baahan awood muquunisa. Awoodda bulshooyinka bahalaha ah muquunin kartaana waa diktaatooriyadda kelitaliska ah oo qudha ama waa dimoqraaddiyad la hoos geeyay wax loo yaqaanno xeer , oo dadka oo dhami u hoggaansan yihiin.

Dimoqraadiyaddu waxa ay la macno tahay fawdo, sidee ayaa aad ugu kalsoonaan kartaa xeerarka bulsho jaantaa-rogan ah oo ku fooggan muran iyo dood madhalays ah. Waxa suurto-gal ah in murankaa iyo dooddaas lagu buriyo muran iyo dood ka liidata oo haddana lagu qancayo oo dhalanteed dadka u sawirraysa. Muranku waa uu fiican yahay maxaa yeelay waxa uu arrimaha u rogayaa qaar ka leexda garashada dhabta, oo u leexda doonida muranka laftiisa. Bulshooyinka dabbaalka ahi waxa ay daba ordaan muranka iyo doodaha madadhalayska ah, taas oo ka hor istaagta xataa in ay ku heshiiyaan doodaha saxda ah.

Haddii ay mar kasta raacaan rayiga aqlabiyadda, waxa uu noqonayaa rayi jahli ka buuxo, jahli ka dhan ah siyaasadda. Taasi waa waxa aasaya iniinta fawdada iyo fadqalalada xukuumadeed, ee ka jirta dawladaha sheegta dimoqraaddiyadda. Sidaas ayaa aanu u hoos gelinay dawladaha ma-yeedhaanka ah ee quuyiimka in ay ku faanaan

dimoqraaddiyadda, iyaga oo sheeganaya in ay yihiin talisyada ugu heerka sarreeya dhanka fikirka aadamaha.

Kelitalisnimada oo qudha ayaa xaddaarad dhidibada u taagta. Ma suurto-gal ayaa in qorshe u qayb qaybsan garaadka kala duwan ee dadkii sameeyay uu ilbaxnimo taago? Maya waa wax aan suurtogal ahayn. Inta badan waxa rayiga la wadaago ka soo baxda ilbaxnimo dabacsan , oo bilaa anshax ah; maxaa yeelay shacabku dabeecad ahaan waa mid bahalo ah, mar kasta oo aad xorriyad siisid na fadqalallo ayaa ay u rogayaan. Qofka tamarta leh ayaa mar kasta wax maamula, ka daciifka ahina waa hoggaansame. Sidaas ayaa uu aabbuhu markasta ugu guulaystaa in uu tarbiyadeeyo inankiisa yar, halka uu wiilkiisa weyn awoodi waayo in uu tarbiyadeeyo. Xukuumadeenna waxa waajib ku ah in ay tirtirto oo ay muquuniso fallaago kasta oo ka hor timaadda.

Siyaasadda iyo anshaxu ma aha laba meelna iska soo gala, taliyaha anshaxa dhawraa ma aha siyaasi wacan, inta badanna taliskiisu ma waaro. Waxa qasab ku ah qofka in uu wax hoggaamiyo doonaya in u yeesho is-tusnimo, munaafaqad iyo dhagar badnaan. kal-soornaanta, gobonnimada iyo amaanadu waa u foolxumo siyaasadda, waxa aanay inta badan ka qaybqaataan burburinta taliska, halkii ay ka adkayn lahaayeen.

Waxa aan doonayaa in aan idiin sheego arrin weyn, sidee ayaa aad u addoonsan kartaa dawlad weyn sida Ruushka. Marka koowaad xumaan kala dhex dhig oo kala fogee shacabka indhaha la’ iyo dawladda nacasta ah, nacaybka dhexdooda yaallana sii kordhi. Mar kasta oo ay xukuumaddu nacdo shacabka waxa ay si qaab daran u adeegsan doontaa awoodda dawladnimo, waxa aanay baalmari doontaa xeerarka dimoqraaddiyadda ee uraya. Mar kasta oo u kordho nacaybka uu shacabku u hayo taliskuna waa ay ka fallaagoobi doonaan xeerarka xukuumadda ee inta ay dhigtay ay iyaduba iska baal martay.

Marka aad dawladdii iyo shacabkii kala fogayso, ayaa aanu annagu weerar qaadaynaa. Waxa aanu kacdoon ama inqilaab u samaynaynaa taliska jira iyo nidaamkiisa oo dhan. Waxa aanu ku tuuraynaa xeerarkii dawladdana guddaafadda ugu dhow, waxa aanan samaynaynaa xeerar iyo laamo cusub. Sidaa ayaa aad ku noqonaysaa diktaytar madaxa kaga fadhiya xukuumad tamarteedii iyadu iska tuurtay oo adiga kugu soo wareejisay.

Marka ay dawladdu gacanteenna ku soo dhacdo, innaga oo ah Yuhuud ahna hantiilayaasha qudha ee dahabka adduunka, dawladda waxa aynu u dhiibbi doonnaa xadhig ay ku dhagto, xadhigaasina waa lacag. Marka ay xadhigaa qabsato waxa ay inoo noqotay addoon innaga, haddii ay sii deysana waa ay qarqoomaysaa. Dahabku waa mishiinka dhaqaajiya dawlad kasta, markasta oo aynu innaga oo qudhu haysannana dhaqdhaqaaqa xukuumad kasta waa aynu joojin karaa, marka aynu doonno. Haddii aynu Yuhuud nahay innaga oo qudha ayaa gacanta ku hayna dhaqaalaha adduunka. Aqoonta dhaqaaluhu waa boqortooyadeenna, waxa nagu hareeraysan ciidan dhan oo dhaqaaleyahan ah, badankooduna maanta waa ay inala joogaan: waxa aad tihiin hubka ugu khatarsan hubabka aanu haysanno, noqda madaxda bangiyada, ama warshedleyda ama dadka milyanneerka ah ba.

Haddii ay dawladi gacanteenna ku soo dhacdo waxa aanu u dhiibnaa xilalka madaxtooyada iyo wasaaradahaba dadka leh taariikh nololeedka xun, ee laga qoray bogagga badan ee dhibcaha madow ku ah noloshooda, kuwaas oo ka baqanaya in la ogaado. Haddii ay naga hor yimaaddaan waxa aanu ku furnaa maxkamad waana la xidhaa. Sidaa darteed, waxa ay illaa marka ugu danbaysa dufaaacaan maslaxaddayada. Xukuumadaha qaar ayaa muujiya in ay mucaarid nagu yihiin annaga, balse falalkoodu waa kuwo dul iyo hoos ba annaga noo xaglinaya.

Waxa aanu u samaynaa bulsho kasta haayado aanu ku rinjiyeynayn rinji gobonnimo doon, oo leh aftahanno ku sixra

bulshada hadalkooda xeesha dheer, balse waa hadal aanay wax falal ahi la socon dhab ahaantii. Waa uu sixrayaa hadalkaasi oo waa ay iska rumaysanayaan iyaga oo diiddan quusta, oo qaba rejo isbeddel. Markasta oo aanu kordhinno mushaharka shaqaalaha waxa aanu kordhinnaa sicirka badeecadaha. Waxa aanu ku daalinnaa warshedleyda in ay mushaharka shaqaalaha kordhiyaan, halka aanu shaqaalahana ku daalinno sicir-bararka. Cid na wax ma faa'idayso waa la isku daba-daalayaa uun.

Waxa aanu hayaankeenna ka bilaabi doonaa Ruushka, ka dibna waxa aanu la gurguuran doonna sida uu u gurguurto masta Siirbenti, annaga oo silsilado aan jabin ku xidhayna Yurub oo dhan. Waxa aynu waajihi doonnaa marxalad adag oo xasaasi ah, waa Imbiraadooriyadda Cismaaniyiinta ee weyn, waxa ku degi doona Siirbenti, annana waa aanu ka daba tegi doonnaa. Waa aanu burburin doonnaa burbur aanay ka soo kabsan. Ka dib Siirbenti waxa uu u duuli doonnaa Quddus, annana waa aanu raaci doonnaa. Halkaas waxa aanu ka dhisi doonna dawladeenna, halkaas ayaa uu ku dhammaan doontaa kala filiqsanaanteenna dunidu.

Marka ay salka dhigato dawladeennu , waxa aynu noqon doonna dawlad ka mid ah kuwa ugu awoodda badan caalamka. Haddii ay cidi ina soo weerarto waxa jiri doona dawlado inoo hiiliya. Markaas ayuun baa aynu bilaabi karnaa in aynu caalamka u diyaarinno soo dhawaynta boqorkeenna weyn ee dunida oo dhan maamuli doona 'Antikiriistoos'

Maalintii 2aad

Guurtidii reer Sahyoonoow, maanta waxa ay gaadhay awooddeennu heer heshiis kasta oo dunida ka dhacaya aynu ku lug leennahay. Awooddeennu waxa ay gaadhay heer aynu innagu jaangoyno ciqaabta, qofka aynu doonno waa aynu daldalnaa, ka aynu doonna waa aynu sii daynaa. Halkaa waxa

aynu ku gaadhnay waayo Eebbe waxa uu ina siiyay maskax badnaan aanu siinnin shacab ka mid ah shucuubta caalamka. Maanta waa maalintii labaad, berrina waa maalintii saddexaad ee ugu danbaysay kulankeenna taariikhiga ah. Waxa waajib ku ah qof kasta oo kulanka jooga in uu garto aniga oo aan u sheegin, in xog kasta oo halkan la isku weydaarsanayaa ay ahaato mid qarsoon oo sir ah.

Maanta waxa aan ka hadli doonaa "Nidaamka Jamhuuriga" ah oo aynu ku beddeli doonno taliska boqortooyada ah ee hadda dunida ka jira. Boqorka nidaamka boqortooyada waxa aynu beddeli doonna wax ruwaayad ah oo loo yaqaanno madaxweyne. Waxa aanu u dooran doonnaa xilkan nin leh fadeexad hoose, oo aanu annagu garanayno, ha ahaato mid anshax, mid galmo ama mid laaluush. Waxa uu inta ugu badan xukunkiisa ku qaadan doonaa isaga oo ka baqanaya in la shaaciyo fadeexaddiisa. Waxa aanu gacanta u gelin doonnaa madaxweynaha koox jilicsan oo la yidhaahdo 'Golaha Shacabka' waa koox dad ah oo bulshadu dooranayso si ay iyaga u metelaan. Waxa aanu ka hoos saari doonnaa golahan awoodda xeer geddinta, madaxweynaha ayuun baa yeelan doona awood dhammaystiran.

Waxa aanu ka dhex abuuri doonnaa fadqalallo joogta ah madaxweynaha iyo shacabka, dhaqaale ahaan ayaanu cunaha u qaban doonnaa dawlad kasta. Waxa ay shucuubta adduunku maalin uun ku kici doonaan madaxdooda dhammaan, waxa aanay dooni doonaan hoggaamiye keliya oo dunida oo dhan xukuma, oo dadka adduunka oo dhanna mideeya – Antikiriistoos.

Annaga oo keliya ayaa og sirta Maasooniyadda oo hoggaamina. Sidee ayaa ay bulshooyinka xoolaha ah ee quuyiim u fahmi karaan dulucda iyo ujeeddooyinka Maasooniyadda waaba ma-yeedhaan aan garaad lahayne. Waxa waajib innagu ah in aynu laba jibbaarno unugyada Maasooniyadda iyo maxfalladeeda dalalka dunida oo dhan. Waxa aanu soo jiidan doonna qofkasta oo lagu tuhmo in uu

leeyahay ruux caannimo. Dhammaan unugyadani waxa ay leeyihiin hal hoggaamiye oo madaxdeenna ka mid ah. Waxa aanu soo jiidan doonnaa oo aynu ku dari doonnaa xubnaheenna dhammaan laamaha sirdoonka ee dalalka caalamka, maxaa yeelay iyaga oo qudha ayaa daaha ka faydi kara waxa aynu rabno, oo burburin kara buuq kasta oo madax xannuun inagu keenaya. Waxa inagu soo biiri doonna cid kasta oo naftii-hallig ah oo doonaya in ay noqdaan hantiile degdeg ah, annaga ayuun baa u hayna hanti degdeg ah.

Warbaahinta … waxa waajib ah in aynu meesha ka saarno warbaahin kasta oo farogelinaysa awooddeenna. Balse mararka qaarkood waa in aynu weerar innagu isku soo qaado, weerarkaasi waxa uu beegsanayaa meelaha u baahan in wax laga beddelo siyaasaddeenna, taasina waa maskaxbadnaan heer sarreysa. Mucaarid kasta oo aynu samaysannaa waa mucaarid fudud, oo aan u dhawaan karin arrimaha muhiimka ah.

Waa in aynu innagu gacanta ku dhignaa wararka oo dhan. Waxa aad garanaysaan in wararka adduunka ay gacanta ku hayaan dhawr wakaaladood, kuwaas oo warbaahinta dunida warka u qaybiya. Haddaba marka aynu taliska qabsanno waxa aynu gacanta ku dhigi doonnaa dhammaan wakaaladahaas, mana ogolaan doonno in la baahiyo wixii aynaan ogolaannin innagu.

Waa in aynu iibsanno inta ugu badan ee wargeyso ah saddexdeeda noocba. Warbaahinta dawladdu waa in ay maslaxaddeenna ka shaqayso, warbaahinta rasmigu u janjeedhaanna waa in ay soo jiidato quluubta dadka dhexdhexaadka ah. Warbaahinta mucaaridka ahi waa jaadka saddexaad waxa aanay iska dhigi doontaa in ay innaga inagu kacsan tahay, waxa ay soo jiidan doontaa dhammaan dadka inagu kacsan, si ay ugu afrogaan afkaartooda inaga dhanka ah, sidaas ayaa aanu ku ogaanaynaa waraaqaha ay adeegsanayaan iyagu.

Faafreebka… Faafreebka waxa la daabacayo waa in aynu u samayno haayad maamusha, oo diidda ama ogolaata waxa ay doonto; ha noqdo waxaasi buugaag, filimo ama wargeysyo. Haayadani waa in ay gacanteenna ku jirtaa, si aan u maamulno dhammaan wixii la baahinayo meel kasta oo adduunka ka mid ah. Suugaanta iyo aqoontu waa hubka ugu halista badan ee kacdoon kasta oo bulsho, markasta oo ay labadaasi gacanteenna ku jiraanna xaalku waa uu deggen yahay weli.

Si aynu dadka uga fogaynno in ay arrimaha waaweyn ka doodaan ama ay furdaamiyaan masallooyinka noloshooda taabanaya, waxa aanu markasta u abuuri doonnaa dhibaatooyin mashquuliya. Waxa aynu u abuuri doonnaa mushkilado dhaqaale iyo kuwo siyaasadeed oo dalkooda ka dhaca. Si aanu u mashquullino garaadkooda waa in aynu madaddaalo u furnaa: sida tartanka ciyaaraha, tartanka fanka iyo tartanno kale oo badan.

Bulshooyinka fooraraa waa sida cunugga yar oo kale, marka uu ilmaha yari kaa doono wax, hadii aad ku tidhaahdo eeg shinbirkaa, waa uu eegayaa shinbirka isaga oo illaabaya wixii hore ee uu kaa doonay ba. Qofka lagu yidhaahdo wax kasta annaga –Yuhuud – ayaa kacanta ku hayna waa uu yaabayaa, waxa aanu odhanayaa taasi suurtogal ma aha, maxaa yeelay, qofna ma awoodo in uu isku dubbarido hawsha aanu qabannay oo dhan. Annagu waxa aanu gacanta ku haynaa dahabka iyo dhaqaalaha oo dhan, waxa aanu nahay dadka ugu hodansan dunida, qofka dhaqaale haystaana isaga ayaa u taliya adduunkan.

Waxa uu nagu caawiyay malagga soo dhacay ee Siirbenti in uu burburiyo dhammaan caqiidooyinka dadka aduunka, oo uu ka leexiyo sidii loogu talogalay. Dadku waxa ay curiyeen Talmuudka oo Tawraad ka danbeeyay, waxa aanay ka dhigeen Ciise inankii Ilaahay iyo Ilaah la mid ah Eebbe, halkii uu ka ahaa nebi Ilaahay soo diray. Inkasta oo aanu ku guuldarreysannay in aanu Islaamka burburinno sidii aanu u

baabbiinay Masiixiyadda iyo diinta Yuhuudda, laakiin waxa aanu soo saarnayn wax loo yaqaanno Shiicada, waxa aanay muslimiinta dhadhansiiyeen hoog aanu cadawga Islaamku weligii dhadhansiin.

Waxa noo suurtogalay ma ay noo hagaageen haddii aannaan basaasiin ku dhex daadinnin bulshooyinka caalamka, waxa aanu farnay basaasiinta in ay bulshooyinka ku dhex milmaan, milan aan laga soo dhex sooci karin. Basaasiintaasi waxa ay noo soo diraan warbixinno faahfaahsan oo ku saabsan xaaladda bulshooyinkaas ee siyaasadeed, bulsho iyo kuwa diimeed ba.

Maalinta 3aad

Hadalka idinkuma dheerayn doono maanta, waxa uu noqon doonaa wargelin qudhaata. Waxa aan filayaa in aad dhammaantiin muraajacayseen, oo aad qorateen oo aad fahanteed ama aad xafiddeen hadalkii hore. Madaxda dawladaha xoolaha ahi waxa ay ku qasbeen dawladahooda in ay lacag ka amaahdaan bangiyadeenna , waxa aanay ka amaahdeen lacag badan oo aanay iska bixin karahayn haddii ay qarniyo badan jiraan. Wax badan ayaa aanu u soo jeednay in ay sidaasi dhacdo, wax badan ayaa aanu ka fikirnay in aanu bulshooyinka oo dhan addoonsanno. Waxa aanu ku guuleysannay in aanu dhammaan dawladaha oo dhan kildhi madaxa u gellino, waxaana nagu waajib ah in aanu sidaa ku ilaalinno. Waxa aanu samaynay oo dhan waxa na faray taliyaheenna weyn: boqorkeenna adduunka ka maamuli doonna carshigii Daa'uud ee ah tafiirtii Daa'uud.

Haa innaga ayaa gacanta ku hayna dahabka, marka aynu doonno ayaa aynu inta aynu doonno oo dahab ah kala soo bixi karnaa kaydadkeenna qarsoon. Waa dahab aanu wax badan kaydinaynay. Ugu danbayntii waxa la idiin qaybin doonaa guurtiyeey warqad la idinka rabo in aad saxeexdaan. Waxa

aynu soo marnay waddo dheer, horteennana waxa ah jid dheer oo dhib badan, sidaa darteed waa in aynu soo jeednaa.Waxa warqaddii saxeexay dadkii matalayay Sahyuuniyadda ee heerka 33aad ee Masooniyadda ahaa.

DHAN

Iftiimin

Sidee ayaa ay muxaadaradani dibadda ugu soo baxday? Waxa ay leedahay sheekadan:
Nin ka mid ah dadkii goobjoogga ka ahaa muxaadaradani waxa uu ahaa nin sirkhaan ah, waxa aanu ka yimi shirka si uu u aado gabadh ka mid ah kuwa jidhkooda ka ganacsada si uu ula baashaalo. Gabadhani waxa ay ka xadday boorso uu sitay iyada oo moodaysa in lacag badani ku jirto, waayo ninku waxa uu ahaa nin hantiile ah. Dhabtu waxa ay ahayd in boorsadan ay ku jireen kaydad iyo xogo muxaadaradii oo duuban ah iyo iyada oo ku qoran afka Cibriga .Gabadhii waxba waa ay ka fahmi weyday xogtii waxa aanay siisay nin kale oo macaamiisheeda waaweyn ka mid ah. Ninku waxa uu ahaa nin Ruush ah oo ah Niikoola Niifiitish, oo ka mid ahaa madaxyoweyntii Ruushkii Qaysariga ahayd. Waxa uu dareemay in ay xogtani tahay mid saamayn leh sidaa darteed waxa uu siiyay turjubaan Ruush ah oo ay saaxiib yihiin, kaas oo ahaa Seerji Niiloos[80] si uu Af Ruush ugu turjumo. Markii uu turjumay Seerji waxa uu la yaabbay weynaanta xogta ay xanbaarsan tahay, waxa aanu xogtii oo dhan sheegay saaxiibkii Niikoola. Niikoola waa uu cadhooday waxa aanu go'aansaday in uu Yuhuudda fadeexayo , oo uu sirtooda si guud u soo bandhigo. Kaydka xogtan waxa ku xusnaa in Yuhuuddu ay rabto in ay kacaan ka ridaan Ruushka, sidii ay kacaan uga sameeyeen Ingiriiska iyo Faransiiskaba. Ruushku waxa uu ahaa maalmahaa mid uu ka taliyo hannaanka

[80] Seerji Niiloos: Sergei Nilus.

Qaysarigu [81] , Yuhuudduna waxa ay ahaayeen kuwo la ugaadhsado. Niiloos waxa uu baahiyay buug uu xogtii oo dhan ku ururiyay oo uu u bixiyay ***"Borotokoollada Guurtida Sahyoon"***.

Yuhuuddii waa ay xanaaqeen waxa aanay sheegeen in waxa ka dhan oo dhami ay yihiin been-abuur, balse dadkii buugga akhriyay waxa ay la yaabeen sida ay isu waafaqeen wixii dunida ka dhacay iyo waxa buugga ku qornaa. Waxa lagu kacay Yuhuuddii ka dib markii si madmadow badan loo dilay qoraa Niiloos.

Waxa bilaabmay in la xasuuqo Yuhuuddii Ruushka deggenayd, xasuuqii koowaadna waxa ku dhintay toban kun oo Yuhuud ah. Yuhuuddu waxa ay ku dadaaleen in ay xasuuqaas joojiyaan, runtii waa ay joojiyeen iyaga oo ka faa'idaysanaya awooddii ay Ingiriiska ku lahaayeen. Ingiriiska ayaa cadaadis saaray Ruushka si xasuuqaas loo joojiyo.

Si kedis ah waxa u dhacay Kacdoonkii Ruushka sida ay saadisay Borotakoollada Sahyoon. Waxa dhacay inqilaabkii Shuuciyadda, Ruushkiina waxa uu ku dhacay gacanta Balaashifada, oo badankoodu Yuhuud ahaa. Dadka Ruushku waxa ay doonayaan in ay mar uun ka nastaan taliska Qaysariyadda waxa aanay ku dhaceen cadaabta Shuuciyadda Yuhuudda ah. Sidaas ayaa ay Shuuciyaddu ku gaadhay dhammaan dalalkii ku dhegsanaa Ruushka. Shuuciyaddu marka la soo koobo waa in laga gaaloobo dhammaan diimaha oo dhan se waxa ay garabka saarayeen diinta Yuhuudda.

Marka kale ayaa Borotakoollada Guurtida Sahyoon uu dunida ku faafay markii af Ingiriisi loo rogay, balse Yuhuuddu waxa ay ku guulaysteen awooddii ay Ingiriiska ku

[81] Qaysari: Kayseri.

lahaayeen dartii in ay joojiyaan faafitaankiisa Ingiriiska dhexdiisa. Ka dibna waxa lagu baahiyay af Jarmal , haddana Yuhuudddu waxa ay isku dayeen in ay joojiyaan.

Mar kale buuggii waxa uu ku faafay Ingiriiska iyo Talyaaniga balse waxa la joojiyay mar kale. Waxa la baahiyay huuhaa sheegaysa in qofkii buuggaas turjuma ama baahiya la dilayo. Ugu danbayntii buuggu waxa uu soo gaadhay dalka Masar, gaar ahaanna Aniis Mansuur kaas oo diiday in uu turjumo isaga oo ka baqanaya in la dilo. Ka dib waxa uu soo galay buuggu gacanta Cabbaas Maxamuud al-Caqaad, kaas oo si geesinnimo leh u turjumay oo u baahiyay.

Isku soo xooriyoo kulankani ma uu ahayn ka keliya ee ay yeeshaan Guurtida Sahyoon, balse waxa ay kulmeen boqollaal kulan oo kale, si ay u gorfeeyaan qorshahan laftiisa oo ay waxna uga beddelaan. Buuggani ma aha ka keliya ee qofkii qoray si madmadow badan loo dilay, waxa jira buugaag kale sida buugga "***Dhagaxaan Dulsaaran Miiska Jeesta***[82]" ee uu qoray Wilyam Jay Kaar[83], iyo buugga ***"Gacanta hoose"***[84] ee qoray dhaxalsugaha Iskandaneefiyaan ee Shiiriib Sibiiryiidofiitish. Iyo buuggan hadda gacantaada ku jira oo uu qoraagiisu dhiman doono saacado kooban ka dib.

Guurtida Sahyoon waxa ay xuseen warbaahinta iyo xero-galinta warbaahinta. Seexiyaha ugu weyn ee taariikhdu waa sanduuq yar oo xagal gurigaaga ka mid ah yaalla TV. Waxa uu inoo yeedhinayaa habeen iyo maalin ba wax ay tahay in aynu si dhab ah u rumaysanno. Anigu waxa aan doonayaa in aan ku siiyo xog ku saabsan warbaahinta: waxkasta oo aad

[82] Dhagaxaan Dulsaaran Miiska Jesta: Pawns in the Game.
[83] Wilyam: William Guy Carr.
[84] Gacanta hoose: Invisible Hand.

warbaahinta ka maqashaa ama siyaasiyiintu waa waxa aynu ku kala geddisannahay, waa waxyaalaha ina kala geynaya, waxyaalaha ina kala durkinaya; sidaas ayaa ay inala doonayaan. Waxa ay xoogga saarayaan wax kasta oo idin kala geynaya sida isirka, diinta, qawmiyadda, dakhliga dhaqaalaha, tacliinta, heerarka waxbarasho, doonista galmada, shaqooyinka iyo wax kasta oo ay doonayaan in aynu isku dhacsanaanno.

Adiga laftaada ayaa laga yaabbaa in aad noqoto waxbayahay 'daadxoor'. Marka aad Faysbuugga furto oo aad aragto war weerar ku ah koox aanad rabin waxa aad taabanaysaa barta 'baahi' , warkiina sidaas ayaa aad ku faafisay inta aanad warkaas hubsan . Marka aad sidaas u dhaqmayso iyaga oo kale ayaa aad noqonaysaa waxbayahay/daadxoor. Waxa aad faafinaysaa wax baa uu duminayaa ee waxba ma dhisayo, waxa aad baahinaysaa dhiig ayaa uu daadinayaa ee ma joojinayo dhiig. Waxa aad samaynaysaa waxa uu u adeegayaa weedha ' Kala qaybi oo u tali.' Ummaddaada kala qaybi, dalkaaga kala qaybi, taasi waa waxa aad samaynayso dhabtii.

Haddii aan ahay madaxweyne Carbeed oo dalkaaga ah maxaa aan samayn lahaa? waxa aan samayn lahaa wixii uu sameeyay Cali binu Abi Daalib dhacdooyinkii fidnada ee saxaabada ka dhex dhacay; waxa aan midayn doonaa qulqulka oo dhan xataa kuwa aan ka shaki sanahay in ay ku jiraan adeegayaal shisheeye iyo khaayimiin.

Waraaqaha inoo hadhay waa ay yar yihiin, markan waxa aynu haysannaa waraaq keliyaata.

- **Waa waraaqda ajendaha Laybaraaliyadda:** Waxa ka muuqda nin Yuhuudi ah oo gacanta ku haya waraaq dheer oo uu akhriyayo isaga oo faraxsan.

Hore waxa aan kuugu sheegay in ay jiraan toddoba shaydaan oo inagu gaafwareegayaa, waxa aan kuu magacaabi doonaa shayaadiinta aynu illaa hadda sheekada ku soo qaadannay.

1. Shaydaanka koowaad waa **Luusifar** waa madaxa shayaadiinta, waa aad garanaysaa sheekadii dhexmartay Namruud.
2. Shaydaanka labaad waa **Siirbenti maska**, waa shaydaanka marin-habaabinta iyo fidnada.
3. Shaydaanka saddexaad waa **Baafomiid**, waa shaydaanka ay caabudaan Fardooleyda Haykalku, waa shaydaanka sixirka iyo buugaagta cilmiga shaydaanka.
4. Shaydaanka afraad waa shaydaan insi ah, **Daraakoola**; ruuxdiisa cadaaban ee xun ayaa inagu xeeran.

Saddex shaydaan ayaa hadhay oo aanad garanayn, waxa ay sidaan saddex sirood. Sheekada soo socota waxa kaaga sheekaynaya shaydaan iyaga ka mid ah, waa shaydaan la fogeeyay, waa shaydaanka shanaad.

***

Shaydaankii Reer Bani Israa'iil
(1350 – 1912 C.D)

Si kedis ah cirkii waxa ka soo daatay roob maydad ah, dadkii ku noolaa magaala Kaafa[85] ee qadiimka ah ee Yukrayn waxa ay cirka u eegayeen sida uu u eego ninka argagaxsan, ee ka dibna dabada jeediya baxsasho. Cirku waxa uu da'ayay maydad dad ah, adigu si qumman markii aad u eegtay muuqaalka dhabtii waxa aad arkaysaa raq soo hoobanaysa. Raqda gadaasheeda waxa aad ku aragtaa wax cirka sudhan, ma garanaysid waxa uu dhab ahaan yahay, waa cabbaayad madow oo cirka babbanaysa sida aad ka dheehato filimaanta baraleyda ah. Madaxu waxa uu ku qarsoon yahay mugdiga maxaa yeelay cabbaayada ayaa qarinaysa madaxa, wejiga se si toos ah ayaa aad u arkaysaa, si yaxyaxleh ayaa aad u aragtaa. Wejiga waxa aad mooddaa fooddad cad oo leh jinniyado dheeldheela, waxaasi waxa uu ka soo laalaaday cirka, gadaashiisa ayaa aanay ka soo hoobanaysay maydkan soo daadanayaa, ee ku soo dhacaya gudaha deyrka magaalada Kaafa. dadkuna waa ay yaacayeen marka uu maydku sida roobka ugu soo daato iyaga oo aan waxba fahansanayn.

Si aad waxa dhacaya u fahanto waa in aad xusuusnaato in magaalada Kaafa ay xayndaabkeeda ka soo xidhatay, maxaa yeelay Maqoolka ayaa soo weeraray oo ku hareeraysnaa. Maalmahaas daacuunka madow waxa uu si daran ugu faafay

[85] Kaafa: Kaffa.

Aasiya oo dhan, waxa aanu haleelay ciidanka Maqoolka ee ku hareeraysnaa magaalada Kaafa. Cadhadii Maqoolku waxa ay isu rogtay dagaalkii ugu horreeyay ee Baayoolaji ah taariikhda, ciidankoodii uu daacuunku laayay ayaa ay ku xidhxidheen wadhfiyaha waxa aanay ku ganeen gudaha magaalada go'doonsan ee Kaafa. Markii hore dadka Kaafa ma ay fahansanayn waxa uu yahay maydku balse markii uu dad badani ka xanuunsaday oo ay leedeen ayaa ay iskaga yaaceen magaalada.

Waxa uu ahaa shaydaanka Maastiim wixii madoobaa ee dhex duulayay raqda maydka isaga oo dheeldheelaya. Hadda waxa aad aragtaa mar kale isaga oo duulaya balse waxa uu duulayaa cir kale, waa Yurub waana magaalada Biisaansoon[86] ee Faransiiska. Markan ma uu dheeldheelayn balse waa uu murugaysnaa. Hagoogtii dheeldheelka ee uu markii hore xidhnaa hadda waxa ay noqotay mid murugo leh. Waa uu duulayay isaga oo eegaya muuqaal ah ka ka murugaysiiyay. Waxa uu arkayay ciidan badan oo cago-cad oo xidhan maryo ka samaysan baco oo sita shaabuug ay la dhacayaan Yuhuudda waddooyinka maraya iyo kuwa guryaha ku jiraba. Waa ay garaacayeen illaa uu dhiiggu jidhkooda qulqulay iyo illaa ay naftu ka wada baxday. Dadka shaabuugga sitay waxa ay ahaayeen Masiixiiyiin Kaatoliig[87] ah oo reer Yurub ah. Maxaa ay Yuhuudda u garaacayaan? Waa aan kuu dheegi doonaa. Markii ay dadku ka soo yaaceen magaalada Kaafa ka dib markii Maquuliyiintu ay ku soo tuureen raqo daacuun wata, dadkii Kaafa waxa ay dageen deegaanno badan oo Yurub ah, daacuunkiina waxa ay u soo qaadeen

[86] Biisansoon: Besancon.
[87] Kaatoliig: Chatolic.

magaalooyinkaas. Sannadkii koobaad ma uu dhammaan markii ay gaadhay tirada dhimashada reer Yurub toban milyan. Sannadkii labaad oo aan dhammaan tiradii waa ay sii labanlaabantay waxa aanay gaadhay dhimashu shan iyo labaatan milyan oo qof. Saddex meeloodoow meel ayaa dhimatay dadkii Yurub. Qof kasta oo uu daacuunku ku dhaco waa uu dhimanay, cid kasta oo dhex gashaana waa ay dhimanaysay, qofka xabaasha u qaadaa waa uu dhimanayay. Waxa ay ahayd maalmo argagax badan.

Dadka waxa ka lumay iimaankii ay ku qabeen caafimaadka, Eebbe, kiniisadda iyo wax kastaba. Waxa faaftay huuhaa ay cidna xakamayn kari wayday, waa huuhaa odhanaysa Yuhuudda weeye sababta daacuunku. Iyaga ayaa sumeeyay ceelalka iyo webiyada Yurub sababtoo ah nacaybka ay u qabaan Masiixiyiinta Kaatoliga ah, kuwaas oo beryahaa cadaadis badan ku hayay. Dadkii waxa ay weerareen Yuhuuddii sida dhurwaa adhi helay. Kuwii ugu horreeyay ee Yuhuudda weeraraa waxa ay ahaayeen kuwo shaabuugyo sita. Kuwani intii aan beenta la faafin ka hor waxa ay mari jireen waddooyinka socdaallo toddobaadle ah iyaga oo isla dhacaya shaabuugga si uu dhiiggoodu u daato, si uu Eebbe uga dulqaado dadka dhibta daacuunka ee dilay in ka badan saddex meeloodoow meel dadkii Yurub. Beenta ka dib kuwani waa ay joojiyeen in ay iyagu is gaaraacaan waxa aanay weerar ku qaadeen Yuhuudda iyaga oo si arxan daran oo xaasidnimo ah u laynaya.

Wejiga Maastiim waa uu cadhoodaa markasta oo uu arko Yuhuud lagu ugaadhsanayo meel dhulka ka mid ah, waxa uu xasuustaa sidii uu u murugaysnaa markii Yuhuudda la soo ururiyay ee lagu xidhxidhay barxadaha magaalada Noorish ee

Ingiriiska ee ka dibna la gubay. Taasi waxa ay u dhacday maxaayeelay Masiixiiyiintu waxa ay ku tuhmeen Yuhuudda in ay gawraceen wiilka masiixiiga ah ee Wilyam si ay dhiiggiisa ugu adeegsadaan Alle-bariga ciidda Fusxiga[88] ee Yuhuudda. Tuhunkaasi marar badan ayaa uu soo noqnoqday meelo badan oo Yurub ka mid ah, markasta inta Yuhuudda la soo ururiyo ayaa la dili jiray.

Weli waxa uu xasuustaa Maastiim murugtiisii maalmihii dagaalkii Macatablayaasha, waa markii ay Masixiiyiintu fikireen ee ay naftooda ku dhaheen waxa aynu gaafwareegaynaa dunida oo waxa aynu laynaynaa cadawga Macatabka. Miyaanay habboonayn in aynu ka bilawno cadawga macatabka ee inagu dhexnool, waa Yuhuudda waa kuwii dilay Ciise Masiix iyo taageerayaashiisiiba. Waxa ay weerareen Yuhuuddii mar keliya ee magaalada Miins [89] ee Jarmalka, kun qof ayaa aanay mar qudh ah dileen. Sidaas ayaa ay u wadeen dilka Yuhuudda illaa curuuqdoodi qabowday oo qalbigoodii xasilay. Wejiga Maastiim waa uu murugaysaa isaga oo daawanaya Jarmalka oo Yuhuuddii soo eryay iyo Ingiriiskii oo ku xigay...kaddibna Faransiiska, Talyaaniga, Usteri, Iswiisarland, Hangari iyo Holand. Yuhuuduna ma ay helin dhul ay degaan marka laga reebo Undulus, taas oo ay muslimiintu si caddaalad ah u maamulayeen. Muslimiintu waa ay soo dhoweeyeen Yuhuudda waxa aanay siiyeen dhul ay degaan, waxa aanay u ogolaadeen in ay muujistaan shacaa'irta diintooda una gutaan si madaxbannaan, iyaga oo hore ugu cibaadaysan jirey qolal xidhan iyaga oo cabsanaya. Markaas waxa aad arkaysay shaydaanka Maastiim oo dul

[88] Fusxiga: Easter.
[89] Miinis: Mainz.

duulaya dhulka Undulus isaga oo dhoollacadaynaya, markan ma uu dheeldheelayn ee waa uu faraxsanaa.

Si kedis ah ayaa ay Macatablayaashii weerar ugu soo qaadeen Undulus oo waa ay qabsadeen, markan waa uu soo duulay Maastiim isaga oo cabsi badan ka qaba waxa Yuhuudda lagu samayn doono, waxa aanay u muuqataa in cabsidiisa ay saxsanayd. Waxa ay Macatablayaashu ku qasbeen dhammaan dadkii dagganaa Undulus Muslim iyo Yuhuud ba in ay Masiixiyadda qaataan ama in ay isaga guuraan dhulkan. Ciddii Masiixiyadda qaadatay xataa iskama ay dayn Macatablayaashu, balse xukuumaddii Isbaanishku waxa ay u samaysay maxakamado loo yaqaannay maxkamadihii baadhista. Waxa ay dili jireen qof kasta oo looga shakiyo in uu dusha Masiixiyadda ka qaatay hoostana uu ka yahay Muslim ama Yuhuudi. Cid kasta oo Masiixiyadda diiday waa ay ka haajireen dhulka. Yuhuuddii Undulus ma ay helin dhul kale oo ay u hayaamaan oo aan ka ahayn dhulkii balaadhnaa ee dawladda Cismaaniyiinta. Mar kale ayaa ay Muslimiintu soo dhoweeyeen oo ay maamuuseen. Waxa soo dhoweeyay suldaankii Cismaaniyiinta ee Saleebaan al-Qaanuunii. Shardi keliya ayaa uu ku xidhay, kaas oo ahaa in ay degi karaan dhulkasta oo ka mid ah dhulka dawladda marka laga reebo dhul keliya oo ka mamnuuc ah kaas oo ah dhulka Falastiin.

Mar keliya ayaa uu cirka istaagay shaydaanka Maastiim, waxa uu eegayay muuqaal soo jiitay. Waxa uu arkayay shaydaan kale oo soo galay hawada dawladda Cismaaniyiinta, gaar ahaanna magaalada Istaanbuul, caasimaddii Khilaafada Islaamka. Shaydaankaasi waa mid la garanayo, waa Siirbenti maska wax halleeya. Waxa ay u muuqataa in kalkii dhulka Carabtu uu soo galay, waxaana la gaadhay markii la goosan lahaa. Seerbanti waxa uu dhexqaadayay hawada isaga oo ku sii jeeda qasriga suldaanka Saleebaan al-Qaanuuni laftiisa. Seerbanti qasrigii ayuu soo galay, shaydaankii Maastiimna waa uu ka soo dabagalay.

Maastiim markii uu soo galay qasriga Cismaaniyiinta si degdeg ah waxa uu la kulmay muuqaal ka fajaciyay, sulaadaamad Maah Dooraan xaaska khaliifku waxa ay gacmaha kula dagaalamaysay si daran jaariyadda loogu yeedho Rooksalaana. Rooksalaana waxa ay ahayd mid qurux badan waxaaba la moodayay quruxdii oo gabadh iska soo dhigtay, waxa ay u muuqatay in dagaalkan laga adkaanayay. Wejiga ayaa ay qabatay suldaamaddu, waxa soo kala dhexgalay hooyada suldaamadda waxa aanay kala furfurtay loolankan gacmaha iskula jira. Si degdeg ah waxa u soo galay suldaan Saleebaan, waxaana legga kaga boodday Rooksalaana oo ooyaysa oo cabanaysa, gacmahana waxa ay ku tilmaamaysay dhaawacyo qoorta iyo wejiga kaga yaalla. Suldaanki waxa uu si cadho leh u eegay suldaamad Maah Dooraan, waxa aanu ku soo rogay amar adag oo ah in laga madalufiyo Maah Dooraan qasriga Maansiya. Waxa uu eegay shaydaanka Maastiim quruxleyda Rooksalaana taas oo si dhibirsan u haysatay boqorka, indhaheeduna ay faraxsanaayeen si dheeldheel ah oo aanay cidna arkayn, waa dhoollocaddayn wax badan muujinaysa.

Shaydaankii Maastiim waxa uu eegay maskii Siirbenti kaas oo markaas afkiisa kala furay si jeesjees ah oo masasku yaqaannaan. Eegmadii ay labada shaydaan is eegeen ayuu waxkasta fahmay Maastiim. Jaariyadda quruxleyda ah ee Rooksalaana waxa ay ahayd sixirrooley Yuhuudiyad ah. Waxa looga soo qaatay ka jaariyad ahaan jasiiradda Qirim [90] , Tataarkii Qirim ayaa u soo hibeeyay suldaan Saleebaan al-Qaanuunii. Mar kale oo uu eegay Siirbenti waxa uu gartay Maastiim in soo qaadisteeda ka jaariyad ahaaneed aanu ahayn

[90] Qirim: Crimea .

mid kama ah ee ay u socotay shaqo gaar ah. Waxa ay u socotay in ay sixir ku saameyso suldaankii Cismaaniyiinta ugu xoogga weynaa. Maastiim waxa uu isha la raacay suldaan Saleebaan al-Qaanuuni, kani waxa uu ahaa suldaankii Cismaaniyiinta ay dartii u balaadhatay dawladda Cismaaniyiintu balaadhkii ugu weynaa. Waxa uu ahaa nin xoog badan, oo weyn, oo ay adagtay sida laac loogu dhigaa ama loo saameeyaa. Yuhuuddu ma ay helin wax ka habboon sixir, mana ay dooran sixirroole duq ah ee waxa ay heleen sixirroole ku habboon. Waa Rooksalaana oo ah mid ka mid ah sixirrooleydii ugu fidnada iyo quruxda badnaa ee taariikhda soo mara. Waxa ay ahayd sixirrooley ku seexata lagga Khaliifka badanka habeennada toddobaadka.

Rooksalaana waxa ay quruxdeeda ku sixirtay qalbiga Khaliifka intii aanay ku sixrin tafaafulkeedaba. Waxa ay ka codsatay in uu guursado. Inkasta oo ay reebbanayd in Khaliifku uu guursado adeegtadiisa haddana Saleebaan al-Qaanuunii markii ugu horreysay waxa uu guursaday adeegtadiisa xeerkiina waa uu jabiyay.

Suldaanku awood uma uu lahayn in uu diido, waayo waxa aynu ka hadlaynaa sixirka doonista, jacaylka, kalgacalka kanina waa noocyada ugu adag sixirka. Rooksalaana waxa ay ku noolayd qasriga Xariim iyaduna ma ay jeclayn taas. Dadku waxa ay ku tooseen aroor dab dumiyay gidaarka Xariim Rooksalaana waxa ay ku carartay legga Suldaanka gadaashiisa ayaa aanay isku qarisay, waxa aanay ka codsatay in ay isaga qasrigiisa kula noolaato. Dhabtii waxa uu u raray qasrigiisa balse waxa uu geeyay qayb gaar ah oo madaxbannaan, oo qaybtiisa u dhow. Arrintaasi ma ay jeclaan waxa aanay codsatay in afaaf loo sameeyo u dhexeeya qaybteeda iyo qaybta Suldaanka, labadii qayboodna sidaas ayaa ay isugu milmeen. Sidaas ayaa ayna u noqdeen iyada iyo Khaliifku laba aan kala maqnaan maalinta oo dhan. Arrinkaas waa ay jeclaatay, raalli ayaa ay ku ahayd oo waa ay ku faraxsanayd.

Suldaan Saleebaan al-Qaanuunii waxa uu noqday mid la soo baxay dhaqanno cusub oo ku kacaya wax aanu hore u samayn jirin, si kedis ah waxa uu u faray in la deldelo muftiga dawladda Ibraahiim Baasha oo ahaa saaxiibkiisii dhallaanimo. Deldelaaddu waxa ay u dhici jirtay dawladda Cismaaniyiinta in dun cas oo xariir ah qoorta la iskaga ceejiyo. Maastiim waxa uu eegay maskii Siirbenti eegmo weydiin leh, Siirbentina waxa uu u tilmaamay Rooksalaana, waxa uu ahaa shirqool ay iyadu soo abaabushay. Waxa uu ahaa shirqool Suldaanka ka shaki galiyay saaxiibkiisii dhallaanimo, muftigii weynaa. Arrintaa waxa ay u samaysay muftigu waxa uu doonayay in uu khilaafada la wareego Saleebaan al-Qaanuuni ka dib inankiisa mujaahidka weyn ah ee Mustafe, iyaduna arrinkaas ma ay jeclayn. Waxa ay doonaysay in uu khilaafada la wareego inankeeda uu suldaanku ka dhalay iyada ee aan la aqoon ee xanuunsanaya 'Saliim'.

Waxa duulay shaydaanka Maastiim si uu uga war doono Saliim, waxa aanu arkay isaga oo legga kaga jira adeegtada Raasheel, waa jaariyad Yuhuudiyad ah oo Isbaaniya ay uga keentay Rooksalaana. Waxa uu ahaa mid sirkhaan badan oo aan hoyga adeegtadiisa ka soo bixin marmar uu Suldaanku u yeedho mooyaane. Hogoogtii Maastiim waxa ka muuqday jeesjees, waxa aanu u duulay mar kale dhanka sixirooleyda Rooksalana.

Saleebaan al-Qaanuuni waxa uu ku dhegganaa in wiilkiisa Mustafe uu taliska uga danbeeyo, balse Rooksalaana ma ay jeclayn arrinkaas. Maalin Mustafe waxa uu ku maqnaa dhulka Beershiya, waakaas gelaya taandho si uu ula kulmo aabbihii Khaliifka ah. Waxa si kedis ah u soo weeraray shan nin oo afka duubtay oo aan la arkayn indhahooda mooyaane. Waxa ay ku ceejiyeen dun cas oo xariir ah, isaga oo iskaga caabbinaya ragga waxa awood uu lahaa oo dhan waxa uu arkayaa aabbihii khaliifka Saleebaan al-Qaanuuni oo muuqaalkan daawana isaga oo aan jixin jixayn. Waxa uu daawanayaa dilka wiilkiisa, waxa si kasta isugu xeeray sunta

maska oo aan ruuxdiisa ka tegin bar aan sixir ahayn, waa sixirka madow. Waxa ay ku qancisay quruxleyda Rooksalaana iyo muftigii ay iyadu keentay ka dib markii muftigii hore la dilay, waxa ay ku qanciyeen in uu wiilkiisa Mustafe abaabulayo afgenbi uu xukunka kaga tuuro, arrintaasi waxa ay ugu muuqatay Saleebaan in ay tahay khiyaano. Isaga oo ahaa nin ku ad'adag xeerka iyo qaanuunka ayaa aan wax dhibirsani aabbonimo ah u gelin inankiisa.
Mustafe waxa uu ku dhacay dhulka isaga oo ah raq ay naftu ka baxday, Rooksalaana waxa ay u dirtay cid disha cunugiisa yar si aanay wax tafiir ahi uga soo hadhin.

Waddadu uma ay sii xaadhnayn wiilka lama-yaqaanka ah ee Saliim, Suldaanku waxa uu lahaa wiil kale oo ay u dhashay Rooksalaana, balse waxa uu ahaa mid dagaalyahan halisa ah. Dhibtu waxa ay ahayd ma ay jeclayn iyadu kan, magaciisu waxa uu ahaa Baayasiid. Waxa ay sixirrooleydu u u dhigtay inankeeda dhagar, illaa ay ka dhigtay mid ka fallaagooba taliska. Sidoo kale dhagar ayaa ay u maleegtay Suldaanka illaa uu ka amray in la soo qabto Baayasiid oo la deldelo, isaga oo lagu eedeynayo khiyaano weyn.

Kani waxa uu ahaa wiilkii labaad ee Suldaanka ee la faro in la dilo, waa sixir madow oo noocee ah kan nacdalan. Nacdashu waxa ay isugu timi markii la dilayay. Dhaxalsuge Baayasiid waxa uu dhex taagnaa kayn isaga oo ay ku hareeraysan yihiin afar wiil oo uu dhalay Suldaankuna awoow u yahay. Waxa ku hareeraysnaa ciidan farobadan oo ka mid ah ciidanka Suldaanka, waa ay ku go'doomiyeen kaynta. Waxa ay dileen Baayasiid waxa kale oo ay dileen afartiisii carruur ahaa, waa ay dileen iyaga oo garanaya in uu Suldaanku arrinkaas ku farxdi doono oo uu abaalgud ku siin doono dilka wiilkiisa khaayinka ah, iyo carruurta bilaa danbiga ah ee uu awoowga u yahay. Hagoogtii Maastiim waa ay ka soo gudubtay dhoollacaddayntii jeesjeeska ahayd waxa aannay isu rogtay qosol gariir dheeldheel ah. Waxa aanu u duulay dhanka Rooksalaana mar kale.

Imika dhabbadii loo marayay kursiga khilaafadu waa ay xaadhan tahay, wiilashii Suldaankana waxa nool Saliim oo keliya, oo isu eekaysiinaya halyeeyada. Maastiim waxa uu dul duulay sixirrooleyda Yuhuudiyadda ah illaa ay ku dhimatay dhabta Saleebaan al-Qaanuunii. Waxa ay dhimatay iyada oo fulisay hawshii loo wakiishay. Ka dibna waxa dhintay Saleebaan al-Qaanuuni, inankiisii halyeyga loo eekaysiinayay ee Saliim ayaa carshigii fuulay. Waxba iskama ay bedelin xaalka Saliim, weli waxa uu ahaa sirkhaan halaq ah. Maastiim waxa uu ahaa mid faraxsan, kuma uu faraxsanayn doqonniimada khaliifka cusub, balse waxa uu ku faraxsanaa maskax badnaanta xaaskiisa. Waa Raasheel adeegtada Yuhuudiyadda Isbaanishka ah ee aanu ka ag tegi jirin ninkan ay saaqday. Waxa ay qaadday jidkii macalimaddeeda Rooksalaana, waxa aanay ahayd mid jihaysa ninkeeda. Iska daaye waxa ay hagi jirtay dawladda Cismaaniyiinta oo dhan, iyada ayaa ahayd taliyaha dhabta ah. Intaas oo keliya ma aha aabbaheed oo Yahuudi ah Jooseef Naasi waxa uu ahaa saaxiibka suldaan Saliim iyo la taliyihiisa arrimaha khilaafada oo dhan. Inta ugu badanna isaga ayuu la qaadan jiray sakhradda iyo akhaaq-xumada. Dawladdii Cismaaniyiinta ee weyneyd ee balaadhnayd waxa ay noqotay mid ay gacanta ku hayso gabadhYuhuudiyad ahi, sidaas ayaa uu xaalku ahaa berigaas. Sidaas ayaa aanay hagoogta Maastiim u ahayd mid faraxsan, sidaa ayaa aanay Yuhuuddii soo diray Rooksalaana iyo Raasheel u ahayd mid muusoonaysa.

Waa uu dhintay boqor-ismoodkii Saliimkii 2aad, waxaana dhaxlay boqor-ismood kale oo ah inankiisa Muraadkii 3aad. Waxa ay u muuqatay in ay yihiin taxane boqor-ismood ah oo xidhiidhsan. Waxa ay ahayd Raasheel mid daaha gadaashiisa ka maamusha dawladda, maya e awooddeedu waa ay sii korodhay waayo Muraadka 3aad waa inankeeda faashilka ah. Sidaas ayaa ay ku bilaabmatay in dhiigga Yuhuuddu uu dhuuxa u raaco lafaha dawladda Cismaaniyiinta iyada oo uu hagayo maska Siirbenti, dushana uu kala socdo shaydaanka

Maastiim ee muusoonayaa. Yuhuuddii ka soo qaxay Undulus waxa ay bilaabeen in ay sida ay doonaan ugu dheelaan cidhifyada dawladdii Cismaaniyiinta, iyaga oo qabanaya xilalka muhiimka ah ee ay rabaan oo dhan. Waxa intaaba ka darnaa waxa ay u soo jeesteen in ay eegaan dhulkii inta badan laga mabnuucay, ee illaa haddana aan loo ogolayn, waa dhulka Falastiin. Waxa eegmadooda raacay maska Siirbenti isaga oo xiisaynaya iyo shaydaanka kale ee Yuhuudiga ah Maasmiin oo xidhan hagoog cad.

Kuma uu dheeraan Maastiim joogista qasriga khilaafada, balse waxa uu u duulay barxad ku taalla badhtamaha magaalada Istaanbuul. Waxa uu ahaa muuqaal argagax leh waxa halkaa ka dhacayay. Waa nin kursi cagaha saaray luquntiisa iyo gacmihiisuna ay ku xidhan yihiin bir sare, waxa ku hareeraysnaa kun soo-xoome, waxaana ku xeernaa askar ka mid ah ciidanka Suldaanka. Maastiim waxa uu eegay maska Siirbenti oo ku duuduuban birta uu ninku ku xidhan yahay. Ninkaas xidhxidhani waxa uu ahaa Saabataay Sayfi[91], maalintuna waxa ay ahayd maalintii deldelaadiisa. Waxa uu ahaa maalin la isu soo baxay sida ka muuqatay. Saabataay Sayfi waa Yuhuudi, waxaana raacsanaa kun Yuhuudi. Waxa ay taageerayaashiisu ugu yeedhi jireen Masiixii badbaadiyaha ahaa, isagu se waxa uu isu yaqaannay magacyo badan sida inanka Ilaaha ee bikrada ah, Aabbihiin Yisraa'iil. Maya waxa aabu isugu yeedhi jiray inuu yahay Rabbiga ama Ilaaha sare. Waxa uu dhashay xilligii ka danbeeyay markii Yuhuudda lagu ugaadhsanayay Yurub. Waxa uu koray iyada oo ay Yuhuuddu isu sheegaan in ay soo dhowaatay soo-bixistii Masiixa badbaadiyaha ahi, ee uu Ilaahay ugu ballanqaaday,

[91] Saabataay Sayfi: Sabatay Sevi.

kaas oo iman doona si uu uga badbaadiyo dhibta ay ku jiraan iyo inuu dhulka oo dhan xukumo. Waxa uu bartay Talmuudka waxa kale oo uu bartay Kabaalaha. Markii uu barbaar noqday waxa uu la soo baxay in uu Yuhuudda u sheegto in uu yahay Masiixii badbaadiyaha ahaa iyo in aanay madaxa la soo kacayn illaa ay galaan dhulka Falastiin iyaga oo furanaya.

Waxa ku soo xoomay isaga boqollaal iyo kumannaan Yuhuud ah. Markii la gaadhay sannadkii 1666 C.D. Lix lix lix waa lanbarka bahalka sida uu Injiilku sheego, waxa uu u sheegay dadkii raacsanaa in waxa keliya ee ka hortaagan in ay Falastiin galaan in ay tahay dawladda Cismaaniyiinta ee macangagga ah. Waa dawlad ay hidde-sidayaasheedii Carbeed ee wasiirrada ahaa ay kaga bateen hidde-sidayaasha Yuhuudda wasiirrada ahaa, ee ay ku beertay Rooksalaana dhiigga salaadiinta ee markii danbena noqday suldaan-ismoodayaasha. Waxa ay ahaayeen raggaasi -Carabta ahi- rag hagaajiya waxa ay xumeeyaan salaadiintu, marka ay wax hagaajiyaanna xoojiya, waxa ay ahaayeen rag casila ama kursiga saara salaadiinta, waxa aanay maamuli jireen arrimaha dalka oo dhan. Waa rag sameeyay dawlad keliya oo xoog weyn, waa dawlad ay qasab tahay in aynu duminno haddii aynu Yuhuud nahay. Waa in aynu arrinkaa ku dhaqaaqnaa ama weligeen madaxa dhulka kala kici mayno.

Waxa uu soo banbixiyay Saabataay bannaanbaxyo ku baaqaysa in suldaanka la rido, suldaankuna waxa uu amray in la soo qabto oo lagu deldelo barxadda guud, ha arkaan dadku sida aanu qudha uga jarnay. Markii la deldelyay rag badan oo kuwa Suldaanka ah ayaa gacmaha soo fidinay si ay madaxiisa u qaataan. Waxa agtiisa joogay turjubaan, u sheegaya hadalka lagu leeyahay inta aan la dilin ka hor, Maastiim waxa uu u duulay dhanka turjubaanka si uu u dhagaysto.

Turjubaanku waxa uu Sabaataay ku lahaa:

- Waa aad waalatay mudane, waxa aan filayaa in doqonniimadaadu ay jaxiima kuu diri doonto.
Sabaataay ayaa eegay, waxa aanu ku yidhi:
- Hadalkaagu wax macno ah iima samaynayo hadda.
Sidii nin wax halis ah u sheegaya ayaa uu turjubaanki ku yidhi:
- Aad ii dhagayso, waxa aan ahay Yuhuudi kula mid ah, waa aan ku rumaysanahay adiga iyo dacwadda aad waddid ba. Waxa aan jecelahay in aan kula wadaago fikrad kaa badbaadinaysa dilka, oo aad suldaanka agtiisana maamuus ku helayso, iska daa taase hibo iyo waxsiin ayaa aad suldaanka ka helaysaa.

Wejiga Sabaataay waxa ka muuqday yaab, waxa aanu ku yidhi turjubaankii:
- Waa fikrad noocee ah taasi, miyaa aad igu ciyaaraysaa?
Si degdeg ah ayaa uu turjubaankii ugu yidhi:
- Waa in aad ku dhawaaqdo Islaamnimo hadda, waa inaad hadda sheegataa in aad toobbad keentay, oo aad u soo noqotay diinta Maxamadiyiinta oo aad ku xasishay.
- Waxa ay u eegtahay in aad igu dheeldheelayso, runtii ma Yuhuudi ayaa aad tahay kanoow?
- Sida aad moodayso ma aha Masiixoow, arrinkan waxa aad ka odhanaysaa uun carrabkaaga, qalbigana kama rumaysanaysid, dacwaddaada waxa aad ku dhex faafin doontaa si hoose kuwa daacadda kuu ah. Waxa aynu dhagar u maleegi doonnaa Suldaanka illaa uu ka dhacayo, waxa aanan kuu raaci doonnaa Falastiin si aad halkaa uga taagto dawladda Alle ee halkaa lagu yaboohay.

Indhaha ayaa uu yaryareeyay maskii Siirbenti isaga oo faraxsan, Maastim laftiisana waxa ka muuqday jinniyado Yuhuudi oo xun. Si la mid ah labadooda ayaa uu yeelay Sabaataay, waxaana dhacay wixii uu u soo jeediyay turjubaanku oo xaraf xaraf loo sameeyay. Sabaataay Sayfi

waxa uu shirka ka sheegay in uu islaamay, sidaas ayaa aanu Suldaanku ku cafiyay, waxa aanu bil kasta u qoray in la siiyo konton gobol oo maar ah. Waxa soo baxay Sabaataay oo xor furan ah, waxa aanu la baxay magaca Maxamed Afandaay, waxa aanu faray dhammaan taageerayaashiisii in ay Islaamka u digarogtaan sida uu sameeyay, oo ay Yuhuudiyaddana qarsadaan siduu u qarsaday. Magac gaar ah ayaa loo yaqaannay Yuhuuddaas dawladda Cismaaniyiinta dhexdeeda, waa Yuhuudda Dawnamada. Waxa laga wadaa Yuhuuddii toobad keenay ee Illaahay u soo noqday. Waxa ay ku faafeen cidhifyada dawladdii Cismaaniyiinta iyaga oo badhkood ka qabtay dawladda xilal aad u sarreeya.

Mid kasta oo iyaga ka mid ahi waxa uu lahaa laba magac, magac Islaami ah oo uu muujisto dadkuna u yaqaannaan iyo magac Yuhuudi ah oo uu qarsado oo uu kula dhaqmo dadka la caynka ah. Waxa ay ku fulin jireen shacaa'irtooda Yuhuudiga ah oo dhan albaabada xidhan gadaashooda, marka laga reebo shaqada maalinta sabtida si aanay u qaban indhaha dadku. Waxa ay farsameeyeen buugaagta yaryar ee jeebka lagu qaato ee la qarin karo, si ay ugu fududaato in ay qariyaan. Waxa ay ahaayeen Yuhuud haysta mad'hab u gaar ah oo ka duwan Yuhuudda dunida oo dhan, waxa dhexdooda caan ka ahaa xafladaha muldhukha ah ee la qaawan yahay, ee ay gabdhaha ay qabaan isku waydaarsadaan. Waxa ay lahaayeen ciid nalka la demiyo oo sida xoolaha la isu fuulfuulo, cunugga u calol gala ciiddaasna waxa ay u haysteen in uu yahay mid barakaysan. Sinadu agtooda xaaraan kama ay ahayn, si daranna waxa ugu dhex faaftay sinada qoyska. Waxa ay u arkayeen Falastiin in ay tahay dhulkii ballanqaadka, waxa aanay doonayeen in ay qabsadaan si ay u soo dadajiyaan ballanta Tawraad, oo ah Masiixa badbaadiyaha ah oo ku soo degi doona iyaga oo dunida ka maamuli doona Quddus. Si ay arrintaasi u dhacdo ma ay sugayn sida Yuhuudda kale balse waxa ay ku hawlanaayeen soo dedejinta imaatinkiisa si ay Falastiin u qabsadaan, si ay ugu fududaato in uu dunida

Falastiin ka xukumo. Kuwani waxa ay ahaayeen iniinyaha wax foolxun oo sannadihii ka danbeeyay soo baxay, waa wax la naco oo loo yaqaanno Sahyuuniyadda.

Waxa ka muuqday wejiga Maastiim jinniyado murugo sheegaya, waxa uu u duulay hawada si uu ula socdo waxa dhacaya. Waxa loo mastaafuriyay Sabaataay Sayfi dalka Albaaniya, halkaas oo uu ku dhintay isaga oo uu dilay cudurka Koleeraha. Taageerayaashiisu weli waxa ay rumaysnaayeen aragtidiisa, inkasta oo uu Masiixoodi dhintay. Waxa ay yidhaahdeen cirka ayaa uu u baxay waxa aanu noqday malag, waxa aanu soo noqon doonaa marka ay dawladdoodu ka dhalato Falastiin. Waxa ay Falastiin u arkayeen si daran, dawladda Cismaaniyiintuna waa ay u diidaysay arrinkaas. Waxa kordhay tirada iyaga ka mid ah ee qabanaya xilalka sare ee xasaasiga ah ee dawladdii Cismaaniyiinta, waxa ay noqdeen hoggaamiyayaal ciidan, wax aanay noqdeen kuwo ciyaaraya kaadh kale, waa kaadh loo bixiyay Jimciyadda "Midawga iyo Dallacsiinta".

Sannado badan ka dib, waxa uu u orday Maastiim dhanka qasriga khilaafada Cismaaniyiinta ee cusub, waa qasriga Yildiis e. Waxa uu galay dhanka carshiga, waxa aanu ku arkay halkaas muuqaal taariikhi ah. Khaliifka Cismaaniyiinta ee cusub Cabdixamiidka 2aad ayaa la taagnaa hoggaamiyaha iyo aasaasaha dhaqdhaqaaqa Sahyuuniyadda Tiyuudar Hertisal. Waxa uu Hertisal ku lahaa:

- Mudane haddii aanu helno Falastiin waxa aanu siin doonnaa dawladda Cismaaniyiinta wax badan, waxa aanu ognahay in Khilaafadu ay ku jirto xaalad dhaqaale oo adag dagaaladii badnaa ka dib, annaga ayaa idiin hagaajin doonna xaaladdiina dhaqaale annaga oo aan waxba idin amaahinayn, waxa keliya ee aanu rabnaa waa in Falastiin nala siiyo.
- Maxaa aad Falastiin u rabtaan gooni ahaan? Waxa aad degi kartaan gobol kasta oo ka mid ah dawladda Cismaaniyiinta.
- Mudane Falastiin waa saldhiggii hore ee Yuhuudda.

- Falastiin sal uma aha Yuhuudda oo qudha, ee waxa ay sal u ahayd diimaha oo dhan.
- Laakiin annaga ayaa ahayn ciddii ugu horreysa ee degtay, Suldaan.
- Beenaale, waxa idinka hor dagay Finiiqiyiinta iyo Kancaaniyiinta iyo dad kale oo badan.
- Balse waxa aanu ahayn dadkuu muddada ugu dheer ka talinayay.
- Maya waxa aad xukunteen 400 oo sanno muslimiintuna intaa saddex laabkeed. Waxa aanu xukumaynay 1200 oo sanno welina annaga ayaa ka talina.
- Mudane Tawraad waa aad rumaysan tihiin, waxa noogu yaalla ballanqaad cad inaanu leennahay dhulka barakaysan.
- Tawraaddiinu ma aha Tawraadda aanu rumaysannahay, xataa Tawraaddiina la leexiyay waxa ku cad in dhulkaa loo ballanqaaday addoomaha alle ee wanwanaagsan, idinkuna ma aydaan wanaagsanayn marka laga reebo siddeetan saanno oo xilligii nebiyada ah mooyaane, afartii boqol ee kale wixii ka dhinnaaba waa aad xumaydeen.
- Kuma jirno dood taariikheed mudane, maanta waxa aanu u nimid in aanu idiin fidinno gacan taageero. Waxa aanu doonaynaa in aanu idiin celino abaal wanaagsan. Waxa aad nagu qaabisheen dhulkiinna markii ummadaha kale oo dhami ay na soo eryeen, annaguna waxa aanu haysannaa hanti, idinkuna hanti iyo maal ayaa aad u baahan tihiin. Waxa keliya ee aanu rabnaa waa dhul yar oo aannaan dhaafi doonin. Dhulka kale oo dhan ayaa aanu uga soo haajiri doonnaa si aanu u degno. Dhulkiinnu xad ma laha mudane, idinkuna cidhiidhyi mayno. Intii aanu noolaan lahayn annaga oo ku kala tafaraaruqsan dhulkaas iyo dhulkaas, nagu ururiya dhul keliyaata.
- Anigu yaa aan ahay marka aan Falastiin kaa iibinayo. Ma waxa aad moodaysaa hanti aan leeyahay? Oo aan gadanayo ama iibinayo marka aan doono? Waa hanti ay leedahay ummadda Islaamka oo dhami, waa halkii laga dheelmiyay

nebi Maxamed, waxa ay ahayd qibladayadii. Ugu tag ummadda Islaamka qof qof iina keen markhaati iyo cid kugu gargaarta, waa aanan kaa iibin doonaa.
- Waxa aanu dusha u ridan doonnaa hagaajinta xaaladdiina dhaqaale, waxa aanu idiinka taagi doonnaa Yurub teed adag oo dhanka Aasiya ah, waxa aanan dhisi doonnaa ilbaxnimo ku lid ah dibusocodka.
- Awowyaashay waxa ay u dagaalameen dhulkan dartii, waxa aanay ku waraabiyeen dhiiggooda qaaliga ah, iska haysta malaayiinkiinna lacagta ah. Haddii la burburiyo dawladdayda tan ah markaas lacag la'aan ku qaata Falastiin, se aniga oo nool ma ogoli in qaybo jidhkayga ka mid ah la qaato. Haddii aad sii waddaan nacasnimadan waa aan ka eryi doonaa Yuhuudi kasta dhulkayga waxa aanan idiin madalufin doonaa meesha ay ummaduhu hilibkiinna u hammuun qabaan.

Waxa ay isu rogtay hagoogtii Maastiim mid cadhaysan, se Hertisal waxa uu siiyay suldaankii dhoollacaddayn balaadhan sida ay caanka ku yihiin Sahyuuniyaddu, wuu salaamay waa aanu iska baxay. Waxa uu doonayay in uu boqorka lacag ku gato, se waxa uu ogaaaday macdanta Cabdixamiidka 2aad si wanaagsan. Waxa uu kula xanshaashaqay naftiisa in uu jiro xal keliyaata kaas oo ah in aanay Yuhuuddu tagayn Falastiin iyaga oo aan ka dul tallaabsan raqda Cabdixamiid. Waa uu ka baxay Hertisal qasrigii Cismaaniyiinta, Maastiimna waa uu raacay isaga oo aan ka hadhayn.

Sannado ka dib dhacdadan Hertisal waxa uu u khudbadaynayay Guurtidii reer Sahyoon ee shakiga lahayn. Qorshihiisu waxa uu ahaa in maska Siirbenti ku wareego Yurub si loo rido dhammaan boqortooyooyinka ka jiraa, ka dibna uu masku ku dego dhulka Carabta oo uu rido dawladda Cismaaniyiinta. Shirkii Sahyoon ka dib waxa uu ku guulaystay maskani in uu rido nidaamkii Qaysariga ee Ruushka oo lagu riday kacaankii Ruushka, taas oo waddanka gacanta u gelisay xukun Shuuci Yuhuudi ah. Waa kaas maskii Seerbenti soo degay dhulkii Carabta. Waxa uu Hertisal ka

sheegay shirkii Sahyuuniyadda in ururka Maasooniyaddu uu yahay agab ay reer Sahyoon u adeegsadaan dhisidda qorshaha Yuhuudda goob iyo goor kasta. Maastiim waxa uu ka daba duuulay Hertisal oo u kacay dal la yidhaahdo Saalooniika, Giriigga; oo Cismaaniyiintu ka taliyaan xilligaas. Halkaas ayaa uu waxkasta ka fahmay Maastiim.

In kasta oo Yuhuuddii sheegtay Islaamnimada ee ahaa taageerayaashii Sabaataay ay ahaayeen kuwo ku filiqsan dhammaan cidhifyada dawladda Cismaaniyiinta oo dhan, haddana isu-taggooda ugu weyni waxa uu ahaa Saalooniikada Giriigga ee Cismaaniyiinta. Halkaas waxa ka firfircoonaa maxfal ay leeyihiin Maasooniyiinta Talyaaniga raacsan, oo ay isugu yimaaddeen Yuhuuddii Dawnama kuwaas oo xilal sare ka hayay dawladda Cismaaniyiinta, gaar ahaanna ciidanka. Dhammaantood waa uu ururiyay waxa aanu u sameeyay jimciyad la dhaho jimciyadda Midawga iyo Dallacsiinta. Waxa uu ka dhigay hannaanka jimciyadda mid u dhigma ka ay raacaan maxfaladda Maasooniyaddu. Jimciyaddani waxa ay lahay yool qudhaata oo ah in ay ridaan suldaanka Cabdixamiidka 2aad, qiime kasta oo ay ku kacayso. Waxa istaadhmatay agabka warbaahinta Yuhuudda ee cududdooda la yaqaanno, waxa istaadhmay Maastiim oo markii ugu horreysay la arkay cududihiisa iyo gacmihiisa, waxa uu lahaa ciddiyo dhaadheer iyo gacmo duq ah.

Waxa ay u muuqatayba in dunidiba ay ku kacday madaxa suldaan Cabdixamiidka 2aad, waxa ay sameeyeen ciyaartoodii la yaqaannay. Waxa ay ku kiciyeen Suldaanka shacabka iyaga oo faafinaya warar been-abuur ah iyo dhacdooyin la malmalluuqay oo loo eekaysiinayo in uu isagu sameeyay. Si kedis ah waxa uu suldaankii u noqday kaligiitalis iyo dhiigyocab. Waxa ay ku beereen garaadka dadka in ay waajib tahay in dawladda Cismaaniyiinta laga xoreeyo kelitaliska Islaamiyiinta dhegaha adag, oo loo rogo dawlad ilbax ah sida ta Ingiriiska ama Faransiiska. Waxa ay baahiyeen in Suldaanku uu cadaw u yahay ilbaxnimada iyo in uu

aqoonyahanka ka tuuro daaqadda qasrigiisa. Waxa ay sheegeen in uu diiddan yahay in uu raaco ku shaqaynta dastuur ilbax ah oo u dhigma dastuurka dalalka ilbaxa ah, oo uu iska daayo ku dhegsanaanta dastuur duug ah oo boodh leh. Arrintaas oo dhan waxa buunbuuniyay warbaahinta oo gacan ka helaysa hantiilayaasha Yuhuudda. Waxa ku soo biiray Jimciyadda Midawga iyo Dallacsiinta rag badan oo ka mid ah ciidanka Cismaaniyiinta, iskaba dhaafe wasiirka maaliyadda ee dawladda Cismaaniyiintu waxa uu ahaa Yuhuudi. Waxa uu badhitaaray in uu ku shaqeeyo hannaanka Yuhuuddda ee maalgelinta oo u sahlaya Yuhuudda in ay suuqa gacanta ku dhigaan. Madaxa xafiiska warbaahintu waxa uu ahaa Yuhuudi. Waxa aanu xidhi jiray wargeys kasta oo qoraya hadal liddi ku ah Jimciyadda Midawga iyo Dallacsiinta. Waxa ay u muuqatay in xafladdii Yuhuuddu ay ka bilaabmatay dawladda Cismaaniyiinta, kumana ay raalli ahayn in ay u kala jarjaraan qurub qurub aan dib u soo noolaanaynin mooyaane.

Waxa uu soo saaray suldaan Cabdixamiidkii 2aad xeer adag oo la xidhiidha socdaalka Yuhuudda ee Falastiin. Waxa uu ku amray Yuhuudi kasta in uu qaato baasaaboor cas oo u diidaya qofka sita in uu Falastiin galo, in uu wax dhul ah ka iibsado.

Waataas taariikhdu inala eegaysa innaga iyo Maastiiim muuqaalka koox askar ah oo ka soo kicitimay Saalooniika si ay xukunka uga siibto Cabdixamiid si qasab ah oo xoog ah. Ciidankii waxa uu soo gaadhay Istaanbuul, waxa aanay u soo galeen Suldaankii si ay ugu dhiibaan warqaddii uu isku casili lahaa. Waxa ay ahaayeen afar nin oo midkood Yuhuudi yahay saddexda kalena midna Carab ama Cismaani ma uu ahayn; mid waxa uu ahaa Armeeni, midna Albaani midno Joorjiyaan. Maastiim waa uu qoslayay ilbidhiqsigan, maya wuu qahqahlaynayay. Suldaankii waxa loo mastaafuriyay Saalooniika, waxa lagu dhex tuuray Yuhuuddii, waxaana lagu xidhay guri ka mid ah guryaha Yuhuudda muddo saddex

sanno ah. Dhagihiisa ayaa uu ku maqlayay Suldaanku Yuhuudda oo ku heesaya: "waa uu dhacay suldaankii kadeedka ahaa, ee Yuhuudda ku qasbay in ay qaataan baasaaboorka cas ee ka mabnuucay Falastiin." Maastiim weli waa uu qoslayay isaga oo si shaydaani ah u faraxsan, waa ay u ahaatay in uu qoslo. Jimciyaddii Midawga iyo Fallacsiintu waxa ay muslimiinta khaliif uga dhigeen Maxamedkii 6aad. Waxa uu ahaa khaliif magac-u-yaal ah, talada dalkana waxa gacanta ku hayay jimciyadda Midawga iyo Dallacsiinta oo ah Yuhuud. Haa, tani waxa ay ahayd waqti waqtiyada ka mid ah oo ay Yuhuuddu gacanta ku haysay khilaafada Islaamka ee balaadhnayd.

Jimciyaddu waxa ay meesha ka saartay baasaaboorkii casaa. Yuhuudi kasta waxa uu xaq u yeedhay in uu u hijroodo goob kasta oo Falastiin ka mid ah marka uu doono iyo in uu dhulkuu doono ka iibsado. Dayntii lagu lahaa dawladda Cismaaniyiintu oo ahayd soddon milyan xilligii Cabdixamiid waxa ay noqotay afar boqol oo milyan. Waa sidii ay ku sameeyeen dawlad kasta oo ay hore gacanta ugu dhigeen. Yuhuuddu meelkasta inta ay isaga yimaaddeen ayaa ay Falastiin isku soo shubeen, illaa ay noqotay tirada Yuhuudda ee Falastiin joogtaa shan iyo siddeetan kun oo Yuhuudi.

Midawga iyo Dallacsiintu waxa ay u kaseen in ay dalka ku xukumaan si u janjeedha qawniyadda Turkida, waxa aanay xaqiri jireen isirka Carabta badawda ah, iyaga oo sheegi jirey in isirka Turkida ahi uu yahay isirka wax furtay ee sarreeya. Aragtida cunsuriga ahi waxa ay keentay in uu dhasho aragti ka soo horjeedda oo la mid ahi. Carabtu waxa ay ka daaleen taliyaashooda Turkida ah ee isu haysta in ay dadka ka sarreeyaan, waxa aanay Carabti dooneen in ay Carabnimadooda kala xoroobaan kuwan. Waayo xilalka ay Yuhuuddu ka haysay dawladda Cismaaniyiintu waxa ay gaadhay heer aan laga aamusi karin, Yuhuuddina waxa ay galeen Falastiin oo ay markii hore mabnuuc ka ahaayeen. Carabti waxa ay ku fikireen in ay gobonnimo ka qaataan

Turkida oo ay salka u dhigaan dawlad Islaamiya oo cusub oo uu ka talinayo khaliif Carab ahi, oo u soo celiya Carabnimadoodii iyo weyneyntoodii hore. Maastiim hadda waxa uu joogay Falastiin, gaar ahaanna magaalada Quddus. Waxa uu dul duulayay masaajidka al-Aqsa isaga oo dhoollacaddeynaya. Tani ma ay ahayn dhammaadka hayaanka, Maastiim waa uu ogaa in ay tahay bilawgii, bilawga xilliga Antikiriistoos.

DHAN

Iftiimin

Maastiim waa shaydaan Yuhuudi ah oo ay yartahay meelaha lagu sheegay. Magaciisa waxa lagu xusay oo qudhaata kitaabka Yuubiilaad oo ah kitaab diineed Yuhuuddu leedahay oo hore. Sheekadan waxa aan ku xusay oo dhami waa dhab, waxa aanu ku qoran yahay buugaagta taariikhda ee la hubo. Ha u malayn in aan huuhaa kuu laabayo, dhabta ayuun baa aan kuu soo bandhigayaa aniga oo ka soo qaadanaya ilaha loogu kalsooni badan yahay. In taariikhda laga beensheegaa waa ciyaar weyn oo cid gaar ah u danaynaysa, ciddaasina waa Yuhuudda. Yuhuudda oo dhan ma aha balse waa faraca Sahyooniyadda ee iyaga ka midka ah.

Sheekada Rooksalaana iyo suldaan Saleebaan al-Qaanuuni waxa ay ku jirtaa musalsalka Turkiga ah ee la yidhaahdo "Xariim Suldaan". Rooksalaana waxa ay u bixiyeen magaceeda Carbeed ee Hiyaam, waa ay muujiyeen in ay tahay gabadh dhagar badan oo wax badan shirqoosha. Waa musalsaladda sida dhabta ah waaqica ugu fadhiya marka laga reebo daraamaha badan ee laga buuxiyay. Jimciyadda Midawga iyo Dallacsiintu waxa ay ahayd koox ku baaqaysa Layberaaliyadda. Dhibtu waxa ay ka taagan tahay cida samaysay fikradaha waaweyn ee dunida waa ururka Maasooniyadda, dadka qaata ee shacabka ka mid ka ahina waa kuwo ka dhoohan oo aan kasayn cidda fikraddan la timi. Marka aad weydiiso qof bidixda u janjeedha xaggee ayaa aad afkaartaada ka keentay waxa uu ku odhanayaa Kaaral

Maarkas [92] iyo Firidirik Iinjilis [93] dhammaantoodna waa Maasooniyiin rasmi ah. Marka aad weydiiso qofka u dooda Calmaaniyadda ama Layberaaliyadda ee aad tidhaahdo xaggee ayaa aad ka keentay waxa uu ku odhanayaa Foolteer[94] iyo Jaan Jaak Rooso[95], iyaguna waa Maasooniyiin rasmi ah. Maasooniyaddu waa isha fikradaha waaweyn ee dunida, haddii la doono fikradahaasi ha iskaba soo horjeedaane. Ujeeddadu waa uun in dadka laga fogeeyo afkaartoodii dhaladka ahayd ee asalka ahayd, oo loo sameeyo afkaar ay ku murmaan, iyada oo laga yaaboba in aanay markii hore waxba isku haysan.

Sheekada Maastiim weli ma ay dhammaan, hadda aan kuu soo bandhigo waraaqo kale.

- **Waraaqda koowaad**: waa waraaqda xaashida danbidhaafka, taas oo ay masiixiyiintu dhul jannada dadka uga iibin jireen.
- **Waraaqda labaad**: iyo ta saddexaad waa isku mid, waa Israa'iil. Waraaqda hore waxa ka muuqda askari Israa'iili ah oo meel gaadhka ka haya waxa hortiisa ka muuqata xiddigtii Daa'uud oo cad.
- **Waraaqda saddexaad:** waxa ka muuqda sawirka dagaalka askari Israa'iili ah iyo kooxaha wax-iska-caabbinta Falastiin, oo midkood ay tahay gabadh xijaaban oo dhagax tuuraysa.

[92] Kaaral Maarkas: Karl Marx.
[93] Firidirik Iinjilis: Friedrich Engels.
[94] Foolteer: Voltaire.
[95] Jaan Jaak Rooso: Jean-jacques Rousseau.

- **Waraaqda afraad**: waa waraaqda Qaramada Midoobay. Waxa ka muuqda laba nin oo dhar rasmi ah xidhan oo isku qaylinaya, mid waa caddaan midna waa madow.
- **Waraaqda shanaad**: waa waraaqda jaa'isadda Noobel ee nabadda. Waxa ka muuqda sawirka gabadh u eeg mid xun oo qoorta ay u sudhan tahay abaalmarin weyni.
- **Waraaqda lixaad**: waa waraaqda Ruushka, waxaana ka muuqda aqalka Kirimiliinka.

***

Dhiig Ku Daatay Dhulkii Ballan-qaadka
(1500 – 1947 C.D)

Waxa uu ahaa mid dhex dabbaalanaya badweynta fikirkooda, marna wuu quusayay marna wuu dul socday. Afkaartoooda badh ka mida ah waxa uu ku hayay gacantiisa ciddiyaha dhadheer, waxa aanu ka eegay gadaasha indhashareerkiisa cad ee cabsida leh. Wuu dhoollacadeynayay, wuu degganaa. Meel fog marka aad ka aragto ma garanaysid cidda uu yahay, iyo sida uu u dhex dabbaalanayo afkaartooda. Hadda waa aad garatay, kaasi waa shaydaanka Yuhuudiga ah ee Maastiim. Waxa uu dhex dabbaalanayay badda fikir ee mad'hab Masiixiya oo cusub. Waa mad'hab ka soo baxay Yurub markii Yuhuudda laga eryay kadib. Maastiim waxa uu dhex dabbaalanayay fikirka xerta mad'habka Borotestanka[96].

"Yuhuuddu waa ubadkii Eebbe iyo soociisii,
Masiixiyiintuna waa shisheeye.
Shisheeyuhu waa in ay raalli ku noqdaan
in ay sida eyda iska cunaan hadhaadiga
ka daata weelka madaxda."
Maartin Luudter[97].

[96] Borotestanka: Protestant.
[97] Maartin Luudter:Martin Luther.

Waxa uu helay fikirkan oo dhex sabbaynaya badda afkaartooda, waa fikrad soo jiidatay dareenka shaydaanka Yuhuudiga ah. Waa fikrad uu yidhi Maartin Luudter, abuuraha mad'habka Borotestanka oo dhan. Waa wadaad nacay awoodda Boobka ee Ilaahiga ah. Waxa uu nacay iibinta xaashida danbi-dhaafka ee dadka u dammaanad qaadaysa in ay ka dhowrayso naarta oo ay jannada gelinayso. Dhowr arrin oo kale ayaa uu nacay oo uu si muuqata uga soo hor jeedsaday oo xamaasad leh. Mad'habkiisan waxa uu ugu dhowaanayay Yuhuudda, waxa aanu ka soo hor jeeday ugaadhsigooda, in laga eryo dhulka iyo in loola dhaqmo in ay yihiin gacan-ku-dhiiglayaal abadi ah oo dilay Ciise Masiix.

"Meel iska dhig Injiil waa la leexiyay.
Kitaabka keliya ee saxda ahi waa ka Yuhuudda
ee Tawraad wax kale oo kaa ka duwanina ma jiraan.
Talmuudka ma aha in aynu u gubno
sidan naxariista daran."
Maartin Luudter.

Waa fikrad kale oo uu gacantiisa ku qabtay oo uu si dhugasho leh u eegayay. Waa fikrad ka dhigtay Tawraaddii Yuhuudda bartii Injiisha mad'habkan Masiixiga ah ee cusub. Masiixiyiintii hore ee asalraaca ahaa ee Kaatoligu waxa ay ku eedeeyeen in uu yahay Yuhuudi is-qarinaya. Muddo kad dib waa ay is-geddisay aragtida ninku, waxa aanu soo saaray wax kale oo yaab leh:

"Yuhuuddu waa noole ay waajib tahay in si degdega loo tirtiraa,
waa dirxi wiswisa, oo uskag ah oo nacdalan weligood.
Waxa waajib ah in aanu ka qaadno buugtooda
oo dhan oo aynu gubno. Waa in aynu
dhammaantood ka erinaa
dhulkeenna."
Maartin Luudter.

Maastiim ayaa eegay fikirkan si dhugasho leh, ninkani miyaa aanu mardhowayd ahayn mid Yuhuudda jecel oo soo dhowaynaya? Maastiim oo arrinkaa ka fekeraya waxa u yeedhay maskii Siirbenti, waa yeedhmo uu ka fahmay in kasta oo afkaarta ninkani ay noqotay mid ka soo horjeedda Yuhuudda haddana waa aragti Sahyooni ah. Waxa uu bilaabay Maastiim in uu dabbaasho si uu u baadho afkaartan Sahyooniga ah ee dhex yuururta kasmada Borotestanka ah. Waxa uu helay iyada oo ku qoran khad weyn oo cas, oo ka dhex mudhay afkaarta kale oo dhan:

"Waa in aynaan hor istaagin tegitaanka Yuhuudda ee Falastiin.
Waa in aynu siinno waxkasta oo ay u baahan yihiin
hayaankoodaas, waayo? Marka ay awood u yeeshaan
Yuhuudduin ay Falastiin ka dhistaan dawlad
ay leeyihiin waxa soo degi dooona
Ciise Masiix si uu dunida
uga badbaadiyo sharka."
Maartin Luudter.

Fikraddani waa dhashii dhabta ahayd ee Sahyooniyadda, waxa uu soo baxay intii aanu dhalan Hertisal, maya xataa ka hor dhalashadii Sabaataay Sayfi. Waa uu iskaga tagay Maastiim afkaartii Maartin Luudter waxa aanu baadhbaadhay fikirka dib-u-habeeye Borotestaani ah oo kale oo gadaashii yimid oo la odhan jirey Kaalfin[98]:

"Ribadu ma aha xaaraan
waa xalaal aanay
waxba ku jirin."
Kaalfin.

[98] Kaalfin: Jean Calvin.

Fikirkani waxa uu ka qaybqaatay fududaynta dhammaan adeegyadii dhaqaale iyo qabsashadii ay Yuhuuddu qabsadeen dhaqaalaha dhammaan wadamada Yurub. Kaalfin waxa uu si xamaasad leh ugu baaqi jirey fikirkii Maartin Luudter, fikirkiisanina waxa ay kala kaxaysay kiniisadda iyo shacabka Ingiriiska, taas oo keentay in uu shidmo dabkii kacdoonkii Ingiriiska, taas oo aynu dhalada kala daawannay Siirbenti mar hore.

Waa uu iskaga tagay Maastiim badda afkaartii Borotestanka waxa aanu u duulay cirka Yurub oo uu ka socday dagaal diimeed u dhexeeyay taageerayaasha mad'habka Borotestanka iyo xerta Mad'habka guunka ah ee Kaatoliga. Waa dagaal diimeed oo ay dad badani ku dhinteen, kaas oo ay Yurub si diiniya ugu kala qaybsantay qayb Kaatolig ah sida Faransiiska, Talyaaniga iyo Isbayn halka Ingiriiska iyo Jarmalku ay ka noqdeen Borotestan.

Maastiim waxa arkay dagaalkan dhexdiisa Borotestankii oo ka hulleelaya Ingiriiska iyaga oo ka gudbaya badweynta una socda Maraykanka. Waxa ay u malaynayeen hayaankoodani in uu la mid yahay hayaankii muqadaska ahaa. Waa maalmihii ay Yuhuuddu ka baxeen Masar markii uu gumaystay Fircoon, ee uu Muuse u jeexay badda uuna gaadhsiiyay dhul lama-degaan ah oo ah dhulka Siinaay ama dhulkii baadida.

Borotestanku waxa ay uga yaaceen ugaadhsigoodii Yurub dhul baadi ah oo cusub oo ah dhulka Maraykanka. Dhulkaas waa ay ku farxeen waxa aanay ka noqdeen aqlabiyad sare, sidaas ayaa uu mad'habka Borotestanku u noqday mad'habka ugu badan Maraykanka.

Maastiim ma uu garanayn waxa ay ka dhigan tahay taasi, waxa keliya ee uu kasayay waxa uu ahaa in Borotestankani ay aqbaliyad ka noqdeen dunida iyo in ay taageersan yihiin oo ay kaalmeynayaan ku noqoshada Yuhuudda ee Falastiin. Labada dawladood ee ugu waaweyn ee taageeri doonaana waxa ay

kala yihiin Maraykanka iyo Ingiriiska. Si wacan uma uu garanayn waxa ay taasi ka dhigan tahay isaga oo duulaya dusha Masaajidka Aqsa, waqtiga ayaa ku filnaa in uu fahansiiyo. Yuhuuddi waxa ay bilaabeen hadda in ay u hayaamaan Falastiin kun daba socda kun, waa markii Jimciyadda M idowga iyo Dallacsiintuuu qabsaday taliska dawladdii Cismaaniyiinta. Waa kaas maskii Siirbenti ku siqaya barxadda Masaajidka Aqsa ee Qubbada Sakhra isaga oo deggan. Waxa ay u muuqatay in maska Siirbenti in uu gaadhay yoolkiisii ugu danbeeyay, waxa aanu u fulin doonaa si guul leh, sidii uu u fuliyay heerarkii ka horreeyay ba.

Markii uu dhintay Hertisal waxa uu Maastiim u duulay dhanka nin kale, waa ninkii ka dhaxlay Hertisal hoggaaminta Sahyooniyadda Xaayiim Waysmaan[99], waa caalim Kimistari oo Yuhuudi ah. Waxa uu u diray Loodh 'Rootsheeld' in uu booqdo Falastiin xilligii hayaanka Yuhuudda. Ninkasi waxa uu sameeyay falal foolxun oo aad u cajab gelisay Maastiim. Markii hore waxa uu magaalada Yaafa ka sameeyay shirkad horumarinta dhulka, oo ujeeddadeedu ahayd in ay dhulka ka iibsato Falastiiniyiinta si nidaamsan. Waxa uu dhulkii ugu weynaa ka iibsaday qoys reer Lubnaan oo lahaa dhul aad u weyn kuwaas oo deggenaa Yurub. Waxa uu bilaabay Waysmaan in uu deegaanno gumaysi ka sameeyo dhulkii uu ku guulaystay in uu iibsado. Kaddib waxa uu seeska u dhigay kooxo hubaysan oo loo yaqaannay dhowrayaasha Haashomiir, waa Yuhuud hubaysan oo leh qaab yaab leh. Waxa ay madaxa ku xidhan jireen cumaamadda cad ee Carabta, laabtana waxa ay ku xidhan jireen laba suun oo kala go'an oo madmadow. Kuwaaso waxa ay ahaayeen gaadh

[99] Xaayiim Waysmaan: Chaim Weizmann.

ilaaliya dhulalka gumaysi ee Yuhuudda. Waxa uu abaabulay Wasymaan bannaanbaxyo lagu dalbanayo in Falastiin laga aqoonsado afka Cibriga. Isaga oo dhex duulaya Maastiim jidadka Falastiin waxa uu arkay wargeys furan oo jidka agtiisa lagu tuuray, wuu eegay waxa uu magaceedu ahaa Karaamil. Waxa bogga hore kaga xardhanaa digniin ku socota Carabta oo dhan oo looga digayo yagleelidda dawladda Yuhuudda, waayo waxa ay noqon doontaa soodh sumaysan oo dhabarka kaga mudan Carabta. Waa uu dhoollacaddeeyay Maastiim dhoollacaddeyn weyn, kaddibna meeshii waa uu iskaga tagay isaga oo u duulay goob kale.

Si kedis ah ayaa ay dunidi u gilgilantay, waxa bilaabmay dagaalkii labaad ee adduunka. Waxa is-bahaystay Ingiriiska, Faransiiska, Ruushka iyo Talyaaniga iyaga oo ka soo horjeeda dawlad qudhaata oo ah Jarmalka. Dawladda Cismaaniyiintu waxa xidhiidh ah oo dhow ama mid dheer toona lama ay lahayn dagaalkaas Yurub, balse jimciyadda Midowga iyo Dallacsiinta ayaa ku qanciyay khaliifkii maqaarsaarka ahaa in uu dagaalka galo isaga oo garab saaraya Jarmalka. Sidaas ayaa ayna u dhacday. Gilgilkii wuu sii batay waxaana adkaaday lulanka cabbaayada Maastiim isaga oo eegaya guuldarrada is-dabajoogga ah ee ay la kulantay dawladdii Cismaaniyiintu. Waxa ka baxay gacantii Muslimiinta dawlado badan sida Balqaanka, Seerbiya, Giriigga, Buurta Madow iyo Qooqaaska. Dawlad keliya oo Carbeed ma ay taageerin Cismaaniyiinta, taa lidkeeda dhammaantood waxa ay ku qaylinayeen cod doonaya madaxbannaani in ay ka qaataan dawladda Turkiga dagan ee liidata. Dawladda Cismaaniyiintu xaalkeedu ma uu wanaagsanayn, dhabtii ma uu wanagsanayn.

Waa uu mudnaa Maastiim in uu u qoslo si dheeldheel isaga oo daawanaya ugu danbayn bilowga waxa loogu yeedhay Kacdoonka Carbeed ee weyn. Mar kale ma ay kicin waxa ay hurtay mar ay dawladdii Cismaaniyiintu ku foogganayd dagaalkii labaad ee adduunka. Maastiim si aad ah ayaa uu u xamaasadaysnaa. Waxa uu u duulay bu'da dhacdooyinka,

waxa uu ahaa boqorka Xijaas iyo shariifka Maka oo loo yaqaannay Shariif Xuseen mid dhambaallo la wadaaga safiirka Ingiriiska ee Masar oo loo yaqaannay Makmaahoon[100]. Waxa uu ninka Ingiriis rabay in ay Carabtu ka qayb galaan dagaalka labaad ee adduunka iyaga oo taageeraya Ingiriiska kana hor imanaya dawladda Cismaaniyiinta. Taas lidkeeda waxa uu Ingiriisku ballanqaaday in la sameeyo dawlad weyn oo Carbeed oo koobsanaysa Jasiirad la-moodka Carabta oo dhan, Shaam iyo Ciraaq. Shariif Xuseen waxa loo ballanqaaday in uu noqon doono Khaliifka weyn ee dawladdaas. Waxa shardi looga dhigay in Falastiin iyo Lubnaan aanay ka mid noqonnin dawladdaan, taasna waa uu ogolaaday Shariif Xuseen dagaalkina waa uu bilaabmay.

Iyada oo ay dawladda Cismaaniyiintu jiho kasta kula dagaalamaysay Ingiriiska, Faransiiska iyo Talyaaniga, ayaa uu soodh darani dhabarka kaga dhacay, waa soodhka Carbeed ee ay ku qoran tahay Shariif Xuseen. Maastiim waxa uu sacab ku garaacay labadiisa gacmood ee cabsida leh tumaatidda soodhka darteed.

Waa uu iskaga tagay Maastiim jawiga Kacdoonka Carbeed ee weyn waxa aanu tagay jawi kale. Waa shir hoose oo u dhexeeyay Ingiriiska iyo Faransiiska, waa heshiis leh magac caan ah Saaykis-Biiko [101] . Waxa hoggaaminayay dhanka Ingiriiska Saaykis wakiilka Ingiriiska ee arrimaha Bariga Dhow, dhanka Faransiiskana waxa hoggaaminayay Biiko qunsulkii hore ee Faransiiska u fadhiyay Bayruud. Waxa ay ka tashanayeen sidii ay u kala qaybsan lahaayeen keegga Cismaaniyiinta, waxa aan ujeedaa sidii loo kala qaybsan lahaa

[100] Maakmahon: McMahon.
[101] Saaykis-Biiko: Sykes-Picot Agreement.

dalalka Carabta marka ay dhacdo dawladda Cismaaniyiintu. Ingiriisku waxa uu qaadanayaa Ciraaq iyo Urdun, Faransiiskuna waxa uu qaadanayaa Suuriya iyo Lubnaan. Falasdiin iyada waxa loo daynayaa in ay wada maamulaan is-bahaysigu. Sidaas ayaa ay Ingiriiska iyo Faransiisku u doonayeen in ay u cunaan qurubyada doolshaha Cismaaniyiinta. Inkasta oo ay ugu ballanqaadeen in ay qurubyadaas siin doonaan Shariif Xuseen balse Maastiim waxa uu is-weydiinayay qaybtii Yuhuudda ee kackaca macaan, waxa uu is-weydiinayay Falastiin.

Si kedis ah ayaa uu Shariif Xuseen u kala furay wargeyska al-Sabaax waxa aanu kula kulmay warka heshiiskaas sirta ah ee u dhexeeya Faransiiska iyo Ingiriiska. Inkasta oo uu heshiisku sir ahaa haddana Ruushka ayaa warkeeda u soo dusiyay wargeysyada. Furka ayaa uu tuuray boqorkii Xijaas balse war keliya oo Ingiriiska ka yimid ayaa dejiyay, waxa ay ku yidhaahdeen ha rumaysan warka wargeysa waayo waa war wargeysa, wax heshiis ahi ma uu dhicin annaguna weli waxa aanu ku taagannahay heshiiskii hore. Waa uu isdejiyay, wuu kala degay waa aanu seexday isaga oo ku riyoonaya in uu noqdo boqorka Carabta. Maastiim waxa uu dul duulayay Falastiin si uu u soo hubiyo xaalka Yuhuuddii halkaa degtay. Waxa ay ahaayeen kuwo weli dhulka iibsanaya oo deegaanno gumaysi ka samaynaya. Ugu danbayntii Yuhuudeey waxa aad gacanta ku dhigteen qayb Falastiin ka mid ah, ka gadaal markii uu xilligu idin barabixiyay oo ay dadkii goobtuna idin dulleeyeen.

Maastiim waxa uu maqlay dayaanka bandhig lagu qabanayo Ingiriiska, waa bandhig weyn. Si degdeg ah ayaa uu ugu duulay dhanka bandhigga. Waxa ay ahaayeen Yuhuud dabbaaldegaya, maxaa ay u dabbaaldegayaan talow? Waxa uu u jeedaa guurtidii ugu waaweynayd ee Sahyooniyadda oo madasha ku sugan: waa Xaayim Waysmaan, Saaykis, Loodh Rootsheeld iyo kuwo kale oo badan. Waxa ay u dabbaaldegayeen dhacdo weyn, dhawr cisho ka hor waxa uu

Ingiriisku soo daayay ballanqaad, waa ballanqaad loo sameeyay Yuhuudda in loo yagleeli doono dawlad madaxbannaan oo ay ka samaystaan Falastiin. Waa ballanqaadkii Bilfoor [102] . Waxa isku dhacay galaasyadii khamriga, gacmihii iyo dhoollacaddayntii Yuhuudda. Waxa hadhaysay cabbaayadii Maastiim ee duulaysay iyo hagoogtiisi isu rogtay ilbidhiqsigaas iskudar cajiib ah oo farxad iyo cabsi ah.

Ma uu ahayn ballanqaad rasmi ah, waxa uu ahaa farriin uu wasiirka arrimaha dibadda Ingiriisku Bilfoor u diray loodh Rootsheeld. Waa farriin uu Maastiim aad u xiisaynayay in uu akhriyo. Waxa uu u duulay halkii ay taallay farriinta rasmiga ahi waa aanu kala furay, waxa aanu u akhriyay si dhugasho leh.

Waxa ay u dhignayd sidan:

Wasiirka Arrimaha Dibadda
2 Noofenbar 1917.

Mudane loodh Rootsheeld
Waxa ii farxad ah in aan idin soo gaadhsiiyo anniga oo ka wakiil ah xukuumadda boqorka Ingiriiska dhawaaqan soo socda, kaas oo hoos imanaya u dhibirsanida himilooyinka Yuhuudda iyo Sahyooniyadda. Waxa loo soo bandhigay wasaaradda anna waa aan ogolaaday: Xukuumadda Xurmadluhu waxa ay si dhibirsan u eegaysaa yagleelidda baro qawmi ah oo Falastiin shacabka Yuhuuddu ku yeesho. Waxa aanu awooddayda inta ugu badan ku bixin doonnaa ka dhabaynta yoolkaas. Waa in si mug leh loo fahmaa in aannaan ku kacayn shaqo dhantaalaysa xuquuqda madaniga ah iyo ta diineed ee ay haystaan kooxaha aan Yuhuudda ahayn ee ku dhaqan Falastiin,

[102] Bilfoor: Balfour.

iyo hawl aan dhantaalayn xuquuqda iyo wadciga siyaasadeed ee ay haystaan Yuhuudda ku dhaqan dal kasta oo kale. Wanaag ayaa aan kuu hayaa haddii aad ogaysiisaan Midowga Sahyooniyadda dhawaaqan.
Kalsamaan
Aarter Jaymis Bilfoor.

In aad siiso dhul aanad lahayn bulsho aan xaq u lahayn, waa intaas ballanqaadka Bilfoor oo koobani. Dhowr toddobaad kaddib waxa uu kala duray Maastiim warqad kale oo sir ah. Waa warqad ka timi Sahyoonigii ugu horreeyay ee gaadha heerka wasiir ee Biritan, waxa uu u dirayay golaha wasiirrada ee Biritan:

"Xilligan la joogaa kuma habboona in la yagleelo dawlad Yuhuudeed oo madaxbannaan, sidaa darteed waxa habboon in Falastiin si toos ah dagaalka kaddib loo hoos geeyo Biritan. Waa si loogu fududeeyo kooxaha Yuhuudda in ay dhul iibsadaan oo ay ka dhigaan baro gumaysi iyo in la habeeyo hayaanka loogu guurayo Falastiin. Waxa habboon in aynu ku dhex beerno Maxamadiyiinta (Islaamka) saddex illaa afar milyan oo Yuhuudda Yurub ah."

Waxa ay ahayd farriin maskax ku dhisan, sideeda ayaana loo fuliyay. Ingiriisku waxa uu ka dalbaday Faransiiska in wax laga bedelo heshiiskii Saaykis-Biiko, oo Falastiin oo isku duuban la siiyo Ingiriiska halkii ay ka hoos tegi lahayd Isbahaysiga. Heshiiskiina waa la beddelay. Ingiriisku waxa uu u daabulay ciidankiisa si ay u qabsadaan Falastiin. Ciidanka Cismaaniyiinta ee Falastiin ku sugnaa waxa uu dhammaa boqol kun oo uu haysto nin ka tirsan jimciyadda Midowga iyo Dallacsiinta , ninkaas oo loo yaqaannay Mustafe Kamaal Ataatook. Waxa loo soo diray amar ka yimid hoggaanka Midowga iyo Dallacsiinta oo lagu farayo in uu dhammaan ciidankiisa ka soo saaro Falastiin oo uu banneeyo. Sidaas ayaa aanu sameeyay Ataatook, boqol kun oo nin ayaa uu ka

kexeeyay Falastiin. Wakaa Maastiim oo hawada duulayaa eegaya muuqaal aanu arag muddo toddoba qarni ah.

Waa ciidan Ingiriis ah oo aanay ishaadu qabanayn dhammaadkooda, waxa aad mooddaa tax dheer oo ciidan ah oo fidsan hirka illaa dhulka Falastiin. Ciidankan waxa hoggaaminayay Jeneraal Alliinbi. Ciidankan waxa ku dhex jiray guuto Yuhuud ah oo aad u tabobaran, kuwaas oo ay ku jireen wejiyo aanu Maastiim markii hore wada garan balse ay taariikhdu kaydisay magacyadooda. Waxa ku jiray guutada Yuhuudda nin ay bidaartu kala badh qabsatay madaxiisa oo ay kaga tagtay laba jasiiradood oo dhinacyada ah, waa nin ay taariikhdu u taqaanno Dayfidh Bin Gooryoon[103] iyo nin kale oo ah Naxmiyaa Raabiin, Isxaaq Raabbiin aabbihii iyo kuwo kale oo mar danbe soo shaacbixi doona. Waxa uu jeneraal Alliinbi dhex lugaynayay dadka reer Falastiin kuwaas oo aan garanayn meesha uu tagay ciidankii Cismaaniyiintu, balse waxa ay ahaayeen kuwo ku faraxsan Ingiriiska oo soo dhowaynayay. Iyaga waxa ay la ahayd in Ingiriisku uu yahay Malaa'ig u timi dhulkooda si ay ugu kaalmeeyaan Falastiin ka madaxbannaanida dawladda Cismaaniyiinta ee Turkiga qooqan.

Tani ma ay ahayn fikrad ay qabeen bulshada caadiga ah oo keliyi, waxa uu ahaa fikir ku dhex faafsan guurtida, mufakiriinta iyo xataa muftiga guud ee Falastiin. Waxa uu maqlay Maastuun jeneraal Alliinbi oo jawigaas eegaya oo leh:

- Maanta ayaa ay dhammaadeen dagaalladii Macatablayaashu.

[103] Ben Gooryoon: David Ben-Gurion.

Shaydaankii maska ahaa ee Siirbenti ma uu joogin, waxa uu si kedis ah uga tagay Falastiin waxa aanu u jeedsaday dhanka Ruushka. Xukuumaddii Qaysariga ahayd ee Ruushku waxa ay ahayd mid ugaadhsanaysa Yuhuudda ugaadhsi daran. Mar waxa uu wakiilka Yuhuuddu u tagay wasiirka maaliyadda ee Ruuska waxa aanu ka codsaday in uu Yuhuudda dhulkiisa joogta u wada madalufiyo Falastiin. Wasiirkii Ruushka ahaa waxa uu ku yidhi:

- Anigu waxa aan jecelahay in aan Yuhuudda wada madalufiyo runtii, laakiin ma aha in aan Falastiin u diro ee waa in aan badda madow ku hafiyo.

Waxa qasab ahayd in tiradaa badan ee Yuhuudda ah ee Ruushka joogta loo raro Falastiin habkasta oo suurtogal ah. Waxa uu dhex wareegay maskii Siirbenti cidhifyada Ruushka oo dhan waxa aanu kiciyay kacdoon argagax leh. Waa kacdoon haddii aynu doonno in aynu dhacdooyinkiisa oo dhan taxno inagu qaadanaya buug gooni ah. Waa xin iyo maskaxbadnaaan Yuhuudda gaadhsiiyay taliska Ruushka halkii ay ka ahaayeen kuwo la ugaadhsado. Waa xumaan aanay arag dhulku marka laga reebo meelaha uu ku siqay maska Yuhuudiga ah ee Siirbenti. Waxa dhacay kacaankii Ruushka shuuciyadduna waxa ay maamushay Ruushka. Xukuumadda cusub badideedu waxa ay ahayd Yuhuud, go'aankii koowaad ee ay ku dhaqaaqeenna waxa uu ahaa in Yuhuudda loo diro dhulkii ballanqaadka, Falastiin.

Furka ayaa uu tuuray Shariif Xuseen waa aanu rabbaasay, balse Biritan ayaa la hadashay oo dejisay oo seexisay sariirtiisa fidsan. Inankiisii waxa ay u dhiibtay taliska Ciraaq, inankiisii kalena taliska Urdun. Maastiim waxa uu dusha kala socday nolosha Yuhuudda ee Falastiin markii Ingiriisku qabsaday kaddib. Afkii Cibrigu waxa uu noqday af rasmi ah, waxa ay Yuhuuddi yeesheen xarumo koronto oo u gaar ah, waxa ay yeesheen wasaaradda biyaha iyo wasaaradda hawlaha guud. Waxa meeshii soo galay dhaqaale yahankii Yuhuudda waxa aanay dheeleen dheeshoodii, waxa ay furteen shirkadahoodii,

waxa aanay bilaabeen in ay Falastiiniyiinta jeediyaan. Markii uu dhacay hayaankii weynaa ee ay Yuhuuddu kaga yimaaddeen Ruushka waxa kacay dadkii reer Falastiin waxa aanay dareemeen halista. Waxa laga dareemayay wejiga Maastiim halista soo fool leh.

Dhinaca kale waxa la soo abaabulay hurinta dagaal been ah oo u dhexeeya Cismaaniyiinta iyo Giriigga, waxaana la sameeyay halyey been ah oo ay buunbuuniyeen wargeysyadu, Mustafe Kamaal Ataatook. Waa halyey uu ammaanay Axmed Shawqi markii uu lahaa:

"Allaa weyn, maxaa cajab ku sugan furashada
Khaalidkii Turkidoow cusboonaysii
Khaalidkii Carabta."

Waxa ay dhabbada u xaadheen buunbuunintii iyo durbaankii wargeysyada ee halyeyga beenta ahi in maalin ku dhawaaqo in uu yahay madaxweynaha Turkiga iyo in uu ku dhawaaqo dhicitaanka khilaafadii Cismaantu weligeed. Markii uu qabsaday Ataatook waa uu la yaabay Maastiim arrimaha fajacisada ah ee uu ku kacay: waxa uu ka saaray erayga Islaam dastuurka Turkiga, waxa aanu jideeyay in ay dawladdu tahay Calmaani aan diin lahayn, waxa uu mabnuucay xidhashada xijaabka ee dummarka, waxa uu meesha ka saaray dabbaaldeggii labada ciidood, sannado badan ayaa uu muslimiinta ka hor joogsaday in ay xajka aadan; waxa uu xidhay tiro badan oo masaajiddo ah, masaajidka Aaya Soofiya ee weyn waxa uu ka dhigay kiniisad, waxa uu diiday in af Carabi lagu eedaamo waxa aanu ka dhigay addinka af Turki. Waxa uu dilay 150 sheeekh oo ka soo horjeedsaday xeerarkiisan, waxa uu ku qasbay iimaamyada masaajidyada in ay xidhaan koofiyad Yurubiyaan ah halkii ay ka qaadan jireen cumaamadda Islaamka. Waxa uu tuuray kaltirsigii Hijriga, waxa uu simay dhaxalka ragga iyo dumarka. Waxa uu magaciisa ka saaray Mustafe waxa aanu ku soo koobay Ataatook. Ugu danbayn markii uu dhimanayay waxa uu dardaarmay in aan lagu tukan. Inkasta oo waxa kan oo dhami

ay laabta u balaadhiyeen Maastiim haddana yaabku waa uu ka tegi waayay waqti dheer markii uu Seerbenti u sheegay in Ataatook ay soo korisay hooyo Yuhuudiyad ahi.

Waxa uu curiyay Axmed Shawqi maanso dheer oo uu ugu baroordiiqayo Turkiga iyo dhicitaankii Khilaafada, taas oo uu ku weerarayo Ataatook. Waxa uu yidhi:

"Waxa oyday salaaddii taasi waa fidno mid wax qarribaya.
Waa sharcigii halaq garsoore ma-xishoode ah.
Waxa uu keenay dhoobdhoobad waxa aanu ku hadlay baadi,
waxa uu la yimi dhulkii gaalnimo cad."

Ma aha suurtogal in aad dadka oo dhan markasta dagto, waxa soo baxay muftigii Falastiin iyo dhammaan waxgaradkii taageersanaa qabsashada Ingiriiska ee Falastiin iyaga samaynaya mudaharaaddo waaweyn oo badan oo nabadgelyo ah, oo ay kaga soo horjeedaan waxa socda. Maastiim se waxa uu dul duulayay mudaharaad kale, waa mudaharaad weyn oo ay Yuhuuddu ku qabsadeen Gidaarka Bureeqa, iyaga oo raba in la dhiso Haykalka ay sheegtaan. Waxa ay ku heesayeen heesta rejada ama sida ay u yaqaannaan Haatikaafa.

"Weligeed waxa qalbiga ku sugan naf Yuhuudiyad ah oo hanqal-taagaysa.
Hore waxa u koraya bariga il eegaysa Sahyoon, Riyadeeni weli may midho-dhalin,
waa rejo kun sanno jir ah. Waa in aanu noqonno ummad gob ku ah dhulkeeda
Dhulkii Sahyoon iyo Oorshaliinta Quddus.

Salaadii Jimce ee maalintaas ku xigtay Maastiim waa uu duulayay isaga oo daawanaya muuqaal argagax leh oo ka hor dhacaya masaajidka Aqsa. Jamaahiir muslimiin ah ayaa ay isku dhaceen kooxo Yuhuud ah. Ciidanka Igiriiska ayaa soo kala dhex galay labadii kooxood, soo dhexgalkiisuna waxa uu

ahaa in uu rasaas ku furay kooxdii muslinka ahayd ee aan hubka wadan, kuwaas oo uu dhiiggoodii qulqulay barxadda masaajidka Aqsa. Hagoogtii Maastiim waxa ay isu rogtay muuqaal argagax leh oo cabsi leh, waxa aanu dul duulay dadkii oo dhan duulis masiibo tilmaamaysa.
Waxa kacday kacdoon weyn oo hordhac u ahayd dhammaan fadqalaladii ka danbaysay oo dhan, waa kacdoonkii Bureeqa. Waxa ay Falastiiniyiintu gebi ahaanba burburiyeen lix deegaan gumaysi oo Yuhuuddu leedahay, waxa aanu kacdoonki sida kansarka ugu faafay dhammaan magaalooyinka Falastiin oo dhan, oo aan kala hadh lahayn. Dhammaan wargeysyada caalamku waxa ay soo bandhigayeen warka Falastiiniyiinta argagixisada dadqalka ah oo gabboodfalladii ugu xumaa u gaystay walaalohoodii Yuhuudda ahaa ee aan hubaysnayn. Waxa la xidhay sagaal boqol oo Falastiini, oo la dilay saddexdii ugu mudnaa. Kacdoonku waxa uu socday sannad dhan, Intaa kaddib waa la yareeyay hayaankii Yuhuudda. Waxa kale oo lagu tiriyay gidaarka Bureeqa in uu yahay hanti Islaam oo aanay Yuhuuddu wax xidhiidh ah la lahayn.

Gidaarka Bureeqa ee sare ku xusani waa waxa maanta loo yaqaanno Gidaarka Oohinta oo lagu tiriyo hantida Yuhuudda u gaarka ah ee aanay Muslimiintu wax xidhiidh ah la lahayn. Waa gidaarka ka xadeeya dhanka galbeed masaajidka Aqsa. Waa gidaarkii uu ku xidhay nebi Maxamed faraskiisii Bureeqa intii aanu gelin masaajidka oo uu ku tukiyay nebiyada intii aan loo dheelmin cirka. Yuhuuddu waxa ay ku tiriyaan in uu yahay gidaarka qudha ee ka soo hadhay Haykalkii, isaga ayaa aanay ka ag ooyaan iyaga oo ka murugaysan burburkii Haykalka. Waxa ay u muuqatay in kacdoonkii yara degay markii uu ciidanka Ingiriisku si argagax leh rigaaxay. Maastiim waxa uu dul heehaabayay goob cajiib ah, waa masaajid ka mid ah kuwa Xayfa. Waxa aad maqli karaysaa codka khadiibka ee korreeya ee qalbi taabadka ah:
- Waxa uu yidhi Ilaaha weyni:

"miyaa aydaan la dagaalamayn qolo burisay
iimaankooda oo ku hammiyay in ay Rasuulka saaraan,
iyaga ayaana idinku bilaabay markii koowaad.
Miyaa aad ka cabsanaysaan,
Ilaahay ayaa xaq u leh
in laga cabsado haddii
aad muuminiin tihiin."

Saddex jeer ayaa uu weedha u danbaysa ku soo celceliyay. Codkiisu waxa uu ahaa mid gariiraya oo kulul, xamaasadaysan oo murugaysan dhabtii. Waxa uu yidhi:
- Dadoow, waa aad barateen arrimaha diintiina heer uu mid kasta oo idinka mid ahi noqday caalim, waana aad barateen arrimaha dalkiinnaa heer uu idinku waajibay Jihaad. Ilaahayoow ma gaadhsiiyay, Alloow ka markhaati noqo. Jihaadka ina mariya muslimiineey.

Masaajidkii waxa uu isla oogsaday oohin iyo raadeyn. Kaasi waxa uu ahaa Cisudiin Qasaam, waa As'hari reer Suuriya ah oo dadkii u hoggaamiyay in ay ka hor yimaaddaan gumaysigii Faransiiska, kaddibna waxa uu u socdaalay Falastuun si uu dadka ugu horkaco in ay ka hor yimaaddaan gumaysiga Ingiriiska. Saacad kaddib khudbaddaas waxa y ciidanka talisku daydayayeen ninkaas sida argagixisada, isagu se isla ilbidhiqsigaasba waxa uu u kacay dhanka buuraha isaga oo qorigiisa sita. Maastiim waxa uu u duulay dhanka buuraha si uu u arko Cisudiin Qasaam oo ay la socdaan koox xertiisa ka mid ahi iyaga oo kula dagaalamaya ciidankii Ingiriiska oo ka war helay buuraha ay ku dhuumanayaan. Waxa ka mid ahaa ciidanka boolis Carab ah oo Ingiriiska la socday. Taliyahoodii ayaa qayliyay:
- Waa aad go'doonsan tahay Cisudiinoow, isdhiib iskama celin kartide, iskama celin kartid Ingriiska e'.
Cisudiin waxa uu ugu jawaabay:
- Annagu waxa aanu joognaa heer aanad weli gaadhin, waxa aanu joognaa heerka jihaadka, qofka u soo baxa heerkanina

ma habboona in uu isu dhiibo Ilaahay mooyaane.

Maastiim waxa uu la socday rasaasta ay is-weydaarsanayeen labada dhinac ee buuraha ku sugani, balse wuu daalay, dagaalku waxa uu socday laba saacadood in ka badan. Si kedis ah waxa dagaal u soo qaaday diyaarado Ingiriisku leeyahay, waa diyaarado duqeeyay aaggii mujaahidiinta. Gantaalladaasi waxa ay qaadeen naftii mujaahidiinta dhammaantood, waxa baxday naftii Cisudiin Qasaam; waa ninkii dhimashadiisu kicisay kacdoon ka weyn kii Bureeqa, kacdoonkii Falastiin ee weynaa. Hagoogtii Maastiim waxa ay bilawday in ay u jeexjeexmato si yaab leh.

Kacdoon keliya ma ay ahayn waxa ay ahayd kacdoon iyo shaqo joojin. Waxa laga yaabaa in ay tani ahayd kacdoonkii ugu adkaa ee soo mara taariikhda Falastiin. Waa kacdoon ay u muquunisay awooddii ciidanka Ingiriisku jid kasta, xataa waxa dhici jirtay in la duqeeyo oo la qarxiyo guryaha haddii looga shakiyo in kacdoomayaal ku jiraan. Kacdoonku waxa uu socday saddex sannoo oo isku xiga oo la sameeyay ku dhowaad toban kun oo hawlgal nafhur ah, maalintii sagaal hawlgal oo nafhur ah ayaa dhici jiray. Dildillaacii hagoogta Maastiim waa uu sii weynaaday, waxa uu ahaa mid dul duulaya masaajidka salaaddii ciidda kaddib. Markii ay salaaddii dhammaatay ee ay dadkii soo baxeen ciidamada Ingiriiska ayaa dadkii soo weeraray in badan oo iyaga ka mid ahna waa ay xidheen. Maastiim waa uu raacay, waxa aanu arkay dadkii oo lagu guray meelo xidhan oo loo bixiyay Xeryaha Faquuqa, saddex cisho oo isku xigta ayaa anay halkaa ku xidhnaayeen. Maastiim waxa uu arkayay iyaga oo isku dul kaajaya waayo ma ay jirin meel ay ku kaajaan, iyo iyaga oo dhulka wadhan gaajo iyo harraad darteen. Waa ay ooyayeen iyaga oo ka xun xaalkooda liita iyo jabkooda. Wejiga Maastiim waxa ka muuqday digasho iyo nacayb xad dhaaf ah. Maastiim waxa uu dareemayay in dunida oo dhami ay gilgilanayso, gilgilasho tan oo kale ah waxa uu xasuustaa mar aan sii fogayn. Gilgiladku markan waa uu ka xoogganaa kii hore,

waa dagaalkii labaad ee dunida. Is-bahaysigu weli waa is-bahaysi Ingiriiska, Faransiiska iyo Ruushka balse Maraykanka ayaa markan ku soo biiray. Waaxda kale ee bahda Jarmalka waxa ku soo biirtay Jabbaan. Waxa uu ahaa dagaalkii ugu weynaa ee dhulka ka dhaca, waa dagaal ay ku dhinteen 50 malyuun oo qof. Waxa ka quseeya Maastiim dagaalkan waxa uu ahaa waxa ka soo barakacay Jarmalka iyo Yurub qaxoonti hor leh oo Yuhuud ah. Waa hormooyin dhan oo u jihaystay dhanka Falastiin, waa hormooyin sheeganayay in ay ka soo qaxeen qooqa Hitler kaas oo sameeyay xero-dhiig iyo meelo lagu gubo Yuhuudda si loo isir tiro. Waxa ay hormooyinkani soo raaceen doonyo waaweyn waxa aanay ku soo xidheen Falastiin. Waxa ay kuwaasi soo galeen Falastiin iyaga oo filaya in la siin doono hoy, cunto iyo cabbitaan. Filashadoodaasi waxa ay ahayd mid dhab ah, dhammaan dhab ayaa ay ahayd.

Dagaalkii labaad ee adduunka ka hor ururka ay ku midaysan yihiin dalalka adduunka oo dhami waxa loo yaqaannay Liigga Qaramada, waana ururkii siiyay Ingiriiska xaqa in ay Falastiin qabsato oo ay gumaysato. Dagaalkii labaad ee adduunka kaddib magaceedu waxa uu noqday Qaramada Midoobay. Waxa ay QM go'aansatay si loo xalliyo dhibaatada Kacdoonka Falastiin in Falastiin la hoos geeyo QM, oo aanay Yuhuud iyo Carabtoona lahaannin. Yuhuuddi waa ay qayliyeen oo waa ay kaceen iyaga oo ka horyimid QM, waa ay ka noqotay go'aankeedi QM waxa aanay ka fikiraysay go'aan kale. Go'aanka ah in Falastiin loo qaybiyo laba dawladood: mid Yuhuuddu leeyihiin iyo mid ay Carabtu leeyihiin. Iyo in la dedejiyo fulinta go'aankan si Ingiriiska looga saaro Falastiin.

Markaas Yuhuuddu waxa ay lahaayeen guutooyin ciidan ah oo farabadan: waxa ay lahaayeen guutada Iirjoon, guutada Shatiiroon, guutada Haajaana iyo guutada Baalmaakh. Dhammaantood waa guutooyin milatari ah oo ku gaashaaman hub culus oo u tabobaran si heersarreysa. Inkasta oo ay

dhammaan kooxahaasi ka caawin jireen Ingiriiska muquuninta kacdoonka Falastiiniyiinta, markii uu soo baxay go'aanka ah in Ingiriisku si degdeg ah uu Falastiin uga baxo -iyaga oo u gogolxaadhaya in la qaybiyo Falastiin- waxa ay go'aansadeen in ay ku kacaan falal argagixiso oo ka dhan ah Ingiriiska, si ay u dedejiyaan bixitaankooda. Dhab ahaan waxa ay ku kaceen falal argagixiso oo caan ah oo ka dhan ah ciidanka Ingiriiska: waa qaraxyo, dilal qorshaysan iyo dil. Waxa la soo qabtay horjoogaha guutada Iirjoon oo la odhan jiray Manaaxim Biijan waxaana lagu tiriyay argagixiso. Waxa Maastiim ka qosliyay ayaa ah in ninkan la xidhay isaga oo lagu eedeeyay in uu argagixiso yahay ayaa soddon sanno kaddib waxa la siiyay abaalmarinta Noobalka ee nabadda isaga oo la wadaagay madaxweynihii Masar Anwar Saadaat.

Waxa uu Ingiriisku faray Raysalwasaaraha Masar Mustafe Nixaas in uu sameeyo urur la yidhaahdo Jaamacadda Dalalka Carabta, oo ka kooban dhammaan dalalka Carabta marka laga reebo Falastiin. Carabti waxa ay ku midoobeen ururka Jaamacadda Carabta Falastiinna waa ay ka tageen. Waxa ay Jaamacaddu ka koobnayd toddoba dal oo lix ka mid ahi ay hoos tagaan oo uu gumaysto Ingiriisku. Taasi waxa ay ka dhigan tahay in aanay Jaamacaddu waxa faa'ido ah lahayn in ay shaanbadayso waxa uu Ingiriisku ku rabo magaca Carabta mooyaane. Mar labaad ayaa uu qoslay Maastiim.

Maastiim waxa uu u haaday dhanka xarunta QM, waxa ka socday shir muhiim ah, waxa aanu lahaa Yuhuudiga hadlayay:

- Marka aynu ka hadlayno dawlad Yuhuuddu leedahay maskaxdeenna kuma jirto dawlad isir-nacayb ah ama dawlad xagjir diimeed ah, balse waxa aanu rabnaa dawlad ku taagan sinnaan dhammaystiran oo ka dhaxaysa dadkeeda oo dhan. Waa dawlad aan la isku takoorayn diin iyo isir, waa dawlad aanay ka jirin muquunin iyo haysasho.

Yuhuuddu waxa ay ahaayeen kuwo haysta 5% dhulka Falastiin, balse kulankan kaddib waxa ay hantiyeen kala badh

dhulkii Falastiin. Kani waxa uu ahaa heshiiskii Falastiin u kala qaybiyay labada dawladood: badh ay Carabtu leedahay iyo badh ay Yuhuuddu leedahay. Quddus waxa la go'aamiyay in aanay midna raacin, ee ay tahay goob caalami ah. Waxa la faray dhammaan Falastiiniyiintii degganaa dhinaca Yuhuudda la siiyay in ay ka guuraan deegaankooda oo ay tagaan qaybta lagu sheegay Falastiin. Waxa ay guddidu go'aamisay in uu Ingiriisku ka baxo Falastiin 15 Maayo 1948. Waa lix bilood kadib.

Waxa bilaabmay in Falastiiniyiinta laga raro dhulkii qaybta ugu hagaagay Yuhuudda, waxa aanu Maastiim u duulay tuulooyinka dushooda si uu ula socdo hannaanka rarista. Ciidamadii Haajaana waxa ay soo galeen tuulada Qasdal, oo ah tuulooyinka ugu mudan ee Quddus ku xeeran. Waa ay soo galeen oo dhammaan dadkii joogay waa ay ka eryeen. Waxa uu u fiirsanayay Maastiim koox mujaahidiin Falastiiniyiin ah oo u muuqday kuwo habaysan oo hubaysan, kooxdani waxa ay ahayd ciidanka Jihaad Almaqdas. Waxa uu samaysmay ciidankani markii ay kulmeen dhammaan Falastiiniyiinta ku kala sugan daafaha Falastiin si ay u mideeyaan cududdooda, oo ay u samaystaan ciidan iska-caabbin mid ah. Hoggaamiyaha ciidankaasi waxa uu ahaa nin Falastiini ah oo mujaahid ah oo la yidhaahdo Cabdiqaadir Xuseeni. Waxa uu arkayay Maastiim isaga oo horsocda mujaahidiin soo galaya Qasdal.

Waxa dhex maray ninkan iyo ururka Jaamacadda Carabta xogwarran taariikhi ah. Waxa ka mid ahaa:

- Waxa aan u socdaa in aan xoreeyo Qasdal, waa aanan geli doonaa oo waa aan xorayn doonaa xataa haddii aan ku dhimanayo. Waxa aanu idinka doonaynaa idinka in aad na siisaan hubka idiin kaydsan.
- Waxa aanu kala ballanay arrinka Falastiin guddi milatari oo gaar ah kuwaas oo arrinka la socon doona marka uu Ingiriisku ka baxo 15-ka Maayo.

- Haddii aad sugtaan 15-ka Maayo waxa aad u baahan doontaan toban laabka waxa aad maanta u baahan tihiin.
- Ma taageerayno annagu hawlgalka shaqsiga ah.
- Annaga ayaa ka mudan hubka kaydsan bullaacadaha aad ku kaydiseen, taariikhdu waxa ay idinku eedayn doontaa in aad Falastiin lumiseen, ogaadana taariikhdu ma naxariisato. Anigu waxa aan ku dhiman doonaa Qasdal inta aanan u joogin gaabintiinna iyo hagrashadiina.
- Hadalka nacasnimada ah jooji. Annagu hub waa aanu haynaa balse kuma siinayno adiga, waxa aanu sugaynaa 15-ka Maayo.

Waxa uu wejiga kaga tuuray Cabdiqaadir agab uu gacanta ku haystay, waxa aanu ku yidhi:
- Idinku waxa aad khiyaamaynaysaa Falastiin, waxa aad doonaysaan in nala dilo oo nala gawraco.

Waxa uu arkayay isaga oo sii galayay Qasdal oo wata koox ciidankiisa ka mid ah. Waxa hareereeyay oo si adag u go'doomiyay ciidanka Haajaana. Maalinta galinkeedii danbe waxa aad arkaysa raqdiisii oo ag taalla guri ka mid ah guryaha Qasdal. Maastiim ayaa dul duulay raqdiisii waxa aanu u eegay si deggan.

Waaberiga maalintii labaad Maastiim waxa uu dul heehaabayay tuulo u dhow tuulada Qasdal, waa tuulo la yidhaahdo Deyr Yaasiin. Si degdeg ah waxa ka soo weeraray tuulada xoogagga Iirjoon iyo Shatiiroon saddex jiho. Markii hore waxa ay adeegsadeen codbaahiyeyaal iyo muujiyeyaal, waxa ay farayeen dadka oo dhan in ay si degdeg ah tuulada u cidleeyaan. Waxa ay dareemeen mar keliyaa rasaas ku soo hoobanaysa, Maastiim ayaa u duulay halka ay xabaddu ka soo dhacayso, waxa aanu arkay dhallinyaro tuulada u dhashay oo is ursursaday oo is hubeeyay oo diyaar u ah in ay naftooda u huraan ilaalinta dhulkooda. Xabaddii waxa ay ka xanaajisay budhcaddii Yuhuudda ahayd taas oo iska joojisay codbaahiyayaashii, waxa aanay qaateen hubkoodii darandoorriga u dhacayay waxa aanay u weerareen tuulada si

farabadan oo qudhaanjo la moodo. Yuhuuddu waxa ay ka gaysteen Deyr Yaasiin wixii ugu xumaa ee ay Falastiin ka gaysteen intii ay soo galeen markii ugu horreysay, hoggaamiyahooduna waxa uu ahaa Manaaxim Biijan. Waxa indhaha la raacraacayay Maastiim kaas oo ay balaadhatay dildilaacca niqaabkiisa cadi, iyada oo la moodayo in uu ka faydmayaba. Waxa uu arkay Maastiim ciidamdii oo rasaas ku rushaynaya dadka, oo u goosaysa jidhba jidhka uu ku xidho. Waxa ay rasaastu soo ridaysay carruur iyo dumar ba. Waxa uu arkayay iyaga oo banbooyin ku tuuraya guryaha dhexdooda, guryuhu waa ay qarxayeen waxa aanay googooynayeen qoysas dhan oo ku dhuumanayay miiskaa gadaashiisa ama kaas.

Waxa uu arkay ciidan gacmaha jiidaya nin iyo gabadhiisii oo dhirbaaxo la dhacaya illaa ay dhulka ku dhacaan, waxa ay jiifinayaa gabadhiisii waxa aanay u fuulayaan sida xoolaha, inanteeda yari ma garanayso ma waxa ay eegtaa aabbaheed oo naftu ka sii baxayso, mise hooyadeed oo qaylinaysa si ay cid uun u maqasho. Waxa siibtay qayb kale oo hagoogtii Maastiim, kaas oo weli la socday xasuuqan ka dhacay tuuladan dhagax kasta oo ka mid ah. Waxa aad aragtaa hadda kooxahan budhcadda ah ee Yuhuudda ah oo istaajisay labaataneeyo dhallinyaradii tuulada ka mid ah oo gidaar lagu tiiriyay, iyaga oo indhaha iyo gacmaha laga xidhay. Waxa lagu furay rasaas, waa aanay isku dul daateen. Waa kuwaas go'doomiyay roodhiilihii tuulada, kaas oo waaberigii ka dib dabka u shiday furinkiisa, markii ay waaberigii tuulada soo galeen waa ay hareereeyeen, waa ay qabteen oo waxa ay ku dhex rideen moofadii furinka.

Hadda waxa faydmay hagoogtii wejiga Maastiim oo dhan, waxaana caddaaday madowgii qarinayay, hagoogi ma ay jirin; waxa uu ahaa madaxiisu lafo shaydaan, oo si digasho leh wax u fiirinaya, waxa dhabanka kaga sawirnaa xiddigtii Daa'uud. Waxa uu u duulay muuqaal kale, waxa uu arkay koox Yuhuud ah oo qabtay dumar iyo carruur badan oo ku guraya

ceel ka mid ah ceelalka tuulada, waxa ay ku shubeen shidaal waa ayna ku gubeen, ololkii ayaa cirka isku shareeray dib ayaa aanay uga joogsadeen Yuhuuddii iyaga oo gacmaha wejiga saaraya. Waxa uu ka muuqday Maastiim dabka dhabarkiisa, waa shaydaan Yuhuudi ah oo u eeg sida shayaadiintu u eegyihiin.

Waxa uu dhammaaday xasuuqii Deyr Yaasiin saddex cisho ka dib, waxa la dilay saddex meeloodoow meel dadkii tuulada, intii soo hadhayna waxa ay u yaaceen tuulooyinka deriska. Dadkii tuulooyinka deriskuna waxa ay u sii qaxeen tuulooyin kale, kuwaa laftooduna waa ay sii firdhadeen. Falastiiniyiintii waxa ay noqdeen kuwo cabsi ay ka qabaan kooxaha budhcadda Yuhuudda darteed la baxsada. Waxa soo noqnoqonayay daryanka codka Maastiim ee shaydaaniga ah. Muuqaalka dadka reer Falastiin waxa uu ahaa mid murugo leh markii ay ka tagayeen tuulooyinkooda, waxa ay ku jireen safaf dhaadheer, badhkood waxa ay maalayeen cagtooda iyaga oo alaabtooda sita; badhkood waxa ay la socdeen baabuur ay xafashkooda ku qaateen . Waxa ay u socdeen meel aanay garanayn, oo aanay ku hubin hoy iyo hu' toona. Waxa murugada leh waxa uu ahaa in aad aragto Maastiim iyo lafahiisa shaydaanka ah oo si dheeldheel ah u eegaya dadka, isaga oo dhaqdhaqaajinaya ciddiyihiisa dhaadheer ee shaydaaniga ah si uu u muujiyo farxaddiisa. Dadkan qaxoontiga ahi waxa ay ka tagayaan dhulkooda si ay ugu noolaadaan Yuhuuddu, waa Yuhuud ka yimi cidhifyada dunida oo dhan, waa Yuhuud adduunku soo eryay. Waxaa lagu qasbay Falastiiniyiinta in ay waxaas oo dhan qiimaheeda bixiyaan.

Yuhuuddu waxa ay indhaha ku hayeen magaalada Yaafa, waxa aanay u hub ursursanayeen in ay gudaha u galaan oo ay ehelkeeda ka eryaan sidii ay ku sameeyeen tuulooyinka kale oo dhan. Hoggaanka ciidanka Hajaanaha waxa ka mid ah nin la yidhaahdo Mooshi Dayaan, waa nin bar madow ku leh isha bidix. Waxa uu u diyaarsanaa inuu qabsado Yaafa isaga oo

diyaarsaday qorshe halis ah. Maastiim isagu waxa iskaga tagay diyaargarowgan waxa aanu daawanayay muuqaal kale oo soo jiitay, waxa ay ahayd gabadh qurux badan oo la tacaalaysa in ay ka gudubto xadhkaha siliiga ah ee ku xidhan xadka u dhexeeya labada gobol ee Carabta iyo ka Yuhuudda. Maastiim gabadhaas ayaa uu fiirinayay iyada oo ka soo baxaysa gurigeeda oo ku yaallay mustacmaradda Biitaam ee koonfurta Yaafa. Iyada oo dhuumanaysa si aanay cidna u arag ayaa ay soo gaadhay siligga xidhxidhan, waxa aanay ka dhaawacantay lugta dhaawac daran. Waa ay carartay iyada oo u ordaysa dhanka Yaafa xilli ka horreeyay waaberiga saacad. Waqti badan kama uu soo wareegin markii ay hor istaagtay afaafka guri ay garaacday, lugteeduna waa ay dhiigaysay si aanay qaadi karahayn.

Waxa uu la yaabay Maastiim waxa uu ahaa in ay inantan quruxda badani ay ahayd Raasheel Dayaan inanta wiilka ay walaalaha yihiin Mooshi Dayaan. Waa la furay albaabkii guriga ee ay hortaagnayd Raasheel, waa ay ku soo boodday oo laabta ayaa ay gelisay, waxa aanay weyddiisay waxa ku dhacay, gudaha ayaa aanay soo gelisay. Gabadhaas kale waxa ay ahayd Muhiiba Khoorsheed, mid ka mid ah dhaqdhaqaaqayaasha siyaasadeed ee reer Falastiin. Waxa dhex maray iyada iyo Raasheel saaxiibtinimo cajiib ah, inkasta oo ay Raasheel tahay Yuhuudiyad balse waxa ay aad uga soo horjeedday aragtida Sahyuuniyadda si aad ah. Maadaaba ay Raasheel qaraabo ahaayeen Mooshi Dayaan waxa ay heshay qorshaha Haajaana ay Yaafa ku soo weerarayaan, waxa aanay rabtay in ay Muhiiba uga digto weerarkan si ay reer Yaafa u feejignaadaan. Maastiim waa uu ka cadhaysaa arrinkan, waxa uu u arkayay in waxa ay Raasheel samaynaysaa uu yahay khiyaano, balse waxa ka yaabiyay waxa uu ahaa wixii dhacay maalintii xigtay. Markii ay gudaha u soo galeen budhcaddii Yuhuuddu Yaafa waxa uu eegay Maastiim isaga oo rumaysan la' waxa ay arkayaan labadhiisa indhood ee waaweyn ee galka ka soo baxay. Waxa u muuqday

koox hubaysan, waa koox dumar ah oo hubaysan oo Falastiiniyiin ah. Waa koox ay hoggaaminayso Muhiiba Khoorsheed, taas oo la arkayay iyada oo aad mooddo fardofuul hore iyada oo sidata qori darandoorri u dhaca. Waxa ay xidhnayd xijaab iyo maryo ciidan ciidan ah, waxaana dabasocday koox ciidan ah oo dumar ah.

Maastiim waa uu hilmaamay waxa dhacaya waxa aanu la socday dhaqdhaqaaqa kooxdan la dagaalamaysa Hajaanaha sida daran. Waxa uu naxay markii uu arkay Raasheel Dayaan oo gurigeeda ka soo baxaysa oo qorina sidata, oo badbaadinay mid ka mid ah haweenka hubaysan. Raasheel iyo Muhiima goobta dagaalka ayaa ay ka wada dagaalamayeen, mid waa Muslimad midna waa Yahuudiyad, waxa aanay la dagaalamayaan ciidanka Sahyuuniyadda. Waxa ay muujiyeen karti iyo geesinimo dheeraad ah oo u suurtogeliyay in ay noolaadaan xataa markii la qabsaday Yaafa ee dadkeedii la barakiciyay. Raasheel waxa ay ka baxaysay magaalada iyada oo la socota Muhiiba, waxa aanay xidhnayd xijaab si aanay u garan tolkeed.

Waxa timid maalinkii ay ciidanka Ingiriisku safka dheer u galeen si ay uga baxaan Falastiin, waa saf dheer oo u eeg kii ay galeen markii ay imanayeen Falastiin. Waxa ay ka baxayeen markii ay dejiyeen shacab dhulka shacab kale, ee ay sharaf siiyeen shacab midna ay duleeyeen. Markii ay baxayeen waxa socday dabbaaldeg ay dhigayeen Yuhuuddu, waxa madasha fuulay Dhayfidh Bin Gooryoon waxa aanu dadka u akhriyay ogaysiiska ku-dhawaaqista dhisitaanka Israa'iil, ama sida ay u yaqaannaan bayaanka gobonimada. Waxa yaab leh in aanay asalkii hore wax joogitaan ah ku lahayn Falastiin si ay gobonimo uga qaataan. Waxa uu Bin Gooryoon lahaa:

"Waxa uu ka aasaasmay shacabka Yuhuuddu dhulka Falastiin, halkaas ayaa aanu ka samaystay dawlad jiritaan leh. Waxa laga raray Yuhuudda dhulkan maalin inkaaran, balse shacabka Yuhuuddu isaga oo qaxoonti ah marna ma uu illaabin rejada soo noqoshada. S

idaas ayaa uu shacabka Yuhuuddu isaga oo
kumannaan ah ugu soo noqday
Dhulkii Ballanqaadka, dhulkii markii hore laga eryay.
Waa innagaa maantaba -innaga oo ka jawaabayna
dhawaaqii marxuum Tiyadoor Hertisal ninkii lahaa
fikradda dawladda Yuhuudda- halkan taagan oo
ku dhawaaqayna dawlad iskeed u taagan,
lehna afkeeda iyo ciidankeedaba."

"Gubistii Hitlerkii Naasiga ee qabsatay Yuhuudda xilligii u
danbeeyay taas oo ay ku dhinteen malaayiin Yuhuudda
Yurub ka mid ahi, waxa ay dunida u muujisay
in ay lagama maarmaan tahay in xal loo helo
dhibta bulshada Yuhuudda ah ee aand waddanka
iyo madaxbannaanida midna lahayni.
Waxa ay ku dhawaaqday Qaramada Midoobay
qaraarka yagleelidda dawlad madaxbannaan
oo ay Yuhuuddu dhulkan ku yeeshaan.
Waxa aanu maanta ku dhawaaqaynaa
in uu dhammaaday joogitaankii Ingiriisku,
annaga oo ka duulayna xaqayaga dabiiciga ah
iyo kaayaga taariikheed waxa aanu maanta
ku dhawaaqaynaa yagleelka dawladda Yuhuudda ee
dhulka Israa'iil. Dawladdan magaceedu waa Israa'iil,
waxa aanu ugu baaqaynaa
Qaramada Midoobay in ay aqbalaan dawladda Israa'iil
in ay ku soo biirto qoyska QM."

DHAN

Iftiimin

Waa in aad kala garato saaxiib in Yuhuuddu ay gaar tahay halka Sahyuuniyaddu ay wax kale tahay. Yuhuuddu waxa ay rumaysan yihiin in dawladda Israa'iil ay caqabad ku tahay hawlgalka Masiixa badbaadiyaha, Sahyooniyaddu se waa jilib qudha oo ka mid ah jilibada Yuhuudda, waa jilib sharwade ah. Markii ugu horreysay waxa ay la bilaabmeen Hertisal kaas oo fikirkiisa ka soo qaatay Saabataay Sayfi. Sahyooniyaddu waa garabka ugu xooggan ee ka soo dhex baxay hagoogta Maasooniyadda, waayo qof kasta oo gaadha heerka 33aad waxa uu toos u galayaa jilibka 13aad ee reer bani Israa'iil, jilibka xun. Ha u malayn in Yuhuudda dunida ku filiqsani in ay Sahyooniyadda taageersan yihiin, badhkood waa ay ka soo horjeedaan ba. Dhibtu ma aha in Yuhuudda caadiga ahi ay ka soo horjeeddo dawladda Israa'iil , dhibtu waa taageerayaasha mad'habka Borotestanka kuwaas oo ayidsan qabsashada Israa'iil ee dhulka Falastiin. Anigu waxa aan ka hadlayaa bulshooyinka, laakiin madaxda dawlaha waaweyn oo dhami waa ay taageersan yihiin Israa'iil, tallaabooyinka ay qaadaanna waa ay dhiirrigeliyaan.

Maasooniyaddu markii ay u adeegsatay Sahyooniyadda si ay u qabsadaan Falastiin waxa ay fulinayeen riyo weyn oo ka mid ah riyooyinkooda . Waa in Haykalka Saleebaan laga dhiso meesha uu ku yaallo masaajidka al-Aqsa. Waxa aan hore kuugu ballanqaaday in aan kuu sheego sababta ay u doonayaan in ay sida xamaasadda leh u dhisaan Haykalka, ee ay waqtiga dheer arrintaa ugu hawlanaayeen. Waxa kan oo dhami waxa ay ku soo ururayaan ballanqaad ku qoran Tawraad. Eebbe waxa uu Yuhuudda u ballanqaaday in uu aakhiru sabaanka soo diri doono nin tafiirtooda ka mid ah, kaas oo ka soo ururin doona filiqsanaantooda, oo dunida xukumi doona isaga oo saldhiggiisu uu yahay dhulka

barakaysan ee Falastiin. Inkasta oo uu Eebbe u rumeeyay ballanqaadkaas oo uu u soo direy nebi Ciise haddana waa ay beeniyeen. Markii ay arkeen isaga oo laanqeyrta macatabka ku dhimanaya waxa ay yaqiinsadeen in aanu kani ahayn Masiixii badbaadiyaha ahaa ee loo yaboohay. Yuhuudda dunidu maanta waxa ay sugayaan aakhiru sabaanka si uu Eebbe ugu soo diro ninkaa badbaabiyaha ah ee aan Ciise ahayn, ee ah mid kale. Taasi waxa ay ka dhigan tahay in ay wax uun iska sugayaan.

Markii ay midoobeen jinka iyo shayaadiintu, waa markii koox insiga ka mid ahi "Fardooleydii Haykalku" ay kala soo baxeen kutubtii sixirka iyo culuumta shaydaanka xaramka Quddus hoostiisa wax kastaa waa ay is rogeen, fikirkoodina waxa uu bilaabay in uu is geddiyo. Waxa ay yidhaahdeen sax ma aha in aynu iska sugno inta uu imanayo Masiixii badbaadiyaha ahaa, balse waa in aynu innagu ka shaqaynaa imaatinkiisa. Ka shaqayntaasi waa in si guud Falastiin loo qabsado, ka dibna waxa dhacay dagaalkii Macatablayaasha oo ahaa dagaal waalan oo Falastiin lagu gaadhayo. Markii ay Fardooleyda Haykalku magacoodii u dooriyeen Maasooniyadda ee uu dagaalkii Macatablayaashu dhammaaday, ee ay dawladda Cismaaniyiintu noqotay tamar aan loo babac dhigi karin, waxa adkaaday sidii ay Falastiin ku gaadhi lahaayeen. Maalmahaas Yuhuuddu waxa ay ahaayeen kuwo lagu ugaadhsado dhammaan daafaha dunida oo dhan oo la caydhiyay.

Tallaabada koowaad ee ay qaadeen waxa ay ahayd in ay Yuhuuddu ku soo noqdaan dhulkii laga eryay, ma aha in ay soo noqdaan oo qudha ee waa in ay iyagu ka taliyaan. Taas waxa loo marayaa jidka lacagta, waxa aanay ku guulaysteen in ay kacdoonno badan ka huriyaan Yurub, kacdoonnadaas oo ku dhammaanayay in dawlad kastaa ay addoon u noqoto Yuhuudda deynleyda ah.

Tallaabada labaad waxa ay ahayd yagleelidda dawladda weyn ee Maraykanka ee khayraadku ka buuxo. Inkasta oo

dhammaan madaxdii Maraykanka soo maray ay ahaayeen Maasooniyiin waxa kale oo ku qasab ahayd in ay caqiidada bulshada u jeediyaan mid u janjeedha Yuhuudda oo la dareen ah. Taasi waxa ay dhacday markii ay Maasooniyaddu ay hagoogteeda ka soo dhex saartay mad'habka Borotestanka oo si dhab ah u rumaysan baahida loo qabo in Yuhuuddu qabsato Falastiin.

Tallaabada saddexaad waxa ay ahayd in la rido dawladda Cismaaniyiinta ee weyn iyo in Yuhuudda la geliyo dhulka Falastiin ka dibna dawlad loo sameeyo. Taasina waa waxa ay si dhab ah ugu guulaysteen. Markii ay Yuhuuddu qabsadeen kala badh dhulka Falastiin 1948kii, waxa ay haddana bilaabeen in ay is balaadhiyaan oo ay riixaan dhulkii kala qaybsanaa. Waxa ay qabsadeen 85% dhulkii Falastiin waxa ay uga tageen Carabtii 15%. 15% kaasi waxa uu u qaybsan yahay laba faladh oo kala fog, sidii jasiirad ku taalla bad Yuhuud ah. Faladh ka mid ah labadaas faladh waa luuq yar oo la yidhaahdo Marinka Qasa, faladhka labaadna kaa wuu ka yara weyn yahay oo waxa la yidhaahdaa Daanta Galbeed, oo waxa ku taalla Quddus. Markasta dawladda Israa'iil waxa ay sii fagataa labadaa faladh iyada oo hadba dhul ka sii qabsata.

Waxa u hadhay oo keliyaata hadda in ay qabsadaan dhulka inta ka hadhay iyo duminta Masjidka Al-Aqsa, si ay uga dul dhisaan Haykalka. Waxa aad moogtahay in ay hogag waaweyn oo badan ka hoos qodeen masaajidka Al-Aqsa, haddii uu dhaco dhul gariir fudud ama roobab waaweyni waa uu iska dumayaa masaajidku.

Waxa laga yaabaa in aad i weydiiso maxaa aynu qaban karnaa si aynu magacyadan cabsida leh oo dhan uga hortagno: Maasooniyadda, Sahyooniyadda iwm. Tani waa su’aasha ugu mudan ee aad i weydiisay tan iyo bilawgii kulankeenna. Magacyadan oo dhami saaxiib waa magacyo xaashi ka fudud, xaashi oo dhan ma aha ee ta xashiishka lama qiimo aha. Markii aynu ahayn ummad midaysan oo leh hoggaan daacad ah oo mid ah xaashiyahan oo kale waxba

inaguma ay samayn karayn. Waxa laga yaabaa in aad arrintan ka dareentay sheekada Maastiim, iskaba dhaafe waa ay inoo dulleysnaayeen. Magacyadan cabsida leh oo dhami yaa ay raacsan yihiin? Waxa ay raacsan yihiin Luusifar, Luusifarna waa maxay; waa shaydaan. Cidda shaydaan raacday waxa joojin kara uun cidda raacda ciddii shaydaanka abuurtay oo ah Ilaahay. Sidaas ayaa aynu ahayn berigii hore, illaa ay kuwaasi ku guulaysteen in ay ina qaybiyaan.

Waxa ay inoo qaybiyeen dhowr iyo labaatan dawladood, oo dawlad kastaa ay ta deriskeeda neceb tahay, waxa ay inagu dhex beereen qawmiyad. Kani waa Masri, kaasi waa Sucuudi, kaasi waa Khaliiji, kani waa Marookaan. Midkastaa waxa ku beeran nac uu u qabo kan dawladda kale, Masrigu ma rabo inuu Sucuudiyaan noqdo, Sucuudiyaankuna ma rabo inuu Marookaan noqdo. Ma oga in ay dhammaantood yihiin Carab muslin ah, oo aanay taariikhdooda dheer qawmiyaddani ka dhex jirin. Waxa kan oo dhan dhowaan ayaa la beeray, oo sal ma aha.

Maxaa aynu samaynaa? Kuma baaqayo in aynu samayno wax aan suurtogal ahayn, waxa aan ku baaqayaa arrimo caadi ah. Si aynu ummadaha miisaan ugu dhex yeellano waa in aynu u dhaqaaqno dhan aan ahayn dhanka ay inala doonayaan in aynu u kacno. Marka koowaad lacagtiinna mideeya sida ay Yurub lacagteeda u midaysay, xuduudda la idin dhex dhigay oo dhan tirtira, waa in uu qofka Carabka ahi dhammaan dalalka Carabta bilaa fiise ku dhex maro, sidaas ayaa ay Yurub ba samaysay, iyaga oo colaad taariikhi ahi dhex martay sida dagaalkii 2aad iyo kii 1aad ba. Carabta wax loolan ah oo taariikhi ahi kama dhexeeyo, kaliya waxa ka dhexeeya nac qawmiyaded oo la abuuray. Arrintaasi miyaa aanay suurtogal ahayn? Miyaa aynaan boqol sanno ka hor hal mid ahayn? arrinka kugu dheerayn maayo, keliya waxa aan furayaa maankaaga, si aad u fahanto waxa aan u jeedo.

Aynu ku soo noqonno sheekadeennii. Sheekada xasuuqa iyo dabargoynta ay sheegtaan Yuhuuddu in uu Hitler ku

sameeyo, waa waxa ay u yaqaannaan Holikoost[104], taas oo ay u sameeyeen ciid sannad le ah oo ay maxkamadeeyaan ciddii diidda ama ka soo horjeedsata anigu waxa aan ku leeyahay cod dheer: dabargoynta aad sheegaysaan waa been weyn oo aad gaashaan uga dhigateen si aad dunida u dareensiisaan in aad tihiin bulsho la ugaadhsanayo oo u baahan dal ay leeyihiin. Waxa aad sheegateen in uu Hitler Holikoost idinkaga dilay 12 malyuun oo qof iyada oo ay jirto in tiradiinna Yuhuudda oo dhan ee Yurub joogtay xilligaa uu ahaa 8 milyan. Tiradii ayaa aad haddana yarayseen oo waxa aad tidhaahdeen waa lix milyan, xaqiiqada aad doonaysaan in aad qarisaan ayaa waxa ay tahay in Yuhuudda ku jirtay jeelalka Jarmalku ma dhaafayaan 20 kun, kala badhna waxa la helay iyaga oo nool.

Mise waxa ay Yuhuuddu ku sameeyeen Falastiiniyiinta iyo wixii ay gaysteen Macatablayaashu dagaalkii Macatabka iyo malaayiinkuu uu laayay Maraykanku ee Hindida ahaa , iyo burburintii Heroshiima iyo Nagasaaki ee lagu dhuftay qunbula durriyaha? Waxaas oo dhami qiimo ma leh! Waayo waa bulshooyin aan Yuhuud ahayn, ama waa xayawaan sida Talmuudka ku qoran "Quwiim".

Imika waxa aad fahantay in dhammaan wixii ay samaysay Maasooniyadda iyo Sahyuuniyaddu waxa uu daarnaa dhismaha Haykalka Saleebaan, si ay u soo dedejiyaan soo degitaanka Masiixa badbaadiyaha ah. Laakiin miyaa aanad u jeedin wax la yaab leh? In uu noqdo yoolka Maasooniyaddu mid diimeed oo ah in uu soo dego Masiixa badbaadiyaha ahi, iyaga oo aan asalkaba rumaysnayn Eebbe, iskaba dhaafe iyaga oo ku guba sannad kasta kaynta Boohiimiya? Ilaaha ay

[104] Holikoost: Holocaust.

caabudaan miyaanu ahayn Luusifar? sidee ayaa ay isu waafaqayaan kaas iyo soo degitaanka masiixa badbaadiyaha ahi iyo ballanqaadka Tawraadeed? Ha ka degdegin jawaabta, waxa aad inyar u jirtaa in aad ogaato, anna waxa aan inyar u jiraa in aan dhinto. Laba shaydaan ayaa ka hadhay toddobadii shaydaan, waxa xiise leh in shaydaanka lixaad uu yahay dheddig.

Mar kale aynu eegno waraaqihii kuwaas oo kuu bidhaamin doona sheekadan. Waxa aynu haysannaa shan waraaqood.

- **Waraaqda koowaad:** waraaqda gooryaan Internetka ee bahalka ah. Waxa ka muuqda sawirka gabadh horfadhida Kombiyuutar kaas oo uu dhaladiisa ka soo baxayo gooryaan cagaar ah oo bahalbahal ahi, oo leh madax saddex xagal ah oo dusha ay il kaga sawiran tahay.
- **Waraaqda labaad:** waa waraaqda magaalada Silikoon. Waxa ka muuqda xidhmooyinka Silikoon oo hab nambaro ah u qoran.
- **Waraaqda saddexaad**: waa waraaqda ammaanka Kombiyuutarka. Waxa ka muuqda gabadh hagoog madow afka ku duuban oo dhar madowna xidhan, oo ay madaxeeda ka soo baxayaan wax tuunbooyin u eeg oo ay ku fidinayso hareereheeda oo dhan.
- **Waraaqda afraad**: waa waraaqda budhcadda internetka . Waxa ku sawiran nin Kombiyuutar dul fadhiya oo si xun u qoslaya.
- **Waraaqda ugu danbaysaa:** waa waraaqda shirkadaha telefoonnada. Waxa ka muuqda gabadh shirkad shaqaale u ah oo dhagaha ku haysa laba sameecadood oo la moodo in ay dhagaysanayo xogta macaamiisha.

Waa waraaqo yaabab leh, waxa inoo sheekaynaysaa waa shaydaamad markaa waa in aynu dhagaysanno.

***

Miyaan la Gaadhin Xilligaagii Mudane?

(1950 - illaa hadda oo aynu joogno)

Farriintan waxa diraysa shaydaamad la yidhaahdo Basaasa[105] iyada oo sii marinaysa Asiirka[106] . Waxa ay u diraysaa cid aan la garanayn, waxa ay adeegsanaysaa ***Mareeg*** (***web***) aan la garanayn iyo ***Celceliye*** (***frequency***) aan la garanayn.

Mudane xilligu wuu dheeraaday, qalbigayaga, ruuxdayada iyo dareemayaashayaduba waa ay kuu xiiseen, ammintii waa la gaadhay mudane. Wax kastaa waxa ay noqdeen sidii aad ugu talogashay in ay noqdaan, wax kasta oo aad na tidhi sameena waa aanu samaynay, oo waa aanu ku guulaysannay. Waa aanu ku guulaysannay weynahayagoow. Waa aanu guulaysannay ee waxa noo hadhay oo keliya in aanu ku aragno. Waxa hadhay oo keliya in aad ka demiso dabka xiisaha quluub ku dhalaashay darnaanta sugitaanka, xilliyo daba socda xilliyo … miyaan la gaadhin ammintii mudane?

Wax kasta oo aad na fartay in aanu samayno waa aanu samaynay, dhammaan waa aan xasuustaa aqoon-hagistaadii oo dhan iyada oo isku duuban. Aqoontaadu ma laha wax xad ah. Waxa aan xasuustaa sida ay dadku dagaalkii labaad ee adduunka ay u daahfureen qalab weyn oo qol leeg oo ay u bixiyeen "***ENIAC***". Waxa aan xasuustaa taliye sidii aad noo

[105] Basaasa: Spy.

[106] Asiirka: Aether

bartay in dadkaasi ay yihiin doqommo iyo sidii aad noo fartay in aanu u ku xidhno qalabkooda weyn ee foosha xun liid Silikoon ah oo aan baaxaddiisu ka weynayn qudhaanjada. Waa liid ay u bixiyeen ***Hagaajiye*** (***Processor***) oo aan xasuusto sidii ay ugu faraxsanaayeen iyaga oo moodaya waxa dhacay in uu yahay wax ay maskaxdooda ka curiyen. Waxa ay markii ugu horreysay ku guulaysteen noloshooda in ay sameeyaan qalab maskax badan oo leeg telefiishanka, waa qalabka ay u bixiyeen ***Qaybe*** (***Computer***).

Waxa ay u adeegsan jireen Comuter-ka shirkadahooda iyo xisaabaadkooda doqoniimada ah ee aan dheefta lahayn, kaddibna wax baa aad na fartay mudane oo waa aanu fulinnay. Wax baa aad na bartay oo waa aanu hirgelinnay. Waxa aad na fartay in aanu Computer-ka gelinno guri kasta oo ka mid ah guryaha caalamka, waa aanad noo sheegtay sida taa u samaynayno annaga oo horumarinayna barmaamijyo leh falgal soo jiidasho leh. Waa barmaamij aad na fartay in aanu u bixinno Windows, si ay u noqoto sida magaceedu sheegayo daaqad laga galo guryaha. Waa daaqad gudaha loo galayo ee aan dibadda looga soo baxayn. Waxa aad na bartay barmaamij kale oo aanu u bixinnay "***Macintosh***", waa magac laga soo qaatay qoys reer Iskootland ah, waxa aanu macnihiisu yahay "***Inanka Taliyaha***". Waa magac adiga ku tilmaamaya si toos ah, waxa aad tahay taliyahayaga iyo wiilka taliyahayaga.

Alla aqoon badanidaa, oo ilayskaagu weynaa mudan. Koombiyuutarki waxa uu galay guri kasta, waxa aanu noqday meel lagu kaydiyo oo dadku dhigtaan xogta, sawirrada iyo muuqaalladaba. Dhanka ciidanka waxa uu ahaa habka xogta loogu kala gudbiyo Koombiyuutarka dal iyada oo loo wado dal kale mid gacanta lagu qaado. Fadligaaga dartii waxa aad na bartay sida la isugu xidhiidhiyo dhow Kombiyuutar iyada oo la adeegsanayo xadhka tilifoonka. Sidaas ayaa ay u samaysay Wasaaradda Gaashaandhigga Maraykanku mareegtii ugu horreysay ee isku gudbinta xogta ciidamada waxa aanay u bixiyeen "***Arbanet***". Waxa ay isu haystaan in ay

yihiin dad maskax badan, mana oga in aad adigu tahay barahayga weyn.

Waxa ay ahayd Arbanet mid isku xidhiidhisa afar qalab oo galbeedka Maraykanka yaalla, kaddibna waxa ay noqotay mid isku xidhiidhisa boqollaal qalab oo gudaha iyo dibadda Maraykanka yaalla, waa qalab yaalla wakaalado ciidan iyo kuwo jaamacadeed. Kala duwanaanta nidaamka qalabyada dhexdooda iyo kuwo kale waxa dadkii soo foodsaartay in ay awoodi waayeen in ay xogta u kala gudbiyaan wax u dhow kala badh qalabyadaas. Halkaas markii la marayo waxa aad na fartay in aanu u waxyoonno qayb cilmigaaaga ka mid ah, waxa aanan u waxyoonnay af Kombiyuutar oo ay fahmayaan dhammaan qalabyada dacaladda dunida yaallaa "***HTML***". Waxa aanu barnay in ay siiyaan xog kasta oo ay dirayaan iyo sawir kasta oo ay dirayaan ciwaan, ciwaankaas oo ay u bixiyeen ***URL***.

Sidaas ayaa ay ugu suurtowday in ay ka gudbiyaan xog qalab una gudbiyaan qalab kale sida ugu degdegga badan. Sidaas ayaa ay u dhacday in kombiyuutar Faransiiska yaallaa in uu u arko sawir ku jira kombiyuutar kale oo Maraykanka yaalla marka uu ciwaankiisa ku qoro. Taasi waxa ay u ahayd furasho weyn ilbaxnimadooda. Sidaas ayaa ay mareeg isku xidhan oo ka kooban boqolaal kun oo qalab oo kala yaalla dacalada dunidu qof kasta ugu fududaatay in uu galo, marka kombiyuutarkaaga laga xidho xadhig telefoon. Waxa ay u bixiyeen furashadan weyn "***Internet***", taas oo ah cunugtii ay ayayda u ahayd ***Arbanet***.

Halkaas markii ay marayso waxa aanu garannay in waqtigii dheeshu ay dhammaatay oo la gaadhay waqtigii dhabta. Marka uu qofku ku xidhiidhiyo qalabkiisa Internerka ee ay u soo baxdo in qalabkiisu xidhiidhsan yahay, waxa aanu arkaynaa goobta uu ku sugan yahay si toos ah. Kaddibna sida qulqulka webiga ayaa aanu ugu soo daadanaynaa qalabkiisa, waxaanu bilaabaynaa in aanu baadhno xogtiisa gaarka, sawirradiisa iyo faylalkiisa xaggayaga ayaa aananu u

gudbinaynaa isaga oo aan dareemin. Waxa aanu moodaynay in aanu sidaa u gaadhnay waxkasta oo aanu u baahannahay, balse waxa aad na bartay in aanay waxaasi waxba ahayn. Waa aanu kuu dhagraaricinnay annaga oo kula ashqaraarsan adiga oo noo sharraxaya waxa ay tahay in aanu qabanno. Alla kaswaansanidaa mudane, waxa aad tahay kaswaan. Waxa aad na bartay sida aanu qof Internerka ku jira ugu qancin karno in uu booqdo mareego gaar ah, halkaas oo uu dhigay xog dheeraad ah oo uu leeyahay. Markii hore waxa aanu barnay ***E-mailka*** sida ***Hotmail*** iyo ***Yahoo***, kaas oo uu ku galayo magac iyo weedh sir ah, waxa aanu moodayaa in aanay cidna la socon emailkiisa. Ma oga in dhambaalladiisa soodhaca iyo kuwa uu dirayaaba ay ku kaydsan yihiin agtayada, waa aanu aragnaa annagu waxa uu qorayo iyo waxa loo soo qorayaba. Balse waxa aad na bartay in aanay taasi weli nagu filnayn, oo loo baahan yahay wax dheeraad ah.

Waxa aanu barnay barmaamijyo uu kula hadli karo dadka kale ee ku sugan dunida oo dhan. Barmaamijka ergada ***MSN***, ***Yaahoo***, ***ICQ*** iyo ***Mirc***. Waa barmaamijyo ay u bixiyeen barmaamijyada wada-sheekaysiga (***Chat***), midkii ka mid ahiba waxa uu waqtigiisa inta ugu badan ku qaadan jiray baraha wada-sheekaysiga. Waa uu hadlayaa oo waxa uu ku hadlayaa hadal bilaa macni ah, balse waxa aad na bartay sida loo kaydiyo eray kasta oo uu ku hadlo, waayo weedhaha waxa laga soo dhuuxayaa xogo. Xogtuna waxa ay inoo kordhinaysaa xogaha baanka ee aynu ka hayno qofkan. Waxa ay barmaamijyadani ku soo kordhiyeen xog badan kaydka xogteenna, dadku waxa ay noqdeen kuwo iska dhurma si ka badan carrabka caadiga, kaasina waxa uu ahaa dheeraad aan dhammaad lahayn oo xogteenna ah.

Wada-sheegaysigii qoraalka waxa aanu ku beddelnay wadasheekaysi cod ah iyo mid muuqaal ah, waxa aanu golaha keennay barmaamijyo ay ka mid yihiin ***ICU2*** iyo ***SKYPE***. Waxa kordhay iibsiga sameecada iyo kamaradaha oo markii

hore iska tuulnaa bakhaarrada. Dhabtii dhammaan xogtooda maqalka ah iyo tooda muuqaalka ahiba waxa ay ahaayeen wax noo kaydsan. Taas waxa ka daran marka ay iibsadaan sameecadaha iyo kamaradaha taasi waxa ay ka dhigan tahay in aanu guryahooda ku beernay qalab dhegaysi oo sir ah, oo maqal iyo muuqaal ba ah. Qofna ma oga in hadalka uu ku hadlo qolkiisa dhexdiisu in uu noo duuban yahay iyo in sawirka uu ka qaaday qolkiisu oo noo duuban yahay. Qalabkani waa mid iska furan markasta, doqonkuna waxa uu moodayaa in uu isagu yahay ka furaya ee xidhaya.

Waxa aanu haddana u soo saarnay laba mareegood oo la kala yidhaahdo ***Facebook*** iyo mid kale oo la yidhaahdo ***Twitter***, halkaas ayaa aanu ka barannay saaxiibadood, ehelkooda iyo inta ay u dhow yihiin asxaabtooda iyo ehelkooda. Halkaas ayaa aanu ka helnay sawirradooda, dadka iyo waxyaalaha ay jecel yihiin, muusiga iyo filimaanta ay ka helaan iyo aragtida siyaasadeed ee ay u janjeedhaan. Waxa aanu ogaannay bandhigyada ay tagayaan iyo kuwa ay tagi doonaan, waxa aanu qorannay taariikhdooda, taariikhda mawqifkooda iyo dareenkoodaba. Haa, dhabtii waxa ay ahaayeen Facebook iyo Twitter furasho weyn, waxa ayna ahaayeen bootintii labaad ee kayda xogeed ee aanu hayno oo sii balaadhatay, balaadhasho wareer ah.

Markii aanu dareennay in aanu u baahannahay sawirro intan ka badan waxa aanu u sameynay bog sawirrada u gaar ah oo la yidhaahdo ***Instagram***, halkaas ayaa ay sawirradoodii ku soo af rogeen si aan kala hadh lahayn. kaddib waxa aanu dareennay in aanu u baahannahay in aanu muuqaalladooda daawanno, waxa aananu u samaynay meel muuqaallo kooban lagu soo bandhigi karo oo loo yaqaanno ***Keek***. Halkaas ayaa ay ku soo duubaan muuqaalladooda xaalad kasta oo ay ku sugan yihiin. Arrintaasi waxa ay ahayd mid cajiib ah mudane, adigu ma ogid wax dartaa u dhacay.

Waxa mar kale dhacday bootintii saddexaad, oo ah moobilada maskaxda badan. Waa moobilo ay ku xidhan tahay

kamarad oo ay ku hoos jiraan dhammaan daahfurkayagii oo dhan sida: e-mail, barmaamijka wadadheekaysiga, Facebook, Twitter, Instagram iyo wax kasta. Sidaas ayaa ay mid kasta oo iyaga ka mid ah ugu fududaatay in uu adeegsado daah-furradan cajiibka meel kasta oo uu tagaba. Waxa aanu moobiladan ku soo kordhinnay barmaamij wadasheekaysi oo kuwii hore oo dhan ka heersarreeya, waa barmaamij ay addoomo u noqdeen, waa barmaamij la yidhaahdo ***WhatsApp***. Kamaradaha iyo sameecada ku xidhan moobiladani waxa ay u shaqaynayaan sidii kuwa kombiyuutarka, halkii aanu markii hore barmaamijyo basaasnimo qolalkooda ugu xidhnay hadda waxa aanu ku xidhnay jeebabkooda.

Annaga oo ku soconna talooyinkaaga mudane waxa aanu seeska u dhignay shabakaddii basaasnimo ee ugu weynaa taariikhda. Waxa qurruxda leh waxa weeye weynahayagoow in shabakaddani ay noo soo gudbinayso siraha dadka, waxa kale oo ay na siinaysaa siraha shirkadaha; shirkadaha kuwooda waaweyn iyo kuwooda yar-yarba, dhammaantood waxa ay ku shaqeeyaan hannaanka Internetka. Inkasta oo ay shirkaduhu leeyihiin hannaan Interner oo qallax gaar ah leh, balse waa hannaan aan annagu dhignay seeskiisa iyo qallaxiisaba. Sidaas darteed dhammaan xogta iyo siraha shirkadaha caalamku gacmahayaga ayaa ay ku hoos jiraan. Miyaa aanan hore kuu odhan mudane waxa aad tahay kaswaan. Shirkadaha oo keliya ma aha balse baanankuna waxa ay ku shaqeeyaan hannaan Interner oo qallaxan qallaxnaan aad ah, si ay u ilaashadaan xoolohooda mugga leh. Sidii aad na bartay mudane waxa aanu ka dhignay baananka kuwa aan ka maarmi karin Internet qallaxan, iskaba daaye waxa ku dhacaya faalig haddii in yar ay wax ka xumaadaan hannaankan; annaguna waxa aanu nahay aabbayaasha hannaankan. Hantida adduunka oo dhami gacmahayaga ayaa ay ku hoos jirtaa, hantida caalamka oo dhan iyo shirkadihiisuba annaga ayaa gacanta ku hayna. Gacmahayaga

ayaa uu ku jiraa waxa ay ka dhigan tahay in aanu markeliya curyaamin karno dhaqdhaqaaqa wax kasta, waayo annaga ayaa ka aabbe ah hannaankaas dhammaantii. Boqorkayagiiyoow sidii aad na bartay waxa aanu noqonnay kuwo gacanta ku haya dhaqaalaha adduunka oo dhan.

Wakaaladaha dawladda ee muhiimka ah sida sirdoonka, waaxda dagaalka, ciidanka iyo arrimaha dibadda dhammaan waaxahani waxa ay xogta iyo siraha isugu gudbiyaan hab Internet ah oo loo horumariyay hannaan iyaga gaar u ah. Waxa ay markasta ku faanaan in hannaankoodaasi uu yahay mid aan la jabsan karin wax kasta oo dhaca, waa dhab isagu waa mid aan la jabsan karin, waayo annaga ayaa ka dhignay mid aan la jabsan karin. Annaga ayaa samaynay oo galdaloolladiisa oo dhan awdnay. Shabakadda basaasnimo ee weyn ee aad na bartay in aanu samaynaa mudane waxa ay hadda gaadhay heer ay dawladaha basaasi karto, kuwooda waaweyn iyo kuwooda liitaba. Waxa aanu hantinay dadka, shirkadaha, baananka, ciidanka iyo dawladaha. Waxa aad na bartay in ay aqoontu tahay awood, annaguna waxa aanu noqonnay kuwo wax kasta garanaya.

Imika waxa aanu leennahay saldhig xogeed oo dhammaystiran taas oo koobsanaysa dhammaan bulshoweynta caalamka. Haddii la dulgeeyo magaca qofka aad rabto waxa kuu soo baxaya: magaciisa Internetka sida aanu ka helnay xogta aanu ka soo saarnay akoonnadiisa kala duwan, magacaiisa dhabta ah kaas oo uu barmaamijkayagu kala soo baxayo saldhigga xogta ee laanta madaniga dalkiisa, waxa kuu soo baxaya sawirkiisa gaarka ah ee u dhigay kombiyuutarkiisa ama moobilkiisa iyo sawirradiisa guud ee uu ku baahiyay Internetka. Waxa kuu soo baxaya nuqulka iyo dhokomantiyadiisa xukuumadeed ee laga soo qaatay dhammaan laamaha kala duwan ee dawladda. Waxa kuu soo baxaya muuqaalladiisa gaarka ah iyo kuwa guud, iyo xogo faahfaahsan oo ku saabsan ehelkisa, sooyaalkiisa waxbarasho, xukuumadeed iyo ka danbi. Waxa kuu soo baxaya xogta cidda

uu la shaqeeyay iyo faahfaahinta shaqadiisa sida imaatinka, mushaharka, maqnaanshaha sida aanu ka soo qaadanayno kaydka xogta ee laamahaas. Waxa aanu heli karnaa dhammaan dhaqdhaqaaqiisa bangi oo faahfaahsan oo taariikhaysa iyo goobihii uu kaadhkiisa wax kaga iibsaday, waxa uu iibsaday iyo inta uu ku iibsaday. Waxa aanu helaynaa xog ku saabsan asxaabtiisa iyo janjeedhkiisa siyaasadeed, faneed, suugaaneed iyo galmo. Tan waxa aanu ku helaynaa jidka baadhista ee uu wax ka baadho markasta mareegaha baadhista sida Google iwm. Waxa kuu soo baxaysa wadasheekaysigiisii qoraal, sawir iyo ta muuqaal ee ku sameeyay koombiyuutarkiisa ama moobilkiisa, iyaga oo taariikhaysan oo faahfaahsan. Sida oo kale waxa uu barmaamijkayagu helaa dhammaan hadaladiisa telefoonka oo dhammaystiran ee uu ku hadlay moobilkiisa intii uu noolaa oo dhan. Waxa uu kuu soo saarayaa mareegaha Internetka ee uu booqday noloshiisa oo dhan iyo saacadda iyo daqiiqaddaba. Ugu danbaynti waxa uu kuu soo saarayaa dhammaan wixii uu duubay moobilkiisa caaqilka ahi ama koombiyuutarku, waxaas oo ah cod ay duubtay sameecaddu ama muuqaal ay qabatay kamaraddu. Haddii aan soo koobo mudane, waxa kuu furmaya qofka aad doonto furasho cad, haba ahaado madaxweyne dawladeed e'.

Ma jiro wax kuu diidaya in aad noo soo baxdo annaga boqorkayagii iyo waynahayagiiyoow. Dunida oo dhami waxa ay noqotay mid hadda u diyaarsan soo dhowayntaada. Adduunka oo dhami waa uu kuu hoggaansan yahay, waxa kuu hoggaansan dadkiisa, shirkadihiisa, hantiidiisa iyo ciidankiisa. Waxa kuu hoggaansan hubkiisa, sirdoonkiisa, baanankiisa iyo dayax gacmeedkiisa. Waxa kuu hoggaansan sirihiisa oo dhan, ciidankiisa iyo waaxaha lacagta. Waxa kuu hoggaansan haayadihiisa, shaqooyinkiisa iyo xogtiisa. Weynaantaada ayaa uu caalamka oo dhami u hoggaansamay mudane. Waynaantaada ayaa uu u hoggaansamay ee noo soo bax mudane, waxa nagu dheeraaday sugitaankiiye.

Mudanahayga weynoow, boqorkayagoow, ii ogolow in aan kuugu yeedho magacaaga weyn kaas oo ay u foorarsatay weynaantiisa dhamaan waaxyaha dunidu. Magacaaga oo badbaado u noqon doona dunidan baas. Waxa aad tahay masiix oo waxa aad tahay badbaadiye. Magaca aad na fartay in aanu kuugu yeedhno mudane waa Antikiriistoos, waa magac widhqidhaya oo leh dhadhan Laatiini ah, laatiiniguna waa salka afafka oo dhan. Waxa ay kuugu yeedhan dadka afka Cibrigu "***Haamaashiyaax***", kuwa galbeedkuna waxa ay kuugu yeedhaan Antichrist. Dadka ku hadla afafka barigu waxa ay kuu yaqaannaan Masiix (***Masiixu Dajaal***).

DHAN

Iftiimin

Waxa aan dareemayaa codka dibadda in laygu soo garaacayo, ma garanayo ma shayaadiin baa mise waa dad. Waa uu burburay dhammaan xirsi-xidhkii aan akhristay, i rumayso imika waxa aan gelayaa ilbidhiqsiyadii ugu danbeeyay noloshayda. Ma i garatay saaxiib ma i garatay? Ma garatay sababta ay u doonayaan in ay u dhisaan Haykalka Muqaddaska ah, waa kuma Masiixa Badbaadiyaha ah ee ay u sugayaan sida daran?

Waa Dajaal Cawar, ma aha magaciisa balse waa naanaystiisa. Cidna ma garanayso waxa uu yahay magaciisa dhabta ahi. Kuwaasi sida aan kuu sheegay Ilaahay ma aqoonsana mana garanayaan Masiixa badbaadiyaha ah. Ilaaha ay caabudaan waa dab-sidaha shaydaanka Luusifar. Waxa ay u samaynayaan waxa ay sameeyeen oo dhan si uu u soo dego Masiixa Luusifar; inanka Luusifar; Dajaal Cawar, kaas oo dunida oo dhan maamuli doona , dhammaan shayaadiintana sii deyn doona. Imika ma garatay, waxa ay sheegayaan Haykal huuhaa ah, waa Haykal u samaysan sida xiddig lix gees ah; xiddigta shaydaanka ee caanka ah ee ay si been ah ugu sheegaan xiddigta Daa'uud. Nebi Daa'uud shaqo kuma laha xiddigtaas.

Ma waxa aad i weydiinaysaa cidda ay tahay shaydaamadda ***SPY***? Waa shaydaamad lagu sheegay axaadiista Nebi Maxamed (NNKH). Waqti iima uu hadhin aan kuugu sharraxo arrinka ***SPY*** . Aad baa la iigu garaacayaa albaabka. Haddii aanad doonayn in aad i rumaysato akhri ***NSA*** ama ka akhri ***Information Awareness Office***. Waxa aan eegay albaabka aniga oo rumaysan in ay tahay eegmadii ugu danbaysay , waa ay yimaaddeen. Iyagu ma deynayaan qof ka

gaadhay heer sare Maasooniyadda, taasi kuma qorna xeerarkooda. Nabadgelyo dadoow iyo cidkasta oo meerisyadan akhriyaysaa. Xusuusnow in aad buuggan gubto marka aad akhridid, gub saaxiib si aanay kuugu iman iyaga oo yaacaya sida ay iigu yimaaddeen. Gub saaxiib waa ay ii yimaaddeen oo waa kuwaas ii sii wata meel ka baxsan qolkayga e' . Gub oo erayadiisa ku daabaco maskaxdaada si aad dhabta u ogaato, oo aanay cidna kuu dagin. Waxa aan kaaga digayaa in ay cid ku dagto saaxiib. Magacayga aad u xasuuso, Boobi Faraank.

War ku soo baxay wargeyska maalinkii labaad:

''*Waxa la helay gabboodfalka dilka foosha xun ee wiilku dhallinyarada ah ee reer Maraykan Boobi Faraank, oo ka tirsan dadka reer Shikaago. Waxa uu isu beddelay kuus dab ah oo shiilan oo laga buuxiyay Aysiidh. Wiilku waxa uu ahaa kuwa ugu wanaagsan dhallinyarada Yuhuudda ka soo jeeda ee Maraykanka. Waxa jira warar sheegaya in uu ahaa xubin sare oo ka mid ah ururka Illuminaatiga, laakiin cidna ma ay xaqiijin warkaas. Waxa la sheegay in ururkaasi dilay markii uu doonay in uu ka baxo oo uu siraheeda baahiyo. Waxa hadalkooda xoojinaya ayaa ah in qolkiisa laga helay walxo aan la garanayn oo ka mid ah waxyaalaha sixirka loo adeegsado. Balse danbibaadhaha Shikaago oo la yidhaahdo Rikis Waatson ayaa ku guulaystay in uu soo qabto gacan-ku-dhiiglayaashii , labada danbiile waxa ay qirteen in ay iyagu gaysteen falka, waxa ay se diideen in ay sheegaan cidda ay ka tirsan yihiin ama soo dirtay*."

"*Waxa yaab leh in ay jirto koox aan la garanayn balse awood badan leh in ay u xilsaartay mudane Kalaarans Daaro qareenka ugu weyn Maraykanka in uu difaaco danbiilayaasha, waxaana loo diiday danbibaadhe Rikis Waatson inuu soo xaadiro fadhiyada maxkamadda, xataa waxa la faray in uu ka baxo magaalada Shikaago, iyada oo lagu eedaynayo in uu laaluush ka qaatay qoyska Boobi ee hantiilayaasha ah oo uu isku dayayo in uu garsoorayaasha si hoose ula kulmo. Danbibaadhihii waa laga eryay shaqadii oo booliska u*

hayay oo dhan, dacwaddiina waa la xidhay iyada oo lagu andacoonayo in ay tahay isku day aargoosi oo loo maleegay eedaysanayaasha, oo ka imanaya dhanka qoyska Boobi sababo dhaqaale dartood."

Waxa yaab leh in miiskii Boobi laga helay waraaqo ciyaareed oo badan oo ku daadsan, waxa jiray saddex waraaqood oo si habaysan loo dhigay miiska.

- **Waraaqda koowaad**: waa waraaq ay ku qoran tahay cudur ka yimi shaydaan. Waxa ka muuqda shayaadiin foolxun oo magaalada ku soo degay, oo buux dhaafiyay waddooyinka, oo tiirarka haysta oo guryaha dushooda jooga, oo cirkana duulduulaya. Waa shayaadiin bahalo ah.
- **Waraaqda labaad**: waa waraaq ay ku qoran tahay ***Big Foot***, waxa ka muuqda xayawaanka caanka ah ee timaha badan ee dadka reer Maraykan ay u yaqaannaan Cag Weyn.
- **Waraaqda saddexaad**: waxa ku qoran ***Dajaal Cawar***. Waxa ka muuqda nin la moodo nin xikmad badan oo taaj weyni madaxa u saaran yahay.

Cidna ma ay garan waxa waraaqaha kan looga jeedo, sida aanu xogta ku haynanaa in

***

Mudannahayaga iyo Wiilka Mudannahayaga
(1800 C.H – 20 C.D)

''Shan baanu ahayn, waxa nagu lix ahaa Luusifar.
Lix baanu ahayn, waxa nagu toddobada ahaa
taliyahayaga iyo wiilka taliyahayaga.
Annaga mooye cid kale ma garanayso
arrinta taliyahayaga iyo
wiilka taliyahayaga.''

Sheekadayadii ugu danbaysay, ee adigana kuugu danbaysay dhagayso. Waxa kuu warramaya jinka Yuhuudiga ah ee Maastiim. Wuxu yidhi: Waxa ii sharaf ahayd in aan goobjoog ka noqdo dhalashada taliyahayga, barbaariddii taliyahayga iyo maskax badnaantii taliyahayga, intaaba goobjoog ayaa aan u ahaa. Taliyahayga waa Antikiriistoos.

Waxa aan kormeerayay guryaha qoysaskii reer bani Israa'iil xilligii Fircoonkii Muuse. Guryaha reer bani Israa'iil waxa ay ahaayeen qaar danyar iyo saboolnimo laga dareemayo. Hal sannad waxa uu Fircoon dili jirey dhammaan wiilasha reer bani Israa'iil, sannadna waa uu dayn jirey, si aanay tafiirtoodu u go'in; waayo waxa ay u ahaayeen shaqaale. Waxa ay ahayd sannadkii wiilasha la deynayay, waxa aan gaafwareegayay aniga oo cabbaayad xidhan guri ka mid ah guryaha Yuhuudda ee saboolka ah, gurigaas si gaar ah ayaa aan u danaynayay. Gurigaasi waxa uu ahaa mid ku barakaysan qalbigayga, waxa uu ahaa gurgii ay ka dhacday dhalashada taliyahaygu iyo wiilka taliyahaygu: waa dhalashadii Antikiriistoos.

Aabbihii waxa uu ahaa nin Yuhuudi ah, oo leh sandheer oo mudac la moodo, hooyadiina waxa ay ahayd gabadh Yuhuudiyad ah oo buuran, gacmo dhaadheer oo laab weyn. Waxa ay is qabeen soddon sanno wax carruur ahna isuma ay dhalin. Waa ay ka quusteen in ay yeeshaan wax carruur ah, oo rejadi waa ay ka dhammaatay. Ma habboona in aan kuu sheego faahfaahin aan loo baahnayn in aad ogaataa, balse waxa kugu filan ay gabadhaa buurani sariirta is-rogrogaysay iyada caajisan oo luloolaynaysa, ka dib waxa ay aragtay waxa uu arko qofka riyoonayaa: sidii oo uu nin shisheeye ahi u imanayo, ma ay garan illaa uu riximkeeda ku tuuray wax ay moodaysay dhinbiil dab ah. Anigu se xaqiiqda oo dhan waa aan ogaa.

Dhabtu waxa ay tahay gabadhaa buurani waxa hurudday sariirteeda halka uu ninkeeda sanka dheeri uu taagnaa sariirta agteeda, waxa uu qolka ka buuxiyay tafaaful, duco iyo hab maamuus shaydaan u yeedhid ah oo aanay waxba kaaga faa'ido ahayn in laguu sheegaa. Wixii dhacay hab maamuuskaa ka dib waa mid aanay rumaysan karin dadka kula mid ka ahi. Saacad ka dib markii uu ninkii wax akhriyay isaga oo daallan, waxa soo dagay taliyahayga, isaga oo aad haybadda iyo maamuuska ka muuqda aanad sawiran karin. Waxa soo degay taliyahayga Luusifar oo yimi gurigaa barakaysan, waxa aanu eegay riximkaa barakaysan, waxa aanu ku tuuray dhibic barakaysan, ka dibna waa uu iskaga tagay hab milgo leh. Waxa uu dhammeeyay ninkii sanka dheeraa wixii uu waday, waxa aanu meeshii ka qaaday wax kasta oo muujin kara raad in cid kale timi. Gabadhii buurnayd ee Yuhuudda ahayd hurdadii waa ay ka gudubtay waxa aanay gashay heer kale, waa suuxdin barakaysan.

Sidaa ayaa ay u dhacday galmadii barakaysnayd, ee dhex martay taliyahayga weyn ee Luusifar iyo gabadha Yuhuudiyadda ah. Gabadhi waxa ay qaadday uur ay u malaynayso in uu ilmaheedii yahay, balse waxa uu ahaa dhashiii shaydaanka -Antikiriistoos. Waxa uu ahaa uurkii ugu

dhibta badnaa ee ay gabadhi qaaddo weligeed, waxa ay sidday 12 bilood oo dhammaystiran. Waxa uu ahaa sidkii ugu dheeraa, ugu dhibta badnaa ee ugu foosha kululaa. Markii ay dhashay cadaab, qaylo iyo dhiig ka dib, waxa uu ka soo baxay isaga oo qurux iyo barakaba wata. Waa ay eegtay, waxa aanay ishiisa ku aragtay wax ay fahmi weyday, balse waxaas ba waxa illowsiiyay qaylada ka imanaysa dibadda. Buuqa baxaya waa ay garanaysaa, waa ciidankii Fircoon; waxa la gaadhay sannadkii ubadka la leyn jirey, dhammaan guryaha Yuhuudda waa ay soo galayaan ciidankaasi.

Dibadda ayaa ay u baxday gabadhii buurnayd iyada oo maryaheeda ku qarinaysa cunuggeedii, waxa aanay u kacday dhanka buuraha. Waxa ay kortay buur aan la islahayn qof sideeda u buuran ayaa kori karaya, waxa aanay aragtay god ay filaysay in uu ammaan yahay, halkaas ayaa aanay dhigtay ilmaheedii. Waxa ay goosatay in ay xilli kasta soo booqato si ay u quudiso.

Halkaas ayaa ay ilmihii yaraa kaga tagtay, markii ay hoggii ku soo noqotayna ma ay helin. Waa ay oyday oo waa ay barooratay. Ma ay filan in malaggu uu u qaaday goob ka aammin badan hogga, halkaas ayaa uu ku quudin jiray malaggu, waxa aanu siin jirey caano, malab iyo subag. Sidii ayaa uu u korin jirey illaa uu weynaaday oo uu koray, waxa aanu noqday wiil barbaar ah. Alla weynidaa taliyahaygoow,alla barakaysanidaa.

Wuxu Yidhi Daraakoola
Shaydaanka Insiga Ee Caanka ahi:

Nasiib uma aan yeelan in aan la socdo oo aan ka warhayo taariikhda taliyahayga sida ay shayaadiinta kale sameeyaan, balse waxa ii sharaf ah in aan anigu dhawr jeer arkay. Maadaama aan ahay nin kasmo badan oo ildheer, waxa aan ahay qofka ugu habboon ee u sifayn kara qof aan arag, ee u xiisa qaba in uu arko daymadiisa barakaysan: waxa uu ahaa nin xoogweyn, oo garbo waaweyn, ma uu dheerayn mana uu

gaabnayn, balse gaabnida ayaa uu xigay. Waa nin cas sida caynka Qooqaasiyiinta cadcad. Waxa uu leeyahay timo madow oo duuduuban oo dhaadheer, oo aad isugu cufan. Waxa uu ahaa nin leh lugo kala fog, dhammaan sifooyinka jinka iyo kuwa insiga waa uu lahaa. Sidaas ayaa u socdaalkiisa dhulku u noqday sida dabaysha duufaanka ah. Waxa uu arki karaa jinka, insiga iyo malaa'igtaba, iyaguna dhammaantood waa ay arki karaan. Ma qabtaan isaga xeerarka waqtigu, waxa uu nool yahay illaa xilligii Fircoon, waxa aanu noolaan doonaa illaa aakhiru sabaanka. Ma weynaado mana gaboobo, waa taliyaha jinka iyo taliyaha shayaadiintaba. Aabbihii Luusifar mooye isaga cid kale uma taliso, waxa aanu noqon doonaa taliyaha insiga aakhiru sabaanka.Madaxiisu waxa uu leeyahay muuqaal aad sheedda ka garanayso, waxa la moodaa madaxiisa madaxii maska, ma garanayo si aan muuqaalkiisa kuugu sifeeyo laakiin madaxiisu sidaas ayaa uu iigu muuqday aniga.

Wuxu Yidhi Shaydaanka Baafomiid
Ee ay Caabudaan Fardooleydii Haykalku:

Waxa uu noolaa taliyahaygu maalmii Faraacinadu ay Masar haysteen, waxa aanu bartay kasmo iyo aqoon aanu qaadi karin caqliga aadamaha iyo ka jinku toona, waa aqoon aanu qaadi karin garaadka sayidkayga mooyaane. Waxa wax baray aabbihii Luusifar iyo murtimaalka jinka. Kaagama sheekayn karo noloshii uu ku noola taliyahaygu xilligii masar, waxa keliya ee aan kuu sheegi karaa markii uu bartay sida doonyaha loo kexeeyo waxa uu go'aansaday in uu ka tago Masaratii Faraacinada, oo uu soo indha-indheeyo dunida ku hareeraysan. Waxa uu dhex qaaday bulshooyinka iyo dalalka isaga oo wax ka baranaya, ugu danbayntiinna waxa uu salka dhigtay Yaman. Waxa uu ku xidhay jasiirad magac fajac ah leh, waa jasiiradda Xaniish ee Badda Cas, Xaniish waxa ay la macne tahay maska. Waxa uu ka doortay jasiirad qudha oo saldhigiisa noqon doonta illaa dhammaadka xilliga.

Waxa dhacday xilligaas in ay Faraacinadii Masaaridu diyaariyeen doon weyn, oo u dhaqaaqi doonta socdaal badeed oo dheer. Waxa doontaa loo diyaariyay shan boqol oo nin oo ka mid ah kuwii ugu geesisanaa Masar, waxa aanay ahaayeen kuwii ugu maskaxda badanaa ee arrimaha baddana yaqaannay. Markii ay badda badhtaneeka marayeen raggaasi waxa doontoodii ku dhabatay dabayl duufaan ah. Kol ba dhan ayaa ay u kaxaynaysay dabayshu doonta, markii danbena dhagax weyn ayaa ay doonti ku dhacday. Dhammaan dadkii doonta la socday waa ay qarqoomeen, marka laga reebo nin keliya, oo qabsaday loox doonta ka jabay. Hirarka ayaa qaaday, waxa aanay siteen saddex cisho iyo saddex habeen oo xidhiidha, markii danbena hirki waxa uu ku tuuray xeelliga jasiirad.

Ninkii waxa uu soo miiraabay isaga oo jiifa xeelliga jasiirad ciid kulul, balse waxa ay ahayd jasiirad hodan ah, oo aanu iyada oo kale hore u arag. Waxa uu ahaa badmareen jasiirado badan cagta dhigay, balse jasiiraddani waxa ay ahayd mid ka duwan kuwii hore oo dhan. Jasiiraddan waxa ka buuxay xayawaan kala duwan, midho badan ayaa aanay dhirteedu lahayd. Waxa uu ugaadhsan jirey xayawaanka hilibka leh, waa aanu karsan jirey, isaga oo sidoo kale duban jirey kalluunka. Waxa uu wax u gawrici jirey qurbaan ahaan Ilaahyadii Masaarida ee uu caabudi jirey, isaga oo ugu mahad naqaya sida ay u badbaadiyeen.

Dhulkii ayaa si kedis ah u gariiray, dhirtiina waa ay dhaqdhaqaaqday, waxaana ku soo baxay nin xidhan dhar dahabi ah oo qurux badan. Badmareenki waa uu argagaxay waa aanu anfariiray. Ma uu garanayn ninkan badmareenka Masriga ahi in uu yahay qofkii ugu horreeyay ee cagaha soo dhigay jasiiradda taliyahayga, jasiiradda Antikiriistoos.

Waxa uu cod sare taliyahaygu ugu yidhi:

– Dhulkee ayaa aad ka timi?

Isaga oo badmareenkii la yaabban tamarta iyo awoodda taliyahayga ayuu ku yidhi:

– Waxa aan ka imi dhulka Masar. Waxa aan ku jiray badda aniga oo la socda koox saaxiibbadey ah, badda ayaa nagu cadhooday oo dhagax ku dhufatay doontayadadii, waa aanay burburtay dadkiina waa ay wada dhinteen oo aniga oo qudha ayaa ka soo hadhay.

Si xikmad leh ayaa uu taliyahaygii ugu yidhi:

– Ha cabsan Masriyahow, amni ayaa aad ku joogaysaa jasiiraddayda. Waxa aad tahay mid la doortay oo ka badbaaday halaaggii dhacay, ee ay ku hoobteen rag badan oo waaweynkii Masar ahi. Waxa aad tahay mid la doortay Masriyahow.

Waxa uu ku yidhi badmareenkii, isaga oo nafisay:

– Xaggee ayaa aad ka timi ninyahow xoogga weyni?

waxa uu ku yidhi taliyahaygii Antikiriistoos:

– Kuma khusayso xagga aan ka imid, waxa aad iigu yeedhi kartaa maska. Waxa halkan igula noolaa toddobaatan jaalkayga ka mid ah, balse waxa danab cirka laga soo ganay ayaa dhammaantood gubtay, aniga oo qudha ayaana ka badbaaday iyo gabadh yar oo kale.

Waxa uu yidhi badmareenki:

– Waxa aad tahay mid nasiib leh masyahow.

Waa uu dhoolla-caddeeyay taliyahaygii waxa aanu yidhi:

– Waxa aan leeyahay awoodda aan wax ku saadin karo, afar bilood ka dib waxa halkan imanaya doon kale oo kugu celin doonta dhulkaagii.

Waa uu farxay badmareenkii waxa aanu yidhi:

– Ma dhabbaa mudane? waxa aad tahay nin wanaagsan.

Haddii ay sidaasi dhacdo waxa aan Masar kaaga keeni doonaa hadiyado badan sida cadar, dahab, udug iyo qurbaan.

Waa uu qoslay taliyahayga Antikiriistoos waxa aanu yidhi:

– Jasiiraddaydu uma baahna wax aad u keentid. Ogow Masriyahow haddii aad jasiiraddayda mar ka baxdo kuma soo noqon kartid, maxaa yeelay jasiiraddaydani badda ayaa ay ku qarsoomi doontaaa, waxa aanay mar labaad u soo muuqan doontaa qofka lumay ee soo anbada sidaada oo kale.

Waxa uu yidhi Antikiriistoos:
– Balse Masriyahow marka aad sidaa ugu noqotid dalkaagii, ma habboona in aad u sheegto in aad qof insi ah halkan kula kulantay, waxa aad ku tidhaahdaa waxa aan la kulmay mas. Ha ku rumaysato ciddii doontaa, hana ku beeniso ciddii doontaa.
Waxa uu yidhi ninkii:
– Sida aad jeceshay masyahow.

Afar bilood ka dib waxa soo gaadhay jasiiraddii doon ka timi Masar, waxa aanu taliyahaygii Antikiriistoos uu siiyay badmareenkii Masriga ahaa hadiyado iyo dheef fara badan sida fool maroodi, indho-kuul, cadar, udug, xawaash, looxyo, dahab, maar iyo xayawaan kala duwan sida garanuug, daanyeer si uu Masar ugu qaato. Waxa uu sii saarnaa badmareenkii doontii cusbayd laba bilood, waxa aanu ahaa mid sii eegaya jasiiraddii Antikiriistoos, waxa aanay ahayd mid marba marka ka danbaysa sii baaba'aysa, illaa ay wada qarsoontay.

Markii uu ninkaasi Masar ku noqday waxa uu sheekadii uga sheekeeyay wasiir reer Masar ah, wasiirkiina waxa uu arrinkii u sheegay Fircoon. Waxa uu faray Fircoon xoghayntii qoraalka Aammuun Ammuuna in uu dhacdadan ku xardho Burdiga. Waxa kale oo xil sare laga siiyay badmareenka qasriga Fircoon, si looga abaalmariyo geesinnimadiisa iyo nafhurnimadiisa.

Waxa laga yaabaa in aad sheekada ninkan badmareenka ah aad akhriday, waxa imika loo yaqaannaa 'Sheekada Badmareenkii Hallaabay' mana aad fahmin akhriste arrinka uu uga sheekeeyay Antikhriistoos ninkaas ee uu ku yidhi toddobaatan jaalle ayaa uu danab laayay oo ila socday. Kuwaasi waxa ay ahaayeen shayaadiin ka amar qaata Antikiriistoos oo u shaqeeya. Waxa ay maalin u sheegeen in uu Eebbe soo dirayo nebi ka soo dhex baxa reer bani Israa'iil, oo weyn. Waa uu cadhooday taliyahaygu waxa aanu amray

shayaadiintii u shaqaynaysay in ay cirka u baxaan oo ay soo dhagaystaan warka ku saabsan in nebi cusub la soo dirayo iyo xilliga uu soo baxayo. Markaas ayaa ay dhacday masiibada naxdinta lihi. Waxa sida roobka loogu soo daadiyay dhammaan jinkii danabyo ololaya, waa aanay gubteen dhammaantood. Tani waa sida dhacda markasta oo nebi la soo dirayo. Maalmo ka dib waxa dhashay nebi Muuse, Antikiriistoosna waxa jasiiradda kula soo hadhay hal shaydaan oo keliya, waana tii uu badmareenku ku sheegay inanta yar. Tani waxa ay ahayd shaydaanaddda Basaasa berigaasna waxa ay ahayd cunug yar.

Wuxuu Yidhi Seerbenti
Shaydaanka Yuhuudiga ahi:

Waxa aan hortiinna keeni doonaa muuqaal ka mid ah muuqaallada ugu yaabka badan ee dunida ka dhacay, waa muuqaalka nebi Muuse oo badda ushiisa ku kala jeexaya, badduna ay laba qaybood u kala jabayso oo bidix iyo mid ah, waxa aadab moodaysay biyo shub weyn oo sare u daadanaya. Waa muuqaal aynu u baahanayno si aan hortaada u keenno in ay isu yimaaddaan dhammaan filim soosaarayaasha Hollywood, si ay muuqaalkaas oo keliya u soo gudbiyaan. Muuse waxa uu horkacayay reer bani Israa'iil oo dhex maraya badda kala jeexantay, iyaga oo Muuse daba socda.

Waxa dhex socday reer bani Israa'iil taliyahayga weyn ee Antikiriistoos. Waxa aan arkayay isaga oo ku jira safka hore oo Muuse ku xiga. Markii uu taliyahaygu ogaaday in nebiga la soo diray uu yahay Muuse waxa uu goostay in uu kula loollamo qoomkiisa dhexdiisa.

Waxa aan dhex gurguuranayay lugaha reer bani Israa'iil, markii uu dhacayay arrinkaa weyni. Waxa aan arkayay Antikiriistoos oo arrin yaableh samaynaya. Waxa uu arkayay malag Jibriil oo fuushan faraskiisii oo badda kale jeexaya, oo uu Muusena daba socdo, reer bani Israa'iilna ay sii daba socdaan. Waxa uu arkay Antikiriistoos in uu raadka faraska

Jibriil uu meesha huruudda ah ee uu cagta dhigaba uu u rogayo cagaar. Antikiriistoos waxa uu ahaa qofka kaliya ee arkaya Jibriil, waxa uu arkayay raadka faraskiisa oo dhulka cagaar u rogaya. Waa uu foorarsaday Antikiriistoos waxa aanu cantoobsaday raadkii cagaarnaa ee faraska Jibriil. Waxa uu raadkaa barakaysan ku riday alaabtiisa dhexdeeda. Waxa uu ogaaday in ay sir kale ku jirto raadka.

Markii ay dhammaan dadkii ka gudbeen baddii waxa ay dhex mareen saxarihii iyaga oo ku sii jeeda Falastiin. Markii ay dhexda sii socdeen waxa ay arkeen qolo caabudaysa dibi, waxa aanay Muuse ku yidhaahdeen:

– Muusoow noo samee Ilaah sida ay iyaguba Ilaahyo u leeyihiin.

Muuse isaga oo cadhaysan ayaa uu ku yidhi:

– Waxa aad tihiin dad juhalo ah. Ilaahay waa uu burinayaa camalka qoladaas, oo waa uu halaagayaa. Ma cid aan Ilaahay ahayn ayaa aad doonaysaa in aad Ilaah ka dhigayaan, isaga oo dadka oo dhan idinka sarreysiiyay, oo hadda uun reer Fircoon idinka soo badbaadiyay?

Waxa uu la socday Antikiriistoos arrinka dhacay, hoosta ayaa aanu sir ku haystay. Markii uu nebi Muuse tegay buurta Duur si uu Eebbe ula hadlo, ee uu tolkiisna u sheegay in uu soddon cisho ka dib soo noqonayo, waxa uu madax uga sii dhigay walaalkii Haaruun. Soddon cisho ayaa dhammaaday Muusena sooma uu noqon, habeenno badan ayaa sidii ku dhammaaday, oo aanu Muuse soo noqon. Halkaas ayaa uu Antikiriistoos fursaddaa ka faa'idaystay si maskax badnaan leh, waxa uu ku yidhi tolkii:

– Tolkayoow ii soo ururiya dahabkii ay idin amaahiyeen Masaaridu, kaas oo aad danbi ku dareemaysaan siditaankiisa, aniga ayaa idin dhaafinaya e'.

Tolkii waxa ay u soo ururiyeen dahabkii, ka dibna waa uu dhalaaliyay, waxa aanu ka sameeyay dibi dahabi ah oo wacan. Ma aan garanayn in taliyahayga Antikiriistoos uu yahay farshaxan weyn, runtii waa farsamayaqaan weyn. Ka dib

waxa uu taliyahaygu ka soo dhex saaray alaabtiisii raadkii uu ka qabtay faraskii Jibriil. Waxa uu raadkii ku tuuray dibigii dahabiga ahaa, waxa aanu isu dooriyay dibigii dibi dahab ah oo nool. Waxa uu ahaa muuqaal anfariir leh oo aniga laftayda iga yaabiyay, reer bani Israa'iil oo dhan ayuu arrinkani ka yaabiyay oo madaxa ayaa ay qabsadeen, iyaga oo fajacsan ayaa uu taliyahaygu ku yidhi:

– Waa uu iska tagay Muuse, waxa aanu halkan ku illaabay Ilaahiisii, kani waa Ilaahiinnii weynaa, waana Ilaahaygii iyo Ilaahii Muuse.

Ka dib waa ay u sujuudeen oo waa ay caabudeen iyaga oo ku dul dawaafaya, oo ku faraxsan kuna faanaya. Haaruun waa uu naxay waxa aanu ku yidhi:

– Tolkayoow maxaa idinku dhacay, Ilaahay ka baqa. Iskaga taga waxan oo kaalaya aniga i raaca oo i addeeca.

Waxa ay ku yidhaahdeen:

– Maya ee halkan ayaa aanu iska joogaynaa, waa aanan ictikaafaynaa inta uu Muuse ka soo noqonayo.

Si kedis ah ayaa uu nebi Muuse u soo noqday, waxaana fajaciso ku noqotay markii uu arkay tolkii oo u sujuudaya dibi dahab ah. Muuse si daran ayaa uu u cadhooy, waxa aanu dhulka ku tuuray looxyo ay Tawraadi ku qoran tahay oo Eebbe u soo waxyooday markii uu tagay buurta Duur, dhammaantood dhulka ayaa uu ku tuuray. Waa uu ku qayliyay tolkiisii waxa aanu ku yidhi:

– Maxaa idin helay tolkayoow. Miyaa aanu Eebbe idiin sameyn balanqaad wacan? Ma ballantii ayaa idinku dheeraatay, mise waxa aad doorbiddeen in ay cadho Alle idinku dhacdo?

Waxa ay ku yidhaahdeen tolkii:

– Maya ee waxa aanu soo ursannay dahabkii Masaarida, waxa aanan u dhiibnay nin Saamiriga ah, ka dibna waa uu na lumiyay.

Muuse waxa uu gadhka iyo madaxa si adag u qabtay walaalkii Haaruun, waxa aanu ku yidhi:

– Maxaa ku helay Haaruunoow? Maxaa aad ugu diidi weyday markii ay lumeen, miyaa aad caasiday arrinkaygii Haaruunoow?
Haaruun waxa uu ku yidhi:
- Walaalo gadhka iyo madaxa toona ha i qaban, cadawga ha ii jabin. Waxa aan ka cabsaday in aad i tidhaahdo waxa uu kala qaybiyay reer bani Israa'iil markii aad tagtay.
Muuse waa uu ka tagay Haaruun waxa aanu u kacay dhanka Antikiriistoos, kaas oo ay u bixiyeen reer bani Israa'iil Saamiri. Saamiri waxa loo yaqaanna qofka qalaad, waxa kale oo loo yaqaanna qofka dadka lumiya. Tani waxa ay ahayd loolankii dhex mari lahaa Muuse iyo Antikiriistoos, aad ayaa aanan u xiisaynayay in aan arko waxa dhici doona:
Muuse ayaa si deggan oo aan laga filayn ugu yidhi:
– Maxaa aad u jeeddaa Saamiriyoow?
Saamiri ayaa si qabow ugu yidhi:
– Waxa aan arkay wax aanay arkayn dadku maalinkii aynu badda ka soo gudubnay. Waxa aan arkay Jibriil oo faraskiisii wata, waxa aanan qabtay raadkii faraskiisa, qabashadiina waxa aan ku tuuray faraskan dahabka ah, sidaas ayaa aanay ii qurxisay naftaydu.
Waxa aan filayay in uu nebi Muuse oo ku caan ahaa cadhadu uu ku xanaaqi doono, balse Muuse si deggan ayaa uu ugu yidhi:
– Iska tag Saamiriyoow. Waxa aad leedahay nolosha ballan aanad dhaafayn e, Ilaahaagii aad dadkayga ku lumisayna waxa aad arki doontaa annaga oo gubnay, danbaskiisiini badda ku shubnay.
Waxa ay ahayd arrin fajaciso ah in uu Muuse sidan deggan u la dhaqmo Antikiriistoos, laakiin waxa ay u muuqataa in uu Muuse gartay Antikiriistoos. Waxa uu gartay in xilliga lala diriraya Antikiriistoos in aanay hadda ahayn, ee waa xilli danbe. Waa xilli aanay joogin Muuse iyo Fircoon toona, waana xilli la qorayo labadii tuduc ee ugu danbeeyay taariikhda aadamaha.

Waxay Tidhi Shaydaamadda Basaasa:

Haddii aan naftayda idiinka warramo waxa aan ahay shaydaamad aanay garanayn dadka dhulka ku nool oo dhami, halka aan anigu ka garanayo dadka dhulka ku nool oo dhan. Waxa aan ahay basaasad, waxa aan basaasaa wararka dhulka dadka. Waxa aan deggenahay taliyahayga weyn ee Antikiriistoos agtiisa, jasiiradda maska. Maalintii ay dhacday masiibadii ay ku gubteen dhammaan shayaadiintii ku sugnaa jasiiraddu xilligii Muuse, aniga waxba ima ay soo gaadhin. Maxaa yeelay, anigu waxa aan u xil saaranahay in aan basaaso dadka dhulka ku nool, ee shaqo kuma lihi waxa cirka ka jira. Waxa aan samaynayo wax ka wanaagsan jin iyo insi toona ma sameeyo. Qaabkayga shaydaaniga ah dadku waa ay arki karaan, illaa xilligan casriga ah ee lagu jirana waa ay i arkaan. Annagu waxa aanu nahay qolo shayaadiin ah oo qaabkayga u wada samaysan, wax yar haba ku kala duwanaadaane. Qolodaydu waxa ay deggan tahay kaymaha adduunka oo dhan, haddii aad doonayso in aad qaabkayga aragto sawirro uun daanyeerka Qoriilaha, ka dibna Qoriilaha ku ded timo badan oo wejigiisa oo dhan qarinaya, sidaas ayaa aan u eegahay, sidaas ayaa aanu annaguna u eeg nahay. Qoladayda waxa aad u bixiseen magac cajiib ah oo ah ***Cag-weyn*** (Big Foot) magaciinaasina waxa uu tusayaa doqonniimada iyo aqoondarrada dadka.

Haddii aad i weydiiso sida aan dadka u basaaso? Taasi waa wax aan dhacayn in aan sheego. Keliya waxa aad ogaataa in aan ogahay, oo aan wax ilaaliyo. Qoladaydu ilama mid aha, hawshooda ayaa ay wataan anna hawshayda ayaa aan wataa. Noloshaydu aniga waxa ay ku xidhan tahay ta taliyahayga, waana hoggaamiyahayga iyo hoggaamiyaha cid kasta.

Laba jeer ayaa uu dad cagta soo dhigay jasiiradda maska. Mar waxa uu ahaa xilligii nebi Muuse, waana badmareenkii hallaabay. Midda kale waxa ay ahayd xilligii Maxamed (NNKH) nebiga aakhiru-sabaanka. Waa tan qisadaasi: Habeen

uu duufan dhacayay badda Yaman, waxa jirtay doon ay hirarku ku dheelayeen, illaa ay garan waayeen badmareenkii meel ay joogaan. Meel kasta oo ay eegaan madowga badda ayuun baa u muuqanayay. Waxa ay doonayeen badmareenku in ay ku dagaan xeelliga berri ee ugu dhow, laakiin waa ay ka quusteen taana. Duufaan iyo hirar ayaa kolba dhan u kaxaynayay doonta, illaa ay si kedis ah doontii u timi xeelliga jasiiradda, tani waxa ay ahayd jasiiraddayda, jasiiradda maska. Kuwa badmareenka ahi waxa ay ahaayeen qolo masiixiyiin ah oo Carab ah, tiradooduna waxa ay dhammayd 30 qof. Waxa ka mid ahaa nin la yidhaahdo Tamiim al-Daari. Xeelliga ayaa ay fadhiisteen illaa ay qorraxdi ka dhacaysay oo uu shaacii madoobaaday, ka dibna jasiiradda ayaa ay soo galeen. Markii ay sidaas u soo galeen ayaa aan annigu la kulmay. Muuqaalkaygu waxa uu ahaa mid iyaga ku cusub, waxa ay ii maleeyeen xayawaan waxa aanay ii bixiyeen daabbad. Iyaga oo yaabban ayaa ay igu yidhaahdeen:

- Hoogto, yaa aad tahay adigu?

Af Carabi ayaa aan ku idhi:

– Waxa aan ahay basaasadda.

Waxa ay igu yidhaahdeen:

- Waa maxay basaasaddu (al-Jasaasa)?

Waa aan iska dhegotiraya weydiintoodii waxa aanan ku idhi:

– Waar raggoow, kaalay ii raaca deyrkaas, waxa jooga nin warkiinna xiiso u qaba e'.

Raggi waa ay anfariireen, waa aanay iga tageen, waxa aanay u degdegeen dhanka meeshii aan u tilmaamay. Markii ay u galeen waxa ay arkeen nin xoog weyn, oo aanay weligood isaga oo kale aanay arag. Waxa yaabka leh ayaa ahaa in uu ku xidhxidhnaa silsilado waaweyn oo aanay hore u arag. Labadiisa gacmood waxa ay ku xidhnaayeen cunihiisa, biro ayaana lugaha kaga xidhnaa. Kani waxa uu ahaa taliyahayga Antikhikhiriistoos, waxa sidan loogu xidhxidhayna waa sheeko aanan adiga kuu sheegayn. Markii ay arkeen nimankii

carbeed muuqaalka hortooda ka muuqda waa ay argagaxeen waxa aanay yidhaahdeen:
– Waar hooge, yaa aad tahay?
Waxa uu ku yidhi taliyahaygii Antikiriistoos:
– Waa aan isu kiin sheegi doonaaye, idinku yaa aad tihiin?
Waxa ay ku yidhaahdeen:
– Waxa aanu nahay niman carab ah. Waxa aanu soo fuulnay doon, markii aanu badda ku dhex jirnay ayaa uu duufaan nagu kacay, oo hirarka ayaa nagu ciyaarayay bil dhan, illaa aanu jasiiraddaadan nimi. Markii aan meeshan nimidna waxa aanu la kulannay daabbad timo badan, oo aannaan sii jeedkeeda iyo soo jeedkeeda kala garan weynayn, timo badnaanteeda darteed. Waxa aanu warsannay cidda ay tahay, waxa aanay nagu tidhi u taga ninka dayrkaa ku jira isaga ayaa warkiinna xiiso u qaba e' . Waa aanu argagaxnay waxa aanan filaynaa in ay shaydaamad ahayd.
Waxa uu ku yidhi taliyahayga Antikiriistoos:
– Iiga warrama timirtii Baysaan, ee Falastiin, weli miyaa ay midho bixisaa?
Waxa ay ku yidhaahdeen:
– Haa, waa ay dhashaa.
Isaga oo yaabban ayaa uu ku yidhi:
– Waxa laga yaabaa in ay midho bixin weydo. Iiga warrama haradii Dabriya ee Falasdiin ee webiga Urdun. Biyo miyaa ay ku jireen?
Iyaga oo yaabban oo is eeg eegaya ayaa ay ku yidhaahdeen:
– Haa waa ay biyo badan tahay.
Waxa uu haddana ku yidhi:
– Waxa ay ku dhowdahay in ay biyaheedu gudhaan. Iigga warrama ishii Saqar ee Falasdiin, miyaa ay ishaa biyo ku jireen? Dadka deegaankuna ishaa miyaa ay wax ku beertaan?
Iyaga oo waxa kan oo weydiimo ah la yaabban ayaa ay ku yidhaahdeen:

– Haa waa ay buuxdaa, dadka deegaankuna biyaheeda ayaa ay wax ku beertaan.
Waxa uu ku yidhi Antikiriistoos si aayar ah:
- Iiga warrama nebigii umiyiinta, maxaa uu sameeyay?
Waxa ay ku yidhaahdeen:
– Waxa uu ka soo baxay Maka, waxa aanu degay Madiina.
Waxa uu ku yidhi:
– Carabti miyaa ay la dagaallantay?
– Haa waa ay la dirireen
- Maxaa uu ku sameeyay.
- Waa uu ka guulaystay ciddii la dirirtay oo waa ay la heshiiyeen.
– Ma run baa taasi?
– Haa.
– Waxa u wanaagsan in ay addeecaan.
Ka dibna si xooggan ayaa uu u yidhi: "*Imika ayaa aan arrinkayga idiin sheegayaa. Waxa aan ahay Dajaal Cawar. Waxa soo dhawaatay markii dhulka la igu sii deyn lahaa. Marka la i sii daayo tuulo kasta waa aan mari doonaa, waxaa aanan joogi dooonaa afartan habeen, marka laga reebo Maka iyo Madiina; labadooduba waa iga xaaraan in aan galaa. Markasta oo aan isku dayo in aan galo waxa iga soo celinaya malag seef sita, aag kasta oo ka mid ahna malaa'ig ayaa ilaalinaysa.*"

Waa ay argagaxeen nimankii, degdeg ayaa aanay jasiiraddii uga baxeen. Mid ka mid ah ayaa u tagay nebi Maxammed, ka dibna inta uu islaamay ayaa uu sheekadan uga sheekeeyay. Nebi Maxammedna inta uu farxay ayaa uu sheekadii asxaabtiisa u sheegay

Wuxu Yidhi Luusifar
Weynaha Shayaadiinta iyo Sidaha Ileyska Weyni:

Waxa aad tahay inankii shaydaanka Antikiriistoosoow, waxa aad tahay wiilkii Luusifar, waxa aad tahay inankii Ibliis. Waxa aad tahay kii sida dhibicda ileyska, adiga dartaa ayaa ay u dhaceen wixii fidno dhulka guudkiisa ka dhacday illaa laga gaadhayo qiyaamuhu. Insi iyo jin isku jira ayaa aad tahay adigu, waxa aad tahay mid jinku ku faano iyo mid insiguba ku faano, oo aabbihiina ku faano. Waxa aad ka abuuran tahay dhoobo iyo dab isu tagay, waxa aanad ku abuurantay riximka gabadh Yuhuudiyad ah. Dhulka insiga iyo jinkeeduba waxba kulama aha marka adiga laguu eego. Waxa soo dhawaatay xilligii lagu sii deyn lahaa, ee aad dhulka gaaf wareegi lahayd sidii aad horeba u samayn jirtey. Waxa aad ka soo bixi doontaa dhanka bariga, magaalada Asfahaan ee Iiraan. Waxa marka uugu horreysa ku raaci doona toddobaatan kun oo Yuhuud ah, oo uu midkastaa xidhan yahay shaal garbaha ka laalaada oo Daylasaan la yidhaahdo, waa shaalka ay xidhaan waaweynka Maasooniyadda, cidda gaadhay heerka 33aad. Waa cidda ah qolada 13aad, ee reer bani Sahyuun. Waa ciidankaagii dhulka oo dhan u sii diyaariyay soo dhawayntaada; waa madaxda dawladaha iyo madaxda dhaqaalaha oo kuwaa ka sii sarreysa, waa madaxda sixirka. Waxa ay bilaabeen in ay dadka fajaciso tusaan muddo badan oo ay isqarinayeen ka dib. Ma jiri doono qof dhulka ku noolli, oo aan ku raacayni, marka laga reebo inyar mooyaane.

Dhanka bari ayaa aad ka soo bixi doontaa, iyada oo ay ku hor socdaan shayaadiin oo ay ku daba socdaan shayaadiin. Bidix iyo midigba shayaadiin ayaa kaa joogi doonta. Waa ciidankaaga sharfan ee jinka ah, dadka waxa ay la hadli doonaan marka aad fartid, waxa ku daba-gurguuranaya Siirbenti, waxa ku dul duulaya Maastiim. Cirka ayaa aad faraysaa in uu da'o oo waa uu da'ayaa, dhulka ayaa aad faraysaa oo wax baa uu soo bixinayaa, xoolaha waa aad amraysaa oo waa ay naaxayaan. Qofka aad doonto ayaa aad

dilaysaa, cidda aad doontana waa aad noolaynaysaa. Jinka waxa aad faraysaa in ay kuu soo saaraan kaydka qaaliga ah ee dhulka hoostiisa ku jira sida malabka shinnida ayaa aanay kuu soo saari doonaan. Waxa ay jinka iyo insuguba kuu arki doonaan in aad tahay Ilaahooda, waa aanay kuu sujuudi doonaan. Waxa aad u sheegi doontaa in dhammaan waxa ay diimuhu fareen ay yihiin sheeko-baraley. Waxa aad ka sheekayn doontaa arrimo shaki geliya. Waxa aad wadataa janno cagaar ah oo webiyo leh iyo janno madow oo kulul. Jannada iyo naartaba indhahooda oo shan ah ayaa aad tusi doontaa. Waxa aad u sheegi doontaa in qofka ku rumeeyaa uu janno degdeg ah geli doono, ma aha janno danbaysa oo aan la garanayn in ay dhab tahay.

Ha cabsan. Marka aad sidaa u tidhaahdo waxa aan ahay Ilaah, waxa kula dagaallami doonta cidda ay dadku Ilaah ahaan u caabudaan. Waxa uu masaxi doonaa il ka mid ah indhahaaga, waxa aanay noqon doontaa mid masaxan oo aan aad u muuqan, ishaada kalena waxa uu ka dhigi doonaa kuus buuran oo aan bu'deeda la arkayn, waxaana la moodi doonaa il quraarad cagaaran ah, oo la moodo canbe qaayisay. Markaas ayaa ay ku garan doonaan dadka Alle caabudaa, oo kuma raaci doonaan, laakiin waa dad yar oo aan waxba kuu dhimayn.

Waxa aad tahay Dajaal Cawar, waxa aad tahay Ilaaha jinka iyo insigaba , waxa aanad tahay inankaygii. Cidda ku caabudda anigana waa ay i caabudday, cidda ku weyneysaana waa ay i weynaysay. Qofka ku rumeeya waxa aan siin doonaa dheef aanu weligii heleen.

Soo deg Dajaaloow, tallaabo kasta oo aad qaaddo barako ayaa kaaga sugnaatay dhankayga. Soo deg oo baabii caqiiqada dadka, una samee caqiido keliyaata oo mid ah. U samee nidaam caalami ah oo aad adigu madax u tahay. Soo deg Dajaaloow oo rumee ballantii aan Ilaahay la galay toban kun oo sanno ka hor markii uu i fogeeyay anoo khayr la raba aadamaha. Waxa aan u balanqaaday in aan dadka oo dhan u

fadhiisan doono jidka toosan , oo aan kor iyo hoos, bidix iyo midigba kaga iman doono, badidoodu ay ka gaaloobi doonaan diintiisa. Dhammaan dadku waxa ay ii raaci doonaan halkii uu igu tuuray, oo ah naarta Saciiira. Soo deg Dajaaloow, qofka aan qiimayn shaqada aad qabatay sannadahan oo dhan, uma qalmo in uu noolaado e'.

DHAMMAAD

.

D.